GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA

اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور

Independent Constitutional Review
and Implementation Commission

# MAXDARQORAALKA

## CUTUBKA 7AAD: MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## CUTUBKA 8AAD: XUKUUMADDA

## CUTUBKA 9AAD: GARSOORKA

## CUTUBKA 10AAD: SHAQAALAHA RAYIDKA EE DAWLADDA

## CUTUBKA 11AAD: NIDAAMKA MAALIYADDA GUUD

## CUTUBKA 12: AMNIGA IYO DIFAACA QARANKA

## CUTUBKA 13: QODOBBO GUUD

**DIYAARIYEY:**
GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA
IYO HIRGELINTA DASTUURKA (GMDHD)

**MOGADISHU: FEBRAAYO 2026**

## Tusmo:

**Kulanka 18aad (Febraayo 17, 2026)** ........ **2**

Xil. Hussien Qasim Yusuf "Idow" ........ 2

Sen. Saed Abdi Hussien ........ 7

Xil. Jama Mohamed Askar ........ 8

Xil. Mohmed Harun Abdillahi ........ 10

Sen. Mohamed Abdi Osman ........ 13

Xil. Mohamud Abdirahman Omar ........ 14

Xil. Mukhtar Mohamed Guled ........ 17

Sen. Deka Hassan Hussien ........ 21

Xil. Dr. Mohamed Sh. Ahmed ........ 22

Sen. Abdihakim Moalim Ahmed ........ 24

Xil. Dr. Suleiman Ali Hussien ........ 26

Xil. Abdikarim Abdow Heydar ........ 27

Sen. Hassan Hussien Haji ........ 29

Xil. Sharif Mohamed Abdalla ........ 31

**Kulanka 19aad (Febreeyo 18, 2026)** ........ **33**

Xil. Bashir Mohamed Jama ........ 33

Sen. Zamzam Abdullahi Ahmed ........ 36

Xil. Adan Mohamed Ali ........ 37

Sen. Muse Sudi Yalahow ........ 38

Xil. Abdulfatah Kasim Mohamud ........ 39

Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud ........ 40

Sen. Saynab Ismail Mohamed ........ 42

Xil. Mohamud Abdulkadir Haji ........ 45

Xil. Yusuf Mohamed Adan ........ 46

Xil. Omar Ali Abdi ........ 47

Sen. Mohamed Abdi Osman ........ 49

Xil. Abdirizak Adam Warsame ........ 50

Sen. Dr. Osman Mohamud Mohamed ........ 52

**Kulanka 20aad (Febraayo 21, 2026)** ........ **55**
Avv. Burhan Adan Omar ........ 55
Sen. Hassan Hussien Haji ........ 58
Xil. Mohamed Harun Abdilahi ........ 60
Xil. Ali Hassan Ibrahim ........ 63
Sen. Abdikani Gelle Mohamed ........ 65
Sen. Abdihakim Mo'allim Ahmed ........ 66
Xil. Mahdi Mohamed Guleid ........ 70
Xil. Abdirizak Adam Warsame ........ 76
Xil. Guled Bihi Abdi ........ 80
**Kulanka 21aad (Febraayo 22, 2026)** ........ **82**
Xil. Bashir Mohamed Jama ........ 82
Xil. Nur Ahmed Dirie ........ 85
Xil. Mohamed Abdukadir Mohamed ........ 87
Xil. Abdikariim Abdow Heydar ........ 88
Xil. Abdiqani Ismail Said ........ 90
Xil. Mohamed Adan Dahir ........ 91
Xil. Abdi Ibrahim Warsame ........ 93
Xil. Abdiqafar Elmi Hange ........ 94
Xil. Dr. Suleiman Ali Hussien ........ 96
Xil. Aweis Moalim Hussien ........ 97
**Kulanka 22aad (Febraayo 25, 2026)** ........ **100**
Sen. Saed Abdi Hussien ........ 100
Xil. Mohamed Harun Abdillahi ........ 101
Xil. Abdiqani Ismail Said ........ 105
Sen. Abdikani Gelle Mohamed ........ 107
Sen. Hassan Hussien Haji ........ 108
Xil. Abdiqafar Elmi Hange ........ 110
Xil. Abdirisaq Abdullahi Moallin ........ 113
Xil. Mohamud Abdirahman Omar ........ 114
Xil. Bashir Mohamed Jama ........ 116

Xil. Mahad Abdalla Awad ........ 117
Xil. Sharif Mohamed Abdalla ........ 119
Xil. Mahdi Mohamed Guleid ........ 120
Xil. Yusuf Mohamed Adan ........ 123
Xil. Mohamud Abdulkadir Haji ........ 124
Xil. Nur Ahmed Dirie ........ 125

**Kulanka 23aad (Febraayo 26, 2026) ........ 128**
Sen. Saed Abdi Hussien ........ 128
Sen. Ahmed Ibrahim Mohamed ........ 129
Xil. Mohamed Harun Abdillahi ........ 131
Xil. Bashir Mohamed Jama ........ 134
Sen. Mohamed Abdi Osman ........ 136
Xil. Mahdi Mohamed Gulied ........ 139
Xil. Mohamud Abdirahman Omar ........ 143
Sen. Ahmed Mohamed Ali ........ 144
Xil. Mahad Abdulla Awad ........ 147
Xil. Mohamed Abdukadir Mohamed ........ 149
Sen. Saynab Ismail Mohamed ........ 150
Xil. Dr. Elmi Mohamud Nur ........ 152
Xil. Abdikarim Abdo Heydar ........ 156
Xil. Omar Ali Abdi ........ 157
Xil. Dr. Suleiman Ali Hussien ........ 159
Xil. Mukhtar Mohamed Guled ........ 160
Xil. Shariif Mohamed Abdalla ........ 161
Xil. Mohamud Abdulkadir Haji ........ 162
Xil. Abdulfatah Kassim Mohamud ........ 164

# CUTUBKA 7AAD

## MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# CUTUBKA 8AAD

## XUKUUMADDA

**Kulanka 18aad (Febraayo 17, 2026)**

| | |
|---|---|
| **Baarlamaanka:** | 11aad |
| **Kulfadhiga:** | 7aad |
| **Kulankiisa:** | 18aad ee labad Aqal |
| **Goobta:** | Golaha Shacabka |
| **Furmay:** | 11:48 AM |
| **Xirmay:** | 3:26 PM |
| **Shir-guddoomiye:** | Xil. Sheikh Adan Mohamed Nur<br>Guddoomiyaha Golaha Shacabka |

**Ajendaha:**

(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka
(2) Ansixinta Ajendaha
(3) Dib u-eegista Dastuurka: Marxaladda 3aad: ka doodista Soojeedimaha wax-ka beddelka Dastuurka. Cutubka 7aad iyo 8aad ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Qodobada 109aad ilaa 119aad iyo Qodobaba 120aad – 129aad.






**Xil. Hussien Qasim Yusuf "Idow"**

Salaamu calaykum wa raxma tullaahi wa barkaatu mudanayaasha sharafta leh waxaan u gudbayanaan cutubka 7aad waxaan gabagebaynaynaa dooddii cutubka 6aad ee aan ku soo jirnay maalmihii la soo dhaafay,waxaan runtii bogaadinayaa doodda nuxurka leh ee baarlamaanku ka geystay ama ka dooday cutubka 6aad oo ku saabsan baarlamaan awood leh, hufan, isla xisaabtan leh, isla markaana ka shaqeeya danta guud ee shacabka Soomaaliyeed intaas waxaan rabaa markaa waxa ka qayb qaata doodda 51 mudane oo labada aqal ka tirsan markaa waxaan iska gabagabaynaynaa cutubka 6aad kaddibna waxaan u gudbi doonaa cutubka 7aad iyoaad oo ajanduhu wuu noo ansaxsan yahay, laakiin aan midba maalin ka doodi doonno 7 aadna maanta, berrina 8aad, Siciid Cawke ayaa noo akhriyi doona cutubka 6aad wuxuu ka kooban yahay 29 qodob.

Nuxurkii xildhibaannada mudanayaasha labada aqal ay hoosta ka xariiqeen cutubka 6aad waxaa ugu horreeya in la mideeyo luqadda loogu yeedho mudnayaasha labada aqal ama derajeda loogu yeedho oo aqalka sarena in ladhaho xildhibaan marna la dhaho senator, marna la dhaho xildhibaannada labada aqal, marna la dhaho senatorada iyo xildhibaannada. Waxaa guud ahaan la soojeediyay in la mideeyo cutubka 6aad iyo meel kastoo dastuurka ka mida dastuurka qaybihiisa lagu mideeyo oo loogu yeedho ama laga dhigo xildhibaan kaddibna aqalka uu ka tirsanyahay la raacsiiyo oo aan marba si habqana siyaabo kala duwan loogu yeedhay.

Qodobka 80 faqraddiisa 1aad ee u dhigan in awoodda xeer dejinta uu u xilsaaran yahay baarlamaanka federaalka Soomaaliyeed in lagu daro oo keliya sidii xeerdejin kale ama xeer kale oo meel kale ka soo baxa loogu qaadan inuu xeer yahay. Markaa xeer waxaa ah uun keliya oo awood u leh baarlamaanka federaalka Soomaaliyeed inuu dejiyo markaa waxaa lagu kordhinayaa keliya ereyga keliya ayaa lagu kordhinayaa si loo adkeeyo.

Qodobka 82 faqraddiisa 1aad oo ku saabsan tirada mudanayaasha xubnaha baarlamaanka federaalka Soomaaliyeed oo 275 ah aqalka golaha shacabka iyo 54 aqalka sare aad ayaa looga dooday waxaana laga soojeediyay aragtiyaal kala duwan, aqalka saraan u malaynayaa doodda inteeda badan inay taabanaysay. Aqalka sare wuxuu ku dhisan yahay habka hanaan heshiis oo laga gaadhay 2016 magaalada Baydho baan u malaynayaa Kismaayaa lagu billaabay, laakiin Baydhabo baa lagu dhammeeyay wuxuu u dhisan yahay heshiis oo markaas ku meel gaar ah ayuu ku dhisan yahay qaabka uu u qaybsan yahay oo dawlad goboleedyadu ay leeyihiin xubnaha kala duwan, qaarna waxay leeyihiin 8 qaarna waxay leeyihi 11, laakiin heshiiskaasi wuxuu ahaa heshiis markaas marxaladdii kala guurka looga gudbay.

Waxaan filayaa dastuurka qodobka 72aad dastuurkeennii hore markaad eegto waxaa ku qoran labo luqadood ama laba turjumaad oo nuxurka laga garan karo, in lagu qaybinaayo dawlad goboleedyada si is leg. Waxa iyadana kaloo nuxurka laga garan karaa oo iyaduna faqradda ku xigta ku qoran in 18 ka gobol ee dalku lahaa 1990 in lagu salaynaayo labadaa suxulba qodobka 72 aad iskula qornayd markaa labadaba lama raacin, 2016 waxaa la jeexday jid cusub oo ku meelgadh ah. Markaa hadda nuqulka idin horyaalla wuxuu soo jiidanayaa in 18 kii gobol lagu noqdo, dooddaas la xiriirta aqalka sare iyo sida metalaaddiisa loo dhigayo, waxaa dhinac ka soo galay dooddii gobolka Banaadir metalaaddiisa meesha ka baxday 2016 ka, iyadana waa soo gashay, laakiin aan filayo haddii 18 ka gobol la qaato inay sida soojeedimaha ku qoran inay metalaaddiisu dhinacaas ka soo sugmi karto.

Waxaa sidoo kale doodda dhinac uga jirtay maadaama aqalka sare uu metalo dawlad goboleedyo in dawlad goboleedyada ay dhismahoodu dawlad goboleed uu saldhig u noqdo inay lagama maarmaantahay iyadana mudanayaal badan ayaa sheegay, laakiin soojeedimaha hadda idin horyaalla waa 18 ka gobol, in lagu noqdo doodda Banaadirna dhinaca metalaad la'aanta ay ugu jirtay.

Qodobka 82 faqraddiisa 3aad oo aha qofkasta oo noqda madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya oo xilka ku baneeya si nabad ah dimuquraadi ah inuu noqdo xubin ka mida aqalka sare aad ayaa loo soo dhaweeyay guud ahaan, laakiin waxaa la soojeediyay in in la caddeeyo xubintaas aanu codlahayne xubin sharafeed tahay in lagu caddeeyo text-tiga hadda si aada uguma cadda inay xubin sharafeed tahay ayaa ku qoran. Waxa kalee la soo jeediyay aragti la xiriirta haddii madaxweynahaasi uu marxaladda kalaguurka uu baneeyo inta muddo xileedkiisa lagu jiro shardigaasi in lagu xiro, marka hore waxaa ku xirnayd inuu si dimuquraadi ah oo xasilloon uu xilka ku banneeyo. Laakiin haddana inuu inta mudda xileedkiisa lagu jiro inuu baneeyo ha lagu daro ayaa la soojeediyay waxaa kaloo la soojeediyay oo aad looga hadlay, laakiin aanan ogayn sida nuxurka doodda qodobkan uga noqon karto in guddoonka labada aqal iyagana dhinaca laga soo geliyo. Hadda qodobkana wuxuu la xiriiray madaxweynaha "retire" garooba oo xilka ka dega.

Markaa qodobka 83 aad shuruudaha xubinnimada baarlamaanka faqraddiisa 1aad xarafkiisa (d) oo u dhigan in musharraxa aqalka shacabka yahay 30 jir musharraxa aqalka sarena yahay 35 jir, waxaa la soo jeediyay in laga hormariyo ugu yaraan si aanu shardi u noqon inuu markaas uu musharaxa yahay uu 30 sano jiro ama uu 35 jiro ugu yaraan la dhaho oo qofku aqalka shacabka musharraxa u ah ugu yaraan da'diisu 15 tahay qofka aqalka sarena 35 tahay. Waxa kale oo la soo jeediyay in da'da labada aqal sideedii hore loo daayo oo dhallinyarada fursad la sii yo oo 25 kii hore oo ku qornayd loo daayo si fursad loo siiyo dhallinyarada ayna u gaadhi karaan hoggaanka dalka maadaama boqolkiiba 75 sida la sheego ay dhallinyaro tahay shacabka Soomaaliyeed ay qayb weyn ka yihiin 40 da'da in laga dhigo aqalka shacabka aqalka sarena 45 laga dhigo iyadana mudanayaal ayaa soojeediyasy isla faqaradaas oo ay shardi tahay in qofka musharaxa uu codbixiye u diwaangashan yahay waxa la soojeediyay in meesha laga saaro oo aan shardi laga dhigin iyadana sifiicanaa loo note gareeyay.

Faqradda 1aad isla qodobkaas in meesha laga saaro waaya-aragnimo khasabna laga dhigo qofku inuu waxbarasho heer jaamacadeed leeyahay oo waagii hore oo u dhiganta waxbarasho waaya-aragnimo u dhiganta, waa shuruudihii qofka xildhibaanka noqonaaya markaa waaya-aragnimadaas in waxbarasho lagu xiro inuu heer jaamacadeed gaarsiisan yahay iyadana waa la soo jeediyay.

Isla faqradda 1aad xarafka (g) sifooyinka daacadnimo iyo amaano iyagana in meesha laga saaro maadaama halbeegaas uu halbeegoodu adag yahay qofku inuu daacad yahay ama amaano leeyahay oo laga dhaafo oo shuruudaha kaleeto loo dhaafo. Isla faqraddaas xaraf (h) in meesha laga saaro inuu dalka deganaa labo sano oo qurbajoogta lagu khasbin inay ee musharrixiinta fursad la siiyo wakhti hore.

Qodobka 84 aad sababaha lagu luminayo xubin nimada baarlamaanka waxaa aad loo dul istaagay faqradda 1aad xarafka (f) ee la xiriirta aqbalaad xil kale oo dawladeed in lagu lumin karo xubinnimada baarlamaanka dood aad ah ayaa laga galay. Laakiin waxaan rabaa inaan idin xasuusiyo, horta dastuurka hore "professional constitution" hadda aan haysano ma reebayo mana waajib yeelaayo inuu xildhibaanku xil wuxuu ogol yahay keliya inuu xil wasiir qaban karo, laakiin golaha wasiirada in la soo galo uu la xiriiro baarlamaanka uma xirna dad kalena waa soo geli karaan markaa dastuurkii hore waa ka aamusnaa.

Laakiin nuqulka hadda idin horyaala oo la xiriirta qodobka 84 aad faqradiisa 1 aad xarafka (f) xildhibaano badan ayaa taageeray soojeedinta inaanu xildhibaanku xilkaloo dawladeed uuna qaban iyadoo doodda ku saleeyay mabaadiida guud ee korjoogtaynta baarlamaanka inay wax u dhimi karto oo halis ku tahay baarlamaanka waajibaadkiisa 1aad inuu guto. Waxaa sidoo kale doodda mudanayaasha ku jirtay in hanaanka baarlamaaniga ah ee asxaabta ku dhisan uu lagamamaarmaan ka dhigaayo in xisbiga talada dalka ku guulaysta inuu dalka xakumo oo aanu xisbi talada haya markii asxaab iyo "parliamentary system" lagu shaqeeyo waxaa meesha ka baxaysa in xisbigu isagaa talada hayee dalka xukumo ayaa imaanaysa. Xisbiguna talada baarlamaankuu kula guulaystee si kale uguma guulaysan markaa labda afkaaraha kor joogtaynta baarlamaanku inuu xukuumada korjoogteeyo dhinac ayey ka jirtay dhinaca kalena waxaa ka jirtay nidaamka baarlamaaniga ah ee asxaabta ku dhisan in xukuumaddu baarlamaanka ka soo dhismato inay lagamamaarmaana noqon karto. Faqradda 2 aad isla qodobka 84 aad ee la xiriirta xilkaxayuubinta xidhibaanada labada aqal oo aan meesha ku caddayn in lagu caddeeyo inay two-third tahay marka xildhibaan laga qaadaayo xilka, markuu

sababa kale oo uu ku sifoobo oo meesha ku qoran waxa u baahantahay baarlamaanku inuu aqlabiyad ku ansixiyo. Aqlabiyaddaas meesha kuma caddie, laakiin waxaa la soojeediyay inay noqoto two-third midii xilka markii tallaabadaas la qaadaayo.

Qodobka 84 aad ee la xidhiidha dhaarta labada xubnood ee baarlamaanka federaalka Soomaaliyeed faqradda 1aad waxaa la soo jeediyay in la muujiyo cidda dhaarinaysa haddii guddoomiyaha maxakamada sare la waayo taas oo noqonaysa in guddoomiyaha maxakamadda dastuurka lagu kabo oo haddii mid maqanyahay mika kale uu dhaarta mudanayaasha uu maamulo. Waxaa kaloo la soojeediyay in dhaartii hore ay yara sahlanayd ayna ka yara koobnayd iyadana mudanayaal badan ayaa ka hadlay, inkastoo dhaarta hadda meesha ku qoranna mudanayaal badan ay bogaadiyeen oo laakiin soojeedintaa ku waa jirtaa.

Qodobka 87 aad ee la xiriira doorasho xilligeedii laga soo hormariyay xildhibaanadu guud ahaan waa ka horyimaadeen qodobkaa waxaana la xusay iany lagama maarmaantahay in duruufaha ay ku imaan karto iyo cida go'aan keeda leh doorasho markay xiligeeda ka soo hormarayso in la caddeeyo sida ay kudhici karto haddii xisbiga talada haya uu ku guul daraysto. Waxay noqon kartaa duruufaha ay ku dhici karto, waxay noqon kartaa in haddii xisbiga talada haya uu ku guuldaraysto inuu meel marsado ajenda miisaaniyada xeerarka uu ku fulinaayo asxaabtiisa ama ajedayaashiisa sharci dejin ama siyaasadeed markuu labada aqal marsiisan waayo oo kale ama xisbi xulafo ku jooga "coalition" ama talada haya ha ahaatee. Haddii xisbiga markaa tallada jooga oo dalka hogaaminaaya uu baarlamaanka ka fushan waayo ajendayaashiisa waxay noqon kartaa waxyaabaha sababi kara doorasho xiligeedii laga soo hormariyey isla markaana in lagu adkeeyo in xisbiga dalka hogaaminaaya ay tahay inuu asxaabta kale u soojeediyo oo aanu keligiis go'aan gaadhin, aqlabiyad lagu meel mariyana lagu xiro. Maadaama doorasho wakhtigeedii laga soo hormarinaayo ay tahay waxyaabahasaa xildhinaanadu ka hadleen, anaguna "note" kaasi waa qaadanay. Waxaa kaloo la sheegay in sanadka u danbeeya oo ah sanadka 5 aad lagu koobo oo aan doorasho xiligeedii laga soo hormariyey aanay iska fidsanaan, iyadana aadaa loo sheegay.

Shuruudaha guddoonka ee qodobka 90 aad faqraddiisa 1aad ee xarafka (b) oo ah in musharraxa guddoonka uu jiro ugu yaraan 35 sano, waxa la soo jeediyay inaa 40 la gaarsiiyo faqradda 2aad ee isla qodobka 90 aad ee la xiriirta in guddoonku ka tanaasulo xisbi siyaasadeed haddii uu ka tirsan yahay. Iyadana waa la soojeediyey iyadoo sidoo kale la sheegay in guddoonku u baahan karo taageero siyaasadeed maadaama baarlamaanku asxaab yahay oo markaas aan loo baahnayn inuu xisbi ka baxo waxaa sidoo kale la soojeediyey in dhex dhexaadnimadiisa ay muhiim tahay oo markaa inuu xisbi ka tirsan yahay ay khatarteeda leedahay markaa labada afkaar xisbigu waa u baahan yahay iyo dhexdhexaadnimadiisa ayay wax u dhimaysaa laabdaba waa sheegay aadaa looga dooday.

Doorashooyinka guddoonka labada aqal ee baarlamaanka federaalka Soomaaliyeed qodobka 91aad faqradiisa 2 aad xafarka (a) inaan two-third ama laba dalool lagu xirin haddii laba musharrax tartamayaan inaan laba dalool lagu xirin maadaama dadka tartamayaa ay laba qof keliya yihiin oo codka haldheeri noqdo wareega 1aad waa haddii dadka tartamayaa ay labo keliya yihiin. Senator C/xakiin baa aad ugu tiikhtiikhsaday baan u malaynayaa inuu waaya-aragnimo gaara u leeyahay.

Qodobka 92aad xilwaayida guddoonka faqraddiisa 3 aad ee in guddoonka xilka looga qaadaayo saddex dalool laba dalool. Waxaa la soojeediyay 91aad oo la xiriira doorashada "simple majory"-tiga ama aqlabiyada lagu xiro oo haddii marka 1aad ba guddoonka ay tahay in lagu doorto wareega 1 aad hadduu "simple majority" ku imaan karo, hadhawna xilka qaadista siduu hadba ku yimaaddo inuu ku baxo oo qodobka 91aad iyo 92aad la isla akhriyo.

Qodobka 95 aad ee guddiga adeegga baarlamaanka faqrada 1aad oo u dhigan waxaa jiraya in laga dhigo waa inuu jiraa oo la adkeeyo oo guddiga adeegga baarlamaanka aanu noqonin wax la dhisi karo la iskana dhaafi karo oo la waayib yeelo oo luqadduu ku qoran yahay la adkeeyo. Faqraddiisa 2 aad waxaa la soojeeediyay xubnaha ka imaanaaya labada gole in la simo aadaa looga dooday, sagaal laga dhiso waxaa kaloo la soojeediyay in meesha guddoonku raacayo maahee meesha kalana xubnaha loo badiyo iyadana waa la soojeediyay.

Qodobka 96 aad ee awooddaha u gaarka ah aqalka shacabka faqrada 1aad xarafka (f) ee la xiriirta eedaynta madaxweynaha waxaa la soojeediyey in lagu daro xil ka qaadista oo la yiraahdo eedaynta iyo xilka qaadista oo eeday keliya lagu simin madanayaasha qaarkood ayaa soojeediyay in hanaankii dastuurkii hore lagu noqdo taas oo aqalka shacabku curinayo eedaynta xilka qaadista ee madaxweynaha loo gudbiyo ugu danbayna labada aqal ay xilka xayuubinta ka wada qayb qaataan aadaa loo soo jeediyey in nidaamkii dastuurkii hore inoogu qornaa aan laga guurin. Laakiin naidaamka cusubna wuxuu u dhigan yahay aqalka shacabka inay curiyaan eeday iyo xilkaqaadista ayna go'aan gaadhaan aqalka sarena inuu meeshii maxkamaddu ku jirtay inuu ku jiro oo maxkamadii ay meesha ka baxdo, markaa in nidaamkii hore loo laabto aadaa looga.

Awooddaha u gaarka ah aqalka sare waxaa la soo jeediyay in lagu billaabo faqrad cusub oo u dhigan in aqalka sare inuu metalo dawlad goboleedyada oo "preamble" kaas loo sameeyo awooddaha u gaarka ah aqalka sare. Faqradda 1aad xafarka (d) oo u dhigan inuu ilaaliyo midnimada federaalka iyo midnimadda dalka in lagu koobo nidaamka federaalka oo qodobka ilaalinta midnimada lagu dhigo mabaadiida guud ee baarlamaanku wada ilaalinayo lagu daro oo mabaadiida guud ee baarlamaanka ka dhexaysa lagu daro aadaa loo fijeeyay.

Faqradda 1aad ee qodobka 97 xarafka (g) ee ansixinta iyo magacaabista danjirayaasha iyo taliyayaasha ciidanka waxaa la soo jeediyay in xukuumadda loo daayo magacaabistooda iyadoo dood badan laga keenay sidii ay suurta gal ku noqon karto in saraakiisha wasaarada arrimaha dibada iyo gaashaandhiga oo qayb ka ah xukuumadda in labada aqal labada dhinac midna intan joogo midna inta joogo. Maadaama safiirkiina wasaaradda khaarajiga ka tirsan yahay taliyayaashuna wasaarada gaashaan dhiga ka tirsan yihiin iyadana siday suurtagal ku tahay waa laga dooday, laakiin aragtida dhahaysa sideedii hore haloodaayo oo xukuumadu ciday rabto ha u dhiibato ayaa aad loo taabtay.

Waxaa kaloo la soojeediyey in faqradda cusub lagu soo kordhiyo awooddaha aqalka sare, waxaa kale oo la soojeediyey in faqrad cusub lagu soo kordhiyo awoodaha aqalka sare oo u dhigan in aqalka sare dib u eegis ku samayn karo xilka qaadista hoggaamiyayaasha dawlad goboleedyada marka golaha wakiilladu xilka ka soo qaado oo aanu kama danbays noqon uu aqalka sare eedaynta ama xil ka qaadista uu meelmariyo ama uu u arko inay khalad tahay oo hanaan khaldan loomaray oo baadhis kaddib go'aanka u danbeeya uu aqalka sare uu yeesho.

Qodobka 99 aad ee la xiriira korjoogtaynta baarlamaanka, waxaa la soo jeediyey in korjoogtaynta labada aqal ay wadaagaan in kastoo ay jirtay dood ah aqalka shacabka kaliyaa xukuumadda korjoogtayn kara, laakiin haddana waxaa muuqata in aqalka sare aanu guddan karin waajibaadkiisa metalaadda dawlad goboleedyada haddaanu kor joogtayn ku lahayn xukuumadda. Markaa kalsooni siinta iyo kalsooni ka qaadisata waa meeshooda, laakiin waa inay baadhi karaan waana inay korjoogtayn ku lahaan karaan haddii kaleeto waxaa ku adkaanaysa aqalka sare inuu metalo, maetalaaddiisa inuu dawlad goboleedyada matalayo ayaa ku adkaan karta. Waxaa kaloo la soojeediyay in baadhitaanada iyo qodobka 99 aad faqraddiisa 5 aad oo xeerinaaya baadhitaannada in loo magacaabo guddi wada jir ah labada aqal, waxa la soo jeediyay inay habboontay in guddiyada golayaasha u qaabilsan hadba umuurta markaas taagan inay kaga habboontahay in guddi la dhiso. Aqalka shacabka ama aqalka sare wuxuu leeyahay haddii arrintu amni tahay guddi amni ayuu leeyahay markaa labada guddi amni ayaa ka wada sahqayn kara, markaa "other commitees" in la dhiso iyadana inay ka haboon tahay. intaasi markaa intii inaan ku soo koobno ahayd maanta laakiin xoghaynta ayaa qabtay wax kastoo lagu hadlay oo nuxurka hadda ka badan dhammaantoodna waa la tixgalindoonaa waana la nuxrin doonaa waxayna ka muuqn doontaa nuqulka ugu danbeeya ee halkan la keeni doono, waxaan rabaa inaan senator Siciid Cawke si uu cutubka 7 aad wax uga yiraahdo guddoomiye haddaa iga ogolaato ayaan soojeediyay senator Siciid soo dhawow.



**Sen. Saed Abdi Hussien**
Xoghayaha Guddiga Lasocodka Dastuurka

Mudane guddomiye waad mahadsantahay mudanayaasha sharafta leh sida ka muuqata ajandaha maanta ina hor yaala ku saabsan qodabada cutubka 7aad iyo qodobada cutubka 8aad oo ka billabanaya qodobka 109aad kuna dhammaanaya qodobka 129aad labadaan cutub waxay sidaan labo barnaamij oo aan kala maarmin cutubka 7aad waxa uu ka hadlayaa madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya wuxuu ka koobanyahay 11 qodob.

Cutubka kalena waa cutubka xukuumadda waa labo cutub oo is khuseeya, maadaama labadaan cutub ay is khuseeyaan oo aan kala maarmin qodobada ay ka koobanyihiina ay yihiin 21 qodob. Guddonka sharafta leh waxaan ka codsaneynaa in xildhibanka wakhtiga uu aragtida dhiibanayo loo siyaadiyo si xildhibanku si faahfaahsan aan ciriiri u dareemin uga wada hadlo qodob qodob, markaa uu aragtidiisa ka dhiibto mar walba waxaa is qora xildhibaano badan marka wakhtiga waa inoo tashiilmayaa oo waa laga faa'iidaysanayaa waqtiga maanta iyo maalinta ku xigtaba qofkuna waxa uu helayaa fursad uu ku bandhigi karo qodobbada aragtidiisa uu ka dhiibanayo.

Matka waxaan codsan lahaa in xildhibaannada loo ogolaado wakhti ku filan oo ay ku dhiibtaan aragtidooda aad iyo aad baad umahadsantihiin, mar walba waxaan rabaa in aan idin xasuusiyo hal arrin oo muhiim ah dhallinyarada maxdarka qaada marka ay maxdarka qorayaan waxay uga jecelyihiin in uu xildhibanka is kor taago qodobka uu aragtida ka dhiibanayo oo uu dhaho 109aad madaxweynaha jamhuuriyadda aniga aragtidaas ayaan qabaa, marka uu u tallaabayo qodob kalena uu is kortaago qodobka uu rabo in uu abaaro taasi waxay sahlaysaa in dhallinyarada maxdarka inoo qabaneysa ay si sahlan nooga qaban karaan maxdarka hadda waxaa diyaar ah maxdarkii cutubkii 5aad waa diyaar iyo badh cutubkii 6aad.

Maxdarkii la qabtay waa diyaar maalmaha soo socda ayaan idinla wadaagi doonnaa dhammaan maxdaradii laga qabtay xildhibanada ay dhiibteen xildhibano badan baa aragtidooda dhiibtay intaana mar walbo waan idin xasuusinaya aad iyo aad baad umahadsantihiin.



**Xil. Jama Mohamed Askar**

Guddoonka waxaan jeclaan lahaa xildhibaannadu waxay u soo diyaar garoobeen 109 ilaa 119 inta badan sidaan filayo. Qodobka 110 inta badan wuxuu ka hadlayaa shuruudaha madaxwaynaha, xarafka (J) wuxuu dhigayaa inuu dalka joogay mudo 5 sano ah. Waxaan jeclaan lahaa in laga yareeyo wakhtiga intaas, Soomaali badan oo aqoonyahano ah oo dalka wax badan gashaday ayaa dibadaha ku maqan marka waxaan jeclaan lahaa in laga yareeyo oo laga dhigo 2 sano sida baarlamaanka oo kale.

Qodobka 110 xarafka (K) wuxuu ka hadlayaa madaxwaynuhu haddii uu ku guulaysto waa inuu ka tanaasulo jinsiyada. Wixii waa shuruudo, shuruuduna waa inay ka horeysaa guusha. Marka waxaan qabaa in la iraahdo marka uu musharaxnimada soo codsanayo waa inuu ka tanaasulaa.

Qodobka 111aad Faqraddiisa 3aad guusha madaxwaynaha waxa uu dhigayaa in musharraxa madaxwaynaha ay soojeediyaan 20 xildhibaan. Isla qodobka 111aad Faqraddiisa 4aad waxay sheegaysaa inay soojeedinayaan 3da xisbi qaran oo ugu codka badan, labo wax oo is qabanaya maaha. Maadaama dalkani uu aadayo xisbiyo badan *Finally*-na ay soo baxayaan 3 xisbi qaran oo ku loolamaya dalka waa in loo daayo "waa inay murashixiin u yihiin 3da xisbi qaran", sabab hadhaw loogu baahanayo inuu xildhibaan *Recommendation*-ka bixiyo murrashax xisbi meesha ma taalo.

Qodobka 111aad Faqraddiisa 6aad xarafka (A) wuxuu dhigayaa in musharraxa ku guulaysta boqolkiiba 51 uu madaxwayne noqonayo. Tani waxay ka soo horjeedaa sidii dastuurku u qornaa oo ka billaabanaysay 3/2 wareega koowaad sidaana u soconaysay ilaa wareega u dambeeya. Dalkan waxa ka jiray dastuur dhaqangal ah oo loo baahanyahay inaan ku dul shaqayno ee muusan ahayn *Draft,* sidii hore in lagu celiyo ayaana fiicnaan lahayd oo yaan la taaban ayaan oran lahaa sidii dastuurkii hore ku qornayd.

Qodobka 111aad Faqradiisa 2aad waxay ka hadlaysaa madaxwaynaha inaan loo raaci doonin jaraa'iimta iyo dambiyada uu galo haddii aanay ku tacaluqin xuquuqul insaanka. Tani waxay ka soo horjeeddaa Shareecada Islaamka, mar kasta halkan waxaan ka hadalnaa shareecada islaamka iyo maqaasideeda hadana dambi uu qof galay ayaan leenahay yaan loo raacin hadaanay xuquuqul insaanka ku tacaluqin, waxaan jeclaan lahaa *Immunity*-gaas la siinayo marka uu madaxwaynuhu xilka baneeyo waxay dhiirrigelinaysaa inuu dambiyo galo intuu xilka joogo marka waa in loo raacaa wixii jariimo ah ee uu galo madaxwaynuhu inta uu xilka joogo maxkamadna la saari karo markuu xilka ka dego.

Qodobka 114 Faqraddiisa 1aad magacaabista reysulwasaaraha ayay ka hadlaysaa, magacaabista madaxwaynuhu uu iska magacaabayaa miyaa? Xisbiyo ayaa tartamaya oo xisbi

ayaa yeelanaya aqlabiyada golaha shacabka marka waxaan rabnaa raysalwasaare haysta aqlabiyada golaha halkan ee ansixinaya in la keeno oo la ansixiyo haddii kale xisbi soo tartamay oo "siraac" siyaasi ah soo galay ayaa hadhow la dhinac mari doonaa marka waa inay halkan ku caddaato madaxwaynuhu inuu ka keenayo raysalwasaaraha xisbiga aqlabiyadda ka hela golaha shacabka.

Qodobka 114aad Faqraddiisa 4aad waxay ka hadlaysaa awoodaha madaxwaynaha. Madaxwaynuhu inuu iskugu yeedhi karo doorasho xilligeedii lagasoo hormariyay, waynu ka doodnay taas, waxaan taageerayaa in la samayn karo doorasho xilligeedii lagasoo hormariyay marka ay sharcigeedii leedahay, raysalwasaaruhu markuu baxo, marka xisbigii xukuumada soo dhisay uu waayo aqlabiyadii golaha shacabka, marka ay suurtagal noqon waydo in la sameeyo *Coalition*-siyaasiya laakiin waqti yaan lagu xadidin waxay dhici kartaa sanadka 1aad, ka 2aad ama ka u dambeeya ayay dhici kartaa.

Qodobka 114aad Faqraddiisa 5aad waxay ka hadlaysaa magacaabista iyo eryida guddoomiyeyaasha maxkamada sare iyo maxkamada dastuuriga ah. Madaxwaynuhu ha magacaabo guddoomiyaha maxkamada sare iyo maxkamada dastuuriga ah marka uu u soo jeediyo golaha adeegga garsoorku, laakiin eryidda ama *Exit*-ka waa in la horkeenaa labada gole oo wada fadhiya, taas uunbaa siin karta damaanad. Waa in la iraahdaa "Baarlamaanka Soomaaliyeed ayaa ansixinaya xilkaqaadista guddoomiyaha maxkamada sare iyo maxkamada dastuuriga ah" waa haddii aan rabno maxkamad iyo garsoor madaxbannaan.

Qodobka 115aad Faqraddiisa 1aad iyo 2aad intuba waxay ka hadlayaan *Executive Order*-ka uu soo saarayo madaxwaynuhu. Nidaam Baarlaamani ah ayaan qaadanay ee dalkani nidaam *Ri'aasi*-ah muu qaadan haddana madaxwaynihii waxaynu siinay wareegtooyin uu dalkii ku maamulayo iyadoo aysan jirin ama dastuurka aysan dhinacna kaga qornayn wareegtooyinkaas cida burin karta, Maxkamadahana awood looma siin, Sharci-dejintana awood looma siin. *Executive Order*-na ama wareegtooyin noocaasoo kale ah marka madaxwaynaha la siinayo dalalka siiyay waxay awoodo kale siiyeen hay'ado kale oo burin kara oo ay kamid yihiin maxkamaduhu. Waxaad aragteen Trum oo kale oo intuu soo saaray wareegtooyin maxkamadi ay burinayso. Waxaan jeclaan lahaa in gebi ahaanba meesha laga saaro waayo madaxwaynuhu awoodo ayuu leeyahay *Silaaxiyaat*-kiisuna waxay ku cadyihiin dastuurkan marka kuwaasuu *Emphasize*-garaynayaa oo uu fulinayaa, wareegtooyinkan iyo waxani meelo kale ayay inala galayaane in meesha laga saaro ayaan soojeedinayaa.

Qodobka 117aad, xilkaxayuubinta madaxwaynaha ee la iri waxa soo bilaabaya golaha shacabka waxayna ku dhamaanaysaa aqalka sare. Markaynu eegno Qodobka 117aad Faqradda 1aad ilaa Faqradda 3aad gebi ahaanba waxaan ku talin lahaa in dib loogu laabto siduu dastuurku dhigayay, dalalka qaarkood Nigeria oo kale labadooda aqal ayaa wada fariista oo xil-ka-xayuubinta sameeya, South Africa oo kale aqalka sare kama qaybgelo ee waxa ka qaada *National Assembly*-ga Sauth Africa. Marka inagu anigoo eegaya marxaladda aynu ku suganahay waxaan ku talin lahaa in labada aqal ay arrintaa masuuliyadeeda wada qaadaan oo sidii hore lagu celiyo.

Qodobka u dambeeya oon ka hadlayo waxa weeyaan Qodobka 119aad Faqraddiisa 3aad, doorashada madaxwaynaha, hadduu madaxwaynuhu meesha ka baxo in madaxwayne kale lagu doorto 30 cisho gudahood ayuu tilmaamayaa. Bal waxaad la eegtaan Qodobka 119aad

Faqradiisa 6aad isna wuxuu sheegayaa in haddii madaxwaynuhu meesha ka baxo 30 cisho gudahood lagu dooranayo marka isku wax ayay sheegayaan labadaasi faqradood ee 3aad iyo 6aad. Marka waxaan jeclaan lahaa in guddiga dib-u-eegaysa dastuurku ay mid ku koobnaato, salaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu.



**Xil. Mohmed Harun Abdillahi**

Guud ashaan xildhibaanada labada gole aad baan u salaamayaa intaan billaabin waxaan ka hormarinayaa hadalka guddoomiyaha gudiga lasocodka halkaan ka jeediyay waxaad mooddaa qaarkood inuu carrabka uleexinayo siduu jecel yahay.

Dalkan dadka xildhibanada ka noqonayaan waa iney deegaan ku yihiin labo sano ayaa lagu soo qoray, laakiin waxaad mooddaa inuu ka booday, awoodihii aqalka sare si inuu udurayo ayaad mooddaa doodad is bar bardhigga oo waxaad dhahdaan intaas iyo intaas ayaa loo batay, ileen aragtida waa kala duwanayd hal meel kuma aruursanayn ama leexinta aad leexinaysaan iyadoo dooddii weli dhammaaninka dhafaa waad mahadsantihiin.

Qod 110aad wuxuu dhigayaa shuruudaha xilka madaxweynaha waxaa kamid ah muwaadin inuu yahay, da'diisa inay kayareyn 40sano tan iyo 1960kii da'40 ayaa la sheegayey, xukuumaddii 40 ayaa lasheegayey.

Waa run nabiga SCw ayaa lagu soodajiyay waxyiga 40jir isagoo ah, laakiin meel hoggaanka ku doorta 40 majirto,40 hadduu wax tarayo Soomaaliya ishaasey leedahay, mana yeelateen dadkiina dha/llinyar bay ubadan yihiin. Da'dan aan marwaliba kor u qaadeyno wadamada badan caalamka oo qaarkood awood waa weynleh da' 40 kuma xiraan qaarkood 30jir hoggaamiyaal ka'ah, qaarna da' kasii yar baa noqota 40 aan mar waliba kor uqaadayno dalkiina dhallinyar ubadan yahay aynu kadeyno oo da'du wax badan masoo kordhiso, laakiin wax garad baa loo baahan yahay da'looma baahna.

Qod 110/G,oo sheegaysa inuu shansano dalka joogo in lakordhiyo ayaan qabaa 10sano inuu si rasmi ah u daganyahayma ahan iuuyimid hadana baxo,waa inuu si rasmi ah udagan yahay duruuftiisa dhaqan,dhaqaale iyo marxaladdiisa siyaasadeed uu yahay qof waayo arag ah sifiican u fahansan, degnaanshaha inaynu waajib kadhigno weliba ayna oran inuu dagnaado ee aan dhahnaa si rasmi ah, qofka waa bixi karaa xaalado caafimaad buu ubixi karaa, booqashooyin buu utagi karaa, laakiin deegaankiisa rasmiga ah waa inuu deeganka yahay.

Qod 110/K, oo kahadlayo marka uu xilka madaxweynimo uu ku guuleysto inuu ka tanaasulo jinsiyaddiisa, waa inaan dhahnaa kahor intaanu guddoomin shahaadada musharraxnimo waa inuu caddeeyaa inuu katanaasulay jinsiyad waddan kale haddii uu haysto.
Doorashada madaxweynaha oo Qod 111/2aad, waa inuu haldheeri noqdaa musharraxa 51% helaa wareeg kale in lagu celiyo maaahan, laakiin ka yar hadduu helaa markaas ayay noqoneysaa wareeg kale in lagu celiyo.

Codeynta isla Qod 111/6aad oo ah codeyn qarsoodi ah maadaama dadka xisbiyo loo wareegayo maadaama ay xisbiyadu ay team samesanayaan,waa iney qarsoodi noqon gacantaag waa inay

noqoto,haddii wali qorsoodigii ay tahay micna ay xisbiyadu sameenayaan majirto isma qaado axsaab baan uguu reynaa iyo baarlamaan baa dooranaya codkiina qarsoodi buu noqonayaa ,xisbiga "majority" ga hela waa in la yaqaanaa, haddii uu "majority" helin co'ordition-ka uu sameystay waa in layaqaanaa codku waa inuu gacantaag noqdaa waxaa meesha ka baxaysa waxkasta oo tuhun ah iyo musuq la adeegsado, markaa codkaas waxaan adkeenayaa inuu marnaba qarsoodi noqon mar haddii xisbiyo loo gudbay ee uu gacantaag noqda.

Qod 111/7aad wuxuu dhigayaa madaxweynaha la doortay inuu 15maalmood xafiiska kula wareego in lakor dhiyaa qabaa , sida wadamo badan dimuqraadi ay qabaan muddo bil ah, 30maalmood waa inuu xafiiska kula wareegaa. Haddii madaxweynihii baneenayey qudhiisu waxaa laga yabaa inuu ku tala galayo inuu sii joogo,30maalmood waa muddo yar xilwareejin rasmi ah oo qurux badan loo diyaariyo waa in 30 maalmood laga dhigaa halkaad 15 ka dhahdeen.

Qod 114aad oo ah awoodaha madaxweynaha xildhibaankii iga horeeyay ayaan la qabaa qod 114/1aad madaxweynuhu inuu ra'iisul wasaaraha ka keenaa xisbiga aqlabiyadda hela waa inaynaan iska furnaan, maadaama axsaab loo gudbay xisbiga aqlabiyadda ayaa noqonaya ra'iisul wasaaraha JFS, madaxweynuhu waa in la soo xaddidaa.

Farqaddiisa 12aad oo madaxweynuhu ka hadlayo cafiska uu fidinayo inaan ku darno cafis keli keli ah iyo cafis wadar ah, waxa kale madaxweynuhu uu cafin karo aynu ku darno qof eedeysane ah maxkamadeyn ku socoto, mararka qaarkood dalka in la isku haayo ayaa la rabaa sababo siyaasadeed ama bani'aadanimo iyadoo maxkamadeyntiisa dhammaan inuu cafin karo, taas inaan ku daro ayaan qabaa.

Cafis eedeyn qof ku socota marxalado gaar oo isagu madaxweynaha xeerinayo inuu cafis u fidin karo ileen waa la garan karaa qofka haddii dambiga lagu helay ciqaabta uu la kulmi karo, haddii qofka soo codaso uu isleeyahay waa laguugu heli karaa dambigaas inuu iyadoo habraacii maxkamadda dhammaan madaxweynuhu uu cafin karo iyadana halagu daro.

Qod 114aad 13, shuruud bay ka koobnaayeen inuu madaxweynuhu toos u magacaabo isagoon "aprovel" goloyaasha ugu baahneyn xilalka saree e madaxtooyada ama caawiyaashiisa maadaama aan dhahnay taliyaashii iyo daljirayaashii, aqalka sare hala mariyo micnaheed waxay ka dhigan tahay madaxweynuhu shaqadiisa inta badan xilalka uu magacaabay inay "aprovel" ubaahan yihiin golayaasha, caawiyaashiisa hadday la taliyaal yihiin,hadey shaqaalaha sare madaxtooyada yihiin,hadey madaxda amnigiisa yihiin kuwaas inuu toos u magacaaban karo inaanu ku darno. Sidoo kale qaybo kamid ah dibadda inuu too "aprovel" ubaahneen golayaasha inuu isagana magacaabi karo ineynu ku darno.

Qod 117aad wuxuu dhigayaa xayuubinta madaxweynaha farqaddiisa koowaad seddex xaraf baad ku soo koobteen A,B,C oo ah khiyaano qaran,ku xadgudub dastuurka iyo xeerarka jmahuuriyadda iyo xil gudasho la'aan.

Madaxweynuhu waa bani'aadam haddii uu dambciyo culus galo haddii uu dil geysto,hadduu kufsi galo dambiyo culus "high crimes" waa inaan ku darnaa hadduu madaxweynuhu galo, xil xayuubin baa lagu sameenayaa waana lamaxkamadeyn karaa,midda kale xasaanada ayaad kaga hadasheen inaan lamaxkamadeyn karin intuu xilka haayo, haadii uu dambiyo culus galo

madaxweyne miir qaba malaha ka fikirteen,mid aan miir qabinna waa ina soomari karaa, hadduu miir qabin sharcia xilka ka qaadayo, laakiin dadka qaarkood udhaqmeyn si aan caadi aheynna wa ina soomari karaa, dambiyo culus hadduu galo ayadana inaad ku dartaan baan jeclahay.

Farqaddiisa 2aad xarafkiisa C waxaad ku sheegteen daacad u noqosho quwado shisheeye dalal shisheeye quwad macada, dalal shisheeye haddii uu daacad u noqdo gacansiiyo ama basaas u noqdo waa inuu xil xayuubin lagu sameyn karaa.

Qod 119aad wuxuu dhigayaa banaaneynta xilka madaxweynaha geeri, is casilaad qoraal ah oo ugudbiyo guddoomiyaha aqalka sare aad baad u soo qurxiseen maadaama golaha shacabka ku sime noqonayo oo isaga duban oo daangeesan ay ka madaxbanaanaato, iscasilaadiisa inuu u gudbiyo gudoomiyaha aqalka sare maxkamaduna ay ku dhawaaqdo banaanta xilkaasi.

Awoodaha madaxweynaha haddaan dib ugu noqdo xildhibaankii iga horeeyay wuu ka hadlay xilkaqaadista iyo magacaabidda guddoomiyaasha maxkamadaha dastuuriga iyo maxkamadda sare inkastoo qabo in la isku daro labadaa waa inuu golayaasha “approval” ka helaa, caddaalad haddii la helo garoorku waxaa larabaa caddaalad iyo muxaafad inuu u caddaalad falo.
Dastuur markay timaado siyaasad baa soo galeysa waxyaabo mararka qaarkood aan ka farxin madaxweynaha xilka haya ama xukuumadaasa imaanaysa waa inuu “approval” helaa marku xilka ka qaadayo waa soojeedinayaa labada gole inay cod aqlabiya ku ansaxiyaan guddoomiyaha maxkamadda dastuurka iyo maxkamadda sare.

Qod 119/3 in xilka madaxweynuhu banaa naado in muddo 30maalmood gudahood lagu soo doorto 30maalmod aad bey u yar tahay, seddex cutub muddo 30maalmood ku dhow beynu wadnaa waa in la kordhiyo oo 60maalmood laga dhigo ayaan tala ahaan soojeedinayaa, haddii jagada madaxwyne nimada banaa naato sii hayaha xilka madaxweynuhu guddoomiyaha gola shacabka waxaad moodaa sidaa soo dhigteen aad bay uqurxanyihiin, laakiin guddoomiyuhu sii hayaha ahaa wuxuu rabaa inuu dalkii maamulo waa markay banaanaato. Sii heyntii baa laba kala ah marna madaxweynihii waa joogaa,oo safar buu ubaxay ama howle kale ayaa ku soo baxay,marna madaxweynihii geeri haku timaado ama iscasilaad haku timaado xilkii baa si rasmi ah u banaan.

Markuu xilka banaanaado labadaasi waa inay noo kala duwanaato, markaa uu noqdo gudoomiyihii markaa sii hayaha madaxweynaha, nin maamulka dalka gacanta ugu jiro,inaad ku dartaan inuu sameyn karo shaqo joojin haddii aad dhahdaan waxna ma magacaabi karo waxna ma cayrin karo cidba ka amar qaadaneyso.

Ugu yaraan inuu shaqo joojin sameyn karo inuu ka jawaabi karo xaaladaha degdega ah ee dadka soo food saara, laakiin hadaad dhahdaan halkiisuu joogayaa doorasho inuu qabto waa laga rabaa cidna kama amar qaadaneyso waa ninaan waxna cayrin karin, waxna magacaabi karin, waxna shaqo ka joojin karin ,haddana shaqo laga rabo isma yeelaneyso.

Awoodahaas aynu kala qaadno marna waa ku sime madaxweyne dalkii jooga oo shaqadiisa wata laakiin howlo caafimaad umaqan ama howlo safar umaqan, arna waa jago madaxweyne nimo banaan, 60ka maalmood halagu koobo, awoodaha maamul ee uu yeelan karana wax halagu kordhiyo oo sidan yaa looga tagin.

Inta badan Qod 129aad maan soo akhrin, laakiin waxaan arkayay da'da golaha wasiirrada isna 40laga dhigay, madaxweyne 40,wasiiradii 40,dalka halka loowado garan maayo 75% waa dhallinyaro,dadkii waaweynaa horey loo soo tijaabiyey guul iyo waxba ma aysan keenin,dhalin yartii ay hakradeyn oo inta badan soo taagnayeen ee dal qurux badan ay udhisi waayeen,hadana in layiraahdo fursad mahaysataan ilaa inta aan noolnahay waa musiibo.

Da'daas inaan marnaba lagu xirin ilaa 25,20 waa lagu celin karaa qofka wasiir ku noqon karo qofka hadduu kartideed uu leeyahay "leadership" ka wadanka muddo in lasoo diyaariyo ayuu u baahan yahay,laakiin maalinkasta haddii 40jir leader ku noqonayo cimriga inta uu haystana 60 baalagu qayaasaa, kii kale aan 40 soogaarin cidba waxba udirin waa gap baa imanaya leaderka muddo ayuu u baahan yahay in lasoo diyaariyo da'da in iyadana laga saaro.

Farqadda ah inuu raysalwasaaruhu magacaabo, xilkana ka qaadi karo raysalwasaare ku xigeenka ama ku xigeennada ama wasiirrada hakal badalnaadaan, waxaan qabaa madaxweynuhu isagoo u magacaabayo raysalwasaaraha inuu ku xigeenkana isna magacaabo, raysalwasaaruhu wasiirka iyo wasiir ku xigeenka magacaabo, hadhow beddelaadooduna in golaha si lamid ah oo raysalwasaaraha ay isla baxaan.
Waad mahadsantihiin.



**Sen. Mohamed Abdi Osman**

Mahadsanid Guddoomiye, mudanayaasha sharafta leh labada aqal, labada guddi oo kasoo shaqeeyay dastuurka, marti sharafka, habdhowrayaasha, ciidamada qalabka sida oo amaankeena sugaaya iyo warbaahinta waan idin salamayaa Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.

Mudanayaal inta aanan billaabin doodayda cutubka 7aad, 8aad waxaan rabaa wax yar oo mulaaxadaad ah, inaan ka iraahdo chapter-kii ka horeeyay mudanayaasha sharafta leh, waxaad modaa labada gole aynu nahay ineynu isku cabireyno gole waliba siduu asaga uu yahay, waxaan leeyahay labada gole waa laba gole oo "institution" aduunka ka jira, taas aan ku abalgareyno waa mahadsantihiin.

Markaan gudagalo dooddayda qobodka 110aad farqaddiisa (k) musharrax heysta jinsiyad dal kale uu caddeeyo ka noqoshada jinsiyadda hadduu ku guuleysto madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya, horta dalkeenu "dual citizen" waxaa la ogolyahay qofka inuu heysto labo dhalasho.

Marka uma jeedo sabab ku khasbeysa inuu jinsiyadii 2aad uu heystay inuu ka noqdo, waxaan qabaa in arrintaasi meesha laga saaro, oo muwaadinka labada jinsiyadood uu haysto, labadoodaba uu heysan karo.

Qodobkaa 110 faqraddiisa 4aad musharraxa madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya waxaa musharraxnimadiisa soojeedin kara saddexda xisbi siyaasadeed ee ka misna ka mid ah xisbiyada, horta saddex xisbi qaran xisbiyada, waxaan filayaa iney ahaayeen xisbiyada ahayeen xisbigii, ururkii 10% ka hela dorshooyinka inuu u gudbaayo xisbi qaran,

marka ma filaayo iney saddex xisbi keliya tahay saddex xisbi ku jaan go'antahay, doorshada saddex baa helo karta, afar baaheli karta iyo ka badan taasna waxan leeyahya iyadana dib haloogu noqdo.

Qodobka 112aad  oo ah dhaarta madaxweynaha waxaan qabaa dhaarta madaxweynuhu iney koobnaanto macnaheedunu inuu aaad u qeexan yahay markaa labadaan aad isku barbardhigay tan danbe markaan aad isku barbardhigay waxaan qabaa in dhaartii hore lagu celiyo iyada ayaa ka kooban, in lagu celiyo ayaan qabaa, sababta waxa waaye dhaartu waxay u baahantahay waxyar oo kooban.

Markaa dhaarta hore in lagu celiyo ayaan qabaa, intaa markaan kaga baxo isla qodobkaas 112aad waxaa la yiri  musharaxiinta markay tartamaan labada musharax oo ugu horeeya  ayaa ku noqonaaya ninka labaad waxaan qabaa midka labaad sidii hore in lagu celiyo, waxaan qabaa in lagu celiyo 4ta musharax oo ugu sareeya inay aadaan wareega 2aad ka bacdina sidii iney kusocota haddii kala bixiwaayaan kan 3aad sababtu waxa weeye mararka qaarkood waxaa dhacda oo jira musharaxa 3aad inuu noqdo kan guuleystaha Meesha inagu aan leenahay labada musharraxood keliya ha'aadaan round-ka 2aad taas waxaan qabaa in teedii hore lagu celiyo oo ah 4ta musharrax oo ugu sarraysa inay round-ka 2aad aado waad mahadsantihiin.



**Xil. Mohamud Abdirahman Omar**

Qodobada inta aanan u gelin oo aan dul istaagayo, waxaan faalo yar ka bixin lahaa warbixiahintii uu ina siiyay guddoomiyaha guddiga lasocodka dastuurka ee baarlamaanka Mudane Xuseen Iidow, waxaan kula talin lahaa marka uu inoo sheegayo warbixintii ama dooddii hore ee dhacday markuu warbixin ka bixinayo inuu ku saleeyo boqolley oo wixii laga dooday, tiradii xildhibaanadii ka dooday, hadday 20 ahaayee, hadday 10 ahaayeen, hadday 15 ahaayeen uu ku doodo uu soojeediyo oo uu yiraahdo, dooddii horre ee dhacday, intaas oo xildhibaan ayaa dooday, boqolkiiba intaas saas ayay yiraahdeen, boqolkiiba intaasna, marka uu boqolley ku saleeyo warbixinta, ayaan soojeedinayaa oo aanu ka labalabayn, xaggaas ayay u janjeertay iyo xiggaasi ayay u janjeertay mid toona, taasi waa iga talo. Midda kale, talo kale ayaan u soojeedinayaa qolada kale karaaniyiinta ee qorta buugga, mathalan qodob kamid ah qodobada ayaa faqradiisa koowaad waxaa la qorayaa xarfo, markaas ayaa A,B,C,D lagu qorayaa, buuggana Af-Soomaali ayuu ku qoran yahay, marka anigu waxaan soojeedin lahaa Af-Soomaaligeena inaan iska wadano B,T,J,X laga dhigo xuruufaha, faqradaha ka hoos baxayana taana waan soojeedinayaa maadaama aa nahay dad Soomaaliyeed oo af Soomaaliga wada fahmaayo.

Aan gudagalo, marwalba waxaan hambalyo iyo bogaadin u soojeedinayaa guddiyada ka soo shaqeeyay dastuurkan aynu hayno qabyo qoraal kiisa iyo wax-kabadel kiisa ku fooggannahay. Qodobka ugu horreeya aan gudagaloyo 109aad oo ka hadlaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,  faqradiisa 3aad, waxay ka hadlaysaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa inuu ugutaa waajibaad kiisa si waafaqsan shareecada Islaamka, markii horre warbixin bay ahayd ayaa ku qorneed dastuurkii horre oo waxaa qornaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu xil kiisa  u gudanayaa si waafaqsan,  taasi runtii iska war bay ahayd, waxaan ku boggaadinayaa in la waajibiyay iminka inuu xil kiisa u guto oo ay waajib tahay sida dastuurka iyo shareecada Islaamka qorayo lagu

xaddiday, taa aad baan ugu boggaadinayaa xubnaha ka soo shaqeeyay arrintaasi. Qodobka 110aad, shuruudaha doorashada xilka madaxweynaha qodob kiisa koowaad ee xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa loo dooran karaa qofkasta oo oo buuxiya shuruudahaan soo aocda: faqrada koowaad ee (A), waan hambalyeynayaa, waa sax, waa inuu yahay Muwaadin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo Muslim ah. Xarafka (D) oo ka hadleysa aqoonta Madaxweynaha oo heer Jaamacadeed ah, waa sax, waxaase la qoray, waa inuu leeyahay waaya-aragnimo 15 sanadood ah, taas waxbaan ka badeli ahaa oo hoos ha loo dhigo ayaa oran lahaa, aniga waxaan soojeedinayaa waayo-aragnimadiisa in laga dhigo 10 sanadood waxyar maahan, qof maamul ku soo jiray muddo 10 sanadood ah, dee waayo-aragnimo u dhiman ma jirto ayay ila tahay dadkana waa in chance la siiyo oo lagu xaddido 10 sanadood. Faqrada (g) oo sheegeysa inuu ku noolaado Dalka Jamhuuriyadda Federaalka dhexdiisa, muddo 5 sanadood ah, ayadana waan qafiifin lahaa oo waxaan sookordhin lahaa halkaasi in laga dhigo muddo ugu yaraan 3 sanadood ah, 5 sanadood way badan tahay, madaxweynayaasha iyo tartameyaashu inta badan dibadda ayay ku nool yihiin, marka waxba yaan la soo luggooynin ee laba sano ama saddex sano oo keliya haka soonoqodo reer kiisa oo sideenu wada naqaano dad keenu waa diaspora oo caruurahuudu iyo reerrahoodu meelahaas ayay iska joogaan, marka uu tartanka imanayo laba sano ama saddex sano haka soo horreeyo ayaan anigu oran lahaa, marka waxba yaan la soo dadijin madaxweynaha ama ninka halgamaya.

Faqradda (i) meel ay ugu dambeysa oo sheegeysa inuu cddeeyo hantidiisa, taa anigu markii horrena waa sheegay ee laga hadlaayay baarlamaanka, hantida caddeynteeda mid uu asaga iska soo qortay yaan lagu deynin, waa inay noqoto hanti itusi oo itaabsii ah, guddi heer qaran ah oo dalku leeyahay oo la aaminsanyahay waa inay soo tirakoobtaa hantidiisa ama dibadda ha u taalo ama gudaha ha u taalo, itusi oo itaabsii inay noqoto ayaan soojeedinayaa.

Qodobka 111aad oo ka hadlaya doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, qodob kaani waa muhiim buu anigu ii yahay, 2sanao ama sanad kahor waxaynu aad uga doodnay afartii chapter ee dastuurka ku meel gaarka oo wax waaweyn aynuka badelnay berigaa dhaweed, iminkana wixii aynu badelnay ayaa dib loo soo celiyay oo faqraddiisa koowaad waxay sheegeysaa, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa kulan wadajir ah ku dooranayo labada gole ee baarlamaanka federaalka, qodob kaan, inaynu xoog isku dul taagno ayaan qabaa, inagu waxaynu ka shaqeynaynaa dastuur ummaddeed oo mustaqbal dheer ah, aragtideena waxaad moodaa inay ku soo kooban tahay waxaan aynu la qabsanay ee doorashooyin kaan dadban iyo waxyaabaha iminka jira.

Inta badan mujtamaca Soomaalida ama aqoon yahan ha ahaado ama shacab caadi ah, laba arrimood ayaa maskaxdooda aad uga dhagan tahay, arrintii dictatorship-ka ee dawladii kacaanka, waxyaabihii maskaxda kaga haray dadka weli way la sii haystaan, hadda iminka marka aad meelahaas mareyso, mararka qaar kood waxaad arkeysaa dadka inay u dhaqmayaan sidii dictator-nimada, intaan dambe ee Carta ka sokeysay ee 25-ka sanadood ahna, dadka waxaad moodaa maskax dooda inay qabsatay doorasho dadban in lagu jiraayo. Dastuurkan aynu ka shaqeynayno Ummadda Soomaaliyeed ee mustaqbalka 2050-ka, 2090-ka iyo wixii ka sii halmaala ayaynu u dhigaynaa, marka anigu argtida aan soojeedinayo waxay tahay, horta dal kaan waa inaynu laba ukala qaaadno, dal ri'aasi ah oo madaxweyne xukumaayo ama waa dal parliamentary ah oo raysalwasaare iyo baarlamaan xukumayaan labadaa inaan mid doorano ayaa horta muhiim ah, waxaan aynu isdhexgelineyno ee la leeyahay iminka waxaynu ku

soomarnay halka horre amaba golaha shacabka iyo golaha aqalka sare waxaa soo dooranayo cutubka 4aad, shacab weynaha Soomaaliyeed ayaa soo dooranayo, maxaa diidaya madaxweynaha inay soo doortaan muwaadiniinta Soomaaliyeed? Illeen maahan dastuurka laba cisho, qaybtii hore aynu beddelnay ee cutubka 4aad, waxaa lagu sheegay, madaxweynaha 4 nin baa u yimid oo mucaarad ah, markaas ayay yiraahdeen dastuurka wax halaga badelo, niman kaas u yimid madaxweynaha ee mucaaradka ah madaxweynayaal dawlad goboleed ma ahayn, niman baarlamaan ah maahayn, Niman suuqaa iska joogo oo magaca mucaaradnimada qaatay ayay ahaayeen, illeen inagu waxaynu nahay matalayaashii ummadda Soomaaliyeed ilaa corner ilaa corner ayaynu matalnaa, waxaynu soo saarnaa sharci buu dal kaan u yahay, maadaama waxkasta aynu soo saarno 329 xildhibaan oo ummadda matala ay ansixiyeen ee 4 nin beddelayaan intay madaxweynaha kala sheekeestaan, maxaa diidaya maantana markaynu niraahno waxaa dooranayo labada gole, saa dambe inay 6 nin u yimaadaan madaxweynaha, hadana yiraahdaan ka beddel oo nooc kale u dhig, arrintaas aad ayaan u diidannahay aniga.

Maahmaah baan sheegayaa, waana yara faanayaa maanta ee raalli hala iga ahaado, nin baa arkay nin saddex ama afar halaad oo geel ah wado, taa iyo taa dhididku ka da'ayo oo u foorinayo oo u heesaya, markaas buu maqaaxi intuu soo yara fadhiistay, koob shaaha ka cab buu is yiri, nin kii oo xiiqsan markuu arkay buu ku yiri: "War xageed ka timid?" "Geel baan waday" ayuu ku yiri, "Aaway geelii?" buu ku yiri, saddex halaad oo halkaas sii socdo ayuu tusay, waa kaas, "Ma saddexdaas halaad baa sheegaysaa?" Allaylahee anagaa geel leh, cid u faanta ama u heysta ayaynu la'nahay buu ku yiri.

Horta aniga mandiqada aan ka soojeedo ee Soomaaliland ayaa Allaylahee nidaam doorasho iyo nidaam dimuqraadiyadeed iyo doorasho hufan oo xalaal ah ayay taalaa, haddii aynu runta isku sheegayno oo Soomaali is indha buuxinayso. Somaliland oo ah mandiqadda aan ka soojeedno, muddo 10 sano ka yar markii dastuurka Jamhuuriyadda la sameeyay, madiqaddaas ayaa waxay kaga baxday doorashadii dadbanayd, inaganu ilaa maalintii Carta la soo saaray Jamhuuriyadda saddexaad ilaa maanta oo 2026 ah ayaa ilaa iminka waxaynu sii qoraynaa Teendhadii halagu sii socdo oo Madaxweynaha Teendhada halagu doorto, arrintaas ayaan daro ayaan u arkaa iyo inaanay sax ahayn, marka halaga beddelo, qodob kaan soojeedinayo waa in lagu qoro, Madaxweynaha ummadda Soomaaliyeed ama Muwaadiniinta Soomaaliyeed ayaa si xor iyo xalaal ah u soo dooranayo, taana intaa ayaan ku dhaafayaa. Isla qodobka faqradiisa 6aad, xarafka (b) waxaa la sheegay, Madaxweynaha marka la dooranayo, inkastoo anigu diiday in Teendhada lagu dooranayo in wareegga labaad, wareegga koowaad hadduu aqlabiyad ku heli waayo qofka Madaxweynaha noqonaayo, wareegga labaad ayay u soo gudbayaan labada musharaxa ee ugu codka badan oo keliya, arrintaa anigu waan diidanahay, dadka in chance la siiyo weeye, 40 qofood in ka badan ayaa berrigii dhaweed isa soo sharaxay, maadaama musharraxiinta ay badanyihiin sideedii horre ha lagu daayo oo wareegg saddexaad halagu kala baxo, wareegga koowaad haddii aqlabiyad saaxii uu heli waayo musharraxu, wareegga labaad afarta qofood ee ugu codka badan ha u soo gudbaan, wareegga saddexaadna labada qof ee ugu codka badan, haddii lagu kala bixi waayo wareegga labaad ha u soo gudbaan. Taasna intaa ayaan ka leeyahay.

Qodobka 112aad, dhaarta madaxweynaha, waxaan boggaadinayaa dhaarta iminka halkaan ku qoran, waa dhaartii dastuurkii horre ee ku meel gaarka ahaa ku qorneed inay dib u sooceliyeen hawlwadeenada ama guddiga inoo soo diyaarisay hab qoraal kaan, marka dhaartaan ayaa ka faahfaahsan tii horre waayo waxay sheegeysaa oo qofka la dhaarinayo uu oranayaa, waxaan ku

dhaaranayaa magac Ilaahay, inaan xil keyga u guto si daacad ah oo ay ku jirto danta dalka, dadka iyo diinta. Marka dhaartani waa dhaar waafi ah oo anigu aan soojeedinayo qofkasta oo xil loo dhaarinayo ilaa heer madaxweyne, ilaa heer agaasime lagu dhaariyo siiqadan oo aan waxba u dhimaynin tii hore.

Qodobka 113aad oo ka hadlaya xasaanadda madaxweynaha, faqradiisa 3aad, waxaa la qoray madaxweynaha kasta oo xilka u baneeya si nabad iyo dimuqraadi ah, wuxuu xaq u leeyahay maamuus qaas ah oo lagu xusayo xeer gaar ah, qodob kaas waxaan oran lahaa waxaynu ku sheegnay qodobka 82aad, faqraddiisa 3aad, madaxweynaha markuu xilka baneeyo inuu xubin sharafeed qiimo leh ka noqonayo aqalka sare , halkaas ayey ku caddahay, marka xeer gaar ah oo xusayo oo inaan waxba loo baahneen mar hadduu xubin sharafeed maamuus leh ku yahay xubnaha aqalka sare. Qodobka 114aad oo ka hadlaya awoodaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaan ka soo qaadanayaa faqradda 2aad oo lagu sheegay Madaxweynaha waa taliyaha guud ee ciidamada qalabkasida, xagga hore waxaynu ku soo sheegnay taliyeyaasha ciidamada waxaa magacaabayo oo ansixinayo golaha aqalka sare, anigu waxaan soojeedinayaa maadaama Madaxweynaha yahay taliyaha guud ee ciidamada qalabka sida, magacaabista inuu madaxweynaha yeesho, ansixintana aqalka sare loo daayo oo aan la iskugu darin aqalka sare inay ayaguna magacaabaan, ansixiyaanna, labadaa eray kala qaada ayaa maalintii horre ku dooday, marka magacaabista madaxweynaha maadaama madaxweynaha uu yahay Madaxweynihii Jamhuuriyadda, qofka ciidanka ah ee Jananka ee la shaqeenayo ee u daacada ah, asagaa garanayo, bulshada ayuu ka soo xulanayaa, ansixinta aqalka sare ha loo daayo.

Wakhtigii baa iga dhammaaday ee hal daqiiqo hala igu daro, isla qodobkaa faqraddiisa 5aad ee sheegaysa awoodaha madaxweynaha inuu magacaabi karo, xilkana ka qaadi karo guddoomiyayaasha maxkamadda sare iyo maxkamadda dastuuriga iyo Xeer-ilaaliyaha Guud, taana waxaan soojeedinayaa inuu garsoorka u madaxbanaanaado, inaan madaxweynuhu keligii xilka ka qaadi karin ee la horkeeno xilka qaadis tooda labada aqal ee baarlamaanka, dee waqtigii baa iga dhammaaday, wax badan ayaan sii wadi lahaa. Aad iyo aad ayaan hambalyeynayaa, waana mahadsantihiin. Asalaamu Caleykum Waraxmatullahi Wabarakaatuh.



**Xil. Mukhtar Mohamed Guled**

Haddaan ku hor maro cutubka 7aad gaar ahaan qodobka 110 aad oo ka hadlaaya doorashada xilka madaxweynaha faqraddiisa 1aad xarafka (g) ama (e) oo ay ku qorantahay, inuu ku noolaado ama deganaado jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya muddo aan ka yaran 5 sano. Waxaan soojeedin lahaa meeshaas in lagu beddelo inuu ku noolaado ama uu imaanaayey 10 kii sano ee ugu danbaysay oo aan xujo looga dhigin 5 taa sano ee ugu danbaysay inuu dalka ku suganaa oo uu joogay. Dadku waa bani'aadam duruufay kala yeelan karaan markaa waxaan soojeedinayaa qof dalka ka warqabay 10 kii sano ee ugu danbaysay imaanaayey inta badana dalku u badnaa in laga dhigo, laakiin shuruuda aan laga dhigin inuu ku noolaa aan laga dhigin ayaan soojeedinaayaa.

Sidoo kale qodobka 111aad oo isagana ka hadlaaya doorashada madaxweynaha jamahuuriyadda federaalka ee Soomaaliya gaar ahaan number 6 ama faqradda 6 aad sidoo kale

xarafkiisa (a) oo ay ku qorantahay wareegga koowaad musharraxii hela aqlabiyadda 50% iyo hal dheeri ah ama 50+1 tirada guud ee xubnaha labada gole ee baarlamaanka federaalka ayaa ku guulaysanaya madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka soomaaliya, haddii la waayo musharax guulaysta waxaa loo gudbayaa wareega labaad. Qodobkaas waxaan qabaa in asalka dastuurka loo laabto oo sidiisii hore lagu celiyo, oo ahayd wareega koowaad madaxweynaha kaliya wuxuu ku guulaysan karaa ama uu kugudbi karaa wareegga koowaad oo uu madaxweyne ku noqon karaaa two-thrid labada gole inuu noqdo ayaan qabaa, laakiin aan laga dhigin 50+1 ayaan soo jeedinayaa qodobkaasi.

Sidoo kale qodobkaa 113 aad oo isagana ka hadlaaya xasaanadda madaxweynaha faqradda 1aad waxaa ku qoran madaxweynaha laguma maxkamadayn karo gudashada waajibaakiisa dastuuriga ah marka uu xilka ka dego haddii uusan gelin gabol fal la xidhiidha xuquuqda aadanaha. Markaa calaamad su'aal waxay ka taagan tahay xuquuqdii aadamaha qof kasta ama shakhsi kasta wuxuu ufasiran karaa nooc uu urabo waxaan soojeedinayaa in meeshaas lagu caddeeyo xuquuqda aadanaha oo ay soo caddayso maxkamadda sare. Xuquuqda aadamaha madaxweynaha xilka ka degay lagu soo eedayn karo waa inay soo caddaysaa maxkamadda sare oo aysan noqonin wax kasta in laga dhigo xuquuqda aadamaha. Sidoo kale isla qodobkaas faqraddiisa 3 aad qodobka 111aad faqraddiisa 3aad oo ay u qorantahay madaxwdeyne kasta oo xilka baneeya si nabad ah iyo dimuquraadi ah wuxuu xaq uleeyahay maamuus khaas ah oo lagu xusayo xeer gaar ah haddii aanu xilka ku banyan maamul ka xayuubin waafaqsan dastuurka. Dhawr qodobbaa waxaan hore uga soo gudubnay cutubyadii hore oo aad ku sheeteen waxaa lagu xusi doonaa ama lagu saari doonaa xeergaar ah, wali ma cadda xeerkaasi gaarka ah cidda soo saaraysa iyada laftigeeda waxaan soojeedinaya faqraddaasi in meesha lagu caddeeyo xeerka gaarka ah yaa soo saaraaya ma labada qolaa ma guddoonka keliyaa ma xukuumaddaa in la soo caddeeyo lafteeda oo cidda xeerkaas gaarka ah oo maamuuska sida gaarka loogu samaynayo madaxweynaha in lagu caddeeyo faqraddaasi.

Sidoo kale qodobka 114 aad oo ka hadlaaya awooddaha madaxweynaha Jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya gaar ahaan faqradda 3aad wuxuu ku dhawaaqaa doorasho xilligeeda laga soo hormariyay si waafaqsan qodobka 87aad ee dastuurka, qodobkana wuxuu ku biiriyay cutubkan kii ka horeeyaan uga hadalnay iyadana xildhibaannadii amaa senatoradii iga horreeyaan la qabaa in laga saaraan soojeedinayaa oo laga saaro oo laga tirtiro.

Sdioo kale qodobka 114aad faqradda 5aad oo ay u qorantahay wuxuu magacaabaa xilkana ka qaadaa guddoomiyaha maxkamada sare, guddoomiyaha maxakamadda dastuuriga iyo xeer ilaaliyaha guud ee qaranka, ka soojeedinta golaha saree e garsoorka si waafaqsan dastuurka iyo xeerarka kale ee jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya. Haddii madaxweynaha maxkamadaha ama garsoorka isaga hadduu soo magacaaabo xilliguu doonana xilka qaadi karo waxaan isleehay garsoor caddaalada ama waajibaadkiisii si dhaba u guta lama helidoono markaa sidaa darteed waxaan soojeedinayaa si maxkamadaha ama garsoorka awood u yeeshaan oo shaqadooda madaxbanaani ugu dareemaan in uu macagaabista madaxweynaha uu lahaado, laakiin xilka qaadistooda ay lahaadaan labada aqal waxaan soo jeedinayaa in lagu daro faqraddaasi. Xilka qaadista hay'addaha garsoorka gaar ahaan maxkamadda sare maxkamada dastuuriga iyo xeer ilaaliyaha guud in cidda xilka ka qaadaysa inay noqoto labada aqal ee golaha.

Sidoo kale isla qodobka 114aad faqradda 8aad wuxuu saxeexaa heshiisyada caalamiga ah ee uu ansixiyo baarlamaanka federaalka Soomaaliya qodobkaasi ama faqraddaasi asalka dastuurka shalayna waa ka hadalnay oo cutubka 6aad, qodobkiisa 90aad asalka dastuurka sidaas uma qorna. Waxay u qorantahay wuxuu saxiixaa heshiisyada caalamiga ah ee uu ansixiyo golaha shacabka ee baarlamaanka federaalka Soomaaliya, markaasi meeshaas inaad golaha shacabka ka saartaan oo aad baarlamaanka ka soo dhigtaan waxay abuuraysaa khilaaf, markaa waxan soojeedin lahaa in qodobka 90aad asalka sidiisii loogu laabto aa u ogolaanaayay golaha shacabka inuu ansixiyo natiijada madaxweynaha ee heshiisyada caalamiga ah inuu ansixiyo ka dibna madaxweynuhu saxiixo.

Isla sidoo kale qodobka 114aad faqraddiisa 9aad waxaa ku qoran madaxweynaha wuxuu ku dhawaaqaa xaalad dagaal iyo mid degdeg ah sida ku waafaqsan dastuurka iyo xeerarka kale ee jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya. Waxaan qabaa faqraddan in lagu caddeeyo madaxweynaha si uu san iskaga dhawaaqin xaalad degdeg ah ama xalad degaal oo laga yaabo xilli doorasho ay soo dhawdahay inuu ku dhawaaqi karo waxaan soojeedinayaa faqraddaasi in la caddeeyo inay labada gole markuu ku dhawaaqo kaddib inay labada gole ansixinaayaan, xaaladda dagaal ama xaaladda degdega ah madaxweynaha ku dhawaaqay ilaa labada gole ka ansixiyaan, in ay dhaqan gal ahayn inuu ku caddeeyaan iyadana soojeedinayaa.

Sidoo kale qodobka 117aad oo ah eedaynta iyo maamuuska xayuubinta madaxweynaha jamahuuriyadda federaalka Soomaaliya gaar ahaan faqradda 3aad waxaa ku qoran hindisa soojeedinta eedaynta madaxweynaha ee ku xusan faqradda 1aad, waxaa golaha shacabka baarlamaanka horkeeni kara ugu yaraan 3 saddex meelood hal meel xubnaha gola kasta ee baarlamaanka federaalka. Meeshaas waxaad mooddaa waxooga in qaybta hore iyo qaybta dambe is lahayn oo labada qoraal is waafaqsanayn sababtoo ah qaybta ugu horraysa waxaa ku qoran waxaa golaha shacabka ee baarlamaanka horkeeni kara ugu yaraan saddex meelood hal meel, haddana waxaa ku sii qoran xubnaha guud ee gola kasta haddana, markaa labada gole hadaynaan keenay hadda gole kasta aad ku soo qortaan oo baarlamaanka federaalka ka dhigtaan inay error type tahay iyo in kale ma sheegi karo qodobka faqradaa 3aad, guddiga waxaan u soojeedinaya inay dib isku saxaan oo ay hagaajiyaan oo ay ka saaran qabta gole kasta ee baarlamaanka federaalka ka dhigeen. Sidoo kale maxkamadda dastuuriga ah ayaa go'aan ka gaadhaysa in ay eedaytu ay sal leedahay meeshaas waxaaa ku qoran markaa eeddaas madaxweynaha la soo eedeeyay cidda go'aan ka gaadhaysa inay tahay maxkamadda dastuuriga ah.

Isla faqradda 5 aad haddana waxaad ku sheegaysaan in eedda madaxweynaha loo soo jeediyay ee go'aanka eedaynta madaxweynaha wuxuu ku hirgalayaa codayn qarsoodi ah oo saddex meelood laba meel ah tirada guud ee xubnaha golaha shacabka, waxaana go'aanka loo gudbinayaa guddoomiyaha aqalka sare muddo aan ka badnayn saddex maalmood. Markaa isla faqradda 3aad iyo faqradda 5 aad haddana wax isku soo noqonayaan oo qaladkiina meeshaa waxaan filayaa inaad ka fahmi doontaan. Faqradda 3aad waxaad ku sheegteen in loo gudbiyo maxkamadda dastuuriga ah oo go'aan ka gaadhaysa eedayntaasi isla faqradda 5aad markaa haddana waxay kuu sheegaysaa in loo gudbiyay haddana guddoomiyaha aqalka sare markaa laftarkeeda inaad kala saartaan, oo maxkamadda dastuuriga ahayd oo sida asalka dastuurka ah inaad ku daysaan ayaan idiin soojeedinayaa iyadana. Sidoo kale waxaan soojeedinayaa faqradaha 7aad iyo 8aad iyo 9aad in sida asalka dastuurka ahaa iyadana dib loogu soo celiyo faqraddan 7aad iyo 8aad iyo 9aadba.

Qodobka 119aad oo ka hadlaaya banaanaanta xilka madaxweynaha jamahuuriyadda federaalka ah ee Soomaaliya namberka 1aad xarafkiisa (b) waxaa ku qoran is casilaad qoraal ah number 1 aan soo billaabo xilaka madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya wuxuu ku banaanaan karaa sababaha soo socda midkood xarafka (b) haddii aan ka hadlo marka oo sababaha aan ka qabo is casilaad qoraal ah oo uu usoo gudbinaayo guddoomiyaha aqalka sare ee baarlamaan. Meeshaas waxaan qabaa in loo soo waxaan qabaa in lagu beddelo in iscasilaad qoraal ah uu ugudbiyo guddoomiyaha maxkamadda sare, sidoo kale isla lamberka 2aad oo ka hadlaaya guddoomiyaha aqalka sare markuu xaqiijiyo arrimaha kor ku xusan, waa faqradda 1aad  (a) iyo (b) ee qodobkan numberkaa number 2 iyadana waxaan soojeedinayaa in meesha laga saaro oo la baabiiyo . sidoo kale faqradda 5aad isla qodobkaasi oo ka hadlaaya sii haya xilka madaxweynaha ma laha awood soosocda, guddiga waxaan u malaynayaa inay isku qaldeen kusime madaxweyne iyo sii haye madaxweyne. Kusimaha markuu yahay guddoomiyaha golaha shacabka ama guddoomiyaha makuu yahay ku simaha madaxweynaha safar kooban oo maalma ah ama ugu badnaan bil aan gaadhaynin markuu ku maqan yahay, waa la dhihi karaa awooddaha meesha aad ku sheegteen inuusan lahayn, laakiin haddii sii haye uu noqdo macnaheedu waxay tahay madaxweynaha jamahuriyadda federaalka waa isaga ilaa madaxweyne kale laga doorto. Meeshaasi waa inuu noqdaa markaa ama uu yeeshaa awooddihii uu lahaa madaxweyne xilka ka degay ama xilka laga xayuubiyay, qabtaa faqradda 5aad sii hayaha xilka madaxweynaha malahan awood meeshaasi aad ka dhigteen waxaan soojeedin lahaa inaad ka dhigtaan inuu leeyahay awood lamida awoodda madaxweynaha markaa xilka ka degay.

Qodobka 20 aad oo ka hadlaaya golaha wasiirada faqradiisa 1aad, golaha wasiirradu wuxuu ka kooban yahay raysalwasaare, raysalwasaare ku xigeen ama ku xigeenno ,wasiirto, wasiirro dawlayaal iyo wasiir ku xigeenno, xeernidaamka xukuumadda uu soo saaro baarlamaanka federaalka Soomaaliya ayaa lagu nidaaminayaa tirada iyo waajibaadka wasaaradaha. Iyadana waxaan soojeedinayaa meesha aad ka dhigteen ku xigeen ama ku xigeenno aad ka dhigteen inaad hal qaadataan ood ka dhigtaan ku xigeenno. Labada meel inaad ka saartaan ku xigeeno maadaama dalku leeyehay laba raysalwasaare ku xigeen.

Sidoo kale faqradda labaad oo ah faqrad cusub oo hadda lagu soo kordhiyay dastuurka oo sheegaysa raysalwasaarahaa wuxuu magacaabaa xilkana ka qaadaa raysalwasaare ku xigeenka ama raysalwasaare ku xigeennada, wasiirro iyo wasiirro ku xigeenno iyo wasiira dawlayaal kaddib marka uu helo ogolaanshaha madaxweynaha. Meeshaasi ah ogolaanshaha madaxweynaha iyo raysalwasaarahaba xukuumaddu si shaqadii u gudato oo qofkii la shaqayn karana golaha kasaarto qofkii markaa shaqada sidii loogu tala galay u gudan karta ay ula shaqayso. Iyadana waxaan soo jeedin lahaa ogolaasha meeshaasi in lagu beddelo latashi oo in madaxweynaha la tashado oo marka uu rabo inuu wasiir xilka qaado, laakiin ogolaansho hadday noqoto caqabaddii hore u jiri jirtay ayaa sii taagnaanaysa weli.

Qodobkaygii ugu danbeeya oo ah 128 aad xilka qaadida ra'iisal wasaaraha iyo golaha wasiirada faqradiisa 4aad gaar ahaan waxaad soo qorteen, haddii golaha shacabka ay cod gacan taag ah 50% ama 50+1 tirada guud ee xubnihiisa ugu codeeyaan xilkaqaadistta raysalwasaaraha, golaha wasiirrada ama xubin ka tirsan golaha wasiirrada ayaa soo qorteen. Meeshaas markaa 50+1 oo aad ka dhigteen tirada guud ee xubnaha waxay noqonaysaa 275 ta xildhibaan inay fadhiyaan micnaheeda sidaasay u dhigantaa. Markaa waxaan soo jeedinayaa inaad ku dartaan 50+1

guntanka koolamka ka koolumka golaha shacabka oo 139 ah, haddii markaasi 50+1 in raysalwasaaraha xilka laga xayuubiyo ama ay u coddeeyaan inuu shaqadiisa wato in sideeda lagu caddeeyo. Laakiin qodobkaasi waxaa ku qoran guntanka koolamka inaad ku cadaysaan meeshaas aad hadda soo qorteen 275 ayaa muuqanaysa in loo baahnaan doono waad mahadsantihiin.



**Sen. Deka Hassan Hussien**

Bismilaahi arraxmaani arraxiin,

Guddoonka, senatarada, xildhibaannada, habdhowrka, xoghayaasha, howlwadeennada, mediyaha, dhammaantood asalaamu caleekum waraxmatul laahi wabarakaatuhu.

Qodobka 109 faqraddiisa 1aad Madaxweynaha jamhuriyadda faderaalka Soomaaliya, in uu yahay taliyaha guud ee ciidanka in logu daro ayaan soo jeedinayaa.

Qodobka 107 faqraddiisa B ay ka hadlayso shuruudaha, waxaan ku soo dari lahaa markaan xildhibaannada dooraneyno in la yiraahdo heer jaamacadeed, in la kala saarin heerka jaamacadeed ay noqonayaan, waxaan soojeedin lahaa maadaama madaxweynihii qaranka uu yahay, heerka labaad ee jaamacadda inaa ka dhigno hal kaas, aan shuruudaha ku soo darno.
Qodobka 110 ee ka hadlaaya doorashada madaxweynaha faqraddiisa 1aad waxaa lagu qoray inay xaadiryihiin saddex meelood labo meelood ee dooranayaan madxweynaha.

Markaa waxaan soojeedin lahaa maadaama ay doorasho dhacayso xildhibaannada iyadoo dhammaystiran in ay doortaan, ay kaga haboonayd ugu yaraan aan la dhihin, waxaan soo jeedinayaa afar meelood saddex meel ay jogaan, si hadduu qof baxo oo kaleentoo u dhammays tiranto oo qabyo u noqonin. Marka xisaabtii waan sameeyay Golaha Shacabka 67% ayeey noqoneysaa, saddex meelood laba meel, marka haddii afar meedood seddex meel laga dhigo 75% inay fadhiyaa, oo u dhiganta 206 mudane inay fadhiyaan, halka "2/3" ka ahayd 67% oo aheyd 186 inay cod ka ku soo bixi karo 186, laakin inay fadhiyaan waxaa lga rabaa aniga soo jeedin lahaa iyaga oo wada dhan ama in la yiraahdo ugu yaraan afar meelood saddex meel, halka golaha Aqalka sarana "2/3" ka uu ahaa 64% oo idhiganta 36 mudane inay cod uqaadista joogaan aya xaadir yihiin, in laga badiya na waan soo jeedinayaa afar meelood saddex meel laga dhigo, oo u dhiganta 76% oo ah 41 sanatar.

Dhaarta madaxweynaha qodobka 112 waxaan aad u taagersanahay sida  hadda siiqada loo sameeyay, in ay ahaato waan iska ayidayaa. Qodobka 114 awoodaha faqradda 5aad, nuxur ahaan u dhigmaysa inuu leeyahay awooda ah inuu doorasho xilligeeda ka soo hormarto madaxweynahu samayn karo, sidaad  ogaydeen  hore u soo marnay, waxaan soo jeedinay oo ani ahaan soojeediyay in laga saaro meesha, hadda waxaa soo jeedinaya in faqraddaasi meesha laga saaro.

Qodobka 117 eedaynta madaxweynaha, waxaa bogaadinaya in qaabka guddiga madaxabannaan iyo guddiga la socodka iyo hirgelinta dastuurka u soo diyaariyeen ee ah  in ay

soo eedeeyaan golaha shacabka, cod u qaadaan muddo 3 cisho ah u soo gudbiyaan guddoomyiha qolaha aqalka sare, iyadana waa bogaadinayaa aad ayaan u bogaadinayaa. Qodobka 118 kusimaha madaxweynaha, iyadana sidoo kale waa bogaadinayaa in kusimaha madaxweynaha marka uu guddoomiyaha golaha shacabka uu joogo ku simo uu noqdo, haddii uu isaga maqan yahay golaha aqalka sare guddoomiyahiisa inuu noqdo ku simaha madaxweynaha dalka.

Qodobka 121 sharuudaha raysalwasaaraha qofka noqonaya raysalwasaaraha laga rabo, isaga heerka jaamacadeed waxaa soo jeedinayaa isgana inuu heerka 2aad laga dhigo, haddii ay noqoto heerka 1aad ama heerka 2aa laga dhigo, heer jaamacadeed lagu ekeenin oo la xadido, Isla sidaas oo kaleeto goalaha wasiirada iyada in laga dhigo heer jaamacadeed keliya ugu qoran iyadana laga dhigo, heerka 1aad ugu yaraan, intaas ku soo gabagabeen aad aya u mahadsantihiin.



**Xil. Dr. Mohamed Sh. Ahmed**

Alxamdulillah mudane guddomiye, shir guddoonka, xildhibanada sharafta leh iyo guud ahaan guddiyada kasoo shaqeyey iyo bahda saxaafada salaamulaah caleykum waraxmatulaahi wabarikatuh.

Salaan kaddib waxaan, rabaa dhowr qodob in aan dul istaago marka 1aad sidii hada ka horba senatar xasan mesha nooga sheegey dastuurka hadda shantaa cutub hadda socota howlaha aan ka wadno waa howlo iska naash naash iyo qurxin iyo wax  toosin nidaamkii federaalka ee xoogaa soo kaca kufayey, laakiin wax is badal weyn oo jowhari ah aad uguma jiraan saa darteed hadda ciddii hadda mesha ka maqan wax weyn kuma dhaafayaanee wax loo qurxiyay ayay u imaan doonaan hadhow ka faa'iidaysan doonaan waxba yaan aad xasaasiyad looga qaadin.

Markan intaa ka soo tago qodobka 10aad ee ku saabsan shuruuda doorashada xilka madaxweynaha ee faqraddiisa 1aad "D" waxaa lagu sheegay aqoonta looga baahanayahay madaxweynaha iyo khibraddiisa marka heer jaamacadeed iyo in uu leeyahay khibrad 15 sano ah waa fiicantahay ayaan leeyahay waan soo dhoweynayaa, laakiin waxan rabaa in aan ku daro khibradaas waa uun khibrad iska duuduuban marka maadaama xilka uga sareyay waddanka uu qabanayo madaxweynaha in khibraddaas xoogaa macno loo yeelo sida guddomiyaha baarlamaanka iyo aqalka sare iyo raisulwasaraha dadka manaasiibta uga waaweyn ee wadanka haaya waxaan dhihi lahaa halagu daro in ay leeyihiin khibrad shaqo oo dawladeed oo manaasiib dastuuri ah in ay horay u soo qabteen ah mansib dastuuri ah xildh ibaan in uu soo noqdey, in uu wasiir soo noqday, guddi qaran in uu madax kasoo ahaa yacnii wixii mansab dastuuri ah oo dawladnimo looga soo shaqeyey waa in uu khibrad uleeyahay.

Laakiin haddii khibrad waxay tahayba  la iska dhaho waxa laga yabaa ay tahay dawladnimadii dhan in uu daadihiyo oo howlaheedii uu wado ee meshaas dawladnimadeena hay'adeheena  wey dhismayaa. haddaa la kobcinayaa khibrad marka dadka masuulka ah waxaas oo dhan in ay daadihiyaan waa in ay dad wax ka og ay yihiin, laakiin haddii hay'adihii jilacsanyihiin maamulkii hoos ka jilecsanyahay cidda xilkii uga weynaa loo dhiibaayana wax khibrad ah leheyn qaraarka uga sareyseyna leh meshaas xooga marka waxaa kujirta marka waxaan qabaa

khibradaa in sidaa loo duuduubin ee lagu daro in uu ruuxa jagooyinka asiga u sarreeya hadda mida madaxweynaha heynaayee in uu xil dastuuri ah in uu soo qabtay in ay kujirto.

Qodobkaas 110aad ee faqraddiisa 1aad ee faqradda "g" oo iyadana tilmameysaa in uu ku noolaa ama degnaa waddanka jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya muddo 5 sano ah waxaan isleeyahay waa munaasib fiican degnaashahaas dastuurka ma faahfaahinayee xeerarka ayaa xadifi doona waxay noqon kartaa sanadka inta ubadan in uu waddanka joogo macnaheeda in aan waddanka laga safrin ama reerihiisii iyo dadkiisii iyo adduunka uusan lamacaamilin ma noqoneyso waa faahfaahin waxyaabahaas lakiin siguud in loo sheego qodobkaas waa muhiim. Isla qodobka isga ah ee 110aad faqraddiisa "k" oo iyadana ku saabsan qofka madaxweynaha xilka usareeya wadanka qabanaya jinsiyad kale hadduu heysto dhalasho wafan kale ah in uu ka tanaasulo ayadana aad bey munaasab utahay, maxaa yeeley jinsiyada waddanka kale ruuxa waxa uu leeyahay labo tol waa la dhaarinayaa in uu waddankiisa daacad uyahay ayuu ku dhaafanaya marka labo waddan ruuxii usareyay waddanka halmar islama noqon karo jagooyinka uga waaweyn oo guddomiya iyo madaxweynaha iyo guddomiya baarlamaanka labadiisa aqlba iyo raysalwasaraha dhammaantood wey kujirtaa qodobkaas aad baan u taagyeerayaa waa munaasib.

Isla qodobka 110aad faqradiisa 1aad mida udanbeysa oo "L" ah waxaa kujirta iyadana in laga rabo qofka usharxan madaxweynaha in uu xisaab keeno hantida uu leeyahay soo gudbiyo oo hanti dhowrkabguud u gudbiyo macnaha in uu cadeeyo hantida uu leeyahay uuna ugudbiyo hab qoraal ah xafiiska hanti dhowrka guud ee jamhuuriyadda waan taagyeersanahay macnaha waan xoojinayaa uun.

Qodobka 110aad ee faqraddiisa 2aad waxay tilmaameysaa qofka madaxweynaha isku soo sharraxaya waaa in uu xisbi ama isbahaysi ay soo gudbiyaan taas waxay ka dhigantahay wadankii axsaab ayuu noqdey. Ruux iska socdo boorso wata intuu yimaaddo madaxweyna ahay ma dhihi karo intuu lacag bixiyo ee waa in ruuxaan soo koorseeyay oo bulshadii qeyb weyn oo kamid ah gobolada dalka oo dhan matalaayo in uu yahay oo soo gudbiyaan ay dhahaan ruuxaan tartan dheer buu soo galey wuxuu u qalmaa in uu madaxweyne wadanka uu ka noqdo waa fiicantahay waana muhiim.

Qofobka ku xiga ee 111aad faqradda 4aad iyo faqradda 3aad labaduba waxay timaamayaan in ay soo jeedinayaan 20 xildhibaan dadbaa markii is diida ufasiray, waxaan isleeyahay ma ahan marka hore waan in uu xisbi soo gudbiyo ama isbeheysi xisbiyo, laakiin xisbiyadaas waxaa sharci ah waa in ay baarlamaanka xubno ay kuleeyihiin marka meesha ay ka soo gudbinayaan waa xubnahoodii baarlamaanka, laakiin xisbi tusaale ahaan 10 xubnood leh ama 15 xubnood leh ama 5 xubnood leh masoo gudbin karo madaxweyne iskuma soo sharrxi karo waan in xisbigaas naftiisa 20xildhibaan uu leeyahay oo ay soo gudbiyaan waxa isdiidaya ma ahan. Faqradda 3aad oo timamaysaa saddex xisbi ee saddexda xisbi ee waddanka uga xoogga badan ama doorashada lambar 1aad soo galey in ay isku raaci karaan in ay madaxweyne soo sharrixi karaan.

Waxaa ladaba dhigey faqra ah madaxweynaha barnaamijkiisa waxaa uu u soo gudbinayaa kulan wadajir ahoo labada gole marka faqraddaas danbe kuma xirna soo gudbinta saddexda xisbi ee murrashaxa madaxweynaha kuma xirna ee si guud bay utaalaa yacnii barmaajika madaxweynaha uu soo gudbinayo waa faqro sideeda ah lama xiriirto.

Madaama xisbiyada saddexda xisbi marka waxaan qabaa in laga saaro oo si gooni ah loo dhigo haddii kale waxaa lala akhrinayaa marka ay xisbiyada seddaxda ah soo gudbinayaan in makaas uun wax la xariiro ay tahay yaa loo akhrinayaa.

Qodobka 111aad farqaddiisa 7aad oo lala akhriyay qodobka 112aad oo dhaarta ah faqraddaa 7aad ee qodobka 111aad waxay ka hadleysaa faqro cusub oo sheegeysa madaxweynaha la doortay wuxuu xilka la waregayaa muddo 15maalmood gudahood ah faqrada wey cusubtahay. Qodobkaan hore ee 111aad baa la raaciyey waxaa ka danbeysa dhaarta madaxweynaha in uu xilka ka la wareego, waxaa ka horeysa in la dhaariyo marka maadaama faqrada ay cusubtahay waxaan soo jeedinayaa qodobka 112aad ee dhaarta ah in lagu lamaaniyo dhaarta iyo la wareegitaanka xilka madaxweynaha halkaa la is raaciyo. Marka dhaarta la sheego kaddib faqradda 2aad laga dhigo madaxweynaha waxa uu xilka la wareegayaa muddo 15 cisho ah ileen aslan wey cusubtahay qodobkaan sabab marka asigoo weliba la dhaarinin xilka ula wareegayo loo yirahdo mesha kuma jirto.

Qodobka 114aad oo tilmaamaya awoodaha madaxweynaha ee ku saabsan doorashada degdega ah oo xilligeeda kasoo hormartay horaana uga doodnay waxaana soo jeediyay in la xaddido xaaladaha noocaas ay dhaceyso si looga qanciyo in ay tahay wax sax ah.

Qodobka 121aad waa cutubka 8aad faqradda 1aad oo tilmaameysa qofka raysalwasaraha shuruudaha xubinnimada golaha wasiirrada shuruud meshaan lagu soo kordhiyay baan rabaa in aan taageero oo aan xoojiyo in uusan xaas ajinabi ah lahayn waa “ok” waxay ka dhigantahay labada dhinacba waxay ka dhigantahay ruuxaa xil weyn baa lagu magacaabay oo dastuuri ah marka ilaa xad waa in la control waaye isla qodobkan naftiisa faqradda “D” muddada ay tahay in uu dalka joogo, maxaa yeeley ruuxa xilka noocaas oo kale qabanaya guud ahaan xilalka waaweyn waxaa laga rabaa in uu dadkiisa la noolyahay waddanka sida uu u socdo uu ogyahay mashaakilkiisa in uu la socdo ruux cirka kasoo degey in uusan aheyn ee ruux wax badan wadanka la socdo in uu yahay marka mudada la sheegey wax dhib ah malahan waan soo dhoweynayaa. Midda jinsiyadda taana sideeda marka xilka qabtana iyadana waan bogaadinayaa waana mahadsantihiin.



**Sen. Abdihakim Moalim Ahmed**

Cutubka 7aad Qodobka 112aad wuxuu ka hadlayaa dhaarta madaxwaynaha. Aniga horayna waan u sheegay oo markii laga hadlayay dhaarta xildhibaannada waana la *Note*-gareeyay sidaan filayee imikana waan kusoo celinayaa, maadaama guddoomiyaha maxkamadda sare ayaa dhaarinaya madaxwaynaha la iri, haddii la waayo in lagu daro guddoomiyaha maxkamada dastuuriga ah, haddii la waayo isagana garsoore ka tirsan maxkamadda sare in la yiraahdo oo albaabkaasi uusan xirmin.

Qodobka 114aad faqraddiisa 5aad. Xilkaqaadista guddoomiyaha maxkamadda sare ayaa lagu soo daray awoodaha madaxwaynaha oo madaxwaynuhu inuu xilka ka qaadi karo guddoomiyaha maxkamadda sare ayaa la sheegay. Horta waxaan rabaa inaan idiin xasuusiyo waddamada qaatay nidaamkan dimuqraadiga ah, saddexda hay’adood ee kala ah fullinta,

garsoorka iyo baarlamaanku waa saddex hay'adood oo kala madaxbannaan, inagu inaan xaggana jiri wayno xaggan kalena jiri wayno oo meel dhexe aan ku lunno wax faa'iido ah oo ay leedahay ma jirto. Saddexdaas hay'adood shaqo iskuma laha, garsoorkuna shaqo ma fullin karo hadduu madaxwayne magacaabayo sidoo kale garsoor shaqo ma fullin karo haddii baarlamaan xilka ka qaadayo ama magacaabayo. Waa inuu golihii adeegga garsoorku dhisanyahay waana inuu isgu leeyahay anshax marinta iyo hagaajinta saraakiisha iyo dadka ka shaqaynaya caddaaladda masuuliyadaas isaga ayaa iska leh, sidiisabana maxkamadda sare ninka guddoomiyaha ka ah xil lagama qaado, dawladaha iyo nidaamka dumuqraadiga ahba cid xilkaqaadis lagu sameeyaa ma jirto xataa madaxwaynaha iyo baarlamaanka marka laga reebo haddii ay dhacdo asbaab yaroo xadgudub in xilka looga qaado inuu sameeyo taasna waxa iska leh golaha adeegga garsoorka, marka aniga *Totally* waxaan qabaa in qodobkaas laga reebo faqraddaas 5aad oo meesha laga tiro.

Cutubka 8aad Qodobkiisa 120aad Faqradda 1aad, waxa ila habboon waddankeenna waxaad ogtihiin maalin kasta raysalwasaare ayaa la dhisaa, raysulwasaaraha la magaacabo waa inoo fikiraa oo intuu rabo ayuu wasiiro nooga dhigaa. Isagaa la diraa oo mid kale ayaa imaada sanadka dhexdiisa miisaaniyaddii dalka oo la ansixiyay oo shaqaynaysa ayuu imaanayaa labo wasaaradood oo isa saarnayd ayuu kala qaadayaa oo saddex ama labo ayuu ka kala dhigayaa, kuwo aan isku darsanayna uu isku darayaa oo maduxuu isku gelinayaa. Horta dalkan wax walba ayaa ku xiran inuu mid yahay, shaqo aan meel la iskugu gayn karina ma jirto, waxaan qabaa inay cadyihiin *number*-ka wasaaradaha uu dalku leeyahay oo ay dastuurka ku caddahay, waa inuusan *access* u lahayn raysalwasaarihii imaadaaba inuu wasaaradaha uu rabana kala gooyo wasaaradaha uu rabana isku daro marka aniga waxaan qabaa in *number*-ka wasaaradaha dalku yeelanayo la xadido oo ay xadidnaato.

Qodobka 121aad Faqraddiisa 1aad (A) wasiirku waa inuu muslim yahay ayaa la yiri. Aniga niyahow dastuurkan meel kasta aad muslimka meel kasta geliseen, dadka Soomaaliyeed saw muslim maahayn? Aniga markaan waddamadaas kale joogo haddii lay su'aalo ma gaal ayaad tahay mise muslim? Waxa igu filan inaan iraahdo Soomaali ayaan ahay haddaan Soomaali ahayna muslim ayaan ahay. Inaga ayaa abuurayna jawi ay balaayo dalkan ku wada nooshahay, marka muslinka aad meel kasta ku cariiriseen dadkani waa wada muslim ee diintooda u daaya, meelahan lagu cariiriyayna halaga tiro. Soomaaliya adduunyada oo dhan ayaa u taqaana inay tahay dal muslim ah, laakiin marka aad adigu meel kasta oo shuruucdaada ah aad ku cariiriso muslim adigaaba abuuraya inay dadka qaarkii muslim aanay ahayn marka aniga waxaan qabaa in lagusoo koobo "qofku inuu Soomaali yahay" sidaasna muslim ayuu ku yahay.

Qodobka 121aad Faqradda 3aad xarafka (A) shuruudaha golaha wasiirrada, waxa lagu qoray qofku ganacsi ma samaysan karo. Aniga waxaan qabaa inaysan sax ahayn, qofku isaga oo shaqaysta oo *business*-leh hadduu soo galo oo dawladda uu kamid noqdo sharci u diidaya oo oranaya dadka aan shaqaysanin ee fuqaradaha keliya halaysku aadsado ma jiro, dawladda ma waxaynu u raadinaynaa oo keliya qof biilka yar ka soo raadsada miyayna dadka kaloo wax haysta ka soo mid noqon karin?axaan u malaynayaa arrintaasi inaysan sax ahayn marka in la tiro ayaan qabaa.

Isla Faqraddaas 3aad xarafka (G) waxa ku qoran, waa inuu 3 sano dalka joogay. Anigu waxaan aaminsanahay kuwa dalka jooga ayaa shar badan, qabyaalad iyo qashin balaayo ayaa ka buuxda kuwa dalka ku nool. Anigu horta baasaboor ajanabi ah ma haysto Cabdihakiin ayaa lay iraahdaa

hal baasaboor oo Soomaali ah ayaan leeyahay marka yaan loo malayn markaan waxyaabahan ka hadlayo inaan ahay nin baasaboor difaacanaya, laakiin waxaan aaminsanahay dadka dalka jooga oo qabyaalada iyo balaayadu googaysay inay kuwa dibedda jooga ka fiicanyihiin marka waxan aan ka xigsaneyno oo aan ka ceshanayno aan iska dayno oo dalka haduu 3 maalmood joogay ha xukumo.

Isla Faqraddaas 3aad xarafka (I) ee ka hadlaya baasaboorkana waxaan qabaa dalkan dastuurkiisa ayaa ogol inuu qofku labo jinsiyadood qaadan karo marka haddiiba aad u ogolaatay inuu labo baasaboor qaadan karo sabab aad u diiddo inuu xil qaban karo iima muuqato, waa muwaadin waanad ogtihiin dadkeenu siday baasaboorada ku qaataan marka *Reason*-aan ugu diidno oo iska dhig aan u dhahno iima muuqatee halaga dhaafo.

Qodobka 121aad Faqraddiisa 4aad waxaan ku soo kordhiyay faqrad cusub oo aan u dhigay sidatan soo socota "Reysalwasaaraha iyo xubnaha wasiirrada waa inay mid mid u helaan kalsoonida golaha shacabka" anigu waxaan aaminsanahay golaha wasiirrada in iyagoo isku duuban halkan la keeno oo gacan loo taago dal uma adeegayso, *Capacity*-ga qofka lama ogaan karo sidoo kale raysalwasaaraha soo xulaya golaha wasiirradu hadduu ogyahay in qof qof kalsoonida loo siinayo dad macno leh oo dalka u adeegaya oo isdifaaci kara ayuu hor keenayaa golaha, laakiin hadduu xor iska yahay oo isku duubnidii lagu keenayo wixii isku duubnaa uunbaa la keeni doonaa ee aan naqaanay meesha ay ku dambaynayso, marka ani waxaan qabaa hadda ayaan dastuur qoranaynaaye qof kasta inuu is sharraxo oo kalsoonida qof hebel la siiyo, raysalwasaaraha iyo cidda soo xulaysaana ay ku talagalaan.

Qodobka 124aad, awoodaha reysulwasaaraha waxaan ku soo daray iyadana faqrad cusub oo oranaysa "inuu raysalwasaaruhu magacaabo agaasimayaasha guud iyo xoghayayaasha joogtada ah". Wasaaradaha qaarna waxay leeyihiin agaasime guud qaarna waxay leeyihiin xoghaye joogto ah marka waxaan ku soo daray awoodaha raysalwasaaraha inuu magacaabo kaddib marka ay soojeedintu ka timaado wasiirka wasaarada. Hadda sidaad ogtihiin waa la gebidhacleeyaa oo maalin waxaad maqlaysaa wasiirka ayaa xilkii ka qaaday maalina waxaad maqlaysaa raysaslwasaaraha ayaa ka qaaday marka in la caddeeyo oo raysalwasaaruhu uu magacaabistaas yeesho in lagu daro ayaan qabaa, aad ayaad u mahadsantihiin salaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu.



**Xil. Dr. Suleiman Ali Hussien**

Waxaan rabaa dhowr shuruudood inaan ku soo daro aan ku daro ra'yiga ah , shuruudaha qofka laga rabo inuu noqdo madaxweynaha jamhuuriyadda , cutubka 7aad ee farqooyinkiisa 1aad waxaan rabaa marka anigu inaa ku daro qodobka 110aad ee cutubka 7aad, shuruudaha laga rabo madaxweynaha jamhuuriyadda, dalka Soomaaliya waa dal soo kabanya waa dal la rabo inuu nabad noqdo waa dal, magaraneysaa, leysku keeno sidaas darted qofka rabo hoggaankiisa shuruudo wanaagsan oo faro badan inuu muslim yahay, da'diisa 40 tahay inuu muwaadin Soomaaliyeed yahay.

In uu yahay dhowr qodob ayaan rabaa in lagu dari lahaa, dalka waxaa aad iyo aad dhibaato ku haya ee ururrada argagaxisada een runtii argagxisada faro badan tahay , markaas qof asalkiisa

hore ururrada habeysan ahaa oo laga yaabo in dhiigga shacabka uu soo daadiyay oo argagaxisada la fikir ahaa in aanu marnaba u qalmin in madaxweynaha jamhuriyadda noqdo in lagu daro. Qof dagaal oogo ahaa oo shacabka Soomaaliyeed dhiigooda soo daadiyay oo qabiil dartii u dagaalmaye in aanu isagana u qalmin een u qalmin een madaxweynaha jamhuuriyadda, shuruudaha madaxweynaha jamhuuriyadda laga rabo shuurudaha dadka noocaas aan u qalmin in laga dhigo.

Qodobka kale aan ku dari lahaa waa inuu ahaadaa een muwaadin oo xaas ajanabo halkaas waxaa oran lahaa in laga dhigo waa inuu xaas qabo oo single ahaanin, nin xaas leh waa inuu u soo tartami Karin qof single madaxweyanaha jamhuuriyadda oo ahaadaa nin xaas leh oo xaaskiisa tahay gabdh Soomaaliyeed, waa inuu degganaadaaa 5sano dalka 100% taas waa taageersnaham y nin aan xog ogaal u aheyn dalka aan ku nooleyn oo qurbajoog soo ahaa oo aan dalkaba ku nooleyn wacyigiisana haynin inuu halka dalka ugu sarreeyso u tartamo intuu aayar iska yimaaddo 100% ani ra'yiiyan waxaan leeyahay taasi macquul ma ahan markii ugu yartahy 5 ama 10 sano waa in lag dhigo.

Cutubka 7aad Qod114 awoodaha madaxweyanaha een waxaa ku soo dari lahaa een inaga hadda adeegga garsoorka nooma dhisna magacaabista guddoomiyaha maxkamdda sare iyo adeegga garsoorka in uu adeegga garsoorka madaxbanaanaado uu guddoonka maxkamadda sare ay iska doortaan adeegga garsoorka oo "suprime court"gu uu awood yeesho ama maxkamdda sare awood lahaato ama wasiir ha noqdo ama xildhibaan ha noqdo ama madaxweyne ha noqdo ama raysalwasaare ha noqdo inay awoood u leedahay maxkamadda sare haddii dambiyada qaar ku caddaadaan inay maxkmadda awood leedahay ay xiri karto.
Sidaas darteed waddamda federlka ah waxaa ka mid ah Pakistan, pakistaan oo kale raysal'wasaarihii oo xilka hayo ayaa eedeemo lagu helay waaba la xiray gabigiisaba maxkamadda saraa xidhay intii dambiyadii lagu soo caddeenayay waa socotay koley rag siyaasiyiin baa tihino waad ku xidhan tihiin aqbaarta, marka anigu runtii waxaa xoojinayaa in adeegga garsoorka iyo maxkamdaha ay madaxbannaanaadaan ay awoodooda la siiyo marka intaasaa kaga baxayaa. Waad mahadsantihiin.



**Xil. Abdikarim Abdow Heydar**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, Awalan xidhlibaannada sharafta leh, guddoonka, guddiga madaxbannaan, sanatarrada guddiga dastuurka ka shaqaynaaya, howlwadeennanada iyo bahda saxaafadda awalan waxaan idin leeyahay ramadaan kariim iyo ummadda islaamkaba meel walboo dunida ay ka joogaan ummadda Soomaaliyeed bishii barakeysneed ayaa noo billaabatay insha Allaah, marka Ilaahay hana soo xijiyo waajibaadkeeda kheyriga ah, ramadaan kaan ramadaankiisana dalkeena barwaaqo iyo bashbash Alle hs gaarsiiyo taas ayaan mida 1aad leeyahay. Guddoomiye Xuseen Iidow waxaan jeclaan lahaa inuu boqoleey inuu waxwalba ku sheego ugana hadlo markiiba cutub noo dhammaado, sidoo kale meeshaan waxaan ugu hadalnay beesha 5aad, qeybtii ka maqneed maadaama dastuurkii la dhammaystirayo saakana kama uusan hadlin arrintaas waxay ula midtahay in xoogaa indhaha leys kaga qabanaayo aanan la rabin in laga hadlo, marka 4.5kii maka baxnay maku jirnaa? Weali caddaynteeda lama haayo 5 maan nahay? Welicaddaynteeda lama haayo waxaan jeclaan lahaa in uu guddigu aad ugu hadlo.

Qodobka 114aad aan rabaa inaan ka hadlo shalayna arrintaa waan ka hadlay madaxweynaha waxaa la dhahay 40 sano inuu jiro guddoomiyaha baarlamaankana waxaa la dhahay 30 sano inuu jiro, 30 sano waa ku qaban karaa xilka waa ku qaban karaa, haddii guddoomiyuhu 30 sano ku qaban karo madaxweyne ku simaha madaxweynaha xilka kusimaaya asaguu noqon doonaa waa sababtaas sababta aan u dhahay 40 sano hajiro guddoomiyaha baarlamaanka haduu madaxweynaha dhinto, hadduu kusime leeyahay 30 nin yaroo dhallanyaraahi xoogaa xilkaasi waa ku ween yahay ayaan is leeyahay, waxaa kaloo la yiri 15 sano oo khibrad ah inuu leeyahay guddoomiyuhu marka 15kaa sano maleeyahay 15 sano wax khibrad ah mayeelan karo isla midaas hadaan kasii hadlo madaxweynuhu waxaa la yiri 15 sano oo khibrad ah waa inuu leeyahay, khibrad coonee waaye? Noocee noqon kartaa khibradu? Ma dowli baa? Ma ganacsi baa? Ma xoolo dhaqashaa aad ayay muhiim u tahay in arrintaa la taabto, sababtoo ah qofaan aqoonin habmaamuuska dawladeed iyo bratakol-ka dawladeed haduu isku soo sharaxo waa arrintaasi ma wanaagsano ayaan is leeyahay in lagu daro aad ayay muhiim u tahay.

Midda kale aan rabaa inaan ku daro aan rabo ayaa waxay tahay, baasaboorka jinsiyadaha waa inuu iska qaadaa ayaa la yiri jinsiyada inta uusan isku soo sharraxin ka hor xoogaa taas maqabo waxaan qabaa xilka markuu ku guuleysto inuu ka tanaasulo, saddex qofaan qabaa iney baasaboorka ay celiyaan hadday xilka ku guulestaan waa guddoomiyaha baarlamaanka, raysalwasaaaraha iyo madaxweynaha saddexda ugu sareyso waaye sababta aan u qaba waxay tahay baasaboorka ajnabiga ah markaad qaadaneysid waad dhaaraneysaa sida dalka Soomaaliya oo kaleete markaad madaxweyne noqoto aad u dhaaranaysid, madaama aad dhaaranayso inaad dalkaas daacad u noqoneyso ayaa ka mid ah, sidaa daraadeed laba dal daacad uma noqon kareysid danaha dalka waa si diidi karaan, marka saddexda xil ee ugu sareyso dalka dadka qabaneeyo waxaan is leeyahay inay ka tanaasulaan baasaboorka markay ku guuleystaan xilka lakiin ka hor xoogaa waxaan is leeyahay 40 madaxweyne ayaa is sharaxday waagii hore dhaweyto hal madaxweynaa aa soo baxay 39 intay baasabooradooda lumiyaan waxna waayayaan hadhow saxna maahan.

5ta sano waxaan qabaa inuu joogo waan qabaa, garsoorka maadaama hadda uu noodhisneen garsoorkeenii oo ma'araktaa oosan diyaar noo aheen waxaan qabaa meesha laga yiri madaxweynaha ayaa xilka ka qaadi kara, in laga dhig labada gole ee baarlamaanka laguna soo doorto labada gole ee baarlamaanka saa ayaan ayadana qabaa, taasna midaas ayaan leeyahay, midda kale oo aan rabo inaan ka hadlo 50+1 xildhibaanno qaarkood waa diideen, laakiin waxay ila tahay 50+1 haddii madaxweynaha uu helo “round” 1aad inuu ka soo baxo taasna sax ayaan u arkaa, waxaa kaloo ii raaca gola wasiirrada qodobka 8aad farqadda 125aad qodobka 3aad wuxuu leeyahay wasiirka ku xigeenka ayaa wuxu yahay ku sime haddana wasiir dowlaha ah, maxaa lagu sababeeyay oo loga qaaday wasiir dawlaha oo wasiir ku xigeenka looga dhigay, hadda wasiir dawladaha ayaa wuxuu yahay ku simaha sida qodobka ka hooseeya wuxuu leeyahay, haddii wasiirka uu xilka iskaga tago ama laga qaado ama uu geeriyooda waxaa kusime sii ahaanaaya wasiir ku xigeenka wasiir dawladaha ayaa hadda ah marka waxa looga qaaday iyo sababta loo sameeyay madaca marka intaas ayaan ku soo koobayaa waad mahadsantihiin wan soo gaabinaaayaa.



**Sen. Hassan Hussien Haji**

Salaan kaddib. Qodobbo yar ayaan soo qortay, waxaan ka billaabayaa qodobka 109aad, faqraddiisa 1aad, waxay leedahay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waa madaxa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waa astaanta midnimada qaranka, madaxbanaanida qaranka iyo ilaaliyaha dastuurka, markaad fiirisaan sidii horre ay u qorneed, waxaa ku qornaa a,b,c waxaa ku soo kordhay astaanta midnimada. Waxaan u soojeedin lahaa guddiga inay u qoran alphabetic oo kale sida a b,c,d waxay noqonayaan sidaas oo kale sababta aan saa u leeyahay, hadhow madaxweynaha haddii lagu soo eedeeyo inuu jebiyay qodobadaan qodob kamid ah, maxkamadda iyo baarayaasha waxay u fududeyneysaa inay yiraahdaan madaxweynaha qodob kaas buu jabiyay, marka taas saas in loo dhigo ayaan soojeedin lahaa. Shuruudaha madaxweynaha, madaxweynaha intuusan madaxweyne noqonin Shuruudaha waxaan ku soodari lahaa inuu ku sifoobo, daacadnimo, hufnaan iyo amaano in lagu daro, tan raysalwasaaraha iyo tan xildhibaannada sidaas inay ugu jirto, waxaana saa u leeyahay see lagu caddayn karaa? Waa la is oran karaa, laakiin caddeyn waa loo helayaa qofka cv-giisa iyo meelihii uu ka soo shaqeeyay iyo noloshiisa dib haddii loogu laabto, waa la garan karaa arrimahaas, haddii baaritaan imaatana, baaritaanka ayaa lagu oggaan karaa, marka arrintaas sidaas ayaan u dhigi lahaa. Shuruudaha madaxweynaha ayaan weli ku jiraa, qodobka 110aad, faqraddiisa (g), inuu ku noolaado 5sano dalka gudihiisa, runtii arrintaan xildhibaannadii iga horreeyay waa ka hadleen senatore Cabdixakiin waa ka hadlay, dadka qurbaha joogo dabcan dal kaan faa'iido weyn ayay u keeneen, wakhtina way soogeliyeen, waxyaabo badan oo ka celinayo xuquuq dooda dastuuriga, markii lagu jiray shuruudahaan way soo noqnoqdeen, marka si caddaalad loogu sameeyo in shuruudahaas lagu xiraayo deganaanshaha in laga fududeeyo sababta oo ah qofkasta oo Soomaali ah oo dibadda ku nool wuu ku xiran yahay dalka, wuu ogyahay dhibaatada dalka ka jirto weliba laga yaabo inay qeyb weyn ka qaataan in hormarka iyo dibudhiska dalka ay qayb weyn ka yihiin, marka in loo arko diaspora in xuquuq dooda la xaddido iyadoo dastuurkana u oggolyahay jinsiyad labaad, marka xaddidaadaas in laga qafiifiyo ayaan qabaa, qodobka 117aad, xil ka xayuubinta madaxweynaha, runtii markaan dhageystay doodaha meeshaan ka dhacay iyo waxa dastuurka hadda dib-u-eegista ku qoran, xoogaa waxbaa iska hor imaanaya ayaa dooddii iiga soo baxday, hanaanka looga qaadaayo marka aad fiiriso waa dhawr tallaabo, talaabada ugu horraysa aan lagu baraarugsaneyn mooshinka horta waxaa keeni kara labada aqal, saddex meelood hal meel labada aqalba mooshin waa keeni karaan yacnii labada aqalba waa keeni karaan, marka labada aqal mooshinka keenaan, maxkamadda dastuuriga ayaa loo diraa, iyadana waxay eegeysaa, eedeyn taas inay wax ka jirto yacnii eedeyn oo madaxweynaha xilka looga qaadi karo inay tahay, marka ay soo oggolaato maxkamadda, golaha shacabka ayaa fadhiisanaya, codka ayay qaadayaan two third majority, saddex meelood laba meel, marka waxaa loo diraa aqalka sare, aqalka sare ayaa fadhi kale galaayo, sidaas ayaa looga qaadaa.

Qodobka 117aad sidaas ayay ugu qoran tahay, wixii aan shalay ka soo hadleenay xoogaa dadka waxay u qateen in golaha shacabka soojeedinayaan kaddibna aqalka sare loo gudbinaayo oo xaggaas arrinta ku dhammaanayso, maahan, marka inaan ku noqono, arrinta aan saxno labada guddi aad ayaan u soodhaweynayaa. Haddaan u gudbo qodobka 120aad, Raysalwasaaraha inuu magacaabayo golihiisa wasiirrada, xilkana ka qaadayo, runtii taas marka iyadoo madaxweynahana oggolaanayo yacnii raysalwasaaraha intuu magacaabo, xilna kama qaadi

karo asagoo madaxweynaha latashanin oo madaxweynahana arrintaas soo oggolaanin, taas waxaa la mid ah, in lagu daro qodob kale ayaan qabaa halkaas, waxaa la mid ah iskushaandheen, arrinta iskushaandheenta mar horrena waa dhacday ayadoo madaxweynaha ka warhaynin in raysalwasaaraha iskushaandheen sameeyo, madaxweynihii iyo raysalwasaarihiina sidaas iskugu xumaadaan maadaama madaxweynaha uu dalku hoggaaminayo oo arrimahaan inuu ka warhasyo ay tahay, raysalwasaaraha inuu samayn karin iskushaandheen asagoo latashanin oo madaxweynaha approve-gareenin sababta aan u leeyahay ha lagu soodaro waxaa weeye kalsoonida madaxweynaha iyo raysalwasaaraha markastaba inay yacnii isla socdaan qofna qofka kale wuxuu sameeyay ka xanaaqin maadaama la isla joogo, taas ayaan soojeedin lahaa.

Qodobka 121aad, faqradda 3aad, waan boggaadinayaa faqraddaas yacnii wasiirka inuusan noqon karin xildhibaan, qodobkii horre ayaan halkaas uga soo hadalnay ayaa haddana wasiirka lagu sheegay, qodob kaas waan boggaadinayaa asagana sidaas inuu ugu jiro, haddii qodob kaas ka gudbo. Qodobka 122aad, faqradda 2aad, waxaa waaye baarlamaanka dabcan golaha wasiirrada way ansixiyaan xukuumadda, waxaa dhacda marka in raysalwasaaraha wasiirradiisa beddelo, markii baarlamaanka ansixiyaan waxaa laga yaabaa wasiirradii sidii loo beddelayo, wasiirro ka yar 10% inay soo haraan oo aan ahayn kuwii baarlamaanka ansixiyay, marka shardigan qodobka lagu soodaray, waan ayidayaa sababta oo ah 50% ka badan hadduu raysalwasaaraha beddelo waxaa loo baahnaanayaa golaha inay siiyaan kalsooni. Arrinta kale shuruudaha raysalwasaaraha asagana 121aad, saddex sano dalka inuu joogo ayadana intii rayaslwasaare laga dhigin, tanna tii horre ayaan la qabaa shardigaan inaan lagu xirin maadaama la heli karo qof ka soo shaqeeyay hay'adaha caalamiga ah oo meelo badan soo maray oo waxyaabo badan oo shaqooyin ah caalamka ka soo qabtay, qof kaas oo khibradiisa ay u baahan tahay Soomaaliya inuu meel dheer gaarsiiyo oo himilo qaran wato oo muwaadinnimadiisa iyo daacadnimadiisa la ogaaday, laga yaabo saddexdaas sano inuu uga baaqdo inuu raysalwasaare noqdo, waxaan qabaa in meesha laga saaro.

Arrimaha awoodda madaxweynaha inuu wax magacaabo, runtii aad ayaa looga hadlay, wax yar inaan kala caddeeyo ayaan rabaa, soojeedin, ansixin iyo magacaabis waaye waxa laga hadlaayo, saddexdaan hay'adood, golaha wasiirada waxay leeyihiin soojeedin, baarlamaanka labadiisa aqalna waxay leeyihiin ansixin, madaxweynahana wuxuu leeyahay inuu dikreeto ku soo saaro, sideedaba wax madaxweynaha ku dhammaanayo ma jirto, waxa madaxweynaha ku dhammaanayo waa hal shay, in raysalwasaaraha uu soo magacaabo, waxa madaxweynaha ka billaabanaya waa inuu raysalwasaaraha soo magacaabo, intii kale awood ee ka soo hartay waa inay soo maraan hanaan kaan, madaxweynahana ay ku dhammaataa.

Qodobka awoodda madaxweynaha ku jirto inuu guddoomiyaha maxkamadda sare iyo guddoomiyaha maxkamadda dastuuriga inuu xilka ka qaadi karo, arrintaan, cutubka 9aad ayaan ugu tagi doonnaa, habraac ayay leedahay, habraaca baarlamaanka, guddi ayaa la samaynaa oo maxkamadda ah oo soojeedin ka imaatay golaha adeegga garsoorka, guddigaas ayaa madaxweynaha saaraayo, guddigaas markuu madaxweynaha saaro, maxkamad ahaan ayay u fadhiisanayaan, waxyaabihii lagu soo eedeeyay ayay si maxkamad ah loo go'aaminayaa, ayagoo garsoore ku jiraan, marka go'aan kaas kaddib markii ay soo saarto maxkamaddaas ayaa madaxweynaha ka qaadi doono, horta taasna waa noo imaan doontaa, xildhibaanno badan ayaa ka hadlay saas ayaa loo xallinayaa.

Qodobka 125aad oo hadda xildhibaankii iga horreeyay ka hadlay, maxaa looga dhigay kusime wasiir ku-xigeen ee looga dhigi waayay wasiir dawlaha, structure-ka ama qaabdhismeedka wasaaradda kuma jiro wasiir dawlaha, banaanka ayuu ka yahay, wasiir dawlaha waxaa loogu talagalay xafiiska madaxweynaha iyo xafiiska raysalwasaaraha inuu u report-gareeyo, wasiir ku-xigeenka shaqadiisa waxay tahay inuu caawiyo wasiirka, marka xoogaa meeshaan waxaad mooddaa in system-ka dawladeed halkaas si fiican loo raacin. Guddiga markay fadhiisteen arrintaan inay saxaan ayay iskudayeen, marka sidaas ayaa loo kala qaaday structure-ka dawladeed. Sideedaba waxaa jira sharci la yiraahdo sharciga xukuumadda, hadda waxaa jira xeer golaha wasiirrada xukuumadda ka hadlaayo, laakiin waxaa loo baahanyahay si wasaaradaha u kala guurguurin, hadhowna wax isku qasmin, xeer baarlamaanka soo saaraayo, waa lahaan jirnay 1960-kii iyo wixii ka dambeeyay, xeer kaas aya lagu maamuli jiray.

Wasaaradahan hadda markii loo fiiriyo xagga mashaariicda, marna halkan wasiirrada ayaa qayb laga raraayo oo meel kale la geenaayo oo wixii dhan isku qasmayaan si loo kala ilaaliyo waxaa loo baahanyahay xeer oo baarlamaanka soo saaraayo oo wasaaradaha iyo qaabdhismeed kooda lagu sameynaayo, marka sidaas ayaan soojeedin lahaa, intaas ayaan ku soo gabagabaynayaa. Asalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatuh.



**Xil. Sharif Mohamed Abdalla**

Bismilaahi. Wal xamdulilaah wassalaatu wassalaamu calaa rasuulillah.

Guddoonku waa mahadsan yahay, xildhibaanada kuwa jogaan iyo kuwa maqan waan salaamayaa, runtii waxaa nasiib u yeeshay waqtiga ugu dambeeyo, mar kastaba ku soo aado, oo rakaas uturo inta daashay oo iney baxdo rabto.

Waxaan ku billaabayaa, waxaan wax yeelo ka qabaa soo koobiddii Guddomiye Xuseen Iidow oo uu ku dul maraye, qodobbadii la soo maray talooyinka qaar uu san soo jeedin baa ku jira, da'da xilibaanka waxaa jirtay soo jeedin 25 dhallinyaro u badan yahay, qof 25 jiro xitaa jaamacad wuu ka bixi karaa hadduu rabo, waxaa jira heerka tacliinta xubinta baarlamaanka inay ku xiran tahay dugsi sare aanan dastuuri ahayn inoo meelaha gaaro, marka xushmadda madaxweynaha xilka ka tahay meeshii lagu dari lahaa Aqalka Sare soo jeedin waxa jirtay in si kale loo xushmeeyo oo maqaamkooda noqdo munaasabadaha qaranka loogu yeero dhaqaalahooda amnigooda, laakiin sabab loo dul saarayo Aqal Sare iyo too hoose toona majirto sidiisa loo xurmeen karaa marka intaas waxa weeyaan intaan ka qabay weeye. Walaalow Saciid Senotar Saciid qodobka 125 markuu ka hadlayay raysalwasaare ku xigeen buu yiri waxa is lahaa woo qaldayee kabadan boo sheegi lahaa raysalwasaare ku xigeen ayaa jira.

Waxaan ugudbahaya sharuudaha faraha badan ee lagu xiray madaxweynaha markii la dooranayo sharuudaha, horta aslan madaxweyne waxaa dooranayo xilibaano farabadan qofka ugu mudan iyagaa xulahaya, sidoo kale baarlamaanka qofka xisbi buu ki imaan haya, xizbiga qofka ugu soo sharxanayo inoo Baarlamaanka galo isaga soo xulayo qofka mudan cilmi ahaan iyo da ahaan.

Sharuudaha bageka 93aad faqradda 1aad, xarafka B Madaxweynaha markii la shegayay labadiisa waalid ey yihiin muwaadiniin Soomaaliyeed, koley dhammaanteen waan ognahay,

ummaddii Soomaliyeed oo meelahaasi jirta dadkii ku dhashay baa 40 gaaray, labadiisa waalid inay u dhasheen Soomaaliya waa la dhihi karaa, laakin jinsiyad kale ayay heysan karaa.

Isla qodob kaas faqraddiisa D aqoontiisa inay gaarsiisan tahay heer jaamacadeed madaxweynaha aan ka hadleenaye, waxaa la raaciyay waaya-aragnimo hoggaamineed, horta hoggaamin ma ehee waxay noqonaysaa maamul, dadka dooranaya ayay jirtaa inay ku doortaan, inaa lagu shardinin aan qabaa, 15 ta sano gaaraysana xittaa hadday maamul naqoneyso 5 sano iyo waxii la mid ah, in 15 sano wax soo hoggaaminayay. Xarafka G in uu daganaa jamhuriyadda Soomaaliya muddo 5 sano ah, taasi na waa laga hadlay waxaan qabaa inay la ruuri aheyn, horaan u soo marnay qof wax yar dalka joogi horay madaxweyne ka noqday, waxna dhibna laguma qabin, inuusan qabin xaas ajnabi ah, ajnabiga haddii loola jeedo kuwa cadcadka waa meesheedi, laakin haddii basaboorka loola jeedo, Soomaalida in teeda badan way haysataa waana la sheegay laba jinsiyadood waa la ogol yahay.

Xarafka I in lagu yaqaanno dhaqan suuban, arrintaas waa arrin runtii aad loo caddayn karin waye, dadka dooranaya ayay tahay inuu isu sheego dhaqankiisi iyo waxiisi ay akhristaan, laakin xaanshada uu soo gudbinayo, arrintaa in lagu xero ma qabo. Katanaasulidda jinsiyadda naftirkeedi carrabkana kuma adkeenayo, laakin dood badan baa ka qabaa, maadaama ummaddeenna sidaan noqotay, dadka soo jeedinaya madaxweynaha marka hore 20 xildhibaan baa soo jeedineysi, 10 qof buu qalqaalsanayaa, meel waxaa ku qoron 3 xisbi, meelna waxaa ku qoran xisbiyo sidaas darteed ama isbahaysi siyaasadeed, taas iska macquul weye maadaama murrashax iskiisa u socda aan la qaadanaynin. Farqaddaan maxkamadaha waa la sheegay guddiga adeegga garsoorka ayay tahay, inay soo saxaan marka xilka loo dhibayo iyo marka laga qaadayo waxii hab raac "document" oo xaanshada madaxweynaha saxiixaya, waa meeshedi waxa ku qoran qodobkan ku soconayna 12aad ee 114, wuxu cafis u fidinaaya ama ciqaab ka dhimi karaa eedeynta, madaxweynaha qodobka 117aad inkasto aynan jecleyn, laakiin labada gole intee soo heshiiyaan ma isla eedeyn karaan xitaa Baarlamaanka isla eedayn karin, waxa weyna cadadkii 90kii wixii la mid aha ayaga hadde ku soo heshiyan, soo eedeyan edeyntaas xukun ma ahan marka xukunka gaadho labada gole iyo Baarlamaan weynaha oo dhan iska arkayan, laakin marka hore ina lagu shardhinin inee labada gole soo jeediyan eedeynta eedeynta Baarlamaanka iska leh, baan qiyaasaya. Haddii aan u gudbo cutudka a la dhashay hayay oo ahaa raysalwasaare ku xigeen in la yiraahdo wasirwazaaro ku xigeeno aya qabaa.

Qodobka 122 wasiirrada in qofqof loo ansixiyo saqafada inay noqonayso umaleena xukuumadda in qofqof loo ansixiyo ayaan ku talinaaya marka waxa iyada meesha ku jirto, haddii hadda raysalwasaare dalka uu yeelanayo dastuuriyan ha lagu xaddido, dhibmalahan laakiin haddi ay noqonayso sida hadda ay tahay ama sida wax ahaayeen, in lakala qaybiyo wasaaradaha siyaasadda iyo wasaaradaha arrimaha bulshada in loo qaybiyo inay noqoto ugu dambeysti wasiir dowle waa lagu fogaaday, wasaaradda arrimaha dibadda loo dhiibanayo feel, nin feel loodhiiban karo oo khabiir ah weeye, malaf gaar ah looma dhiiban karo, labadaan xafiis oo la sheegay, wasaaradda arrimaha dibadda, wasaarad xajmi weynle oo macaamil leh ayaa looga talagay, dadka waxii lagu naasnuujinayo halugu naasnuujiyo, laakiin xilalka noocaas ah ilama ahan, ku xigee ka ayaan arki jirnay inuu yahay qof wasiir ku xigeenka ayaan arki jirnay qofka iska leh marka uu wasiirka uu maqan yahay.

**Kulanka 19aad (Febreeyo 18, 2026)**

| | |
|---|---|
| **Baarlamaanka:** | 11aad |
| **Kalfadhiga:** | 7aad |
| **Kulankiisa:** | 19aad ee labad Aqal |
| **Goobta:** | Golaha Shacabka |
| **Furmay:** | 11:03 a.m |
| **Xirmay:** | 1:00 p.m |
| **Shir-guddoomiye:** | Xil. Sheikh Adan Mohamed Nur "Madoobe"<br>Guddoomiyaha Golaha Shacabka |

**Ajendaha:**

(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka
(2) Ansixinta Ajendaha
(3) Dib u -eegista Dastuurka: Marxaladda 3aad: ka doodista Soo-jeedimaha wax-ka bedelka Dastuurka. Cutubka 7aad iyo 8aad ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Qodobada 109aad ilaa 119aad iyo Qodobaba 120aad – 129aad.






**Xil. Bashir Mohamed Jama**

Cutubka 7aad, Qodobka 109aad ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, gaar ahaan xarafka (c), waxaan ka hadalnay da'adiisa; oo dhan waa inuu da'da madaxweynuhu noqotaa 40 sano. Madaxweynaha, waxaan rabaa in lala akhriyo da'da musharraxa guddoonka Baarlamaanka, Qodobka 90aad, faqradda 1aad, xarafka (b), oo sheegaya inuu jiro 35 sano, lagana dhigo 40 jir.

Sababtu waxay noqonaysaa madaxweyne ku-sime ama madaxweyne ku-meel-gaadh ah; sow iskama hor imaanayso markaa, hadduu 35 jir la doorto, madaxweynihii meesha ka baxo, sida hadda inoo qoran ee la soo jeediyey, guddoomiyaha Golaha Shacabka, haddii la waayo, guddoomiyaha Aqalka Sare, sidaas. Haddii 35 jir aan doorano, markaa 40 jirna aan nidhi madaxweynuhu kama yaraan karo, maxaa dhacaya? Sidaas awgeed, qodobada waa in la isla akhriyo oo la isla fiiriyo, si qodobna uusan qodobka kale "contradiction" ugu samayn. Haddii kalena, dhalinyarada 35 jirka ah ha la geeyo macallaa madaxweynaha "uniformity" ha lahaadaan. Ma aha in 40-ka lagu dhaggan yahay, 35-na la diidan yahay; laakiin waa inay is-waafaqsanaadaan. Sida aynu hadda sheegnay, Ilaahay baa nafta haya, wax kastaa way dhici karaan; madaxweynuhu usbuuca 1aad ayuu si uun shaqada uga fadhiisan karaa, guddoomiyihii aqalkaa ee fadhiisan lahaa meeshana waa 35 jir. Waaniga yiri, ma noqon karo madaxweyne qof ka yar 40 sano; markaa ha la is-waafajiyo.

Qodobka 110aad- shuruudaha Madaxweyanaha Faqradda 1aad, xarafka (g), waxaa la yidhi 5 sano ku noolaa dalka; wax ay xigmad ku dhisantahay ma aqaan anigu. Qofka Soomaaliyeed oo Soomaaliya u dhashay, oo muwaadin ah, ama dalkan ha ku noolaado ama dibad ha ku noolaado, haddii uu leeyahay dalkan baad wax ka qaban kartaa, waad beddeli kartaa, horumar baad gaarsiin kartaa, waa inuu ku noolaado iyo inuusan ku noolaan wax macne ah oo aniga ila samaynayso ma aqaan.
Waa inay noqotaa, oo lagu haraa doodahaas hore meelay ka soo galaan; muwaadinka Soomaaliyeed oo da'daa gaadhay, oo sidaas ah, oo aqoontaas leh, ayaa noqon kara. Guduhuu ku noolaa iyo dibaduu ku noolaa wax micne leh oo keenayso ma leh. Mararka qaarkood inuu dalka ku noolaana faa'iido ayay leedahay, inuu dibadda ka yimidna faa'iido ayay leedahay; labada dhinac midba dhinac buu faa'iido u leeyahay.

Waxaan u la jeedaa dadka akhyaarta ah ama aqoonyahanka ah ee soo diyaariyey, oo aadka ugu mahadsan; waxay ka fiirinayeen, malaha, inuu wixii dalka ka dhacay, xaaladihii iyo noloshii, inuu ogyahay oo uu la socdo.

Dhinac kale ka fiiri; hadduu dhib ka soo gaadhay, uu cadhaysan yahay, ka warama "negative"? Ha laga fiiriyo dhinac kaliya. Ma laga fiiriyey kan dhinaca uu ka xun yahay, wadankii ma joogin? Dhinaca kale ka fiiri nin aan qabiil ka aqoon; waxa aan jeclay Soomaali, Soomaali u tahay, say wallaahi iska ah nidaam iyo dawladnimo raba "positive side"-kiisa, sow ma aha? Markaa mid kasta dhinaca khaldan aan ka leexano, dhinaca wanaagsana aan qaadano; ummadda ha loo simo. Qof kasta oo Soomaaliyeed oo shuruudaha kale buuxiyey, inaan la odhan 5 sano kumaad noolayn. Aniga 5 sano maaha; hal usbuuc inuu ku noolaado macne ii samayn mayso.

Faqradda 2aad, isla qodobkan, musharraxa madaxweynaha waxaa soo gudbinaya xisbi ama isbahaysi xisbiyo. Alxamdulillaahi Rabbil Caalamiin, waa markii aan aaminsanahay inaynu u soconno inaynu axsaab aadi doonno, oo nuuca hadda aynu ku fadhinno aynu ka gudbayno. Laakiin waxaa la yidhi inay soo gudbiyaan axsaab ama xisbiyo; "good". Maxaan ku diidanahay musharrax madaxbannaan oo aan xisbi ka tirsanayn, oo xisbigan arkay duruuftiisa iyo wuxuu wato iyo afkaartiisa waa ila khaldantahay, xisbigan kalena waa ila khaldantahay, oo yidhi si madaxbannaan ayaan isu sharaxayaa, dalkana ku hoggaaminayaa?

Adduunkoo dhan waa ka dhacdaa; maxaan u diidaynaa markaa? Ha diido cid Baarlamaanku dooranayo, ha u diido hadhaw, ha dooran waayo. Laakiin fursaddii inuu tartamo musharrax madaxbannaan, oo xisbi kasta wax ku ciladeeyey, ma aqaano sababta looga hor istaagayo; adduunkana ma aha wax lagaga dhaqmo.

Waxaan soo jeedinayaa in faqrad lagu daro oo ah musharraxa madaxbannaan in ay soo jeediyaan 20 xildhibaan. Meel kale waxaa ku taalla Qodobka 111aad, faqraddiisa 3aad; waxaa soo gudbinaya musharraxa 20 xildhibaan, halka la yidhi xisbi baa soo gudbinaya. Sow "contradiction" ma aha, marna xisbi baa soo gudbinaya, marna 20 xildhibaan baa soo gudbinaysa?

20-ka xildhibaan ha loo daayo musharraxa madaxbannaan; laakiin musharraxa xisbi ka tirsan, oo xisbigu soo gudbinayo, ha loo daayo xisbiyada ama isbahaysi axsaab inay soo gudbiyaan.

Qodobkaasna lagu daro, dhinaca kale laga saaro; laakiin lagu daro faqrad ah in musharraxa madaxbannaan, maaddaama uuna xisbi wadan, 20 xildhibaan uu ka codsado inay u saxiixaan musharraxnimadiisa. Taas wali waxaan ka akhrinayaa sidan sheegaayey; tii hore oo kale axsaab baanu nidhiye, maxaan uga baahanahay musharrax xisbi soo sharaxay inuu 20 xildhibaan isagu raadsado ama isbahaysi?

Markaa faqraddu ha loo wareejiyo in musharraxa madaxbannaan 20 xildhibaan ay u qori karaan. Xildhibaan, marka aan leeyahay, waa xildhibaanada labada Aqal ee Baarlamaanka.

Qodobka 117aad Eedaynta Madaxweynaha, faqradda 7aad, waxaa ku qoran in two-third Aqalka Sare ay ugu danbaynayn masuuliyad ka xayuubinta madaxweynaha ay leeyihiin; hore ayaan uga doodnay. Ha loo noqdo Qodobka 92aad, faqraddiisa 3aad; Baarlamaanku wuxuu awood u leeyahay, wuuna ka xoog badan yahay. Baarlamaan baanu nahay; arrimaha waaweyn oo culus, xil ka xayuubinta madaxweynaha oo kale ah, aynaan u kala fadhfadhiisane, hal mar inagoo fadhina awoodda Baarlamaanka lagu meel mariyo.

Qodobka 119aad, faqraddiisa 1aad, xilka madaxweynaha wuxuu bannaanaanayaa xarafka (d), si waafaqsan Qodobka 117aad. Weli waxaan ka hadlaynaa xarafka (d), two-third-kii Aqalka Sare inuu ka xayuubin karo. Markaa qodobada aan isla fiirfiirino, si fiican aan iskula akhrino; waa inuu isbeddel ku dhacaa lana waafajiyo Qodobka 92aad, faqraddiisa 3aad.

Faqradda 5aad, ugu horrayn, waxaa loo baahan yahay in la kala cadeeyo laba eray: ku-sime madaxweyne iyo madaxweyne ku-meel-gaadh ah. Ku-sime madaxweyne waa madaxweynaha oo safar aaday ama shaqo bannaanka aaday, oo guddoonkii fadhiistay, guddoomiyihii sida sharcigu hadda jideeyo, oo ah ku-sime maalin, laba maalin, saacado iyo intii la doono. Madaxweyne ku-meel-gaadhka ah waa ka duwan yahay; waa jagadii oo faaruqday, guddoomiyihii Baarlamaanka, kuu noqda, uu noqday madaxweynihii Jamhuuriyadda muddada uu dastuurku caddaynayo. Markaa waa in awooddiisa la qeexo; haddii kale maxaa loo lugoynayaa, maaba la iska daayo. Waa lugooyo madaxweyne tahay; waxaad qaban karto ma leh, xitaa dad iskuma yeedhi kartid.

Markaa awood maangal ah ha loo sameeyo; talo waa laga dhiiban karaa guddiyadu mar hadday nooyeertaan, oo waliba "invoice" la socon, laakiin wixii talo lanaga rabo. Faqradda 2aad ee qodobkaas sidii oo kale in loo noqdo Qodobka 92aad faqradiisa 3aad.

Cutubka 8aad, Qodobka 121aad waxaan ka xusayaa kaliya Qodobka 121aad, shuruudaha xubin-nimada golaha, faqradda 3aad, xarafkeeda (b), qabtaan xilal kale. Waa tii la lahaa wasiiradu ma noqon karaan; sow nagii uga wada hadalnay?

Waar, xisbiyo ayaa soo socda; Ra'iisul Wasaarahaa xisbiga ka tirsanaan kara oo xildhibaan u ah, wasiirkaa u ah. Sidan hadda u fadhinno yeynaan ku salaynin Baarlamaan; dastuur waxaan samaynaynaa xisbiyo ay yeelan doonaan. Wasiirka xisbigiisaa keenanaya, Ra'iisul Wasaaruhuna xisbigiisaa keenanaya; kulligood xildhibaano ayay noqon karaan, iyagaa laga rabaa inay dawladadooda difaacaan. Marna kuma jirto in la yidhaahdo ma noqon karo; xisbiga dalban kara ama xildhibaan buu keensan kara ama teknokaraak buu dibadda ka qaadan karaa markuu dawlad dhisanayo isagu. Waa mahadsan tihiin. Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.



**Sen. Zamzam Abdullahi Ahmed**

Guddonka labada Aqal, xildhibaanada labada Aqal, iyo hawl-wadeennada guddiga. Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.
Salaan ka bacdi, intaa ka dib, haddii aan doodeyda bilaabo:

Cutubka 7aad, Qodobka 109aad, Faqraddiisa 1aad Asalkii dastuurka si fiican oo habeysan ayuu u qornaa; sidaas darteed, aniga waxaan qabaa in sidiisii hore loo daayo. Qodobka 114aad, Faqraddiisa 3aad waxaan ka soo hadalnay maalintii hore, markii aan ka doodeynay Cutubka 5aad, Qodobkiisa 87aad, Faqraddiisa 3aad, in laga saaro; aniguna waxaan qabaa in dastuurka laga saaro. Isla hadda faqrad mid u eg ayaa soo baxday; iyadana waxaan qabaa in sida tii hore looga saaray oo kale looga saaro.

Qodobka 118aad, Faqraddiisa 2aad marka lala akhriyo qodobka ku xiga, oo ah Qodobka 119aad, Faqraddiisa 4aad, aniga waxaan qabaa in loo daayo guddoomiyaha Aqalka Sare, isla markaana la is-waafajiyo dastuurka. Meel wuxuu sheegayaa ku-xigeenka 1aad, haddii la waayo guddoomiyaha Golaha Shacabka, sii-haye noqon doono; meel kalena wuxuu sheegayaa in guddoomiyaha Aqalka Sare uu noqonayo, sida ku cad Qodobka 119aad. Sidaas ayuu sheegayaa.

Qodobka 121aad, Faqraddiisa 1aad, Xarafkiisa (i) waxaan soo jeedinayaa in meel walba oo looga hadlayo dadka haysta labada jinsiyadood — Soomaaliga iyo jinsiyad kale — in sidiisii loo daayo. Waxaan ku caddaynayaa in 30-kii sano ee la soo dhaafay, Soomaaliya dadka samata bixiyey ay ahaayeen dadka qurbaha. Sida xaqiiqda ah, haddii aan u wada hadalno, maanta marka la imaado in xilal dowladeed la wada qeybsado, in la yiraahdo qofkii dibadda ka yimid baasboor kale ayuu heystaa, jinsiyaddiisana waa inuu ka tagaa, haddii kale xil ma qaban karo, caddaalad ma aha, xeerna ma aha. axaa kaga filan qofka inuu muwaadin Soomaaliyeed yahay oo shuruudaha buuxiyey. In baasboorka laga tago ama qofka lagu qasbo inuu dalka joogo 3 sano ama 5 sano si shuruud looga dhigo, macno ma samaynayso. Haddii xeerkii jinsiyadaha ka hadlayey uu oggol yahay qofka inuu labo "citizen" noqdo, sababta looga diidayo dastuurka inuu wasiir, madaxweyne ama xildhibaan noqdo aniga ma garan karo.

Isla Qodobka 121aad, Faqraddiisa 3aad, Xarafka (b) wasiirka xilka qabanaya waa inaanu xirfad ku shaqeynin ama ganacsi sameynin. Aan isweydiinee: ma rabnaa wasiir baahi qaba oo wixii loo keeno "corruption" ku sameynaya, oo wada dhammeystiraya wixii loogu talagalay ummadda Soomaaliyeed? Mise waxaan rabnaa nidaam "corruption"-ka ku socda? Qofka haddii uu hanti leeyahay oo uu shaqeysanayo, "there is no point" wax diidaya inuu wasiir noqdo, isla markaana shaqadiisa iyo ganacsigiisaba wato. Ma jiraan wax u diidaya.Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa in faqradan iyadana meesha laga saaro. Waa mahadsan tihiin.



**Xil. Adan Mohamed Ali**

Mudane gudoomiye mudanaysha sharafta le hadaan toos uguda galo qodobka 110aad oo ka hadlaya Doorashada Xilka Madaxweyna Jamhuuriyada Fedaraalka Soomaaliya waxa la yiri oo halkan ku qoran in uu leeyahay waayo aragnimo 15 sano ah waxaan dhihi lahaa 15 sano way badantahay hadii qofku uu da' ahaan jiro 40 sano 15 sano marka laga jaro waa intuu aha ardayga marka waxaan dhihi lahaa in laga yareeyo 10 sano ama 8 sano meelaha la geeyo ayan soojeedin lahaa isla qodobkaas farqadiisa **(E)** markii la cadeeyo caafimadkiisa qofku markuu xanuunsado uu caafimaadi karaa marka inaan la dhihin u xanuun saday oo la yiraahdo markaas la cadeeyo uu xilka doonayo la cadeeyo inuu cafimaad qabo oo aan la dhihin qofka markuu 10 sano 5 sano 8 sano markuu jirey haduu xanuunsaday mar dhimirka ka xanuunsaday haduu cafimaaday ma waxasaa loo xisaabaaya marka cadaalad maaha waxan is leehay in laga saaro qodobkaas sidiisaba oo la yiraahdo marka uu tartamaayo uu cafimaad ahaan inuu cafimaad qabo.

Qodoabka 111aad oo ka hadlaya Dooraashada Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo hada u gudbay qodobka 111aad hada ah oo Dastuurkii horana ka ahaa 98aad kaa isaga ah ma cada qofka hogaaminaayo Doorashada Madaxweynaha marka ay joogaan labbada gole ee Aqalka Sare iyo Golaha Shacabka marka qofka shir gudoominayo in lagu cadeeyo oo la yiraahdo gudoomiyaha golaha shacabka aya shir gudoominaya in la yiraahdo, guddigu waa ilduufeen ayaan u malynaaa markaa in lagu daro **(B)** oo la yiraahdo waxa shir gudoominaya gudoomiyaha golaha shacabka in sidaa loo dhigo ayn qabaa.

Qodobka 112aad oo ka hadlaya dhaarta madaxweynaha jamhuuriyada waxan isleehay dhaartii hore ayaa ka siiqad ficnayd tan, tii hore ayaa ka fiican marka tii 1aad ee hore in la qaato ayaan soojeedinayaa inta badan dhaarta lasoo dhigay waa sidaas marka in dhaartii hore ee dastuurka horay inoogu qornayd ayaa ka munaasabsan tan hada la soo qoray marka sidaa in laga dhigo ayn soojeedinayaa.

Qodobka 120aad ee ka hadlaya Golaha Wasiirada Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya Farqada 1aad waa *ok* sida hada uu u qoranyahay ayaan ku raacsanahay iyo Faqrada 2aadba. Farqada 3aad ee ka hadlaysa qofka noqonaya golaha wasiirada oo laga reebay xildhibaanada sidii hore in laga dhigaan qabaa oo qofka la yiraahdo haduu xildhibaan yahay inuu qaban karo xil wasiirnimo bacdamaa la yiri Xisbi ayuu qofku kasoo galayaa iyo *Parliamenterian system* aan nahay in marka sidaa loo dhigo ayan qabaa.

Qodobka 121aad waxaan qabaan in Farqada **(H)** isla tii hadaaya aan ka hadlaayey waaye oo isaga la yiraahdo cafimaadkiisa in markaa uu cafimaad qabo oo aan loo tirin wax mar hore ahaa, waayo uu caafimadi karaa qofka.

Qodobka 127aad iyadana dhaar ayay ka hadlaysaa in sidii hore loo daayo ayan qabaa.

Qodobka 128aad iyadana qaabka looga keenayo Golaha Wasiirada mooshinka ama la xisaabtanka waxaan qabaa waxa la yiri 10 xildhibaan ayaa ka keeni karta wasiirka marka 10 xildhibaan aad ayay u yartahay marka in laga badiyo oo la yiraahdo ugu yaraan 35 ama wixii ka badan. 10 xildhibaan aad ayay u yartahay oo 10 xildhiban oo soo heshiisay waxay samayn

karaan mararka qaar cadaalad darro waxa loo keenayana waa in la isla xisaabtamo oo qofka lala xisaabtamayo laftirkiisu uu dareeemo cadaalad. Aad ayaad u mahadsantihiin.



**Sen. Muse Sudi Yalahow**

Salaam bacdigeed, Guddoomiye,
Dastuurkan sidiisaba aayad Qur'aan ma aha; wax la beddeli karo ayuu yahay. Haddii aan fiirsado, abaalmarin ma leh; ama si qurux leh u shaqee ama si liidata u shaqee, dadku isku mid bay noqdeen. Waxaa kale oo aan ku arkay xaq dhowr ma leh, salna kuma jiro. Waxa uu u egyahay in si cadownimo ah, qofkii shaqadiisa gudanaya aan ixsaan loo hayn, oo uu u furan yahay si aan caddaalad lahayn.

Waan ku waafaqsanahay sidiisa guud, hase yeeshee dastuurkii hore waxyaabo badan oo uu ku fiicnaa ayaa jiray. Sida Baarlamaanka lagu soo geli jiray, si dadku uga dhex muuqdaan ayay ahayd; midabtakoorka hadda socda — dad dibadda ka yimid iyo dad gudaha ka yimid waa isu sinnaayeen. Dadka wax yaqaan iyo dadka waayo-aragga ah way isu sinnaayeen. Waxaa ka mid ahaa in dadka ciidammada ku jira, marka ay hawlgab noqdaan, ay xaq u leeyihiin inay Baarlamaanka soo galaan haddii dadkoodu doortaan. Taasi waa arrin mudan in dib loo eego.
Sidoo kale, waxaa maqan dadka naafada ah; kuma jiraan Baarlamaanka. Iyaguna waa in lagu daraa, dastuurkana sidaas loogu qeexo.

Guddoonku siduu ahaan jiray inuu ahaado waa muhiim; laakiin guddoonkii shaqo fiican qabta abaalmarin ha lahaado, guddoonkii shaqo xunna abaalmarin kale ha lahaado. Madaxweynaha isaguna, kii shaqo fiican qabta abaalmarin ha lahaado, kii xunna abaalmarin kale ha lahaado.
Haddii la yiraahdo aqoon, aqoontii la cuni karo waa fiican tahay, waaye-aragnimaduna 15 sano waa muhiim. shahaado la rabo, ha noqoto "PhD". Laakiin meel dad la geeyo meel sare, meel kalena laga reebo looma baahna. Dalka qofkii xurmo leh xurmo ha la siiyo, qofkii xurmo darro lehna xurmo darradiisa ha arko.

Abaalmarin la'aan wanaag ma keento. Baarlamaankeenna hadda wax baa ka maqan. Dadkii firfircoonaa, fadhiga ku adkaa, hadda ma joogaan. Mushaar baan qaadannaa, laakiin qof aan mushaarkiisa waxba laga goyn, oo aan la xisaabtamin, ma jiro wax ka go'aya. Askartuna lacag yar bay qaataan; dhibic baa laga jaraa. Annagu dhibic la isma saaro; xildhibaanku shan sano ayuu joogaa, saddex jeer oo keliya ayuu iman karaa, hal sano ama ka badan wuu maqnaan karaa, haddana lacagtiisu way u dhacaysaa. Taasi waa foolxumo ummadda lagu qiyaanayo.

Waxaa loo baahan yahay in shaqada daacadda ah buug lagu qoro, laguna qiimeeyo. Xildhibaanka waxaa u qoran saddex kalfadhi mise laba kalfadhi inuu shaqada ku weynaado; aqalkeenna waxa ku jira shan kalfadhi. Kuwa aan iman haddana ku qoran, marka la dhaho waa galeen oo aan shaqayn, buugga lagu qoro oo lagu saaro, haddii aan waxba tarayn, ha laga dhigo wax tar leh.

Aniga waxaan soojeedinayaa in fiicnaanta iyo xumaanta la kala saaro, laguna daro dastuurka, kan hadda la qorayo iyo kuwa mustaqbalka la qori doono. Waxaa soo haray wasiirrada iyo xildhibaanada xisbiyada ka imanaya. Qofkii is leh waa lagu soo qoraa, qof kusoo qori ma jiro;

qofkii is leh qabiilkaaga gooni kuu soo dooranayaana ma jiro. Xisbiyo kala aada, xisbiyadaasna laga soo kala aado; wixii laga helo ayaa lala yimaadaa. Xisbigaas wasiirradiisa asagaa leh, xildhibaanadiisana asagaa leh, dambiilona ugu wada jiraan.
Waa mahadsan tihiin.



**Xil. Abdulfatah Kasim Mohamud**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim.
Guddoonka labada gole ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, xildhibaanada, warbaahinta iyo shaqaalaha Baarlamaanka, dhammaantiin waxaad ku salaamantihiin salaanta Islaamka:

Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh Ramadaan Kariim.Bisha Ramadaan awgeed, inta aanan guda gelin qodobada inoo qoran, waxaan soo jeedin lahaa, gaar ahaan ganacsatada Soomaaliyeed, inay u turaan una naxariistaan shacabka taagta daran. Sida aynu la soconno, ha noqoto dunida Islaamka ama caalamka kale, waxa ay nooga duwan yihiin ganacsatadooda ama dowladahoodu waa in munaasabadaha diineed sida Ciidaha iyo Ramadaanka, ama xaaladaha adag sida abaaraha, fatahaadaha iyo dagaallada, aanay shacabka ka faa'iidaysan si qaldan.

Sidaas darteed, haddii maanta la waayo wasaarado si sax ah idinla xisaabtama, haddii la waayo Baarlamaan idinla xisaabtama, damiirkiinna ha idin xisaabiyo; shacabka ha loo turo, ha loo naxariisto. Intaa ka dib. Cutubka 8aad dooddu waxay ka bilaabanaysaa Cutubka 8aad. Sida la sheegay, Golaha Wasiirrada, Qodobka 120aad, wuxuu ka koobnaanayaa: Ra'iisul Wasaare, Ra'iisul Wasaare ku-xigeenno, Wasiiru-dowlayaal iyo Wasiirro ku-xigeenno.

Aniga mar kasta aragtideydu waxay ahayd in ama nidaam xisbi lagu dhiso ama nidaamka qabaa'ilka ah ee "reality"-ga ah la qirto. Xisbigu buugga ayuu inoogu qoran yahay muddo dheer, laakiin afka ayaa laga ilaaliyaa, halka nidaamka qabaa'ilku yahay kan aan ku dhisannahay.

Haddii dowladdu miisaaniyaddeeda isku filnayn, wax-soo-saar lahayn, wax dhoofin lahayn, canshuur dalka oo dhan aanay ka wada qaadin, ilaha dhaqaalahana aanay wada xukumin, isla markaana lagu jiro xaalad qof walba madaxweyne yahay, markaas waxa ila qurux badnaan lahayd in dhaqaalaha yar ee la haysto si sax ah loo maamulo.
Sidaa darteed, aragtida ah in la ballaariyo golayaal iyo masuuliyiin is-qancin ah, waxaan ka doorbidayaa in lagu soo koobo Golaha Wasiirrada: Ra'iisul Wasaare iyo Ra'iisul Wasaare ku-xigeen. Wasiirro kooban. Wasiir ku-xigeenno in "totally" meesha laga saaro. Wasiiru-dowlayaasha lagu koobo wasaaradaha muhiimka ah sida Arrimaha Dibadda iyo Gaashaandhigga, iyo sidoo kale Madaxtooyada iyo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

Inta kale ha la iska daayo, xukuumadduna ha noqoto mid "technocrat" ah. Taasi waa arrin ku xiran Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha, laakiin aniga ahaan waxaan soo jeedinayaa in qodobkan la soo koobo. Shuruudaha Xubin-nimada Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada da'da 40 sano ee lagu xiray xilalkan, waxay ila tahay in albaabka laga xirayo dhallinyarada, iyadoo dunidu tahay mid ku shaqaysa tiknoolajiyad iyo aqoon ay dhallinyaradu si fiican u buuxin karto. Sidaas awgeed, da'da 40 sano waxaan ku beddeli lahaa 35 sano.

Arrinta Wasiir ku-xigeennada iyo Wasiiru-dowlayaashasida ku qoran xeer-hoosaadka Golaha Wasiirrada iyo dastuurkaba, Wasiir ku-xigeenka shaqadiisa waxa lagu soo koobay wixii Wasiirka u dirsado. Agaasimaha guud ama agaasime waaxeed ayaa shaqo loo diri karaa. Sidaas darteed, Wasiir ku-xigeenka wax micno ah oo dheeraad ah ma kordhinayo; waxa ay u egyihiin miisaaniyad-buuxin iyo qof-qancin.

Wasiir ku-xigeenka, marka Wasiirku maqan yahay, isaga ayaa shaqada leh. Laakiin Wasiiru-dowle, sida caadiga ah dunida waa arrin kooban, saddex ama afar meelood oo gaar ah; ma aha sida aynu u samaynay.

Tusaale ahaan, Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha iyo Wasaaradda Warfaafinta ayaa leh Wasiiru-dowlayaal badan. Shaqada Wasiiru-dowlaha waa wixii Ra'iisul Wasaaruhu si gaar ah ugu dirsado; laakiin wasaaradda shaqadeeda toos ah kuma lug laha.

Sidaa darteed, Wasiir ku-xigeenka ayaa shaqada iska leh; Wasiiru-dowlaha wax micno ah kuma soo kordhinayo. Xilka Qaadista Golaha Wasiirradawali waxa aynu ku dhex jirnaa "contradiction" iyo masaalix iska soo horjeeda. Caqliyaddii qabaa'ilka iyo caqliyaddii xisbigu maskaxda ayay ku wada jiraan; laba sheydaan ayaa maskaxda isku haya, annaguna kama xoroobinno.

Qodobka wuxuu sheegayaa in Ra'iisul Wasaaraha magacaabistiisa Madaxweynaha iska leh, ka-qaadistiisana Baarlamaanka iska leh. Sida saxda ah, haddii aan rabno nidaam "parliamentarian" ah, waa in awooddaas "totally" Madaxweynaha la siiyo. Inkastoo aynaan si rasmi ah u ahayn "parliamentarian", haddana nidaam "mix" ah ayaynu nahay. Haddii Madaxweynaha magacaabi karo Ra'iisul Wasaaraha, balse uusan ka qaadi karin xilka, taas aragti sax ah ma aha.

Haddii aynu diidnay nidaamkii "presidential"-ka ahaa ee Madaxweynaha awood buuxda lahaa, isla markaana diidnay inuu noqdo madaxweyne "ceremonial" ah oo Ra'iisul Wasaare awood leh jiro, haddana aynu isku dhex wadno Madaxweyne awood leh iyo Ra'iisul Wasaare awood leh, dhibaatadu way sii jiri doontaa.

Waxaan soo jeedinayaa in Ra'iisul Wasaaraha uu Madaxweynaha magacaabo, isla markaana Madaxweynaha uu xilka ka qaado. Aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin. Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.



**Xil. Abdirahman Mohamed Mohamud**

Cutubka 7aad – Qodobka 109aad qodobka 109aad, farqaddiisa 1aad, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida ay guddigu u soo qoreen, waxa ku qoran: "Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa Madaxa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, astaanta midnimada, damaanad qaadaha madaxbannaanida qaranka, ilaaliyaha dastuurka." Aniga waxaan soo jeedinayaa in la soo koobo oo laga dhigo: "Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa Madaxa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, astaanta midnimada qaranka iyo ilaaliyaha madaxbannaanida aasaasiga ah ee dastuurka." Sidaas ayaan isleeyahay in laga dhigo.

Qodobka 111aad – Doorashada Madaxweynaha qodobka 111aad, farqaddiisa 1aad, wuxuu dhigayaa in Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lagu dooranayo kulan wadajir ah oo ay yeeshaan labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Waxa ka dhiman in lagu daro: "Waxaana guddoominaya Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya." In lagu daro ayaan soojeedinayaa.

Qodobka 112aad – Dhaarta Madaxweynaha, markasta dhaartii hore ayaa asalka iyo nuxurka ka toosanyahay. Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro: "Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan xilkeyga u guto si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo diinta ku jirto, isla markaana aan dhawro dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka u yaalla." Intaas in lagu daro ayaan soojeedinayaa.

Qodobka 117aad – Eedeynta iyo Maamuus-ka-Xayuubinta Madaxweynaha, waxaa ku qoran in hindisaha eedeynta Madaxweynaha, sida ku xusan farqadda 1aad, uu horkeeni karo ugu yaraan saddex meelood hal meel xubnaha guud ee gole kasta oo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ah, isla markaana Maxkamadda Dastuuriga ahi go'aan ka gaareyso.

Farqadda 4aadna waxa ku qoran in Golaha Shacabka uu go'aan ka gaaro eedeymaha loo jeediyay Madaxweynaha muddo aan ka badnayn 30 maalmood. Halkaan waxa lagu soo koobay Golaha Shacabka oo keliya, halka bilowgii lagu sheegay in Madaxweynaha lagu doortay labada Aqal oo wadajira. Haddaba, haddii doorashadu ku timid labada Aqal si wadajir ah, sidee bay u suurtogal tahay in eedeynta iyo xil-ka-xayuubintu hal Aqal ku koobnaato? Waxaa kaloo lagu qoray in go'aanka lagu hirgelinayo cod qarsoodi ah oo saddex meelood laba meel ah xubnaha Golaha Shacabka, laguna gudbinayo Guddoomiyaha Aqalka Sare.

Farqadda 6aadna waxay sheegaysaa in Aqalka Sare ka doodayo go'aankaas muddo 15 maalmood gudahood. Haddaba, su'aashu waxay tahay: goorma ayay labada Aqal u kala shaqeynayaan si sidan ah? Goorma ayay noqdeen mid Xeer-ilaalin ah, midna go'aan kama dambeys ah qaadanaya? Labada Aqal waxaa loo dhisay inay "check and balance" isku ahaadaan, ma aha inay hal shaqo isku wada qabtaan ama mid midka kale ku xukumo.

Sidaas darteed, waxaan soo jeedinayaa in qodobka xil-ka-xayuubinta dib loogu celiyo qaabkii asalka ahaa, oo hindisaha eedeynta uu keeni karo saddex meelood hal meel xubnaha labada Aqal si wadajir ah. Kadibna, Maxkamadda Dastuuriga ahi ha xaqiijiso in eedeyntu sal leedahay. Haddii ay sal yeelato, labada Aqal si wadajir ah, cod saddex meelood laba meel ah, ha go'aamiyaan. Sida doorashadu ku timid si wadajir ah, si wadajir ah ha looga qaado, haddii eedeyn sal leh jirto. Qodobkaas in lagu soo koobo ayaan soo jeedinayaa. Dhaarta sidoo kale, sidii asalka ahayd ee dastuurka ku qornayd ayaan codsanayaa in lagu daayo.

Qodobka 120aad iyo 121aad – Golaha Wasiirrada ,qodobka 1aad, farqaddiisa (j), waxa ku qoran in Ra'iisul Wasaaraha ama xubinta Golaha Wasiirrada ay tahay inuu si joogto ah u deganaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ugu yaraan saddex sano. Waxaa dhici karta in dad Soomaaliyeed oo dibadda wax ku soo bartay, duruufo gaar ah dartood aan si joogto ah u deganayn dalka, haddana ay u qalmaan xilka Ra'iisul Wasaaraha. Sidaas darteed, saddex sano aad ayay u badan tahay; waxaan soo jeedinayaa hal sano in lagu soo koobo.

Qodobka 121aad, Farqadda 3aad, waxaa ku qoran in xubnaha Golaha Wasiirradu muddada ay xilka hayaan aanay qaban karin meherado madaxbannaan ama hawlo ganacsi.

Waxaan qabaa in qodobkan siiqadiisa la hagaajiyo. Qofka haddii uu waqti siiyay qaranka, waa inuu waqtigaas si daacad ah u guto. Laakiin waqtigiisa gaarka ah waa inuu danihiisa qabsan karo. Ma nihin nidaam kali-talis ah. Sidaas darteed, halkii si guud looga mamnuuci lahaa, ha lagu beddelo in muddada uu shaqada hayo aanay ku xadgudbin waajibaadkiisa qaran.

Qodobka 126aad – Waajibaadka Wasiirrada, Waxaa jira culeys ku saabsan wada-shaqeynta u dhexeysa wasiirrada iyo hay'adaha kale ee dowladda. Qof walba waxa uu isku dayaa inuu ka sareeyo kan kale, awooddana ku riixo. Waxaan rabnaa in "structure"-ka la hagaajiyo. Wasiir, Wasiir ku-xigeen iyo Wasiir-dowle hal wasaarad wada jooga waa in qaabkooda dib loo eego. Waxaan soo jeedinayaa in Wasiir-dowlayaasha la yareeyo, laguna koobo wasaaradaha muhiimka ah sida Madaxtooyada, Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Arrimaha Dibadda iyo Gaashaandhigga.

Wasiirka iyo Wasiir ku-xigeenka ha loo daayo wasaaradda; Wasiir ku-xigeenkana ha loo qeexo shaqooyin cayiman, si aan shaqadu ugu xirnaan oo keliya Wasiirka, loona sugin maqnaanshihiisa.

Qodobka 127aad – Dhaarta Golaha Wasiirrada, dhaarinta xubnaha Golaha Wasiirrada waxaan qabaa in sidii asalka ahayd lagu daayo. Intaas ayaan ku soo afmeerayaa. Aad ayaad u mahadsan tihiin. Salaamullaahi.



**Sen. Saynab Ismail Mohamed**

Waan salaamayaa dhammaan Xildhibaanada iyo Guddoonka. Asalaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Qodobka ugu horreeya, Qodobka 109aad, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya: "Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa astaanta midnimada, madaxbannaanida qaranka iyo mabaadi'da dastuurka."
Waxaan ka saaray "damaanad-qaadaha", "mabaadi'da dastuurka"-na waan ku daray. Sidaas ayaan u arkaa inay ka kooban tahay, si gaar ahna uga qurux badan tahay sida uu hadda u qoran yahay. Farqadda 2aad, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya wuxuu matalaa Jamhuuriyadda Soomaaliya; wixii kale ee dastuurku ku caddaynayo waa qurux badan tahay, laakiin "Federaalka" ayaa ka maqan halkaas.

Qodobka 110aad, shuruudaha doorashada xilka madaxweynaha, waxaa ku qoran xarafka A. Horta waxaan Guddiga u sheegayaa: waxaan akhrinayno waa Soomaali, haddana waxaad mooddaa inaan ka faanayno alif-beetadeenna in B, T, J ay ku qoraan. Taas ayaan soo jeedinaynaa in A, B, C loo raaco, maadaama wax aan Af-Soomaali ku qorno ay sidaas raacayaan. Marka xarafka A la eego: "muwaadin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo Muslim ah". Halkaan waxaan oran lahaa qodobkaan A-da in lagu beddelo: "muwaadin Soomaaliyeed oo Muslim ah". Ileen qofkii jamhuuriyaddii ma ahan ee qof Soomaaliyeed ayaan ka hadlaynaa; khallaas, Soomaali-nimadiisa halkaas ayay ka muuqanaysaa.

Da'da Madaxweynaha, anigu waxaan qabaa in 35 laga dhigo. Inuu yeesho meel uu aado: qof 90 jir ah oo isa soo sharxaya waa inuu "limit" leeyahay. 35 ilaa 70 marka uu qofku joogo, haddii ay u korodho waa meesheedi; laakiin inta isa soo sharxi karta waa in laga dhigo. Waxaan

aragnay madaxwayneyaal dhalinyaro ah iyo ra'iisul-wasaarayaal 34–35 jir ah oo dalalkoodii wax badan ka beddelay. Marka "age"-ga waxaan oran lahaa 35 "limit"-ka ha noqoto: Ruwaanda, Burkina Faaso, Faransiis Makron, ra'iisul wasaare filand 34 bay jireen. Yaan caqabad looga dhigin 40. Halkaan musharraxa iyo jinsiyaddiisa, maadaama sharci uu jiro oo oggolaanaya in qofka Soomaaliyeed laba jinsiyadood haysan karo, waxaan qabaa in qofka aan la cabburin; waxyaabihii kacaanka aan jirin ha laga daayo.

Inuu caddeeyo hantidiisa: meeshaas waxaa ku qoran Qodobka 121aad, "hantida guurtada iyo maguurtada"; marka taas ayaan ku daray in labadaba la caddeeyo—hanti guurta iyo hanti maguurta—si ay isugu mid noqdaan. Musharraxa Madaxweynaha waxaa soo gudbinaya xisbi siyaasadeed ama isbahaysi; taasi waa run, waan u gudubnay.

Qodobka 111aad, farqaddiisa 3aad: musharraxa Madaxweynaha 20 xildhibaan baa "proposal" gareynaysa meesha ahayd, halka tan ka hooseysa ay leedahay musharraxnimo waxaa soo jeedinaya xisbi ama isbahaysi xisbi. Waxay is burinayaan, ayagaa is burinaya. Marka waxaan oran lahaa: haddii xisbi loo guuray, wixii xisbiyadaas ku soo baxa oo aqlabiyadda hela ayaa meesha ku tartamaya. Sidaas darteed, farqadda 3aad meeshaba waan ka saari lahaa. Halka tan 4aadna oo ah in xisbiyo lagu soo tartamo iyadana inaysan muhiim ahayn ayaan qabaa, in laga saaro.

Farqadda 5aad marka la codeynayo doorashada Madaxweynaha: si loo ururiyo Af-Soomaaliga waxa naga dhaxeeya, "uniform"-ka aan leeyahay waa: anigu xildhibaan baan ahay, Golaha Shacabkana waa xildhibaan; marka qof walba codkiisa ayuu leeyahay, hal cod.
Mudada xil-wareejinta 15 cisho: waa yartahay, waa labo asbuuc. Waxaan oran lahaa bil ama 30 maalmood ha loo dhigo.

Qodobka 113aad, xasaanadda Madaxweynaha: "Madaxweynaha laguma maxkamadeyn karo gudashada waajibaadka dastuuriga ah markuu xilka ka dago, haddii uusan galin gabood fal la xiriira xuquuqda aadanaha." Marka "if" meesha soo gasho, sharcigu fursad buu qof ka siinayaa. Waxaan oran lahaa: maadaama dowlad-dhis ku jirno, oo kabasho ku jirno, sanadkii 40aad ma reyno; arrintaas in laga saaro. Madaxweynaha xilka ka daga, maxkamad waa la saari karaa; laakiin marka uu xilka hayo, Baarlamaan ama cid kale qaban karto. Marka haddii xilka uu ka dago oo la qab-qabsado, wuu galayaa meel kale. Aan ka taxadarno waxyaabaha keeni kara mushkilad; sidaas darteed, arrintaas in laga saaro ayaan qabaa.

Qodobka 114aad, farqaddiisa 3aad, wuxuu ku dhawaaqayaa doorasho aan xilligeeda la gaarin: doorasho laba sano ama saddex sano dambaa lagu dabaqayaa, Baarlamaankana waa la kala dirayaa. Siiqoyinkooda miyaa hagaagsan? Koley sixitaankoodii waa adag yahay. Iyada Laf-tirkeedu waa waxyaalaha aan jecelaystay: dowlad-dhiska aan ku jirno, ma aragtay madaxweyne la eryayo, Baarlamaan la eryayo? Madaxweynaha labo sano markuu joogo, saddex sano dambe Baarlamaanka wuu kala diri karaa, dowlad cusubna waa la dhisayaa. Waxaas xilligan nagu habboon ma aha.

Qodobka 114aad, farqaddiisa 5aad: wuxuu magacabayaa, xilka ka qaadaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga, Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka ka dib soojeedinta Golaha Sare ee Garsoorka si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Si loo xoojiyo "check and balance" ee saddexda laan: xeer-dejinta, garsoorka iyo fulinta, waxaan oran lahaa: xubnaha sare marka Guddoomiyaha laga qaadayo, Baarlamaanka Golaha Shacabka ha ansixiyo, si aan la iskaga eryin. Taasi waxay xoojinaysaa garsoorka oo aad mooddo inuu daciif yahay, si ay u helaan awood ay waajibaadkooda si madax-bannaan u gutaaan.

Farqadda 12aad, isla qodobkaas: wuxuu cafis u fidinayaa ama ciqaab ka dhimaa dambiilayaal uu Xeer-ilaaliyaha soo gudbiyo. Halkaan waxaan ku darsanayaa talo jeeb-keyga ah: in sanad walba si sanadle ah loo cafiyo, maadaama aynu nahay dad Muslimiin ah. Bishan, xabsiyada waxa ku jira dad badan: qof ri' xaday, qof wax boobay, qof wax yar ku gafay. Karaamada iyo barakada Bisha Ramadaan awgeed, Madaxweynaha dambiyada yar-yar kuwa aan xad-jir ahayn, kuwa gaajo iyo baahi ka dhashay ha u fidiyo cafis, si ay u noqoto mid waafaqsan wanaagga diinta. Taasna waa cod aan Madaxweynaha u jeedinayo.

Halkaan Aqalka Sare waxba "ma tuurayaan", laakiin nimanka soo "karinaya" waa Golaha Shacabka. Aqalka Sare loogu gudbinayaa waa xoojinta dowladnimada. Maadaama aan ku jirno dowlad-dhis, "check and balance" waa in la adkeeyaa si aan wax aan suurtoobayn u dhicin. Aqalka Sare waa aqalkii odayaasha; wuxuu u taagan yahay sixid iyo hubin.

Mudada 15-ka maalmood ah, in 30 bari laga dhigo ayaan qabaa; waayo waqti la siyaadiyo, bini-aadamku wuu ka fiirsadaa, caqliguna wuu is rogrogaa, si sharcigaasi u noqdo mid miisaaman. Shuruudaha xubinnimada Ra'iisul Wasaaraha, iyo shuruudaha xubinnimada Golaha Wasiirrada: da'da waxaan ka dhigay 35, waana da' aan u arko mid macquul ah.

Qodobka 121aad, farqaddiisa (G): in uu joogo oo daganaa dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ugu yaraan 5 sano. Waxaan qabaa—inkastoo anigu qurba joog aanan ahayn—ina dadka qurba joogta ah xirfadooda, fikirkooda, dowlad-wanaaggooda, iyo waxqabadkooda loo baahan yahay. In la yiraahdo 5 sano dalka joogay "condition" ha noqon. Madaxweynaha "interview"-ga ayaa ku ogaan kara xog-ogaalkiisa marxaladda uu dalku marayo.

Sharciga jinsiyadda, sida kii hore, qofku double baasaboorkiisa wuu haysan karaa isaga oo xil haya. Waxa kaliya ee muhiimka ah: hay'adda sirdoonka ha xaqiijiso in qofka loo dhiibayo wasiir, wasiir-dowle, wasiir ku-xigeen ama ra'iisul wasaare uusan ku jirin "hoolaha waaweyn" ee sirdoonnada dalal shisheeye. Laakiin baasaboorkiisa iyo arrimihiisa gaarka ah yaan lagu faragelin.

Qodobka 121aad, farqaddiisa 3aad: waxaa ku qoran in wasiiradu aanay xirfad gaar ah lahayn ama aanay ku shaqaynin ganacsi. Waxaan qabaa in la xoojiyo waxa macquulka ah: in la hubiyo in ka hor inta uusan wasiir noqon aanu lahayn hay'ad gaar ah, "company" wax dhisa, ama "company" qandaraasyada qaata oo uu ka faa'iidaysan karo "power"-kiisa. Taasi waa wax "logic" ah oo socda.

Waxba xilalka dowladdu waxay geliyaan wasiirrada; laakiin wasiir ku-xigeen ayaa xaq u leh, haddii wasiirku dhinto ama fasax galo, inuu howsha sii wado, isla markaana agaasimaha guud kala shaqeeyo. Wasiir-dowlaha, siyaasadda Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha meeshuu dhigo ayuu ku shaqo leeyahay, waayo "overlap" iyo khilaaf wasaaradaha ka dhaca ayuu u taagan yahay. Laakiin hawlaha hor-u-socodka wasaaradda waxaa iska leh wasiirka iyo wasiir ku-xigeenkiisa. Waa salaamantihiin.



**Xil. Mohamud Abdulkadir Haji**

Maanta waxaan ka hadlayaa Cutubka 7aad iyo Cutubka 8aad, oo aan dhex geli doono maadaama uu isaguna qayb ka yahay. Laakiin marka hore, hadal-jeedintii Guddoomiyaha Guddiga Dastuurka, saaxiibkay Xuseen, intii lagu jiray doodii adkayd ee Gobolka Banaadir xuquuqda loogu raadinaayey, hadal-jeedintiisa kuma uusan xusin in gobolkan uusan lahayn metelaaddii saxda ahayd. Doodahaas waxa la rabay in ajendihiisa qayb ka noqdaan, balse ma aysan noqon. Sidaa darteed, waxaan rabaa inaan dib u xasuusiyo in doodahaas lagu daro ajendihiisa. Waad mahadsan tihiin.

Qodobka 110aad ee shuruudaha doorashada madaxweynaha, waxaan rabaa inaan xoojiyo shuruudda xarafka (a): "muwaadin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo Muslim ah." Taas waa in la adkeeyo, maxaa yeelay Soomaali kale oo dalal kale leh, sida Soomaali Kiiniyaan, ayaa jirta. Haddii qof yimaado oo yiraahdo "waxaan ahay musharax," isagoo ku doodaya waxoogaa Soomaali-nimo ah, taasi lama rabo. Sidaas darteed, waa muhiim in si cad loo yiraahdo "muwaadin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya."

Xarafka (b), oo lagu soo kordhiyey in labadiisa waalid ay yihiin muwaadiniin Soomaaliyeed oo Muslim ah, iyadana waa in la adkeeyo. Xarafka (k), musharraxa haysta jinsiyad kale: waxaan rabaa in laga dhigo in marka uu isku soo sharaxayo xilka madaxweynaha uu ka tago jinsiyadda kale, oo uu caddeeyo inuu ka laabtay jinsiyaddaas maalinta uu musharraxnimo isu taago, halkii laga sugi lahaa marka uu ku guulaysto. Xarafka (i), inuu caddeeyo hantida uu leeyahay intuusan ku guulaysan xilka, oo qoraal ku gudbiyo Hanti-dhowrka Guud ee Qaranka, waa arrin muhiim ah; waa in lagu adkeeyaa sida ay u qoreen.

Qodobka 118aad, ku-simaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya: haddii madaxweynuhu maqan yahay ama xaalad caafimaad awgeed u gudan waayo xilka, ku-sime waxaa noqonaya Guddoomiyaha Golaha Shacabka. Taasi waa sax sida inoo qornayd. Haddii Guddoomiyuhu maqan yahay ama xaalad la mid ah ku maqan yahay, ku-simaha Madaxweynaha waxaa noqonaaya Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka. Hadda waxaad mooddaa in Aqalka Sare lagu daray waxyaabo aan hore u jirin.

Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka wuxuu metelaa beel la yiraahdo beesha 5aad; sidaas darteed, waa in qodobkan sidiisii hore loogu soo celiyo: haddii Guddoomiyaha Golaha Shacabku ka maqanyahay dalka, ku-simaha Madaxweynaha ha noqdo Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka.

Qodobka 119aad, haddii xilka madaxweynuhu bannaanaado sababo la xiriira geeri, iscasilaad qoraal ah, ama xilka oo si kale u bannaanaada, hadda waxaa lagu daray in Guddoomiyaha Aqalka Sare noqdo ku-simaha. Taasna waxaan qabaa in meesha laga saaro, oo laba-neynta laga fogaado.

Waxaan codsanayaa in doodaha halkan laga soo jeedinayo ee xildhibaanada labada Gole si dhab ah loo tixgeliyo, meel walba oo "points" ahna la qoro. Guddiyadu waa inay ilaaliyaan doodaha xildhibaanada, kuna ilaaliyaan sidii ay u soojeediyeen, maadaama dooddu qoran tahay oo duuban tahay.

Waxaan xusuusinayaa dadka qoraalka diyaarinaya: haddii ay wax khaldaan, doodahayagu waa duuban yihiin, Golaha Shacabkana waan kula xisaabtami doonnaa, haddii Ilaahay yiraahdo, maadaama isagu aqalkan maamulo. Guddoonka Golaha Shacabkana waan kula xisaabtami doonnaa haddii wax ka khaldamaan doodaha. Waad mahadsan tihiin. Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.



**Xil. Yusuf Mohamed Adan**

Mahadsanid, Guddoomiye. Bismillaahi Raxmaani Raxiim.

Waxaan si toos ah u gelayaa Qodobka 110aad, 112aad iyo 113aad; intaas ayaan ku salayn doonaa aragtidayda ku aaddan dastuurkan aan wado. Qodobka 110aad waxa ku qoran shuruudaha doorashada Madaxweynaha. Marka si fiican loo fiiriyo, waxaa ku xusan in da'du uga yaraan 40 sano. Arrintan waxaan la qabaa Xildhibaan Haruun oo shalay ka hadlay, sidoo kale xildhibaano badan oo shalay iyo maanta ka hadlay.

Runtii, arrintani dib u dhac ayay ku tahay dalka. Sida aan ka warqabno, 85% bulshada waa dhalinyaro; haddana dhalinyarada in la riixo ayaa la rabaa. Waad maqasheen hadalkii Xaaji Muuse Suudi (Alle ha u naxariistee) oo sheegay in qaar kamid ah dhalinyarada loo arko inay noqon doonaan bajaaj-wadayaal. Annagu ma oggolin in nala riixo oo gees naloo geliyo. Waxaan rabnaa in aragtidaas wax laga beddelo, lana yiraahdo Madaxweynaha da'diisu ha noqoto ugu yaraan 40 sano.

Markaan joogno Golaha Wasiirrada, waxaa la ogyahay in wasiirrada dhalinyarada ahi ay ahaayeen kuwa aragti badan, falanqayn sameeya, kana hadla dastuurka iyo shuruudaha si qoto dheer. Waxaa kamid ahaa Maxamed Barre iyo Wasiirka Dhallinyarada ee hadda jooga. Sidaa darteed, odayaasha waxaan ka codsaneynaa inay dulmiga naga daayaan.

Qodobka 110aad, arrinta jinsiyadaha laba-geesoodka ah (double citizenship): anigu waxaan qabaa in la oggolaado. Dadkeenna Soomaaliyeed waa qaxooti; burburkii dalka kadib dad badan ayaa dibadda ku nool, Kenya, Itoobiya iyo dalal kale.

Ma rabno dastuur ka hor imanaya "reality"-ga. Ma rabno dastuur ka hor imanaya xaqiiqda. Dadkeenna badankoodu qaxooti ayay ahaayeen; qaarna halkaas ayay ku dhasheen. Ma aha in qof dhalashadii rafaad ku helay laba maalmood kadib lagu yiraahdo jinsiyadda ka tag ama bajaj wad. Arrintaas dib ha looga laabto.

Dastuurkii hore lagu "base"-gareeyo ma qabo. Waxaan rabnaa dastuur ka turjumaya xaaladdeenna. Wadamada deriska ah badankood way oggolyihiin jinsiyadda labaad; qaab lagu xakameeyo ayaa jiri kara, sida Xildhibaan Seynab hore u sharaxday. Laakiin yaan laga dhigin arrin lagu cabburiyo shacabka.

Waxaan qabaa in marka la caddeynayo shuruudaha Madaxweynaha, xaqiiqada qabiilka laga hadlo. Waa in la cadeeyo waxa jira. Qof walba wuu ogyahay sida xilalka loo qeybsado; yaan la iska indho tirin.
Markaan eegay Qodobka 118aad, waxaan arkay in Guddoomiyaha la yareeyey awooddiisa. Haddii Guddoomiyaha uu ku-sime noqdo laba ama saddex maalmood, waa inuu yeeshaa awood

la mid ah Madaxweynaha muddadaas. Haddii kale waa cadaalad darro. Anaga Digil ahaan, waxaan dareemeynaa in xuquuqdeennu mar walba la yareeyo. Marka Guddoomiyuhu joogo laba maalmood, yaan laga qaadin awooddaas. Saddexdaas maalmood ha yeesho xuquuq buuxda oo uu wax ku magacaabi karo, waxna ku qaadi karo.

Waxaan kaloo soo jeedinayaa in Qodobka 110aad lagu daro farqad cusub oo ka hadlaysa danaha is-diidan (conflict of interest). Tani waa mushkiladda ugu weyn ee dalkeenna haysata. Marka Madaxweynaha la doorto, waa in uu ka fogaadaa danaha is-diidan. Waa in qodob cusub la abuuro oo si cad uga hadla arrintan, maadaama ay tahay mid burbur keeni karta. Qof walba labada maalmood uu joogo wax buu qabsan karaa ama wax buu dhibaato keeni karaa; sidaas darteed waa in si cad loo xakameeyo.

Qodobka 112aad, dhaarta Madaxweynaha, waxaan qabaa in dib loo eego oo la sii qeexo. Waxaan rabaa in shan qodob laga fiiriyo dhaarta:

1. In dhaartu noqoto mid waajib ah.
2. In lagu daro ilaalinta dastuurka iyo nidaamka federaalka, maadaama aynu qaadanay nidaam federaal.
3. In lagu daro ilaalinta midnimada iyo wadajirka ummadda.
4. In lagu daro dhowrista xuquuqda aadanaha.
5. In lagu daro ka fogaanshaha danaha gaarka ah iyo danaha is-diidan.

Dhaartu ha noqoto mid si cad u qeexaysa waajibaadka Madaxweynaha, oo ka tarjumaysa mas'uuliyadda qaran.

Qodobka 113aad, waxaan soojeedinaya in lagu daro marka laga reebo hababka xilka qaadista ee la soo xusay.
Intaas ayaan ku soo afmeerayaa aragtidayda ku aaddan Qodobada 110aad iyo 112aad, iyo guud ahaan wax ka beddelka la soo jeediyey. Waad mahadsan tihiin. Asalaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.



**Xil. Omar Ali Abdi**

Intaas waxa ii dheer qodobo yaryar oon u arkay inaan ku darsado fikradayda, mida uugu horaysa oo lagusoo laalaabtay waxa waaye madaxwaynaha dhalasho labaad inuu haysto iyo inuusan ayaa laga doodayay waa Qodobka 110aad xarafka (K) meeshaas qofka inuu soomaali ahaado uusan dhalasho kalena haysan marka uu shahaadada qaadanayaba ayaan adkaynayaa aniga haduu Illahay raali ka noqdo.

Waxa kaloon rabaa inaan ku daro Qodobka 119aad, Xilka Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya marka uu banannaado cida caddeyneysa iyo sida loo caddeynayo. Aniga waxaan qabaa midaan oo Aqalka Sare ah awoodaha *Mostly* waxaad moodaa meelo aannaan fahmi karayn inay soo dhex geliyeen, awoodo ka maqnaa oo muhiim ah oo ay dib u keensadeen waa jiraan sida inay *Approve*-gareeyaan taliyayaasha ciidamada, safiirada oo kale waa muhiim waanan qabaa laakiin meelaha qaar ay awoodaha la ordayaan anigu ma qabo mana lihi yaan la siinin laakiin waa awoodo dalka iyo dadkaba muhiim u ah una baahan inay labada aqal ka wada shaqeeyaan.

Qodobkan 119aad Xarafka (D) xil-banaannaanta madaxwaynaha wuxuu leeyahay "iscasilaad qoraal ah oo uu usoo gudbiyo guddoomiyaha aqalka sare" ayaa la iri waxana lagu sii darey "ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya". Mar hadii la isticmaalayo erayga Baarlamaanka waxay ka turjumaysaa labada aqal marka waxaan qabaa in meeshaas lagu cadeeyo "labada guddoon ee baarlamaanka" meeshana laga tiro "guddoomiyaha aqalka sare" marka meelahan masiiriga ah oo muhiimka ah inay hal qof go'aan ka qaadan karto anigu ma qabo meeshaas waxaan jeclahay inaad si gaar ah u fiirisaan.

Sidaas si lamid ah waxa jira Qodobka 126aad. Wuxuu ka hadlayaa wasiirka, wasiir ku-xigeenka iyo wasiiru dawlaha, markii aad rabto inaad faqrad cusub keento waxa la rabaa inaad keento meeshii aad kasoo ikhtiraacday, nidaamka dawladnimada sidii ay ahayd iyo sidii ay uugu jirtay adigoo ikhtiraacaya ama dokumentiyadooda xataa dabagalaya ayaa wax lagusoo daraa. Halkan waxa lagusoo daray Faqrada 4aad oo oranaysa hadii wasiirka xilka laga qaado ama xilka uu banneeyo sababo kale awgood waxa xilka sii haynaya wasiir ku-xigeenka inta lagasoo magacaabayo wasiir cusub. Way fiicantahay laakiin hada wasiir ku-xigeenku ma noqdaa ku-sime wasiir iyadoo uu joogo wasiiru dawluhu? Maya ma noqdo. Waxa jira xeer-hoosaad xukuumaddan iyo tii ka horeysayba ay ansixiyeen oo caddeynaya inuu wasiiru dawluhu noqonayo ku-simaha wasiirka marka uu maqanyahay marka shaqo socota in la qurxiyo meeshii laga rabay in la carqaladeeyo oo dastuurkii la soo geliyo oo meeshan hada 30 wasiiru dawlena waa joogaan 30 wasiir ku-xigeena waa joogaane iyaga in madaxa laysku gelinayo ayay noqonaysaa. Waxaan qabaa aniga shaqadu sidii ay ahayd ee ay ku socotay ee xeer xukuumad ay ku lahayd in lagu wado waana sida uugu quruxda badan maadaama faqrad aad soo kordhinaysaan ay tahay.

Qodobka 121aad, waxa waaye shuruudaha xubinimada golaha wasiirada. Shuruudahaas waxa kamid ah in 40 sano da'diisu aysan ka yarayn laakiin wasiirka koowaad ayay inta badan ku tacaluqdaa arragtidayda, xildhibaankii waxa la yiri 30 sano yuusan ka yaraan, madaxwaynihii waxa la yiri 40 sano yuusan ka yaraan. Wasiir ama reysulwasaare in hadana 40 sano la yiraahdo wadanka dee ma odayaal ayaa loo shaqaynayaa aaway dhalinyaradii? Aduunkana sidii ay hada sheegaysay senataradii iga horeysay 36 sano gabar jirta ayaa reysulwasaare ka ah Finland sidoo kale Ruwanda, Sucuudiga oo kale 38 waaye mise 39aad, marka qofkii wax toosin waayo toosin la'aanta isagaa u dhashay laakiin halkaa waxaag qabaa 35 in laga dhigo ugu yaraan si ummada ay wax usoo kala gaaraan.

Waxa kaloon qabaa isla Qodobkaas 121aad Faqradiisa (E) waxa ku qoran in uusan qabin xaas ajanebi ah, aniga waxaan aaminsanahay in reysulwasaaraha rag iyo dumarba ay noqon karaan, wasiirana hadaba ay yihiin oo meesha ay fadhiyaan marka qoraalkan wuxuu cadaynayaa in rag keliya laga sheekaynayo. Marka waxaan soojeedinayaa in lagu daro "ama ineysan lahay saay ajanebi ah" meesha nin keliya ayaa la cadeeyay oo la iri inuusan qabin xaas ajanebi ah. Marka dumarkana in lagu cadeeyo inuusan qabin nin ajanebi ahi in lagu cadeeyo halkan ayaan qabaa. Inaheygu intaas ayay ahaayeen, kuma sii fogaan doono waanad mahadsantihiin.



**Sen. Mohamed Abdi Osman**

Qodobka 110 xarafkiisa K wuxuu ka hadlayaa in musharaxa haysta jinsiyad dalkale uu cadeeyo ka noqoshada jinsiyadiisa hadii uu ku guuleysto xilka madaxwaynaha jamhuuriyada federalka soomaliya, xildhibaano badan taasi waa ka hadleen waxaa qabaa in sida xildhibaanada ugu hadleen arintaas in Meesha laka saaro.

Qodobka xukuumadda federalka soomaliya waxay u baahantahay kalsooni siinta golaha shacabka hadii aan isbadal ku imaan kala bar iyo inta ka badan, halkaas doodaas waxaan leeyahay xukuumada jamhuuriyada federalka soomaliya golaha wasiiradu, sidii saaxibaday iga horeeyay sheegeen anigu waxaa qabaa markii la ansixinaayo golaha wasiirada in lagu ansixiyo kali kali qof qof sababtoo- ah waxay hagaajineysaa, in qofkaas wasiirkaas vetank-kiisa hadba gudiyada parlamanku gudigu ku shaqo leh hadba wasaarada loo magacaaway gudiga ku shaqo leh inay su,aalo waydiiyan sidiisa markuu aqriyo in su,aalo laga waydiiyo oo gudiga wasaaradas loo magacaabay baarlamaanka goloha shacabka u xilsaaran uu su,aalo waydiiyo sidiisa markuu aqriyo oo uu vent ku sameeyo.

taasi waxay anfaceysaa in raysul wasaaruhu maadaama wasiirada soo magacaabayo qof qof loo ansixinaayo qof qofna vent looku samaynaayo inuu raadiyo wasaarad walba wasiirki ku haboon oo aqoonteda lahaa iyo “capacity” geeda marka raysulwasaaraha waxay u fududeeneysa inuu doorto dadkii shaqada wadi lahaa oo runtii wasiir walba faculty ama Meesha loo dhiibay ee uu ahaa nin ku haboo.

Sidaasi daraadeed waxaan aad u cusleynayaa in ansixinta golaha wasiirada ay noqoto qof qof wasiir walbana gudiga wasaarada loo xilsaaray in ay iyagu vent ku Sameeyaan, inay sidiisa aqriyaan, inay vent ku sameeyan jaamacadaha oo soo qortay iyo degree yadiisa in dib loo baaro loo ogaado, mayihiin jaamacadu la yaqaano waa waxa adunka oo dhan ka dhaco weeye, marka taasi waxay waxbadan hagaajineysaa inay yimaadan wasiira “capacity” leh oo nin walba wasaaradii loo dhiibay oo ka soo bixi karo raysulwasaaraha waxay u fudeeneysaa inuu doorto dadkii u baahna oo shaqada wadi lahaa.

Qodobka 126, Farqadda 2aad waa role wasiirka wasiir ku xigeenka, wasiir dowlaha, horta wasiir dowle “structure” ka dowladda kuma jiro, laakiin hadde wuxuu ku yimid baahi jirta, waxaan dhihi lahaa wasiir dowlayaashu maadaama “structure” kii dowladaha aysan ku jirin baahi hadda loo qabo aysan jirin wasaaradihii ayna ognahny runtii sadax wasiir inay wasaaradihii ay wada joogan shaqadii aysan u qeybsami Karin dhibaato badana ay dhaxdooda maalin walba ay dacwo ka jirtao “competence” gii in laysku haysto.
marka anigu waxaa qabaa wasiir dowle “structure” ka kuma jiro wasaaraddu waxay leedahy waaxo ayey leedahay, wasiir iyo wasiir ku xigeen.

Wasiirku hadduu maqan yahay wasiir ku xigeen ka ayaa xaq u leh, laakiin hadda saxiibadii iga horeyay waxey sheegayeen in nidaam xeer hoosaad ah oo golaha wasiiradu ay leeyihin lagu maamulo oo ma aragty sidaas.

laakiin waxaan rabnaa arinta inay dastuuri noqoto oo wasaarad ,wasiir iyo wasiir ku xigeen, wasiir dowlaha wayna ognahny  dowladihii dowladaan ka horeeyay waa jiraan lkn waa dad number yar oo wasaaradaha qaarkood muqasas ah iyaguna waxay raysulwasaaraha iyo madaxwaynaha ayey wakil uga yihiin waxey u dirsadaan. halkaan waxaa ku qoran iyo wixii wasiirku u dirsado muxuu u dirsadaa  "structure" ka kuma jiree, culays baa halkaas ka jira xildhiibanada sharafta leh waxaa kajira culyab wxuu ka jiraa sadaxdii wasiir ee isdul fuushan shaqadii uma qeybsanto marka "structure" ku sida uu qorayo aniga waxaan soo dhaweenayaa inuu jiro wasiir iyo wasiir ku xigeen, wasir dowlayaashuna hadee in la yareeyo wasaaradaha qaarkoodana iqtisaas ay u leedahy ay markaas loo qabto.

Qodobka xilbaneynta markii uu madaxweynaha xilka baneeyo sababaha oo u uku baneyn karo, sabab badan baa la sheegay laakiin anigu waxaan ku darayaa mid cusub oo ah farqad cusub oo ah madaxweynuhu haddii uu sabab la'aan muddo 60 maalmood ka badan dalka uga maqan yahay waxay ka mid thy sababaha uu ku baneen karo, xilka intaas ayaa ku soo koobi lahaa, waad mahadsantihiin.



**Xil. Abdirizak Adam Warsame**

Labada aqal ee baarlamaanka labada guddiga ee dastuurkaan noo soo diyaariyay dhammaan Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuhu.

Salaam ka dib xiligii duhurkaa la joogaa waan iska soo gaagaabinayaa, qodobka 110aad, faqradiisa (g) iyo (k)  oo ka hadlaaya runtii aad looga karbaashay qurbajoogta soomaaliyeed, ee raba xilka madaxweynaha jamhuuriyada federaalka soo raadsadaan.

waxaan jeclaan lahaa meeshaas aad ayaa sheelaraha looga qabtay qurbajoogtee laga dhimo, qurbajoogta soomaaliyeed xaqa kuwa gudaha joogta oo kaleeta ayay leeyihiin wadankeenana xilligii ugu adkaa ay dhibaatooyinka ayay joogi jireen, iyo dowladd la'aanta iyo dagaaladii sokeeye qoysaska soomaaliyeed dadka ay ku badbaadeen ama xaga noqosha ha'ahaatee ama xaga waxbarashada dadka qurbaha ayay ahaayeen.

marka waxaan qabaa qodobka ka hadlaaya qodobka 10ad faqradiisa (g) in shardigaa laga daayo inuu daganaa dalka gudihiisa mudo 5sano ah, barkee wax xikmad ay soo kordhineyso ma'ogi waxaa laga yabaa qof gudihii dalka joga iyo qof banaanka ugu maqan mudo in xaalada dalka uu u socod badan yahay oo aad dhaqdhaqaaqii aad dalka wax ka dhacaaya uu ula socdo, waxay na la xiriirtaa dareenka wadaniyadeed ee qofka taasi kuma xirnaan  karto, marka inuu qofka xaq ku waayo uu u lahaa inuu u tartamo madaxweynaha jamhuuriyada federaalka soomaaliya, sidoo kale faqrada (k) oo iyadana sheegeysa in uu jinsiyada dal kale uu ka haysto uu ka tago maadaama dalkeena uu ogal yahay in qofku uu labo jinsiyadood uu heysan karo in iyadana aanan shardi looga dhigin oo halkaa dabarka qurba joogta laga furo.

Qodobka 11aad faqradiisa 1aad oo iyadana sheegeysa madaxweynaha jamhuuriyada federaalka soomaaliya waxaa kulan wadajir ah ku dooranaaayo labada gole ee baarlamaanka dastuurkii hore waxaa noogu jirtay labada gole waxaa gudoominaaya guddoomiyaha golaha shacabka, hadana way ka maqan tahay iyada in lagu soo celiyo, isla qodobka 11aad faqrada 6aad waxay

sheegaysaa in doorashadii madaxweynaha oo noo ahaan jirtay saddex dowro ama saddex wareeg, in laba wareeg laga dhigay in saddexdii wareeg loo soo celiyo ayaan qabaa faqrooyinka A,B , waana qabaa in 50% guuleysta lagu xadido tiradii tiraha badneed ee saddex dalool laba aheed laga daayo lakiin saddexdii wareeg ay sidoodii ahaadaan.

Qodboka 112aad ee ka hadlaaya dhaarta madaxweynaha, siiqada hada lasoo qoray waxaa ad ugu qurxan kana haboon kana kooban yacni tii hore sidaan marka hadii aan si ka wanaagsan loo siiqeyn Karin in tii hore loo daayo.

Qodobka 113aad oo asna ka hadlaaya xasaanada madaweynaha, faqradiisa 2aad madaxweynaha laguma maxkamadayn karo gudashada waajibaad kiisa dastuuriga ah, marka uu xilka ka dago in meeshaas lagu simo ayaan qaba hadii wax kale lasii raacsiiyo waxay noqoneysaa hoos kasii oo leysku isticmaalo madxweynihii xilka kaa badalay oo iraahdo xad gudub xuquuqeyd ayuu sameeyay saa darteedana uu ku maxkamadeeyo si uu door kale ugu soolaabani.

qodobka 114aad faqrada 3aad oo ka hadleysa awoodaha madaxweynaa iyada wuxuu ku dhawaaqaa doorasho xiligeeda laga soo hormariyay si waafaqsan qodobka 87aad ee dastuurka, baarlamaanka markii qodobkaas 87aad ay socotay aad ayaa qodobkaas xildhibaan kasta carabka ugu dhufanaayay baarlamaanka waqtigiisa dhammaanin laka diro doorashada lasoo hormariyo, baarlaamankii 9aad ayaa horey usoo diiday oo qodobkaas u laalay baarlamaankeena carabkiisa waa ku batay aniga waan ku "second" gareynaa xubnihi soojeediyay in qodobkaa Meesha laga sooro.

Isla qodobkaas faqrada 12aad wuxuu cafis u fidiyaa ama ciqaab ka dhimmaa danbiileyaal marka uu soo gudbiyo xeer ilaaliyaha guud ee qaranka si waafaqsan habraacyada ku xusan dastuurka iyo xeerarka kale ee jamhuuriyada, dadka qaar ee xakuman ee xabsiyada ku jira waxay u xakuman yihiin xaqulnaas, marka meeshaasna xaqulnaas Allaah subaaxanu Watacaa ayaanba cafinin wixi danbi qaranka laga galay ama danbiyada fudfudud ah, laakiin xaqul naas haduu yahay in meeshaas qodobo cadeynaayo oona madaxweynaha loo hoos galanin in dad xaqdadow ku xukuman in cafis looga dalbo.

Qododka 116aad faqradiisa 2aad qofna looma dooran kara xilka madaxweyne nimada in ka badan laba mudo xileed oo xiriir ah, meeshaas waxaan is leeyahay soomaalida dadka elite ah ayaa nagu yar oo xilka madaxweyne si sax ah u gudan kara marka hadii taa la yiraahdo qobaradii aadka noogu yareed ama dadka iliidka ahaa ayay aad noogu xadideysaa, marka waxaan qabaa haduu awood ahaan iyo caafimaad ahaan u kari karo in xariga loodaayo hadana waxaa la yiri 40tan ayaa da'diisa laga dhigay hadii da'diisa 40tan tahay, uu laba tream qaato waa 50 jir wali awoodiisii iyo caafimaadkiisiii waa leeyiihiin marka in xariga loodaayo oo meeshaa la fasaxo ayaan jeclaan lahaa.

Qodobka 17aad ee ka hadlaaya eedeynta madaxweynaha faqradiisa 7aad tirada madaxweynaha xilka ka qaadikarta oo aqalka sare saddex dalool laba ah, oo 36 noqoneyso madaxweyne doorashadaas aad arakteenoo wareegyada badan soconeyso soo galay aqalkii baarlamaanka labadiisa aqal isku raaceen oo soodoorteen is 36 qofood xilka ka rido xoogaha waa wax aan suura gal aheen waaye, marka waxaan jeclaan lahaa sida dastuurka hore noogu

qorneed in golaha shacabka soo eedeeyo Labada aqal oo wadajirana ee xilka ugu qaadaan tiradii hore saddex dalool laba aheed.

Qodobka 118aad oo ka hadlaaya hadii madaxweynaha ka maqan yahay dalka ama caafimaad daro ama sabab kasta oo kale uu san awoodin inuu guto xilkisa gudoomiyaha golaha shacabka ee Baarlamaanka ayaa xilkiisa sii qabanaaya ilaa madaxweynuhu xilkiisa dib ugu soo noqonaayo, hadii guddooniyaha maqanyahay waxaa ku sime madaxweynaha noqonaaya guddoomiyaha aqalka sare in iyadana sideedii hore loodaayo oo guddoomiyaha golaha shacabka uu ahaado kusimaha madaxweynaha, sidoo kalene isla guddoomiyaha Ku xigeenka 1aad golaha shacabka uu ahaado kusimaha madaxweynaha madaama horey dastuurkaan uusoo yiri aqalka sare waxay matalaan dowlad gobleed halka golaha shacabka lagu tilmaamay iney matalaan dhammaan muwaadiniinta jamhuuriyadda federalka soomaaliya oo dhan.

Qodobka 119aad banaanaanta madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka soomaaliya faqradiisa 1aad xarafka (b) oo dhahaaya is casilaad qoraal ah usoo gudbiyo guddoomiyaha aqalka sare meesha ah in la yiraahdo guddoonka labada aqal, isla qodobkaas 119aad faqradiisa 2aad guddonka aqalka sare marka uu xaqiijiyo arrimaha ku xusan faqrada 1aad ee A,b ee qodobkaan, waxa uu u gudbinayaa in Maxkamada sare in la yiraahdo guddoonka laba aqal ayaa iyadana gudbinaaya warqadaas is casilaada ah ee timid, isla qodobkaas faqradiisa 4aad wuxuu ku raacsangahay aaagane qodobkii hada aan ka hadleynay ee ahaa ku simaha xilka in uu noqdo asagana guddoomiye golaha shacabka.

Intaa waxaan ku dari lahaa maalin dhaweyd guddiga Dastuurka ayaa halkaan ka hadlaayay cutubyadii hore aan usoo dhaafnay markuu ka hadlaayay xalka matalaada gobolka banaadir ama aqalka sare waxa uu tilmaamay in hadii Baarlamaanka qaataan in 18kii gobol lagu saleeyo aqalka sare halkaas uu ku xalismaayo gobol kii banaadir.
Guddomiye dhagahaaga si fiican iigu fur.. gobolka banaadir gobolka banaadir, guddoomiye dhagahaaga isii gobolka banaadir waa ‘exceptional” anigana kama dhigin adigana kama dhigin dastuurka ayaa ka dhigay sidaa darted aqalka sare wuxuu jiraa laba “tream” labadaas “tream” gobolka banaadir matalaad kuma lahan waxa uu sugaayay ma aheen saddex xubnood, maxaa yeelay 5 “million” ayaa dagan oo ummada soomaaliyeed ah dhammaantoodna la rabo ieny iska wada arkaan matalaada gobolka banaadir ee aqalka sare u uku yeelanaayo 3 xubnoodna kuma filna soomaalida halkaan ku nool, si soomaalidu iskaga wada arakto markaa inuu “exceptional” yahay u aqoonso taada hanagu jiheynin waana mahadasantahay Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.



**Sen. Dr. Osman Mohamud Mohamed**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Alxamdulillaahi, wasalaatu wasalaamu calaa Rasuulillaah. Guddoonka sharafta leh, waan idin salaamayaa. Asalaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Anigu uma soo istaagin inaan ku celiyo wixii hore loo sheegay. Intii la yiri badankeed waan la qabaa. Xildhibaankii iga horreeyay iyo qodobadii uu soo qaaday, qaar badan waan ku raacsanahay oo aan xaqiijinayaa. Hase yeeshee, waxaan rabaa inaan ka hadlo

hal arrin oo soo noq-noqotay, kana soo baxday Qodobka 82aad iyo sidoo kale Qodobka 113aad, taas oo ku saabsan Madaxweynaha marka uu xilka ka dego.

Arrintaas waxa lagu sheegay in marka uu xilka ka dego uu noqonaayo xubin sharafeed. Shalay Guddoomiyuhu arrintaas wuu xusay, balse waxaan rabaa inaan wax yar ka iraahdo. Markii hore waxay ku soo baxday Qodobka 82aad, faqraddiisa 3aad, haddana waxay ku jirtaa Qodobka 113aad, taas oo la xiriirta qaabkii xeer-ilaalinta iyo xuquuqda uu yeelanayo marka uu xilka ka tago. Waxa inta badan la sheegay ma ahayn oo keliya xubin sharafeednimada, balse sidoo kale waxaa la sheegay in uu xaq u leeyahay xuquuq iyo cod uu ku lahaan doono Aqalka Sare marka uu xilka ka dego. Taasi waa arrin muhiim ah oo ay ahayd in si cad loo sheego.

Sidoo kale, maalin dhaweyd waxaan codsanay annagoo tiro badan ina la caddeeyo cidda samaynaysa xeer-nidaamiyaha marka uu madaxweynuhu tago Aqalka Sare. Yaa diyaarinaya xeerkaas cusub iyo nidaamkaas? Arrintaasi si cad uma qeexna. Haddaba, qodobka ugu muhiimsan waa in si cad loo sheego xuquuqda uu helayo, gaar ahaan codka uu ku lahaanayo Aqalka Sare marka uu xilka ka dego. Guddoomiyuhu wuxuu xusay xubin sharafeednimo oo keliya, balse arrinta codka lama caddeyn.

Intaas ayaan rabay inaan hoosta ka xariiqo; arrintan hore ayaa loo sheegay.
Arrinta kale ee ku saabsan marka madaxweynuhu maqan yahay: Guddoomiyaha Golaha Shacabka ayaa matalaya. Haddii ay dhacdo xaalad khasab ah (force majeure) ama sababo kale oo keenaya in Guddoomiyuhuna maqnaado, sida ku qoran qoraalka, waxaa matalaya Guddoomiyaha Aqalka Sare.

Taasi ayaan taageersanahay, halkii laga oran lahaa Guddoomiye-ku-xigeenka koowaad ee Golaha Shacabka. Maya; sida ay u qoran tahay ha loo daayo: Marka hore, Guddoomiyaha Golaha Shacabka; Haddii uu maqan yahayna, Guddoomiyaha Aqalka Sare. Intaas ayaan rabay inaan hoosta ka xariiqo. Wabilaahi towfiiq. Wassalaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

# CUTUBKA 9AAD

## GARSOORKA

**Kulanka 20aad (Febraayo 21, 2026)**

| | |
|---|---|
| **Baarlamaanka:** | 11aad |
| **Kalfadhiga:** | 7aad |
| **Kulankiisa:** | 20aad ee labad Aqal |
| **Goobta:** | Golaha Shacabka |
| **Furmay:** | 11:59 a.m |
| **Xirmay:** | 12:45 a.m |
| **Shir-guddoomiye:** | Xil. Sh. Adan Mohamed Nur "Madoobe"<br>Guddoomiyaha Golaha Shacabka |

**Ajendaha:**

(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka
(2) Ansixinta Ajendaha
(3) Dib u -eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad: Ka doodista Soo-jeedimaha wax-ka bedelka Dastuurka. Cutubka 9aad Garsoorka. Qodobada 130 ilaa 154aad






**Avv. Burhan Adan Omar**
Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka

Mudane Guddoomiye, Mudanayaal, maadaama cutubkani yahay cutub runtii aad "technical" u ah, waxaan doorbidnay in si kooban aan uga hadlo. Qoraalka meesha ku yaal ee aad aragteen, oo 25 qodob ka kooban, waxoogaa wuu faahfaahsan yahay, laakiin aad buu u kooban yahay markii loo eego waxa laga keenay iyo meesha laga keenay

Sida aad ogtihiinba, warbixin aad u faahfaahsan oo koobaysa "background-ka" cutubkana way idin hortaallaa, cilmibaaristuna waxay sheegaysaa taariikhda uu soo maray garsoorka dalku. Haddii aan si kooban u sheegana, Jamhuuriyaddii 1aad dastuurka qaab-dhismeedkiisu wuxuu ahaa maxkamadaha iyo xeer-ilaalintuba waxay ahayd dhowr maxkamadood ayay ka koobnayd.

1960 kii ilaa 1969kii waxaa jiray Maxkamaddahan oo ahaa Maxkamadda sare oo isla iyaduna ahayd maxkamadda dastuurka, waxaa jirtay maxkamadda Rafcaanka, waxaa jirtaya Maxkamadda gobollada, maxkamadda degomooyinka waa sida aynu hadda nahay oo kale. 1969 ilaa 1991 iyadana nidaamkan laftigiisaa la qaatay marxaladii Jamhuuriyadii 2aad.

Laakiin jamhuuriyaddii 3aad waxaa la sameeyay dadaallo aad u tiro badan oo arrimahaas ah, sida garsoorka sidii loo federaalayn lahaa; dastuur federaal ah baan qaadanay. Haddii laga

hadlayo adduunka dawladaha federaalka ama garsoor ahaanba, saddex nooc baa la isticmaalaa nidaamka federaalaynta garsoorka marka laga hadlayo nidaamka garsoorka.

- Midka midaysan oo ah maxkamaddaheenu sida hadda ay yihiin kuligiin waad taqaanaan, maxkamadda sare, maxkamadda rafcaanka iyo maxkamadda darejada koowaad oo ah gobolka iyo degmooyinka.

- Midka "dual" ka ah, kan "dual" ka ah waa mid isbarbar socda oo sida maraykanka oo kale, maxkamadda heer federaal , dawlada heer federaal waxay yeelanaysaa Maxkamadd sare, maxkamadd rafcaan iyo maxkamadda derejada koowaad bay yeelanaysaa oo degmooyinka oo dhana ay garab socdaan, dawlad goboleedkuna waxay yeelanayaan intaas oo kale.

Degmo kasta waxaa ka furnaanaysa Maxkamadda derejada koowaad oo heer federaal ah iyo maxkamadda derejeda koowaad ee dawlad goboleedka ah, kaas ayaa"dual" ka ah. Dastuurkii 2012-kii Meesha aan u socdaayi waa halkaase, dastuurkii 2012kii wuxuu tilmaamayey in maxkamaddaha ay jirayaan, laakiin waxaa biloday markaa taas inaanay socon Karin waa la arkay, maadaama dhaqaale ahaan dalku kama bixi karo, kawaadirta iyo dadka laftigiisa kama bixi karno nidaam "complicated" ahna waa yahay. Marka, kaas si looga guuro waxaa bilowday wadda haddallo tiro badan oo ka bilwoday jawhar 2018kii, waxaa la qaatay nidaamka isku dhafka waxa loo yaqaano oo kan hadda aan soojeedinay ah.

Waxaa misna bilaabantay xukuumadii xiligaa jirtay inay "proposal" kii sii adkaysay iyadoo turxaan bixina ku sii samaysay dastuuradii heerarka kala duwanaa ee soo maray dalkana waxay soojeediyeen  Nooca isku dhafka, markaa nidaamka hadda oo  khulaasa ah oo meesha ku yaala ugu danbayn waxaa lagaadhay 2022kii misna heshiiskii federaalaynta garsoorka oo isaguna soo koobayey nidaamka isku dhafka ah oo macnaheedu yahay dalka waxaa jiraya maxkamaddo isku dhaf ah, taasaan rabaa inaa waxyar dulistaago. Taas oo Macnaheedu tahay waxaa ugu saraynaysa, degmooyinkaan ka soo bilaabayaa, degmo kasta maxkamadda derajooyinka koowaad baa jiraya oo awood u yeelanaysa oo ikhtisaas u leh, inay qaado "case" ka dacwad federaal ah iyo dacwad heer dawlad goboleed ah.

Cutubka 5aad waxaan ku soo aragnay sidaa aragteenaba in ay saddex qaybood yihiin;

- Awood dawlad goboleedka gaar u ah;
- Mid dawladda federaalka gaar u ah iyo
- Mid dawladaha hoose gaar u ah.

Saddexdaas arrimood markaa saddexdaa xeerkii ayaa ka soo baxaya, xeerkii markaa waxaa ka rakibmaya maxakamaddihii daabaqayay. Maxakamadda derajada koowaad waxay yeelanaysaa markaa awooddaas oo dhan "case" kasta oo ka dhaca degmooyinka dalka oo dhan awood waxay u yeelanaysaa inay "case" heer federaal iyo mid kaleba ay galaan.

Rafcaankii waxaa looga soo qaadanayaa mar labaad haddii uu yahay "case" heer dawlad goboleed waxaa laga soo qaadanayaa Degmada tusaale, cadaado baa laga soo qaatay, waxa la aadayaa haddii uu heer dawlad goboleed yahay isla gobolka tii ku taalay. Laakiin haddii "case" ku yahay heer federaal halkaas laga soo qaadanayaa waxaa loo soo gudbayaa maxkamadda

dawlad goboleedka ugu saraysa oo ah dhuusamareeb ta ku taala, halkaasna rafcaan waxaa looga soo qaadanayaa soomaaliya oo Muqdisho maxkamadda sare ku taalo.

Markaa maxkamaddihii waa maxay, waa afar qaybood oo is agyaala;
- *Maxkamadda sare ee soomaaliya;*
- *Maxkamadda kore ee "high court" ee dawlad goboleedka;*
- *Maxkamadda rafcaanka oo gaar u ah dawlad goboleedyada "cases"-kooda iyo*
- *Maxkamadda derajooyinka koowaad.*

Markaa afartaa maxkamaddood, maxkamadda sare halkaa bay joogtaa, dawlad goboleedka waxaa ugu saraysa Maxkamadd kore oo "high court" la yiraahdo. Waxa kaloo jiraysa maxkamadd rafcaan iyo maxakamadaha derajooyinka koowaad oo degmooyinka dalka oo dhan inay ka shaqeeyaan aan ugu talagalnay.

Waxa garab socota oo aad aragteen maxkamadd dastuuri ah oo ah maxkamadd gaar ah oo iyaduna awooddaheedu gaarka ugu taalo, dawlada soomaaliyana markay lahaan jirtay maxkamadda sarre isku ahayd. Waxaan intaa ku soo koobayaa golihii saree e garsoorka maadaama nidaamkaas la qaatay waxa ugu muhiimsan oo aan rabno oo cutubkan aad ka dhex arki karto waa madaxbanaanidii garsoorka, dalkan horumarkiisa iyo dhismaha dawladnimo wuxuu ku jiri karaa oo kaliya garsoor madaxbanaan oo xoog badan markii la helo oo ka madaxbanaan xeerdejinta iyo fulintaba si loo helo golihii garsoorka waa in la sameeyaa baa layiri golihii sare ee garsoorka, heshiis baa laga soo gaadhay waxaa lagu mideeyey dhamaan maxkamaddihii dadkii ugu sareeyey oo dhan. Dawlada soomaaliya maxkamaddihii ugu sareeyey waa maxkamadda sare iyo maxkamadda dastuurka garsooreyaasha ugu sareeyey oo ah guddoomiyaha saree e maxkamadda dastuurka, sidoo kale, xeer ilaaliyaha guud, iyo dawlad goboleedyada Maxkamaddihii ugu sareeyay garsoorayaasha guddoomiyayaashoodii ayaa ku wada jira, markaa waa nidaamkii isku dhafka ahaa laftigiisii oo nidaam is barbar socda maaha.

Markaa nidaamkaas wuxuu maamulayaa oo meesha ka saarayaa in garsooraha cidi iska soo magacawdo, garsoorahaasi wuxuu ku imaanayaa golaha sare, wuxuu ka noqonayaa masuul iyagaa shaqaalaysiisanaaya, gole sare oo ka madaxbanaan dhamaan hay'addaha kale ayuu noqonayaa oo maxkamaddahaas hadday noqoto anshax marin iyo cayrin iyo shaqaalaysiin iyo horumarin iyo Tababbarba iyagaa masuul ka noqonaya. Intaa waxaa garab socota oo aan soo sheegnay si madaxbanaani loo helo in garsoorkii maaliyad ahaana u madaxbanaanaado baanu sheegnay, intaa waxa garab socota xeer ilaalintuna maadaama nidaamkeenu yahay adduunka wax ka jira "common law system" iyo "civil law system". "Civil law system" baa wadankeenu u baddan yahay, xeer ilaalintuna waxay ka mid tahay garsoorka.

Markaa garsoorkii iyadana sifiican baan u sheegnay oo u faahfaahinay waa xafiis dawlada federaalka ah, xafiiska xeer ilaaliyaha guud iyo ku xigeenaa jirayaan niri sida heshiiska ku taalay iyo sidoo kale dawlad goboleedyaduna waxay ka shaqaynayaan sidoo kale xeer ilaaliyaasha xafiiskooda iyo ku xigeenadooda waana isla shaqaynayaan "mechanism" ka loo kala shaqaynayana meeshay ku taalaa.
Mudanayaal iyo marwooyin, afartaa madax buu ka kooban yahay, waxaan rajaynayaa Insha-allaah in talooyinka aad ka dhiibataana aan diwaangalinayno, aad ayaa umahadsantihiin.



**Sen. Hassan Hussien Haji**

Guddoonka Labada Aqal, Xildhibaannada sharafta leh, iyo dhammaan shaqaalaha, aad iyo aad baad u salaaman tihiin. Runtii, Guddoomiye Burhaan ayaa si kooban u dulmaray arrimaha aan doonayo inaan ka hadlo, maadaama cutubkaan uu yahay cutub khaas u ah garsoorka dad badana aysan aqoon uleheyn, runtii cutubkaan in sifiican ayaa loo daraaseeyay oo aara'da la iskugu daro ayaa loo baahanayahay.

Guddomiye Burhaan ayaa dulamaray taariikhda uu soomarey garsoorka soomaaliya lakiin, waxaan ku dari lahaa ee dastuurkeena kumeel gaarka ah cutubka 9aad sifiican uma faahfaahinin.

Maxkamadaha marka uu ka hadlayay wuxuu u kala qaybiyay laba: maxkamadaha dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah dowladda federaalka iyo maxkamadaha dowladda federaalka. Sidaas waxaa loo fahmay in dalka ka jiro nidaam garsoor oo isbarbar socda, halka dastuurka ku qornaa hal guddi adeeg garsoor oo federaal ah. Laakiin sida hadda aad ogtihiin, dowlad-goboleedyada jira waxay leeyihiin gole ama guddi adeeg garsoor u gaar ah. Marka run ahaantii waxaa loo baahdey in la helo garsoor kii horay aan uheysaney aan ahayn, mid isbarbar socdana aan ahayn macnihiisa waxaa waaye anaga "unitary system" baa lahayn dowladii dhexe sida uu guddomiyuha sheegey waaye, maxkamada sare uga saraysay iyo maxkamada degmada uga hooseyso.

Nidaamka isbarbar socdana waa nidaamka mareykanka oo kale waaye oo "state" kasta shuruucdiisa iyo waxa uu leeyahay maxkamadihiisa waxaa loo baahday nidaam isku dhaf ah, run ahaantii aniga markii wasiirka cadaalada ahaa arrinta hada laga hadlayay ee hehiiskii garoowe anaa hogaaminayey oo isku keeney dowlad goboleedyada, waxaana iskugu imaaney jowhar isaga oo madaxweyne Waare joogey, waxaa lagu heshiiyey nidaamkaan isku dhafka ah in la qaato.

Nidaamkan isku dhafka ah macnihiisu waa in la mideynayo awoodaha shaqaalaynta, awoodaha dhaqaalaha iyo awoodaha tababarka. Maadaama arrimahaas oo dhan la mideynayo, waxaa loo baahday gole adeeg garsoor oo mideysan, kana duwan goleyaasha adeegga garsoorka ee hadda dowlad-goboleedyadu leeyihiin. Iyadoo heshiiskaas yaallo, haddana sida Guddoomiyuhu sheegay, Madasha Wadatashiga Qaran waxay diyaarisay heshiiskii la ogaa ee lagu federaaleynayay garsoorka. Runtii taatiikhdaas ayuu soo maray sababta la iskugu daro oo la isku dhafayana waxaa weeye garsoorayasheena iyo xeer ilaaliyayaasheena waxay u baahanyihiin shuruuc mideysan dalka oo dhan wuxuu yeelanayaa shuruuc mideysan,waxay kaloo u baahanyihiin tababar mideysan,waxay u baahanyihiin dhaqaalo mideysan.

Sida aad la soctaan dowlad goboleedyada hada garsoor aya ka jira, laakiin waxay awood u la'yihiin in ay maareeyaan garsoorka dhaqaale ahaan ee garsoorka waxa uu ubaahanyahay si loo helo cadaalad hufan iyo degenaasho dhinac kastaba dhaqaale iyo bulshaba ee garsoor dhaqaalihiisa heysto ayaa madaxa bannaan.

Madax-bannaanida waxaa dammaanad qaadaya baarlamaanka garsoorka, oo sida Guddoomiyuhu sheegay ah Golaha Sare ee Adeegga Garsoorka. Waxayna ka kooban yihiin Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga ah, Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Sare ee dowlad-goboleedyada, Xeer Ilaaliyaha Guud, iyo xubno laga soo doortay bulshada rayidka ah iyo qareennada.

Waxay u taaganyihiin baarlamaanka garsoorka oo lamid ah baarlamaankaan maanta hada aan joogno sida golayaasha xukuumada ay u leeyihiin golayaasha wasiirada.
Marka dowladaha ka kooban golayaasha wasiirada iyo baarlamaanka iyo golaha sare oo adeega garsoorka waa saddexdaas baarlamaan la isku darey ayaa la yirahdaa laamaha dowlada oo ka kooban intaas.

Marka qodobada hadaan si toos ah u galo ee aan rabo in aan rayigeyga ka jeediyo qodobka uga horeeya ee ka bilabanaya cutubkaan waxaan rajeynayaa qodobka 130aad waxaan rajeynayaa markaan akhriyey oo dhegeystey xildhibaano badan marka cutubka la akhrinayo xoogoo waxaad moodaa in garsoorkii awoodiisa aad ku buraarugeyso sawabtoo ah garsoorka awoodiisa waxaa waaye cutubka uga danbeeya ku qorantahay oo golaha adeega garsoorka.

Cutubka ka bilaabanayo awoodahoodana ay ku qorantahay, waa qodobka maamulka garsoorka waa 149aad, koleey guddomiyaha guddiga iyo guddiga hadii ay igu waafaqaan waxaan codsanayaa in lasoo hormariyo si loo fahmo madaxbanaanida iyo maamulka garsoorka. Marka waxaan rajeynayaa cutubkaas in lasoo hormariyo, markaa kadib maxkamadaha iyo awoodahooda la galo, saas ayaan rajeynayaa. cutubkaas marka maxkamadaas maxkamada sare ayaa loo yaqaanaa hada, lakiin hada waxaa soo kordhey maxkamada la yirahdo maxkmada kore ee dowlad goboleedyada dabcan maxkamada sare si loo fahmo in horteeda baraakeet lagu qoro ee wadamada kaleba waa ay leeyihiin (supreme court" sawabta oo ah marmar waa la isticmaalaa maxkamada korena lagu qoro (high court) si caalamka ufahmaan anaga soomaali ahaana waan fahmeynaa maxkamada sare iyo maxkamada kore af-soomaali ahaan waan ku fahmeynaa lakiin caalamka kale markuu fiirinayo maxkamadehena in looga daro oo loo qoro

- Maxkamada sarena "supreme court" lagu qoro
- Maxkamada korena lagu qoro "high court".
-

Mida kale aan rabo in aan waxyar ka taabto waa madax-bannaanida garsoorka; cidda xaqiijinaysa waa Golaha Adeegga Garsoorka. Ee hadda waxaa la magacaabaa garsooreyaasha iyo guddoomiyeyaasha, shaqadana waa laga qaadaa; ee garsooraha oo ku imaaday magacaabista iyo soo jeedinta Golaha Adeegga Garsoorka shaqo lagama qaadi karo. Waa in uu wax cabsi leh garsoorahaas, markuu xukunka gaarayo oo ay shaqadiisa ku tacaluqdo mise maaliyaddiisa ku tacaluqdo, meesha jirin. Ee garsooraha waa in uu u hoggaansamaa, waadna arki doontaa aadna waan u taageerayaa arrinta meesha ku qoran: garsooraha kaliya waa in uu u hoggaansamaa sharciga

Waxaa hadda maanta "media-ha" aad ka arkeysaan mareykanka Maxkamada sare in ay shalay ay go'aan ka gaartey canshuurihii Madaxweyne Trupm soo rogey in ay tiri waa waxba kama jiraan waa dowladii uga weyneeyd aduunyada, waxaa keeney marka madax bannaanida garsoorka ayaa keeney, ee garsoorihii waxaa ka danbeeya golle adeeg garsoor oo ilaalinaya

xuquuqdiis yacnii mushaarkiisa, gurigiisa, gaarigiisa, noloshiisa waa la damaanad qaaday  saas darteed garsoorahaas wax uu ka cabsanaayo majirto aan aheyn in uu qalad ka galo sharciga taas ayuu ka cabsanaa, taasna way ku qorantahay aad iyo aad ayaan u ayidaa.

Markii Maxkamada dastuuriga ah iyo maxkamada sare laga hadlayo qodobka 35aad iyo qodobka 34aad awoodaha waa saxanyihiin waana fiicanyihiin, lakiin hal awood yaan ka raadinayay  oo ay kujirin horeyna waan ku qornay guddiga hadaa nahay lakiin in wax xoogaa hada ka maqanyihiin ayaad moodeysaa, maxkamada dastuuriga ah in khilaafaadka dowlad goboleedyada  iyo arrimahaan xalineyso wey ku qorantahay, lakiin hal shay oo muhiim ah doorasho hadii ay dhacdo oo federaal ah oo la isku qaqabsado yaa awood uleh doorashadaas kuma cado waana meshii uga muhiimsaneyd  dastuurka. yacnii waxaa waaye doorasho ayaa dhaceyso doorashadii dowlad goboleedyada dabcan iyo dowlada federaalka hadey dhacdo arimaha dastuuriga ah dabcan doorashada xuquuq ayay taabanaysaa muwaadinkii doorashadii marka in lagu cadeeyo doorashadaas ikhtisaaskeeda in ay noqoneyso maxkamada dastuuriga ah in lagu cadeeyo ayaan soo jeedin lahaa.

Arimaha xil ka qadista garsoorayaasha waxaa looga qaadi karaa in dacwo lagu soo oogo ama anshax xumo lagu sheego, markaa kaliyaa ayaa laga qaadi karaa, markaasna golaha adeega garsoorka ayaa loo soo jeedinayaa, golaha adeega garsoorka ayaa arintaas talaabo ka qadaya. marka waxaan aad iyo aad u ayidayaa Madax-bannaanida garsoorka in aad loo xoojiyo golaha adeega garsoorka awoodihiisa in aad loo xoojiyo, waxaan kale oo ayidayaa in garsoorka loo helo dhaqaale hufan si ay marna looga cariirinin go'aankooda oo go'aankooda si xor ah oo waafaqsan sharciga oo cadaalada ku dhisan si ay gaaraan. waa mahadsantihiin.



**Xil. Mohamed Harun Abdilahi**

Waxa bogaadin mudan guddiyada dastuurka labadooda heer oo runtii dadaal badan soo geliyay qorista dastuurkan aan ka doodayno, oo aad arkayso in ilbaxnimo badan, waqti badan oo la geliyay iyo aqoon badani ay ka muuqato, meeshana ka saari doona ambiguity-gii iyo iska hor-imaadkii dastuurkeenna markii hore aynu ku xaman jirnay inuu ku jiro kii hore. Runtii wuxuu noqon doonaa dastuur aad u hufan oo ka madax-bannaan iska hor-imaad iyo waxyaabo muran dhaliya.

Haddii aan ku soo dhowaado cutubka 9aad ee dooda dastuurka oo ka hadlaya garsoorka dalka, qodobkiisa 131aad ayaan ka bilaabi doonaa faqradiisa 4aad oo sheegaysa garsoorku inuu madax-bannaan yahay maamulkiisa iyo maaliyaddiisa. Runtii aad baan u ayidayaa, waanan soo dhawaynayaa, waana in la adkeeyaa qodobkaas si garsoorku u noqdo laan ka madax-bannaan laanta fulinta  cadaalad loo wada simanyahayna laga rajeeyo, hadiise uu si uun ay galangal ugu leedahay laanta fulintu, maamulka maaliyadiisa iyo madaxbanaanidiisa ayay dhaawacaysaa markaa aad baan u ayidayaa gadaal baan ku faahfaahin doona qaybaha danbe ee uu kaga hadlayo qodobku.

Waxaa kale oo aan ayidayaa oo aan taageersanahy in lagu muujiyo inay waajib tahay in garsoorku helo maaliyadiisa adeega ugu balaadhan ee dawladu dadka siiso waa adeega cadaalada iyo adeega amniga, markaa waa in la waajibiyaa inuu garsoorku helo dhaqaalo ku filan oo uu ku fushado hawlihiisa maalinlaha ah.

Qodobka 32aad oo ka hadlaya habka dacwad qaadista oo ka kooban 7qodob waxan soo jeedin lahaa in lagu daro qodob 8aad oo waajibinaya laanta fulinta ee maragtay dawlada ku waajibinaya fulinta awaamirta iyo ma aragtay garnaqa ama go,aanada kasoo baxa maxkamadaha heerarkooda kala duwan in badan oo ma aragtay dacwadaha maxkamadu waxa ay dhibaato ka haysataa fulinta, markaa qodob 8aad halagu daro oo waajib dastuuri ah ka dhigaya in laanta fulintu ay fuliso awaamirta kasoo baxa garsoorka.

Qodobka 133aad oo ka hadlaya qaab dhismeedka garsoorka runtii anigu waxaan qabaa qodobkaa 133aad faqradiisa koowad oo ka hadlaya Maxkamada sare iyo qaababka qaab dhismeedka garsoorka in laysku daro maxkamada sare iyo maxkamada dastuuriga ah ayaan qabaa, awoodaha aynu siinay maxkamada dastuuriga ahna dhamaantoodna aynu hoos gayno maxkamada sare. sababaha aan u leeyahayna waxa ka mid ah.

Mar hadii aynu garsoorkii fadaraalaynay oo dawlad goboleed kasta ay yeelanyso saddex Maxkamad hoose tu rafcaan iyo tu sare caasimadii oo ay maxkamda sare ku shaqaynayso laftirkeedu ay saddex xeer yeelanyso oo shaqooyinkii ay qaban lahyd Maxmada sare qudheeda ayaaba soo ururaya maxkamada dastuurkuna shaqo badan oo ma maalinle ah umay oolinba ee waa muranada dastuur ee soo baxa markaa labadaa maxkamadood in hal layskaga dhigo ayaan soo jeedin lahaa.

**Qodobka 134** oo ka kooban isaguna afar farqadood, farqadiisa 8(C) qaab qoraalka ayaan filayaa inuu wax ka yar qaldan yahay qaab qoraalkiisa, waxbaa igalayara dhiman, markaa in qaab qoraalkaas dib loogu yaro noqdo ayaan qabaa, sababaha aan u leeyahay ha la isku daro Maxkamada dastuurka iyo maxkamada sare waa; Waxa adkaan doonta in lakala cadeeyo dacwadaha dastuuriga ah iyo kuwa aan dastuuriga ahyn, markaa halkii aynu abuuri lahayn muran ka dhexeeya maxkamadaha oo ay isku qabsadaan dacwadan anigaa qaadaya iyo anigu ma qaadayo in aynaan murankaa abuurin ee aynu isku darno labada maxkamadood ee kala ah Maxkamada sare iyo maxkamada dastuuriga.

Waxa intaas dheer wadamada fadaraalka ee caalamka boqolkiiba sagaashan(90%) iyo ka badan maxkamada dastuuriga iyo maxkamada sare waa isku mid waxaa kamid ah wadamada maraykanka, Canada, ustareeliya, Pakistan, india, wadamada afrikna waxaa kamid ah ka mid ah Nigeria iyo Ethiopia oo maxkamada dastuuriga iyo maxkamada sare ay isku yihiin hal. marka sababahaas oo dhan ama boqolkiiba sagaashan kabadan wadamada fadaraalka ay uga guuren inay laba maxkamood midna maxkamad sare tahay midna maxkamad dastuuri ah tahay ay sameeyan sababahaasi inagana waa sabab xageenana maangal ka ah markaa labbadaa maxkamadood waa in laysku daro.

Mida labaadna labada maxkamadoba madaama maxkamadaha heerarkoodi la badiyey shaqadoodu way yaraanysaa madam oo dhaqaale dalkani leeyahay ku baxayo in dhaqaalihiisii si caqli gala loo iasticmaalo oo labadaa maxkamadood isku mid laga dhigo. waxa intaa dheer East Africa Community baynu ku biirnay oo ma aragtay dhawaan aynu ka mid noqonay dhamaan wadamada east Africa community guna sidoo kale maxkamadooda sare ayaa ah maxkamada dastuuriga marka kuwaas oo dhan laysku daro waxaan aaminsanahay in maxkamada sare iyo maxkamada dastuuriga ay isku mid noqdaan, dhamaan awoodaha

qodobka 135 lagu muujiyey ee maxkamada dastuuriga ahna la hoos geeyo maxkamada sare oo ah maxkamada dastuuriga ah.

**Qodobka 139** oo ka hadlaya maxkamada ama garsoorka ciidamada inkastoo runtii wiilasha ama garsoorayasha ka shaqeeya maxkamada ciidamadu ay shaqa fiican oo dalkan amnigiisa wax badan ka taray ay qabteen bogaadin ayay naga mudanyihiin garab istaag ay naga mudanyihiin. hadana sida uu xeerarku qabo mid ku shaqaysa may hayn maxkamada ciidamadu marka ciidan la leeyahay Milatarigaa laga hadlayaaa ama navy giisa ha noqdo ama air force kiisa ha noqdo ama ciidamada kale ee dhulkaba ha noqdo lkn kama mid ahayn police ka oo maad aragaty tahay maxkamadaha civilian ka lagu qaado madaama uu yahay kuwa sharciga bartay isla markaana bulshada u adeega sidoo kale asluubta markaa halkan la yidhi maxkamada ciidamada in lagu muujiyo ayan jeclaan lahaa. maxkamada ciidamada milatariga oo police ka iyo asluuntu runtii ay noqdaan kuwa lagu maxkamadeeyo dambiyada ay galaan maxkamadaha rayidka (civilianka) sida uu dhigayo xeerka ay hada ku aas aasantahay maxkamada ciidamadu waxay ku koobantahay ciidamada milatariga ah ama xooga dalka marka si la mida halka laga yidhi maxkamada qodobka ama garsoorka ciidamada in la yidhaahdo garsoorka ciidamada qalabka sida ama ciidamada milatariga aan ahayn ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 140aad** oo ka hadlaya magacaabista garsooraysha iyo kaaliyayashooda farqadiisa 1(b) wuxuu sheegayaa gudoomiyayaasha marka la magacaabo oo golaha barlamaanku ansixiyo horayna waxaan usoo aragnay qodobkii 114(5) awoodaha madaxweynaha waxan kusoo aragnay inuu xilka ka qaadista gudoomiyayaal maxkamada sare isagu samaynayo ma haboona in gudoomiye uu baaralamaan ansixiyey inuu madaxweyne kaligii ka qaado, lkn waa in Dastuurka lagu cadeeyaa marka uu process ka uu markii horaba ku yimiday garsooraha ama gudoomiyaha u sareeya maxkamadu uu soo dhamaysto in uu madaxweynuhuna process kaa uu dhamaytiro oo process ka xilka ka qaadistu iyo process ka magacaabistuba labbaduba ay isku jid maraan ayan ku dari lahaa.

**Qodobka 147aad** oo ka hadlaya xeer ilaalinta farqadiisa 3(a) oo ka hadlaya daryeelka maxaabiista iyo agoonta dadka aan isticmali karin sharciga hortiisa markaa wuxuu ka hadlayaa qodobkaasi awoooda xafiiska xeer ilaaliyaha guud qodobkiisa 3aad oo ka hadlaya xeer-ilaaliyaha guud ee qaranku ay masuuliyad gaara ka sarantahay daryeelka maxaabiista halka uu caruurta agoonta ah la yidhi la yidhahdo dhamaan caruurta ama caruurta guud oo agoon kaliya lagu soo koobin, rajaa imaan karta oo oo agoonta iyo rajo si baan u kala naqaanaa waxaa imaan karta kuwo intaaba ahayn hadana nugul, marka halkii agoon kaliya lagu soo koobi lahaa in la yidhaahdo dhamaan caruurta nugul oo dhan in masuuliyad ka saarantahay xeer-ilaaliyuhu difaacooda.

**Qodobka 149aad** oo ka hadlaya dhismaha golaha sare ee adeega runtii aadbaan u ayidayaa waan bogaadinayaa golaha sare ee garsoorku, runtii wuxuu muujinayaa madaxbanaani badan oo garsoorka la siiyey garsoor madaxbanan uunba cadaalad runtii laga filan karaa oo laamaha kale dawladu ayna fara galin ku lahayn.

**Qodobka 153aad** oo ka hadlaya sanduuq u gaara garsoorka aadbaan runtii u bogaadinayaa, garsoorku maaliyad ahaan waa inuu ka madax banaanada laanta fulinta laanta fulintaa horta masuul ka ah budget ka dawlada, iyadoo laanta fulintu ka masuul tahybaa hadana madaxbanani

garsoorka ah laga shaqayn karaa,  waa in loo sameeyaa sanduuq  u gaar ah oo kharashaadka garsoorka laga maamulo  sanduuqaasina wuxu hoos imanayaa qasnada midaysan ee dalka ama loo yaqaano single treasure account wuxuu noqonayaa sub account hoos yimaada qasnadaa midaysan lagu map gareeyo qasnadaa midaysan isla markaana xoogaa madax banaani ah la siinayo garsoorku inuu haayadihiisa ay si hufan u shaqeeyaan.

Marka aadban u bogaadinayaa inuu sanduuqa midaysan   sanduuqaasi u gaar ka ah garsoorka ha noqdo mid hoos yimaada  qasnada dhexe dawlada isla markaana Sub account ka ah si uuna uguga milmin kharashaadka kale ee dawlada garsoorka in loosameeyo sanduuq gaara oo hoos yimaada qasnada dhexe ee dawlada, sida hadaba ay qasnadeenu u shaqayso oo project yada inagu caawiyaan  world bank ku dhamantood waxay hoos yimaadaan qasnada dhexe ee dawlada dhexe lkn hadana account no gaara oo qasnada hoos yimaada baa lagu maamulaa marka sidaa si la mida ayaan soo jeedin lahaa.  wadamo badan oo ay Kenya ka mid tahay oo ay Nigeria ka mid tahay oo India ka mid tahayna sanduuqa garsoorka way leeyihiin oo miisaaniyada garsoorka lagu maamulo  waxan soo jeedin lahaa qodobka 133 ee ka hadlaya sanduuqaa garsoorka farqadiisa qodobkiisa 4aad oo ka hadlaya miisaniyada garsoorka wuxu leeyahay baarlamanka toos ha u keeno ama farqadiisa 3aad oo ka hadlaya baarlamanka in tooslooguso gudbiyo waxaanse ku dari lahaa maadama oo xukuumaduna ay tahay laantii fulinta oo ay garsoorka ama golaha sare ee adeega garrsorka iyo marka ay isla soo gartaan xukuumadu toos ha ugu soo gudbiyaan budget-ka garsoorka baarlamaanka markaa inay isla soo ogaadaan xukuumada ayaan ku dari lahaa,  waxaan kaloo ku dari lahaa qodobka 153aad farqadiisa 4aad miisaaniyada garsoorka markuu baarlamanku ansixiyo waa in si toosa sanduuqa loogu shubaa, miisaaniyadu sideedaba waa sadaaal  dakhligeenu intuu noqon doono lama hubo marka budget ka la ansixiyo waxan talo kusoo jeedin lahaa in 3 bilood laha  ugu yaraan 3 bilood  in sanduuqaa garsoorka loogu shubo.



**Xil. Ali Hassan Ibrahim**

Bismillaah, waxaan salaamayaa Guddoonka Labada Aqal, Xildhibaannada sharafta leh, bahda warbaahinta iyo shaqaalaha dhammaan. Salaan kadib,Waxaan u gudagalayaa aragtidayda. Maanta waxaan ka hadlaynaa cutubka 9aad oo ka hadlaya garsoorka. Garsoorku, sidaan ognahay, waa saddexda laamood ee noo dhisan hay'adda ugu muhiimsan.

Garsoor hufan oo sax ah oo aan helno waxay ka mid tahay cadaaladdii oo aan u dhawaano, waana dariiqa cadaaladda lagu gaarayo. Sidaas darteed,waxaan ognahay mudadii dheereed oo qaranimada ay soojirtay,dawladdii dhexe xooga badneyd waxay u bur burtay tabasho iyo cadaalad daro laga sheeganayo.

Jamhuuriyaddii sedexaad markii la yag leelay,oo carta latagay Waxaa aad iyo aad la iskugu keeni waaye oo waxyaabihii jiray sababay in soomaaliya shan qaybood loo qaybiyo,shanti qayboodna markii loo qaybiyey madhicin ilaa iyo hadda in ay tabashada baa ba'ado,wali qoys qoys iyo qabiil qabiil ayaa cadaaladdii loo tabanayaa ilaa iyo qof.

Sidaas darteed,waxaan lee yahay indho hufan oo aad uqurux badan cadaalad ah halagu firiyo garsoorka oo yaan lasiyaasadeenin, intaas waa araarteyda.

**Qod 131/2aad**, waxaan jeclaan lahaa in loo dhigo ama ay ila tahay sida uu u qoran yahay garsoorku wuxuu hogaaminayaa in laga dhigo shareecada Islaamka in lagu daro dastuurka markaa kadib la keeno.

**Qod 131/4aad,** waxaan leeyahay garsoorku waa inuu u madax banaanaadaa maamulkiisa iyo maaliyaddiisa ayaa laqoray,lama cadeynin waxa kadambeeyo,waxaan leeyahay waa in "budget" sax ah lagu ogyahay xitaa haddii uu ku yaraado,loo kordhinayo si ay cadaalad uhelaan loo sameeyaa oo u qoondeesan oo la ogyahay fargelin iyo wax waliba ay ugu bad baado,taas iyada in sidaas loo qoro ayaan ku biirinayaa.

**Qod 132/1aad**, waxaan jeclaan lahaa in sidan loo qoro "Maxkamaddu waxay si bilaash ah ugu dacwoon kara in laga dhigo" sawabtoo ah saan ognahay maxkamaduhu ama gobol ha ahaatee ama degmo ha ahaatee lacag ayaa laga qaadaa,waxaajiro marka dad masaakiin ah oo intaba aan bixin Karin,oo aan heysan dacwana ku jira hadana dhibaato,duruuf ay ku sugan yihiin una baahan iney dacwoodaan,haddii lacagta ay heli Karin sabab majirto shardi looga dhigo in lacag laga qaado,waxaan leeyahay si'sidii hore aan ku xusnay maxkamadda "budget" haday yeelato si ay u "cover" gareyso ninkaasi maskiinka oo aan dacwoon Karin loo xaqiijiyo inuu dacwoon karo oo dacwadiis gudan karo qodobkaas waxaan jeclaan lahaa in loo dhigo si bilaash ah in lagu daro ayaan jeclaan lahaa. Isla farqadaas,Waxaa ku jirta jinsigiisa,diintiisa wax waliba lasoo sheegay laguna daro luqadiisa ayaan soo jeedinayaa.

**Qod 132/4aad,** go'aanka maxkamadda waxaan jeclaan lahaa iyadana in sidaan loo cadeeyo go'aanka maxkamadda ay gaarta fulintiis waa inuusan ka badnaanin muddo 30maalmood gudaheeda ah,haddii aysan jirin wax maangal ah oo reebaayo ineysan jirin sidaas ayaan jeclaan lahaa.

**Qod 134/1aad**, iyadana waxaan jeclaan lahaa in sidan loo dhigo "maxkamadda saree e federaalka waa maxkamadda ugu sareysa dalka una madax banaan dacwooyinku ciqaabaha iyo wixii maamul ah"

Micnaheedu waxay tahay in maxkamadda dastuuriga ah ay iyada ay ka sarayso, Maxkamadda dastuurka in ay dalku usareyso, maadaama ay inoo dhisneen, laakiin hadda ay inoo sareyso,wixii maamul iyo ciqaabaad ahna in ay iyadu leedahay, laakiin Maxkamadda dastuurka ay tahay Maxkamadda dalka ugu sarayso oo siyaasadaha iyo wixii la isku qabto go'aan ka gaareyso laakiin tan ciqaabaadka ay leedahay.

**Qod 135/2aad,** waxaan jeclaan lahaa in laga dhigo sidan "waa in go'aan ka gaaristu dacwadaha laxiriira kiisaska qaarkood oo maxkamadda dastuurka in ay iyada xaq uleedahay" sidaas ayaan jeclaan lahaa.

**Qod 136/2aad**, Maxkamadda kore ee federaalka xarafka C natiijada kama dambeyska ah ee doorashooyinku Waxaa xaq uleh marka koowaad in ay ku dhawaaqaan guddiga doorashooyinka ama ha ahaadaan gudi dadban ama gudi toos ah, laakiin maxkamaddu xaqiijin ayey leedahay. Haddii la yiraahdo in kastoo loo dhigay kama dambeys tahay laakiin marka koowaad Waxaa iska leh gudiga doorashooyinka,natiijada iyo xaqiijinteeda.

**Qod 142/1aad,** laba qodob oo iska horimaanaya kow iyo labo ku kala qornaa labada farqood ku kala qornaa,waxaan leeyahay in halmeel lagu jamciyo 75 waa lasheegay howl gabnimadu iyo 70, in ay sax tahay waan aaminsanahay in laga dhigo 70 oo qofka haduu caafimaad qabo sidaas ayaan leeyahay, oo in laga dhigo dhinac la isku raaciyo way iska hor imaanayaan labada farqadood, in laga dhigo 70 jir laga dhigo.

**Qod 142/1aad**, qaab dhismeedka golaha adeega garsoorka waxaan qabaa in sidan laga dhigo "xubnaha gudiga waa in lagu daraa xubin kamid ah ama kasocota golaha culimada soomaaliyeed" ayaan qabaa oo la qeexo Meesha xeeldheerayaalka layiri "xubinta culimada" la dhaho oo aan xeel dheerayaal ladhihin oo lacadeeyo, xubin ay leeyihiin oo ku tashtaan maadaama bulshadu indhaheedu ay yihiin. Intaas ayuu hadalkeygu ku dhan yahay, waad mahadsantihiin.



**Sen. Abdikani Gelle Mohamed**

Mahadsanid Guddoomiye, dhammaan xildhibaannada iyo mas'uuliyiinta kale waan salaamayaa. Asalaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh. Waxaan rabaa inaan hore u galo oo aan waqti badan idinka dhumin maadaama salaaddu ay joogto. Qodobka 131aad faqradiisa 6aad: xubin ka tirsan garsoorka laguma maxkamadeyn karo dacwad ciqaab ama madani ah oo ka dhalatay fal la xiriira gudashada xilkiisa. Xubinta garsoorka ahi bini'aadam weeye, way khaldami kartaa. Aniga waxaan qabaa in lagu daro: haddii uusan gelin wax ka baxsan shareecada Islaamka ama xeerarka dalka u yaalla. Haddii uusan halkaas marin lama maxkamadeyn karo; qofku bini'aadam weeye, sharciga wuu ku gafi karaa, xeerarka wuu jabin karaa, awoodihiisana wuu xoog u isticmaali karaa. Marka in lagu daro: haddii uusan gelin wax ka baxsan shareecada Islaamka ama ku xadgudbin dastuurka iyo xeerarka dalka u yaalla. Taas intaas ayaan ugu gudbay

**Qodobka 132(1)** maxkamadaha waxaa u dacwoon kara qofkasta iyadoo aan loo eegeyn xaalada dhaqaalihiisa, jirkiisa qofnimadiisa, jinsigiisa, diintiisa, maqaamkiisa qofkasta ayaa u dacwoon kara ayaa la yiri, anagu dad islaam baynu nahay hadii hada qof murtad ah oo diinta islaamka ka baxay aad garaneysid uu kuusoo dacwooda, maxaa laga yeeleyaa? Waxaa la yiri diintiisa iyo qofnimadiisa midna looma eegi karo, waxaa jira dad is badalay nin baa naag iska dhigay, naag baa nin iska dhigtay iyaguna waad ogolaateen waxaa tiraahdeen qofka looma eegi karo, waxaan qabaa marka in lagu daro wixii aan waxba ka badalin jirkiisa iyo qofnimadiisa in lagu daro, qofka soo dacwoonaaya diintiisa iyo qofnimadiisa waa inuusan waxba ka badalin, hadii qofkasta loo fasaxo albaabka ayaa iska furmaaya. faqrada 5aad go'aan kasta oo maxkamadeed waa inuu ku qotomaa sabab xeereed, taasna waxaan qabaa in laga dhigo "*go'aan kasta oo maxkamadeed waa inuu ku qotomaa shareecada islaamka iyo xeerarka dalka u yaala*" oo sabab xeereed meeshaas wax laga badalo.

**Qodobka 133aad** oo ka hadlaaya *qaabdhismeedka maxkamadaha* sidii hada la xusay, maxkamadaha jamhuuriyada federaalka soomaaliya waxay tahay, maxkamada sare ee federaalka, maxkamda dastuurka maxkamada kore ee dowlad gobleedka, caasimada mxakamdaha racfaanka dowladd gobleedyada, waxaad moodaa wax farabadan oo isku

noqnoqonaaya iney yihiin, waxaan ku talin lahaa in arrintaas la kobo oo lagu kobo Maxkamda sare iyo maxkamada dastuuriga si aysan tiro inoogu badan in la mideeyo oo meel leyskugu geeyo, si dacwadooda ay u koobnaato hadii hada maxkamad federal ahoo gaar ah iyo mid dastuuri oo gaar ah la sameeyo dowladihii hoosena ay leeyihiin dowladihii dhexena ay leeyihiin maxkamade kore waxaa imanaya iska hor imaad dhinaca garsoorka. sidoo kale waxaa ku qoran Meesha maxkamada caasimada waxay yeelaneysaa maxkamda raacfaanka, caasimada waxay yeelanaysaa inta maxkamad rafaanka ee dowlad gobleedyada ay leeyihiin ayay yeelaneysaa, hadii gobolka banaadir lacala hadii uu noqdo dawlad gobleed caasimadiina uu yahay intaas oo maxkamdeedna ay ka dhisan yihiin, side u wada shaqeynayaan? Hadeer ayay noojoogaan marka waxaan qabaa si aysan iskugu qasmin kuwa dowlad gobleedka ama kuwa hada ka shaqeeya ee aan maxkamado horlahoo cusub lagu abuurin Meesha.

Waxaan kale oo aan ku darayaa ereyada carabiga ah oo hoose sida ikhtisaasiga iyo maqaasida waxyaabaha hada aan ku aragnay dastuurka waxan u maleynayaa iney yihiin carabi badan kooda oo hada Meesha laga leeyahay maqaasida oo kale waa *"u jeedooyin"* in loo badalo ereyo soomaali, maqaasidaa iyo ikhtisaasiga aad ugu buuxa.

**Qodobka 149aad** oo aad kasoo rarteen oo **qod.150aad** oo ka halaaya xubnaha golaha sare ee garsoorka xaga 109aad markaad kasoo rareyseen 9 xobnood baa ku qornaa, hadana waxaa ku qoran tiro aad u fara badan, waxaa ka mid noqonaaya guddoomiyaha maxkamada sare, guddoomiyaha maxkamada dastuurka, gudoomiye-yaasha dowlad gobleedyada, xeer ilaaliyaha qaranka, xeer ilaaiyaasha dowlad gobleedyada xubin guddiga xaquuqul insaanka ah saddex xubnood oo qareenada ka imaanaya. dad aad u fara badan baa Meesha ku qoran waxaan oran lahaa hala kobo oo tirada hala sookoobo, waxaan ku waafaqayaa xilibaan cali in lagu daro xubin culimada ah, madaama hada aan loo fiirin xeer gaar ah ama aan loo eegin cid garsoorka ka shaqeyneysay kaliya, ee lagu daray qareeno iyo xuquuqul insaan in lagu daro xubin culimada ah lagu daro waan soo jeedinayaa. aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin, Salaamullaahi Caleykum.



**Sen. Abdihakim Mo'allim Ahmed**

Cutubka 9aad, qodob kiisa 130 (3) (A,B,C) waxaan qabaa sida ay u kala horreeyaan in waxyar laga badelo, meesha xuquuqaha la yiri sometimes luuqada laftigeeda waa muhim, maadaama uu wax iska qormayo yahay, mulaaxadaad keena ayay ka mid tahay meeshii laga sixi karo in laga saxo, xuquuqaha kalmadaas Luuqad Carabi waaye kalmada ayadaa jamac ah marka in wax lagu sii jamciyo ma jirto, marka meeshaas kalmad ahaan sida ay u qoran tahay "xuquuq" haloo dhaafo, "xuquuqda" marka ayadaa sidaa jamac ku ahaanaysa.

**Qodobka 131(**6), xubin garsoor ah laguma oogi karo dacwad ka dhalatay fal la xariiro xilkiisa, waa run garsooruhu xasaanad ayuu leeyahay, laakiin xasaanad furan malahan sida xildhibaanka iyo wasiirka iyo madaxweynahaba u lahayn, marka inay xiran tahay weeyaan, xagee buu meelaha yacnii in la caddeeyo u baahan, qodob kaan in faahfaahin lagu daro oo la caddeeyo waxa ay tahay, hadduu laaluush ku dhex qaato shaqadiisa, haduu dulmi ku dhex sameeyo, cadaaladda ma iska fasaxeyso ayay ila tahay. Marka dee meesha la yiri fal ka dhashay

shaqadiisa laguma maxkamaddeen karo, waxaan qabaa in la caddeeyo falku waxa uu la xariiro si intaa ka badan loo qeexo.

**Qodobka 132(4),** waxay ka hadlaysaa go'aanka maxkamadda, haddii aysan jirin sabab maangal ah, faqradaas aniga marwalba oo dastuurka qodob kamid ah laga hadlaayo waxaan jeclaan lahaa inaan lagu soodarin qodobo ayaga laftooda tafsiir kale qaadanaaya. qodobo qofka marka uu rabo uu siduu rabo u macneysan karo ee ay cadaato ujeedka laga leeyahay, marka waxa aniga magangal ila ah ayaa qofkale maangal la ahayn, marka wax maangal ah oo heshiis lagu yahay ma jiraan sidaa darteed waxaa fiican waxa laga hadlaayo inay cad yihiin oo la faahfaahiyo oo aad loo caddeeyo.

Qodobka 133(d,c), waxay ka hadlayaan Gobolka Benaadir, waxaa la soo tiriyay dawlad goboleedyada, marka waxaa la yiri Caasimadda Jamhuuriyada, marka hadda musdalax ahaan si loo yaqaano ayaa jiro oo waxaa la dhahaa dawlad goboleedyada iyo atleast Gobolka Benaadir ayaa la dhahaa, intaan dastuurka maqaam kiisa si kale u qeexin, marka musdalaxii hore ee loo yaqaanay uu caanka ku ahaa, dawlad goboleedyada iyo Gobolka Benaadir waxaa ka badelay dawlad goboleedyada iyo Caasimadda loo yiri magaranayo, marka waxaan qabaa in lagu celsho kalmadaas sidii horre ay u qorneed, haddii dastuurka lagu jaangooyo oo hadda intaan doodiisa ku jirno maqaam kiisa si loo xaddido, sida loo xaddido ama loo jaangooyo ama loo aqoonsado ayuu noqonayaa laakiin siiqa ahaan markii halkaan laga hadlayo, Caasimadda meesha aad ka tiraahdeen way soo laa-laabatay dooda dhexdeeda in loo daayo Gobolka Benaadir oo la yiraahdo dawlad goboleedyada iyo Gobolka Benaadir sidii horreba loogu yaqaanay.

Xarafka (i) ee isla qodobkaa 131aad ah, maxkamaddaha darajada koowaad, isla asagii weeye, Caasimaddii Jamhuuriyada ayaa ku qoran, marka qodobka 134aad, maxkamadda sare ee federaalka waxay kaloo leedahay ikhtisaasyada racfaanka ee soo socda, faqrada 8aad, xarafka (b), dacwadaha ganacsi ee dabeecad caalami ah leh, kuwa qiimahooda aadka u sareeyo meesha la yiri waa taan hadda ka hadlayay oo kale weeyaan, qiimaha aadka u sareeyo lama xaddidi karo, qofka miskiinka ah ee halkaan joogo ee maalintii laga yaabo inuu hal dollar ku nool yahay, qiimaha aadka u sareeyo 10 dollar ayuu u yaqaanaa, qof kaleetana waxa laga yaabaa qiimaha aadka u sareeyo inay billion uga billaabato, marka qiimaha aadka u sareeyo, wax jaangooyo la yaqaano oo macruuf ah ma jirto sidaa darteed maadaama ay qawaaniin ka dhalaneyso iyo go'aano maxkamaddeed in qiimaha aadka u sareeyo la xaddido saqfkiisa ayaa ila quman oo aan sidaa inta loo furo looga tagin.

**Qodobka 135aad** ee ka hadlaya maxkamadda dastuurka, fakhradda 2(b), wuxuu sheegayaa in maxkamadda dastuurka leedahay dhageysiga iyo go'aan ka gaarista muranada u dhaxeeya hay'adaha federaalka dhexdooda ama hey'adaha federaalka iyo dawlad goboleedyada ama dawlad goboleedyada dhexdooda intaba. Waxaan horrey u soomarnay qodobka 97aad ee ka hadlaya awoodaha golaha aqalka sare, faqrada koowaad, xarafka (e) ayaa horrey waxaa loogu sheegay awoodaas inuu leeyahay aqalka sare, kala xalinta dawlad goboleedyada iyo dawlada federaalka iyo dawlad goboleedyada dhexdooda waxa ka dhaca waxaa la yiri awooddaas aqalka sare inuu leeyahay, haddii markii halkaan la joogo haddana maxkamaddii la siiyo, ikhtisaasaadkii baa isku dhex qaldamaya, haddii kale labadooda sida ay u kala ratibmayaan oo masalan haddii aqalkii sare uu ku soo xalismi waayo kaddib ayay maxkamaddu aadeysaa oo maxkamadda go'aan ka gaareysaa waa in la caddeeyaa, laakiin labada qodob hadda isku si bay u qoran yihiin, labadaba ikhtisaaska wuu siinayaa, marka kee ku soo hormarayaa, hadhow

waxay noqoneysaa qofka kuu necebyahay inuu ka wareegsado ama kii ku adag inuu ka wareegsado oo kan kale aado. marka khiyaaraadka hala jaangooyo, hala xaddido cida ay tahay inay, sida ay u qorneed aqalka sare, maxkamadda ikhtisaas keeda way ka mid noqon kartaa laakiin markii aqalka sare ay wax ka qaban waayaan ayay maxkamadda aadeysaa, saas in lagu caddeeyo ayaan jeclaan lahaa xalinta.

**Qodobka 139aad**, Garsoorka Ciidamada ayaa laga hadlay, waxaa lagu nidaaminayaa baa la yiri xeer gaar ah, hadda waxaan ognahay waxaa jirto maxkamad military mise Maxkamadda ciidamada qalabkasida ayaa jirta, halkaan marka aad maxkamaddaha tiriseen laguma soodarin oo ayadu maxkamad ahaan uguma jirto, xeer gaar ah ayaa lagu nidaaminayaa baa la yiri, waxaana fahmin maxaa looga dhex saaray maxkamaddaha intooda kale, ma siyaado ayay ku tahay oo marxalad mucayin ah oo keentay ayaa jirta oo si ahaan ayay tahay in laga guuro, sababta ayada keligeed aa u sharxin oo faahfaahinta loo gelin waa maxay? maxkamaddaha kale waa laga hadlay. Anigu sharci yaqaan ma ihi laakiin su'aal un igu soodhacday weeyaan, intii kale markaad sharaxdeen iyada waad ka tagteen, marka in dib loogu laabto ama la qeexo sababta aan loogu qorin ayaan jeclaan lahaa.

**Qodobka 141(3),** guddoomiyayaasha iyo garsoorayaasha maxkamaddaha korre ee dawlad goboleedyada waxaa lagu hor dhaarinayaa hogaamiyaha dawlad goboleedka iyadoo ay goobjoog yihiin gudoomiyeyaasha golaha wakiilada, meeshaas waa luuqad sixid, koley isku si baan u jeednaa laakiin luuqada ayaan ka saxayaaa, guddoomiyeyaasha golaha wakiilada sida hadalka u qoran yahay waxa waaye maalinta la dhaarinayo gudoomiyaha maxkamadda kore ee Southwest marka la dhaarinaayo, waa inay joogaan Hiirshabeele iyo Jubaland waa inay joogaan, marka saa u qorteen macnaha guud ahaan waa inay joogaan inta kale oodhan, sababta oo ah waxaa tiraahdeen "Guddoomiyeyaasha golaha wakiilada ayaa joogayo" marka waxaa loola jeedaa golaha wakiilada ee state-ka ayaan u maleynayaa, marka luuqad ahaan hala saxo, marka la dhaarinayo waxaa goobjoog noqonaayo guddoomiyaha golaha wakiilada hala yiraahdo, guddoomiyayaasha meesha laga yiri, kuwa kale looma baahno inay joogaan.

Qodobka, isla dhaarta, waxaan jeclaan lahaa in kalmad yar lagu soodaro, *"anigoo ah… waxaan ku dhaaranayaa magaca ilaahay in si daacad ah u guto waajibaad keyga, dhawrana una hogaansamo dastuurka Soomaaliya"* anigu waxaan qabaa meeshaas in la yiraahdo una hogaansamo shareecada Islam-ka, iyadaa base ah, iyadaa ah marjica ay ku xirmayaan, marka dhaarta halaga bilaabo shareecada Islam-ka, markaas kaddib dastuurka la yiraahdo, waxaan ku soo kordhiyay dhaarta in lagu daro *"shareecada Islaamka"*.

**Qodobka 142aad**, hawlgabka saraakiisha garsoore-yaasha, marka laga hadlayay guddoomiyeyaasha maxkamadda sare, farqada 1aad, waxaa lagu sheegay in saraakiisha garsoorka ay waajib ku tahay inay hawlgab ku noqdaan da'da 70-jir, haddana isla faqrada 2aad ee isla qodobkaa 142aad, ayaa lagu sheegay guddoomiyaha maxkamadda sare iyo garsoorayaasha maxkamadda sare iyo guddoomiyeyaasha maxkamadda kore hawlgab kooda inuu noqonayo 75-sano, marka haddii loo jeedo inta ka soo hartay intaan marka saraakiisha garsoorka ayaa la yiri, marka haddii loo jeedo saraakiisha garsoorka ee intaan ka soo hartay, faqrada 1aad in lagu caddeeyo waaye, laakiin haddii kale ishkaal ayaa ka imaanaayo, korna waxaa ku qoran saraakiisha garsoorka, aragtideyda saraakiisha garsoorka way wada yihiin, maxkamadda sare quddaadeyda way wada yihiin, kuwa maxkamaddaha kalena way wada yihiin, marka haddii faqrada horre loo jeedo, inta aan ahayn in la caddeeyo weeyaan.

**Qodobka 142(3),** muddada xil haynta guddoomiyaha maxkamadda dastuurka iyo garsoorayaasha waa 7-sano aan la cusbooneysiin karin,  waxaa idiin qorneed in markale la cusbooneysiin karo, aniga waxaan qabaa laba mid in la yiraahdo, in 10-sano la yiraahdo oo la cusbooneysiin karin iyo in 7-da sano loo daayo oo la cusbooneysiin Karin, laakiin cusbooneysiinta in laga daayo. cusbooneysiinta rafaad bay anaga nagu heysaa, baarlamaan keena ayay mushkilad ku heysaa oo maalin walba in naloo cusbooneysiiyo ayaan rabnaa, mawaaqifteena iyo  mabaadiidayna aan aaminsaneen in kamid ah ayaan uga tanaasuleynaa saa u soo laabano, waad iska dareemeysaan sida loo shaqeeyo maanta.

Marka dee haddii qofka shaqadiisa ay ku xirnaato soo laabashadiisa, 7-da sano ee horre laftigeeda ayuu ka shaqeynayaa sidui 7-da sano ee dambe u soo laaban lahaa, marka horre garsoore cadaalad laga rabo waaye, shaqadiisa iyo mustaqbal kiisa yeysan isku xirmin sidaas darteed mustaqbal kiisa halagu xaddido 10-sano uu xor yahay halaga dhigo si uu go'aanadiisa ugu madaxbanaanaado, haddii kale ee 7-da laga maarmin, soo laabashada halaga daayo, aniga waxaan qabaa inaan garsooraha lagu xirin inuu soo laabto ee loo dhaafo hal "term" oo waqtigeeda uu dheer yahay 10-sano ilaahow maa la yiraahdo, laakiin marnaba soo laabashada in laga daayo, wax kale ayaa ka dhalan kara, taana intaas ayaan dhihi lahaa.

**Qodobka 143aad**, xil waayida garsoorka ayuu ka hadlayaa, waxaan u fahmayo, qodob kaan markii hore aan qorayay kaddib waxaan arkay magacii golaha adeega garsoorka waxaa laga dhigay golaha sare ee garsoorka, marka taas waan iskaga gudbayaa, labada musdalaxa yeysan is khilaafin ayaan islahaa.

**Qodobka 144aad**, dhismaha xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka, faqrada 4aad, xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee dawlad goboleedka, waxaan qabaa in lagu soodaro, waxaa la sheegay xeer ilaaliyaha guud ee qaranka xaruuntiisa ayaa la cayimay oo waxaa la yiri waa caasimadda, faqradda 4aad oo dhaheysa xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee dawlad goboleedka waa caasimadda dawlad goboleedka in la yiraahdo ayaan rabaa, oo iyadana faqrad kale laga dhigo oo lagu soodaro maadaama tan marhorre la xaddiday meesha uu maqrib-kiisa noqonayo in asagana la sheego.

**Qodobka 146(2**) xeer ilaaliyaha guud waxa uu u hoggaansamsyaa oo keliya dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka, meeshaan ayadana waxaan ku soodaray, Xeer-ilaaliyaha Guud waxa uu u hoggaansama oo keliya maadaama la yiri, shareecada Islam-ka, dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka, marka ayadana in "shareecada Islam-ka lagu soodaro" iyadaa base kii ah, sidaan ku heshiinay, marka shareecada ayaa ka guda-ballaaran dastuurka oo dee dastuurka asagaa shareecada ku xiran, marka shareecada ayaa ballaaran sidaa 69arist waa inuu u hoggaansamaa shareecada Islam-ka, dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka, marka meeshaas waxaan ku soodaray "shareecada".

**Qodobka 147(2)(g),** inuu ku kormeero hay'adaha 69arista iyo saraakiisha police-ka shaqadooda, maxaa looga jeedaa shaqada uu xeer ilaaliyaha guud  uu police-ka ku kontaroolayo? Shaqada police-ka shaqo aad u waasac ah, marka meelaha uu uga kontaroolayo iyo meelaha waajibaad shaqo ahaan ay iskaga xiran yihiin in la xaddido ayaan qabaa oo aysan sidaan u furnaanin ayadana, midda kaleeto isla 69arista laftigeeda waxaa laga yaabaa "something" oo anaga naga qarsoon oo aanan aad u garaneynin oo details u baahan iyo aqoon

sharci u baahan inay mulaaxado guud u muuqdaan, laakiin waxaa la yiri talaabooyin ayaa la sheegay ayadana, marka 70arista si waafaqsan danaha guud, marka talaabooyinka la sheegayo isla faqradaas ayadana in la caddeeyo ayaan jeclaan lahaa.

**Qodobka 147(3)(a),** daryeelka maxaabiista, agoonta iyo dadka aan isdifaaci karin sharciga hortiisa, waxaa la yiri xeer ilaaliyaha ayaa waajibaad kiisa ama awoodihiisa ayaa lagu soodaray daryeelka maxaabiista, kalmada daryeel macnaha ay leedahay, xuquuqda in la difaacdo keliya maahan, daryeelka waxaa ka dhalaneysa, kalmadaas macno ahaan waxaa ka dhalaneysa baahi kale oo tiro badan oo qofka ku xeeran in lag xaliyo, marka waxaan u maleynayaa halkaan haddii looga jeedo xaalada maxaabiista iyo duruufahooda ayuu la soconayaa iyo mushaakilka haysto, si kale in loo dhigo oo ka qurux badan sidaan, waxaa la yiri waxaa ka mid ah awoodiisa "daryeelka maxaabiista, agoonta iyo dadka aan isdifaaci Karin" marka kalmada "daryeelka" in lagu badelo ayaan qabaa kalmad kale oo sharci ah oo ka dhigi karta shaqadiisa si toos ah u tilmaamaysa iyo meesha uu ka daryeeli karo ama uu kala hadli karo garsoorka. Aad ayaa u mahadsantihiin.



**Xil. Mahdi Mohamed Guleid**

Bismillahi Al-raxmani Al-raxiim, wasaalatu wasaaalamu calaa rasuullilahi sayidinaa Muxamed……wasalam.
Shir gudoonka labada Aqal iyo xildhibaanada labada Aqal dhammaan waan idin salamayaa Ramadaan Mubaarak, ilaahey bisha kheyr keeda hana siiyo.

Waxaa runtii bogaadinayaa labada guddi ee Dastuurka, sida hufan oo ay uga soo shaqeeyeen, guud ahaan doodaha shanta cutub iyo gaar ahaan cutub-ka 9aad, aqoon sharci-yaqaan badani ay ka muuqato, waxaan raacsanahay oo ayidayaa soo jeedimihii Guddoomiyaha guddiga madaxa-banaan iyo wasiir keenii hore ee cadaaladda **sanater Xassan Xaaji,** oo halkaan ka sheeegayn nidaamka garsoorka, ee saddexda u kala baxda, halkan fadaraalku aan qaadanay, nidaam kii horay aanu ku shaqeyn jirnay kuma shaqeyn karno, kan kalana waayo aragnimadeena in nugu filan hadda waan soo aragnay, marka nidaamka isku dhafka ee "Integrated-ka" ahaa ayaa na anfacaya, marka aqoonta iyo "mind power" ka ama in la isu wareejiyo ama la isku siiyo awoodaha garsoorka, habka uu ku shaqeyn karto ee inoo cuntami karo suurad galka ah waa kaa "integrated-ka" ah.

Waxaan u imanayaa **qodobka 130(1)** awoodaha garsoorka waxa ay ka timaadaa shacabka, waa sax awooda dowladnimada in ay ka timaado shacabka, si la mid ah dowladaha shuruucda iyo dastuurka xukumaa, in awooda shacabku iska leeyahay, laakin *"si waafaqsan dastuurka xeerka islaamka iyo xeerarka kale dalka u yaala"* ayan ku so kordhin lahaa, si loo sii xadido in awood iska furan garsoorka aanan u lahayn qudhiisa, marka aynu u eegno shareecada islaamka in ay tiir muhiim u tahay, sida dastuurka qaybihiisa ugu horeyay aan ku xusnay.

**Qodobka 132(1)** ee halka dacwo qaadista maxkamaddaha ka hadlaya, maxkamaddaha waxaa u dacwoon kara qofkasta ayagoo anan loo eegin Xaalada, dhaqaalihiisa, jirkiisa, qoftimadiisa, jinsigiisa, Hada jinsigii Magacyaalo Kale ayuu yeeshay meelaha dambe wakala hadli doona. Dastuurka iminka af-soomaali ayuu noogu qoran yahay, imika dhaqankeena iyo aqoonteena waa caddahay, waa dhaqan soomaaliyeed oo fiican iyo dad islaam ayaynu nahay, laakiin, mar

dhaw markii lagu tarjumo “gender” iyo meelo kale looga kackaco wuu foolxumaan doonaa, marka anigu waxa leeyahay aan iraahno “qofnimadisa” halka “jinsigiisa” aan ku badalno “Lab ama Dheddig” si mar dhaw turjumiska qudheeda aan “Gender” loo so galinin oo aanan meelo kale nala si gali doonaan, marka taas aynu hada iska xakameyno wixii mar dhaw jahawareer kale innagu keeni karo, marka “jinsigiisu” waxa ku badali laha “lab ama Dheddig”, si aynu gaar u si xusno turjimada macno kale aynu u keenin.

**Qodobka 132(7)** Go,aanada Maxkamadda waa in la tilmaamaa, waa in ay jirto fursad markii go,aanka la soo saaro ay jirtaa racfaan Qaadasho, racfaan qaadashadu xuquuqaha asaasiga ayay kamid tahay, Cutubka 3aad ee dastuurka aynu kala so hadalnay, in qofka xaq uu u leeyahay in uu dacweeyo asna la dacweeyo iyo in uu racfaan qaadan karo, marka habraacdyada badankooda waa xaq la leeyahay “*Automatically*” loo siiyay, laakin daasturkena aynu u qorno mar walba si faahfaahsan habraacyada lagu qori lahaa iyo xeerarka madaniga ama ciqaabta waa inoo badanayaa, marka anigu waxa so jeedin lahaa fursadda racfaan qaadashadu in ay xaq dastuuriya tahay oo Cutubka dastuurka lawada qoraayo xaga xaquuqdana ku xusnay, halkana waa fiican thy in si gaar loo yeelo laakin “ Procedure-ka”la siiyo in uu isagana xuquuqaha damaanad qaadayo.

**Qodobka 133**aad ee qaab dhismeedka maxkamaddaha dalka, waxa aynu qaadanay nidaam federal ah oo imikaba aynu leenahay habka noo shaqeenaya, waxa uu noqon karaa mid “integrated” ah, in garsoorka uu deal gareen karo in dacwado noocooda ama qaabkoodu yahay oo noocyada federal-ka ah ay qaadi karaan maxkamaddaha degmooyinka ama gobolka ama dowlad goboledka, shaqaalaha garsoor-ka ee halkaan jooga iyo garsoore-yaashaas ay dacwadaha gali karaan. maxkamadihii markaa hadeenu badino shaqadu way yaraanaysaa, shaqoyinka iyo nooca maxkamadaha ee la aasaasay badankooda waa ayidsanahay, maxkamadda sare ee fadaraalka, anigu maxkamadda dastuurka waxaan ku badali lahaa “maxkamadda ciidamada” sababta oo ah ahmiyad dastuur oo weyn oo maanta noo taalo oo aan qaban karayn maxakamadda sare inta la mideeyo laba doodu ma jirto, shaqada ugu weyn ee halbowolaha amniga wax ka taraysa dalka jiritankiisa kaalin uga jirta maanta waa maxkamadda ciidamada, oo aad ogtihiin nooca dacwadu ay qaadaan iyo xasaasiyadda ay leeyihiin. marka maxkamadda guud iyo maxkamadda sare laba darajo sareeya ayay labadoodu sheegi karaan, marka afsoomaali ahaan taas maqaadan karnaa, mise erey bixin kale baynu Maxkamadda sare u doonna, laakin Kore dadku waa fahmi la'yihiin, xoogaa dhadhanna masamaynayso.

**Qodobka 133(1) (E)** Maxkamadaha darajada 1aad iyo dowlad goboledyada iyo Caasimadda jamhuriyadda, marka haddii labada qiyaar soo aragnay ee ah, gobolka Banaadir ma dowlad goboleed mise gobol leh caasimad? doodo badanna dowlad goboleed in uu noqdo ayay ayidayeen, marka hadii gunaanad ka qaadan doono dowlad Goboleed inuu yahay, Caasimadda jamhuriyadda maxkamadeedu in halkan lagu sheego ma ahan ayee ilatahy, intaa haloo daayo fursad gunaanadkeedu maxuu ahaan doonaa, doodo badanna ahaayeen dowlad goboleed caasimad ah, marka taa dowlad goboled yada ayaa ku kooban in aan niraahno.

**Qodobka 134(6**) xadididda xubnaha garsoorayaasha, iyo shaqooyinka yaala ee faraha badan, waxey ku noqoneysaa dabar in garsoorayaal ku filan hesho, maxkamadda sare ee fadaraalku waxa ay ka kooban tahay, Guddoomiyaha maxkamadda sare iyo 8 garsoore, anigu waxaan qabaa garsoora yaal ku filan in la dhoho aan la xadidin, ama lagu daro “Guddoomiyaha maxkamadda sare iyo 8 garsoore waana kabadnaan karaan”, markaa in fursaddii in lagu kor

dhin karo garsoore yaal kale,  halkaan dacwada ay qaadayso ayaad ikhtisaas keeda sheegteen, ganacsi caalami ah iyo heererka dhaqaale dacwado lagu gaar yeelaya ay galeyso, oo mardhow "procedure" ama habraacu uu faah- faahin doono, marka hadba waxay keeneysaa in  "Pages" kala duwan loo sameeyo, "Page" ka Maxkamadda Sare ee ganacsiga, arrimaha madaniga, arrimaha ciqaabta, saddex saddex garsoore ayay ubaahnaan doontaa midkiiba in ay galaan , marka hadeynu sagaal qof ku soo xadidno oo waliba gudoomiyaha uu  maamul ku mashquulsanyahay sided(8) garsoore kuma filnaanayaan.

Markaa yeeynaan tirada xadidin aynu badino 17 bay noqon karaan 20 iyo dhowr bay noqon karaan shaqooyinkaa kale markaa "pages" kale loo kala sameeyo ayaa kala qeybinaaya shaqaduna way ku badnaan doontaa dacwadii howsheedu ma yara oo waa ogtihiin waliba intiina sharci yaqaanka ah ama ka soo shaqeeyay garsoorka ama garyaqaanada ah.

**Qodobka 136(7)** waxaan soo jeedin lahaa dastuurka waa ka hadasheen waxyaabaha ay u leedahay ikhtisaaska ama awoodaha, laakiin hadana waxaa lagu sii faah-faahin karaa oo ay tahay xeer baa faah-faahinaya dastuurka, sharciga nidaamka garsoorka ama xeerka nidaamka garsoorka  ( law for the Judiciaryn organization) oo mid ah  oo side bay u dhimanyahay garsoorka sharcigaas oo baarlaamanka soo mari doona oo faah- faahinaya, bahweynta sharciga iyo cadaaladda kulli iyo xeer ilaalinta soo falanqeeyeen oo soo lafa gureen oo kasoo wada shaqeyeen.waxaa kale oo loo baahanyahay mid kale (substantive law) oo habraacna ah ( federal iyo state judiciary) awoodaha garsoor side bay is kugu (delegate) gareynayaan oo  iskugu idmanayaan, sidee bay u kala leeyihiin sharcigaas oo golahaan baarlaamanka maraana waa loo baahan yahay, dastuurka laguma koobi karo awoodaha ay kala lee yihiin iyo sida ay u wada shaqeynayaan aniga labadaas sharci in baarlaamnka soo saaro ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 133aad** oo ka hadlaya maxkamada dastuuriga anniga horayna waa uga hadlay waxaan qabaa maxkamadda dastuuriga ah in lagu lamaaneeyo maxkamadda sare, oo xeerka nidaamka garsoorka imikana wuu qabaa, maxkamadda sare oo isu rogi doonta maxkamadda dastuurka oo inta garsooreyaal lagu kor dhiyo, halkii kolba hay'ado soo kordhin lahayn, halkaan sidee ku maraan 4.5 lagu qaybiyo iyo doodisa iyo howllahaasi dhani iyo muranka wada shaqeynta labada garsoor had iyo jeer anaa xaq u leh iyo anaa xaq u leh.

Maalin dhaweed hal kaan guddiga xuquuqul insaanka ee aynu marinay, waxaan filaya mediyaha waa kala socotaan ilaa iyo hadda in ay shaqeyaan waxa ka taagan iyo sida ay iskugu jawaabayaan, marka "institution-nadu" aynu dhisayno maxay  soo kordhin karaan maxayse soo kordhinaynin waa  in aynu  ku salayno, anigoo awoodaheena dhaqaale iyo aqooneedba eegayna, marka anigu waxaa ayidayaa maxkamadda sere ayaa Inoo ah maxkamadda dastuuriga ah, oo aan ku xoojinaynaa garsoorayaal aqoonleh oo beelaha soomaaliyeed oo dhinacyada kala duwan ay ka muuqdaan.

Qod.135(2) (B) dhagaysiga go'aan ka gaarista murannada u dhaxeeya hay'adaha fadaraalka dhexdooda, anigu awooda horana aqalka sare hadana sanator-kayga ayaa ka hadlay in uu maamul goboleedyada iyo dowladda fadaraalka ka shaqeeya oo u garnoqo, hadii halkaan muranadu ay yihiin mid dastuuri ah turjumid ama tafsiir dastuur loogu baahan yahay taasi waxaa gali doonta maxkamada sare hadii ay  awoodaa leedahay iyo haddii maxkamadaan la dhiso, iyadaa awood u yeelan doonta halugu sii cadeeyo, qodobkaa "*muranada dastuuriga*" hala

yiraahdo, murannada maaliyadeed ay noqon karaan ama dhaqaale ayaa la isku qaban karaa ama maamul ayay noqon karaan, markaa halasii gaar yeelo ama halugu sii cadeeyo.

**Qod.135(2) (I),** go'aan ka gaaridda Khilaafaadka ka dhasha doorashooyinka waxaa xeerka doorashooyinka ee 2024 uu siiyay maxkamadda sare, sideedaba muranka doorashadu ma muran maamul baa misa waa mid dastuuri ah? anigu waxaan qabaa sanduuqa sida loo maamulay iyo natiijada sida looga dabaqo in ay tahay muran maamul, oo ayna ahayn muran dastuuri ah, waayo cutubka 3aad xuquuqul insaanka ama baaqa caalamiga ee xuquuqul insaanka iyo "documents-yada" iyo axdiyada xuquuqul insaanka markaad eegtid, siyaasad waa "madani" waa dhaqaale halkee buu dastuurka marka noqon karaa, waa 1 tafsiir sharci oo dastuuri ah in dastuurka loo sameeyo, iyo marka 2aad oo uu yeelan karaa duruuc sharci inta badan ayay ku soo koob mayaan arimaha dastuurka, hadii kale qof shaqaale ah qudheedu waa xaq dastuuri ah. hadii sidaan loo xadidinna oo aan la oranin daruuc sharci oo labadaan Aqal ka soo baxday ayaa muran dhalinaysa ama tafsiir dastuurka in la turjumo ayaa tafsiir dastuuri ah arimaha dastuurka maxkamadda ku shaqayeelanaysa soo galaya, wayna naga baaahaysaa howshu, anigu markaa waxaan leeyahay sharciguna wuu cadaynayaa, ma go'aan maamul, ma muran maamul oo ka dhashay natiijo maamul oo lagu dhabaaqay, markaa hadii ay talo jiri doonaan waxay ku haboontahay maxkamadda sare murannada doorashooyinka in ay ka garnoaqdo, oo ah muran maamul oo hay'ad maamul ka timid go'aan keeda.

**Qodobka 136** maxkamadda kore waan sheegay ereygaa kore ama aanu niraahno "*maxkamadda guud*" ama "*maxkamadda sare*" ama ery bixin kale aynu u doono. **Qod.136(2)(c)** horta doorkii hore oo aynu 4 cutub ka doodnay waxaan halkaan anigu ka soo jeediyay, afsoomaaligii ma anaan "computer" garaynin, xarfihii waan qoreynaa iyo tiradii "Automatically" erey ku qoran ama xarafna Number-kii waan qoreynaa, laakin xaraf ku qora markaan is iraahno A ,B,C,D.. baan u kacaynaa iyadoo shirkadaheenu ay yihiin shirkadaha ugu waa weyn xaga "technology" yadda, wasaaraddii gaar u leenahay, af "chinese" kii la "computer" reeyay far xabashigii la "computer" reeyay hindigaa araktay sida uu uqoran yahay "computer" kii wuu aqbalayaa ilaa iyo hadda umad ahaan ku fashilanni inaan "computer" Soomaaliyeeno, markii koow niraahno B,T,J aynu qorno ilaa iyo hadda A,B,C.. ayaa ina daba socota, waxaan oran lahaa malaha arrintaas ayaa xal noogu baahan, ummad ahaan dhamaanteenba. laakiin labadiina guddi hadii ay idin suurtoobayso bal isku daya inaad b,t,j… qortaan oo aad a,b,c…. aad ku boodaysaan inaga daayasaan ayaan soojeedin lahaa.

**Qod.136(**2)(C) waxa uu lee yahay ku dhawaaqida natiijada kama dambeyska ah ee doorashooyinka goloha wakiilada iyo hogaamiya iyo ku-xigeenkiisa dowlad gobaleedka, waxaan leeyahay maxkamada kore sida aad ogtihiine sharciga dhismaha guddiga dooroshooyinka iyo sharciga doorashooyinka iyo kan axsaabtuba waxay dhisayaan gudi midaysan, dastuurka qodabadiisa 55 ayaa ugu horeeyo oo doorashooyinka ah gudigaas oo heer faderaal ah iyaga sharci ahan waxaa la level ah maxkamada qaab dhismeedka federaalka awoodihii garsoorka iyo doorashooyinka garnaqooda waxaa la siiyay maxkamada faderaalka, marka madaxweynaha iyo xilibaanada taa maxkada kore iyo waxii kale ee aan niraahno haku shaqo lahaato, laakiin ku dhawaaqida kama dambaysta waxaa leh maxkameda federaalka heerar keeda kala duwan. hadii kale shuruucda aan sameenay bay is Khilaafayaan In iyagana dib loo badalo bay noqoneysaa. 185 maxkadaha daraja 1aad waxay leeyihiin ikhtisaas federaali ah oo ay u xilsaarteen maxkamada federaalka mardhow habraaca ayaa lagu faafaahin doonaye maxkamadda "Delegation" ama u siisanayso igmasho, inay ka garnaqaan kiisaska noocaas ah,

maxkamada federaalka ayaa  xaq u leh ama nooc faderaal dambigaas ama dacwadaa madaniga ay lee dahay.

**Qod. 140** habraaca magacaabista gorsoorayaasha iyo kaaliyayaasha 140(1)(b), waxaad tiraahdeen baarlamaanka federaalka soomaaliya ayaa mid kasta ku ansixinayo ama ku diidayo qofka loo magacaabay cod hal dheeri ah(50+1) marka garsoorkii marka la maga caabayo yaa usoo gudbinayo baarlamaanka? halkaan kuma cada waxuu leeyahay habraaca magacaabista garsoorayaasha, dhismihiisa ugu horeeyay cid barlamaanka usoo gudbinaysa majirto ma xukuumada mise madaxweynaha toos ugu soo gudbinaya?  garsoorayaasha had iyo jeer madaxweynaha ayay la level tahay oo soo gudbin jiray marka waa in halkaan lagu sheego, in marka hore madaxweyne uu soo gudbiyo marka 2aad C ah madaxweynaha digreeto ku meel mariyo markoo ku ansixiyo baarlamaanka markii ay  u soocodeeyaan kadib, markaa halkaa soo gudbintii kuma cada cida awooda soo gubinta leh.

**Qod.142aad** mudada xil heenta iyo da`da hawl gabka tan si fiican baa u soo dhigteen in shaqaalaha ama saraakiisha garsoorku ay 65 iyo 70 hawl kale ay qabanayaan, iyo kaalin iyo howlo iyo shaqooyin u badanyihiin markaa dad firfircoon inay ahaaadan waa loo baahan yahay, garsoorku waa dad maskax u baahan in ay ku shaqayso inay 70 jir  ku hawl gabaan anigu waa ku taageersanahay, sanadkii 2012 iyo 14 intii u dhaxeyso ayaan jaamada habardhin aan master ku diyaarinayay Scotland, dabadeeda macalin wax  inoo dhigayay oo maclimiinta ka mid ahaa ayaa waxuu ka hadlay waa tan laga hadlay “life exepecation-ka” jiritaanka qofka inta la fili karo ay ka sheekeeyan inaguna ilaahey baanu aaminsanahay, cimrigeena ilaahey baa qoray,laakiin si kale ayaa wax loo xisaabiyaa ta aan rabo inaan ka soo qaato waxaa waaye waxuu ku dooday macalinkaasi qodobka da`da uu ahan jiray life exepecation-ka hada marka la eego 10 sanadood buu ka yaryahay, oo masalan haduu 50 jir yahay 40 weeye, imika dood weyn oo tii ka balaaran ayaa jirta oo ah qofka haduu 50 jir yahay 25 jir waye energy-giisa maanta iyo tamartiisa is badasho, markaa yaa labaqin 75 meel lagu soo dagdagayo ma aha, 75kii waxa weeye hada 30 iyo dhowr iyo bar buu noqonayaa hadaa aragtidaa qaadano, 75 in  garsoorka uu ku shaqaalaha dowlada kaleba civil servent marka sharcigooda aan kashaqaynayno ama haduu soo galaayo dastuurka in aynu meelaha ku “reire-garoowaan”wali waala  sii shaqayn karaa. anaga ciidamada generaalka waa joogay markii hawl gabka jananada ama ciidanka waa intee dood weyn baa timid war 75 wali xoog baanu leenahay ayay ahayd maxasuusata generaale, marka hawlgabka wali waa lasii tamir karaaye waa waqti fiican 75 yaala gaareen baa leeyahay 70 ilaa 75 halaga dhigo oran lahay waayo wali dadka iyo aqoonta waanu u baahanay meel hore lagu sii Retire garoobo ma jirto .

**Qod.143** xil waayida garsooraha fakhradda 2aad xil waayida garsooruhu waxay ka bilaaban kartaa golaha sare ee garsoorka ama cabasho qofkale usoo gudbiyay ama cabashadaas waxee keeni kartaa in dadku cawdaan sawabta u cowanayaan  waan idin sheegi karaa, anigu garsoorka la shaqayn jiray mudo hay`ado ayaa la shaqeyo ama  lawyer madax bananan baan ahaa ama waa ka soo shaqeeyay dabadeed waxaa qabanay wax la yiraahdo “public Perception” dadku sidee u arkaan cadaaladda, cadaalada markaa timaadid kaba so qaad magaaladan xamar ah maxkamadda gobolka aad tiraahdid dadow see cadaaladda u aragtaan ama racfaanka ama ta sare, qofku waxuu ku qiyaasaya sidii looga jawaabay, marka waxaa soo baxay qofkii maxkamada gobolka u xukuntay dacwadii uu qabay waxuu lee yahay meeshaan cadaalad taalo, qofkii kale laga xukmay waxa uu lee yahay meeshaan cadaalad daro ayaa taalo eex iyo qabiil iyo musuq maasuq baa ka socda, maxkamadii racfaanka la tagayaa waxaa laga yaaba qofkii

xukuntay in laga xukmo, waxuu leeyahay maxkamadii hoose cadaalad baa taalay inan wanaagsan baa joogay iyo garsoorayaal fiican, laakin tan racfaanka cadaalad daro ayaa taalo musuq maasuq iyo eex iyo qabyaalad.

Marka aragtida iyo qiyaaska qof biniaadamka qaasatan soomaaliya oo ay garssorka ku qiyaasaan waxa weeye sida isaga loogu jawaabo, aakhirkii waxay noqotay 50% caadaalad taalo 50% cadaala daro taalo. marka ani waxaan oran lahaa cabashada aan kadayno oo qiimeenta haka timaado waliba cabashada haday tahay dhowr qof waxey rabeen soo cabanayo dabadeed garsoorihi sidaas lagu rukhsaynayaa.

**Faqrada 4aad,** hadii cabashadu mar 2aad lasoo celiyo asbaab maangal ah oo la xadiday oo waliba hadhowne sharci fursad ha loo siiyo inuu sii xadido sharciga xeerka nidaamka garsoorka cabashada waxay tahay, asbaabta maangalka, laakiin cabasho in laga qaado xil garsoore waxay ila tahay qiyaaskii baa yaraanayaa.

**Qodobka 144** dhismaha xafiiska xeer ilaalinta, xeer ilaalinta waa qeyb muhiim ah fulinta xafiis madaxbanan ah iyo dacwo oogista iyo arrimaha kale ee dastuurka iyo shuruucda dalka ay awood ugu siiyay ku shaqo leh. waxaase rabaa inaan 2 kala cadayno 2012 dastuurka aan haysano hal muran baa ilaa manta taagan bahda garsoorka way og yihiin oo ah dastuurka ma Soomaali ayaa marka hore lagu qoray oo markaasa ayaa la turjumay, mise af igririis ayaa lagu qoray? 2014 intii ka dambeysay markii "mbagathi"la fadhiyay markasaa soomali lagu turjumay, mida ay tahay ani garan mayo, waxase umalaynayaa marka hore in af ingiriisi lagu qoray oo niman iska qurba joog ah u badan hay`adaha ka shaqeeya aqoon sharci oo badan iyo xaga luuqadaba ay run ahaati sida u arko marka ku akhrisid aynan jirin,waa ku arkaysa ayaa hadana la turjumay, ama soomaligii laga turjumay oo ingiriis lagu turjumay shaqeeyay. qof aanan turjumin ama shaqsiyad gaar ah guddi balaaran oo inta aqoontii dhan runtii leh in dastuurkii si murankii in loo saaro ani ila tahay.

xeer ilaaliyaha guud **islaas**h attorney general baan oran lahaa mar dhoweed xasan in lakala sii cadeeyo sare iyo kore loo kale sheego engilish oo uu isburin oo la yiraahdo, attorney general murankiisa xog ogaal iyo goob joog ayuu ka ahaa marka intaa jiray ilaa hadana jira. dadkii noo soo dirayay maalin dhowayd east Africa community dacwo ayaan galnay, markii dacwadii soo direen xeer ilaaliyaha guud bay ku soo direen, garyaqaanka guud dacwadaha madaniga ah iyo kan caalamiga ah iyo kuwa dalka idin qaabilsan hore waxaan u soo marnay oo is faham baa lagu xaliyay, ani waxaa oran lahaa sharciga aan ku sii kala cadayno.

**Qodobka 147** xilka iyo awoodaha xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee qaranka, xeer ilaalinta awoodihii ay lahayd waa inuu sii faahfaahiyo oo lagu daro, wuxuu qeexayaa maxaa federal crime ah? dambiyada heer federal noocyada uu yahay canshuuraha miyaa, hawada miyaa, bada miyaa waxii ka dhasha markab soomaliya lee dahay ama diyaarad ay leedahay calanka soomaliya diblumaasiyada iyo waxii baasaboorka ka dhasha iyo wax alla wixii federal ku shaqo leeyahay ayaa dambiyada heer faderaal ah.
dabadeed federal criminal ikhtisaaska garsoor ama xeer ilaalineed ee ay lee yihiin hay adaha garsoorka ku waran yihiin marka sharciga habraaca balaaran ee sidii loo kala shaqeenayo qeexayo fursad haloo siiyo baarlamaanka inuu soo saarayo faahfaahinta "xeer gaar ah ayaa qeexi doono halagu soo qoro ayaa soo jeedinaya".

Waxaan ku noqonaya xaga da`da waxaa u jeeda mudada qodobka waan calaameeyay 70 sano lagu soo gaabiyay, ani waxaan oran lahaa qofka magacaabistiisa mudo yaan lagu xirin waliba garsoor hadii ay tahay ama godoomiye ha noqdo ama garsoorka kale, laakiin asbaabta xilka laga qaadayo waa inay cadaataa, waayo xafiis siyaasadeed ma aha, hay`ad siyaadeed oo madax banan ama dowladeed ma ahan hadii mudo lagu gediyo shaqdii oo qaban lahaa sidii ugu madax banaanida u qaban lahaa uma qabanayo, marka mudada aynu kadayno aan oo halahaado sida dunida oo kale ay tahay in asbaab loogu qaadi karo lagu soo oogo golaha adeega garsoorka iyo habraacyada aasaasi doonaan lagu xusayo laakiin mudada laga daayo.

**Ugu dambayna qodobka 153aad** ani waxaa bogaadinayaa in garsoorka hadii aan u baahanay garsoor madax banana oo hufan oo aan go`aankiisa ku salaynaynin in dhaqaalo ahaan iyo shaqada xafiiska isku filnaado loo baahan yahay, marka 153 waan bogaadinayaa sanduuqa garsoorka oo account gaar ah loo sameeyo Budget-kooda ku dhaco iyagana soo diyaarsadaan, waayo 3 hayadood dalka kala madax banaan fulinta uu madaxweynaha ugu tun waynyahay iyo xukuumadii baarlamaankii iyo sharci dajintii oo dowladnimada ku dhaqaaqaysay ah iyo garsoorkii dacwadaha kala duwan ka gar noqiddeedi 3da dhardhaar ee ay dowladnimadu ka kooban tahay in sanduuq gaar ah loo sameeyo oo ay leeyihiin miisaaniyadooda soo gudbistaan taas waxay ila tahay in madax banaanida garsoorka u baahanahay ay meel marin doonto oo ay awood sii doonto, mar dhow waa arki doontaan. xafiis marka qof fadhiya laguma qiimeeyo mustaqbalka umadda muddada dheer ee soo socota, bari ka malin garsoor madaxbanana qof kastaa u baahan dadka markii xafiis joogo ama fulinta ku jiro ama dowlad yahay, wuxuu is yiraahdaa maanta bari adi qudha u baahnaanaya inaad dhisto hay`ado dowladeed oo dowladnimadeena xoojiyo, marka waa bogaadinayaa waana ayidayaa sanduuq gaar ah in loo sameeyo garsoorka. waa mahadsan tihin wasalaamu calaykum waraxmatullahi wabaraakatu.



**Xil. Abdirizak Adam Warsame**

Bismilaaha alxamudulilaah, wasalaatu wasalaamu calaa rasuulilaahi, amaa bacdu.
Guddoonka labada aqal ee baarlamaanka guddiyada labada ah ee dastuurka, dhamaan labada aqal ee baarlamaanka Aslaamu calaykum waraxma tulaahi wabarkaatuhu, yaanan hilmaamin martida bulshada rayidka ah.

**Runtii cutubka 9 aad** oo ka hadlaaya garsoorka dalka waa cutub muhiimad gaar u leh guud ahaan dalka iyo dawladnimada intaba, waana halka dalkeena uu ka noolaan karo ama ka dhiman karo, markaa inaan aad uga fikirno oo baarlamaanka markii doodu bilaabanto oo la saxiixaba aan lagu kala tagin oo ahmiyad uu leeyahay la wada ogaado. Haddii aan gudaha u galo doodayda cutubka 9aad, qodobkiisa 131aad oo ka hadlaaya madaxbanaanida garsoorka faqradiisa 6aad oo sheegaysa *"xubin ka tirsan garsoorka laguma oogi karo dacwad ciqaab ah ama madani ah oo ka dhalatay fal la xiriira gudashada xilkiis"* qofku waa bani'aadam waana gafayaa, waxa uu u dhaxaynayaana waa dad u soo doontaay cadaaladda, wuxuu fadhiyaa meeshii ugu darnayd oo la rabo qofku inuu iska ilaaliyo. Dadkaas cadaalada u soo doontay inuu dhexdhexaad ka noqon waayo markaa in xoriyadaa mudlaqa ah la siiyo sharcigana cid walba ayuu ka sareeyaa markii la samaynaayana loogu tala galaa, wuu indho la`yahay sidii u socdo meeshii loogu tala galay ayuu galayaa, markaa bari kama noqon karo in la dacweeyo wax

walbaa ka dhici kara waliba anagoo og maant garsoorkeenu sida uu yahay iyo xaalada uu ku jiro.

**Qodobka xiga ee 132(7)**aad oo sheegaysa go'aan kasta oo maxkamaddeed waa inuu tilmaamaa inay jirto fursad rafcaan qaadasho in halkaas lagu simo, oo qaybta kale ee la raaciyay marka laga reebo "xaaladaha xeerku si kale ugu sheegay" laga daayo oo markasta ay jirto muwaadinka soomaaliyeed xukun maxkamaddeed uu ku dhacay ama arrintiisa go'aan laga gaadhay inuu leeyahay fursad uu rafcaan uga qaadan karo xukunkaas oo aan albaabada laga soo xirin.

**Qodobkana 133aad** oo ka hadlaaya qaabdhismeedka maxkamadaha waxaan jeclaan lahaa halkaas in lagu soo kordhiyo laba faqrad oo muhiim ah makamaddaha la sheegay waxay ku egyihiin derajada koowaad heer gobol ah in heer degmo lagu soo kordhiyo, meeshaas oo lagu daro. Maadaama unuga koowaad ee dawladnimada ay degmadu tahay, maxkamaddana ay ka furan yihiin in heer degmo lagu daro iyo fakhrad kaleeto oo ah iyaduna maxkamadda ciidamada oo aan laga reebin halkaas lagu daro inay ka mid noqoto dhismaha maxkamaddaha dalka ka jira.

Waan ognahay maxkamadda ciidamada maanta dawrka shariifka ah ee garsoorka uga jirto iyo hawsha muga leh ee bulshada u hayso. Sidoo kale isla qodobkaas 133aad fakhradiisa 2 aad wuxuu leeyahay lama dhisi karo hay'addo garsoor ama maxkamadda gaar ah in halkaa lagu simo lagana reebo qaybta xigta oo sheegaysa "haddii uusan ogolaan golaha saree e garsoorka". Mar haddii intan oo maxkamaddood la soo taxay oo heerarka kala duwan leh uu dalku leeyahay hay'add kale oo garsoor inaan loo baahnayn ayaa meeshaas ku jirta, markaa in laga daayo oo aan culayska iyo tirada laga sii badin intaa ka badan.

**Qodobka 134(2)**aad oo sheegaysa xarunta maxkamadda sare ee federaalku waa magaalo madaxda dalka waxayse fadhiyadeeu ku qabsan kartaa meelkasta oo dalka ka mid ah, marka guddoomiyaha maxkamadda sare u arko danta caddaaladu sidaa ku jirto. Markaa halkaas in guddoomiyaha maxkamadda sare kaligiis loo daynin oo lagu beddelo golaha sare ee garsoorka markay u arkaan in danta cadaaladu sidaasi ay ku jirto, oo go'aan gole laga dhigo oo shakhsi kaliya lagu koobin.

Isla qodobkaas faqradda 7(c) oo sheegaaya ka garnaqidda iyo ka go'aan gaadhista awooddaha la xiriira magacaabista jagooyinka dawlada ee heer federaal yacnii hay'addaha dawlada waxaa la yiri waa kala madaxbanaan yihiin, haddana hay'add gudaheeda wax ka magacawday ayaa waxaa la leeyahay waxaa ka garnaqaayaa maxkamaddii markaa halkaa in la kala daayo oo magacaabista loo madaxbaneeyo. Haddiise magacaabistaa dood sharciyeed ka dhalato waxaa hawshaa iska leh maxkamadda dastuuriga ah ee malahan maxkamadda sare.

Isla qodobkaas faqrada 8(b) ka garniqidda iyo ka go'aan gaadhista cabashooyinka laga soo qaato xukunadda iyo go'aanada maxkamadda kore ee dawlad goboleedka, faqradiisa 2aad oo dhahaysa maxkamadda dastuurka waa maxkamadd maddaxbanaan oo gaar ah oo leh ikhtisaaska, gaar ah Da` in laga daayo waa lasheegay in maxkamadda dastuurka tahay inay madaxbanaan tahay waa la sheegay, markaa sabab kale oo gaar loo yiraah ma jirto, hay'addaha dawlada dhamaantood waa "public institutions". Isla qodobkaas faqradiisa 3aad maxkamadda dastuurka ayaa awoodd u leh go'aan ka gaadhista taariikhda ay ka bilaabmi karto hirgalinta go'aanka fulinta marka lagu dhawaaqayo in uu xeer yahay wax kama jiraan iyadoo la

tixgalinaayo saamaynta ay ku leedahay a,b,c,d… Waxaan isleeyahay maxkamaduhu waa fadhi ku dirir maxkamadda dastuurka gaar ahaan markii sharci la isku qabsado waxay ikhtisaas u leedahay fasiraadiisa iyo ka go'aan gaadhistiisa.

Laakiin, hay'add ayuu leeyahay baarlamaani ah dalka oo sharci dejinta iska leh, isla markaana waxaa inoo qoran "process-yo" sheegaaya markii sharci lalaalo xiliga uu istaagaayo iyo markii sharci la ansixiyo xiliga uu dhaqan galaayo oo faafinta rasmiga ah uu ku soo baxaayo intaba marka hay'addaas baarlamaanka haloo daayo awooddiisaas dastuuriga ah.

**Qodobka 136aad** oo ka hadlaaya maxkamadda kore faqradda 2(c) ku dhawaaqista natiijada kama danbaysta ah ee doorashooyinka golaha wakiilada iyo hogaamiyaha iyo ku xigeenkiisa ee dawlad goboleedka in awood loo siiyey maxkadda kore soohdimaha dawlad goboleed kasta, hawshaas waxaan isleeyahay maxkamadda dastuurigaa iska leh iyaduna.

**Qodobka 140aad** habraaca magacaabista garsoorayaasha iyo kaaliyayaasha ka hadlaaya faqradiisa 4aad, dhamaan garsoorayaasha kale iyo kaaliyayaasha waxaa magacaabaya golaha sare ee garsoorka, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee jamhuuriyada ayaa la yiri, meeshaa garsoorayaasha federaalka looga hadlay kuwa kaloo dawlad goboleedaa jira oo halkan lagu sheegin. Markaa yaa magacawga iska leh kuwa dawlad goboleedka iyagana? Halkaa su'aalaan ka qabaa.

**Qodobka 141(4)aad** saraakiisha garsoorka ee ku xusan faqradda 1,2 iyo 3 ee qodobkan inta aanay shaqada bilaabin waxay marayaan dhaartii. Dhaartaa cutubkii hore ee 7 aad ayaan uga soo hadalnay iyo kuwii ka horeeyey, yacnii dhaartii hore ayaa siiqo wanaagsanayd, haddii siiqada sidan laga beddeli Karin oo laga soo koobi Karin in tii hore loo laabto dhaarta qarankuna ay mid noqoto dhamaanteed.

**Qodobka 142**aad muddada xil haynta iyo da'da hawlgabka oo lagu sheegay in garsoorayaasha ay ku hawlgabayaan 70 jir halka guddoomiyayaashu ay ku hawlgabayaan 75 sano, halkaa oo xoriyad la siiyay garsorka inuu isagu 65 ku dooran karo, markaa yaan la dooransiinin, waxaa la rabaa da'ad hawlgabka da' go'an laga dhigo oo da'da 70 ama 75-ta loo daayo oo hal number la raaco oo 65 iyo 70 iyo 75 midana aan loo kala qaadin.

**Qodobka 143aad** oo isaguna ka hadlaaya xil-waayida garsooraha meesha la yiri madaxweynaha, madaxweynuhuna magacaabo guddi ka kooban guddoomiyaha aqalka sare oo noqonaya guddoomiyaha afar garsoore oo ka kala socda maxkamadda sare iyo maxkamadda dastuurka ah qareen leh khibrad, yacnii meeshaas oo guddoomiyaha aqalka sare la sheegay in lagu beddelo oo laga daayo in halka baarlamaanka ama guddonkiisa mid ka mida loo soo celiyo arrintaas.

Isla qodobkaas tiradii iyo xarfihii waa la beddelay, waxaan u malaynayaa inay tahay faqradda 10aad loola jeedaa, halkan magacaabayaa halkan guddi ka kooban afar garsoore oo derajeda maxkamadda rafcaanka ugu hoosayso, hal qareen oo leh khibrad aan 10 sano ka yarayn, laba xubnood oo aqoon durugsan u leh arrimaha maamulka bulshada. Waxaan qabaa maadaama waxa la qaadaayo oo la fiirinaayaa ay tahay qof eedaysan in laga daayo halkaa qof aan xil

dawladeed haynin oo loo daayo, oo loo daayo hay'addaha garsoorka iyo qareenada khibrad u leh hawshaas.

**Qodobka 144(3)** oo lagu sheegay xarunta xafiiska xeer-ilaalinta guud waa caasimada jamhuuriyada federaalka soomaaliya, wuxuuna xarumo shaqo ku yeelan karaa meeshii uu u arko xeer ilaaliyaha guud ee qaranka, halkaas waa lagu xusay laakiin xeer ilaalintii dawlad goboleedka ayaa laga tegay in iyadan faqrad lagu soo kordhiyo oo la yiraahdo xafiiska xeer ilaaliyaha dawlad goboleedka waa caasimada dawlad goboleedka ama halkii kale uu isagu u arko.

**Qodobkla 147**aad xilka iyo awooddaha xafiiska xeer ilaalinta guud ee qaranka faqrada 2(a) la dagaalanka iyo ka hortaga dambiyada federaalka ayaa lagu qoray halkan, garsoorkuna sidaan ognahay waa fadhi ku dirir waxbaa loo keenaaye isagu ma doonto. Ka hortaga iyo la degaalanka dambiyada waxaa iska hay'addaha amaanka sida booliska iyo nabad sugida iyo hay'addaha kaloo amaanka inoo qaabilsan.

**Qodobka 148aad** xeer ilaaliyaha guud ee qaranku wuxuu u idman karaa xeer ilaaliyaha dawlad goboleedka ama mid ka mida ku xigeenada xeer-ilaaliyaha dawlad goboleedka oogista dacwad ciqaab dacwadahana ciqaabta ee federaalka. In meeshaas laga daayo xeer ilaaliyaha qaranka isagaa ku xigeeno leh haday ku yar yihiin inuu dal bado oo "procedure" kii magacaabo loo marsiiyo ee uu ku filnaado hawlshiisa, laakiin heer uu heer kaleeto dacwadiisa u gudbinayn haddii aysan ahayn heerarka ka sareeya oo kor loo aadayo dacwadaha.

**Qodobka 150aad** xubnaha golaha sare ee garsoorka oo runtii la taxay faqrada 1(g) xubin ka tirsan guddiga xuquuqul iinsaanka meesha laga dhahay, waxaan qabaa in la yiraahdo guddoomiyaha guddiga xuquuqul iinsaanka in uu ka ka mid noqdo "Automatically". Xubnaha kaleeto isjiidjiid iyo orad iyo campaign ayey keeni kartaa hadda ayay isku dhib qabaan kuwii hadda la dhisay waan ognahay. Markaa meeshaasi sidii ay leexleexad iyo kala orod iyo khilaafaad kale loogu abuurin, waa in la yiraahdaa "*guddoomiyaha guddiga xuquuqul iinsaanka ayaa ka mid noqonaaya golaha saree e addeega garsoorka*". isla qodobkaas 150(i) oo lgu sheegay saddex xubnood oo ku xeeldheer xeerarka oo haysta shahaado jaamacdeed meesha laga yiri oo qaanuun ah, waxaan qabaa in laha yiraahdo saddex xubnood oo ka socda bulshada rayidka ah in meeshaa lagu daro, maxaa yeelay inta kale oo hadda la soo sheegay dhamaantoo ayaa sharci yaqaano ah markaa bulshada qaybaheedii kaleeto ayaa la rabaa inay qayb ka noqdaan waxaan markaas dhihi lahaa saddexdaas xubnood in laga dhigo xubno ka socda bulsada rayidka ah ee soomaaliyeed.

**Qodobka 153** oo ka hadlaaya sanduuqa garsoorka faqradiisa 3aad, sanad maaliyadeed kasta xoghayaha guud ee garsoorka ayaa diyaarinaaya miisaniyadda garsoorka una gudbinaya baarlamaanka si uu u ansixiyo ka dib marka golaha sare ee garsoorku uu ogolaado. Waxaan qabaa hay'addaha kala duwan ee saddexda ah ee dalka ka jira oo garsoorka fullinta iyo sharci dejinta leh way kala madaxbanaan yihiin sax.

Laakiin haddana shaqadoodu way iskaabaysaa way isasoo dhexgalaysaa, markaa waxaan qabaa miisaaniyada dalka oo dhan inay mid ahaato oo "channel" kii ay maraysay ay marto laakiin sanduuq gaara ay ku yeeshaan bangiga dhexe oo markii loo ansixiyo waxooda loogu shubo si ay u madaxbanaanaadan. Laakiin in ay soo marsiiyaan process ka hadda la soo marsiiyo oo

kaleeto oo baarlamaanka iyo wasaarada maaliyada u qaabilsan dalka oo dhan ay keento miisaaniyadii dalka oo isku jirta oo saddexdii ka mid yihiin haddii kale waxaa dhinaanaysa in hay'add walba tiraahdo miisaaniyadayda waan u madaxbanaanahay anaa soo diyaarsanaya anaa keen sanaaya.

**Qodobka 154(4)** aad shirarka goluhu wuxuu ku qabsan karaa xarunta guud ee golaha, wuxuu sidoo kale ka dhigi karaan hadba meeshii uu guddoomiyaha goluhu u arko munaasib in meeshaas la yiraahdo "meesha goluhu cod aqlabiyad ah iskula ogolaado in laga dhigo".

Intaa kadi waxaan rabaa faqrado dheeraad ah oo aan isleeyahay meeshan way ku haboon yihiin in lagu soo daro oo muhiim ah in lagu soo daro, sidaan ognahay waxaa jira markii garsoor laga hadlaayo xubin muhiim ah oo la yiraahdo "idaaratul qadaa" ama maamulka garsoorka oo "civil servant" ah oo aan sida garsoorayaasha ahayn oo ka duwan oo garsoorka maamula. Maxaa yeelay, garsoorku wuxuu u baahanyahay hadda sidaan hore u soo sheegnay oo kaleeto qodobadii xoghayahaa miisaaniyada masuul ka ah, xoghayahaas guud ee garsoork'a ayaa maamulkaas ugu saraynaaya wuxuuna leeyahay xafiisyo sida maamulka iyo miisaaniyada xiriirka dawlad goboleedyada garsoorkooda iyo garsoorka federaalka. Markaa in "idaaratul qadaa maamulkii garsoorka" faqra ah ama qodob lagu soo daro oo looga hadlaayo qaabdhismeedkooda siday u dhismayaan iyo hawlahooda iyo sida ay u gudanayaan waajibaadkooda iyo waxyaabaha ay qabanayaan.

Sidoo kale waxaan jecalaan lahaa waxa xubin muhiima ah marka garsoorka laga hadlaayo qareenada soomaaliyeed oo iyaguna waajibaad iyo awooddo ku leh garsoorka habsami u socodkiisa in iyagana halkaa lagu xuso xasaanad iyo awoodna loo yeelo si waajibaadkooda u gutaan qareemada soomaaliyeed. Aad aa u mahadsantihiin, asalaamu calaykum wa raxma tulaahi wabara kaatu.



**Xil. Guled Bihi Abdi**

Mahadsanid guddomiye, uga horrayn xildhibanada howlwadeenada, saxaafada, ciidamada amaanka, waxaan idinku salamaya salaanta islaamka aslaamu caleykum waraxmatulahi wabarikatuh. Ramadaan mubaarak illahay hanaga aqbalo acmaasha bishaan barakeysan aniga waan soo koobayaa uga horeyn waxaan u mahadcelinayaa guddiyada dib-u- eegista dastuurka Heerarkooda kala duwan oo runtii dadaal fara badan muujiyey ee heer ay aad uga soo shaqeeyeen oo luuqada uu ku qoranyahay sida uu uyaalo ay aqoon badani oo sharci ah ay ka muuqato, runtii arrintaas aad baan uga mahadcelinayaa.

Sida caadiga ah dastuuradu mabadi' guud bay ka hadlaan faahfaahin badan oo dheeri ah magalaan oo inta badan mabadi'ada guud baa waxaa ka dhasha xeerar iyo nidaamyo gaar ah ayay ka dhashaan, kanse waxaad moodaa marka loo eego dastuurkeenii kan ka horeyay ama soojeedimahaan marka kii ka horeyey marka la eego waxaad moodaa xoogaa in uu yara faah-faahsanyahay baad moodaa, tusaale ahaan, cutubkaan aan ka hadleyno ee garsoorka kii hore waxa uu ka koobnaa 8 qodob kanna waxa uu ka koobanyahay wax ka badan 24 Qodob taasna *"somehow"* wayfiicantahay in lafaahfaaahiyo, lakiin, marar badan waxaad moodaa in meelaha qaar ay soo noqnoqonayso, tusaale ahaan, qodobka 103(3)aad iyo faqrada 1aad nuxur ahaan

waa isku micno halkana waxaa uga jiraan labo farqadood, labaduba waxay ka hadlayaan madax bannaanida garsoorka ayay ka hadlayaan oo ay leeyihiin laguma fara gelin karo marka faqrada 1aad ii kale garsoorku wuxuu ka madax bannaan yahay laamaha fulinta iyo xeer dejinta ee dowlada wuxuuna gudanayaa waajibaadkiisa iyadoo aanay jirin wax faragelin ah.

Faqrada 3aadna waxa uu leeyahay qofna ama hay'adna ma faragelin karo garsoorka iyo saraakiisha marka ay gudanayaan waajibaad kooda, marka waxyabahaas oo kale marka aad eegto waxaad moodaa in ay isku soo noqnoqonayaan "that is why" u yara batay ee sidaan idin sheegay waan soo koobi doonaa qodobka 135aad oo dastuurkii horena noqonaya qodobka 109aad, lakiin kan hada soojeedimihiisa wax ka bedelka aynu ku hayno 135aad noqonaya wuxuu ka hadlayaa guud ahaan maxkamadda dastuuriga ah waxaan la qabaa xildhibanadii iga horeyey sida garyaqaan ra`isulwasare mahdi maxamed guuleed, sawabtaa waa la sheegay xildhibaano badan oo iga horeyay way sheegeen oo sawabta uga wayn waxaa waaye curfigeena iyo nidaamkeena garsoor, ilaa 60-kii majirin maxkamad gaar ah oo dastuuri ah majirin waxay kamid aheyd maxkamada sare ayay kamid ahayd ee arrinta kale ee aannlooga baahaneyn waxaa kamid ah wey fiicantahay ee maxkamado badan oo labada heer ee dowlada ah baa lasameyay waxaan culays badan ahayn oo ay soo siyadinaysaa iyada nafteeda majirto ee fududeynta howlaha nafteedu howlaha socda ee la xariira garsoorka ayay qaabilsantahay culays bay ku keeneysaa waqtiga iyo qarashaadka iyaga naftooda waxaan la qabaa xildhibanadii iga horeeyay waxaan qabaa maxkamadii dastuuriga waa in ay noqoto qeyb kamid ah maxkamada sare waa in ay noqotaa.

Qodobkeyga uga danbeeya ee ah qodobka 150aad ee ka hadlaya xubnaha golaha sare ee garsoorka soo jeedimahaan waxaad moodaa magacii golaha sare ee garsoorka layiri markii horena guddiga adeega garsoorka in ay ahayd baan filayaa, hadanan qaldaneyn ee guddigaan waxa uu ka koobnaa 9 xubnood markii hore, hada lakiin waxaad moodaa marka lataxo farqada 1aad ayaa shegeysa xubnahaan oo guddigaan ka koobnaanayo faqrada 1aad baa sheegeysa taqriiban wax ku dhow 25 ilaa 24 hadaan qaldanayn ayey noqonayan xubnaha intu katirsanyahay, waa marka aan lagu darin somaliland oo iyadu gaar ah iyo maamul goboleedyo ay suurtagal tahay in hada kadib ay macquul tahay in ay yimadaan marka guddiga xubnuhu 9 baan ka qaadnay oo dhowr iyo labaatan bay marayaan.

Guddigaan waxa uu yeelan doonaa insha allah xeerka nidaamka garsoorka oo xeer cusub noqonaya, guddigaan markaad eegto baahida loo qabo iyo "practicality" sida uu u hirgalayo markaad eegto wax badan oo aynu ubahanahay oo ay tahay dastuurkeena ku qorano ayaa jira, lakiin markaan eegno daruufta aan ku shaqaynayno iyo xaga aan soomarayno mararka qaar in la qoraba aan haboonayn ayaa jira, hada howlaha adeega garsoorka tan iyo 2012-kii way jireen iyagoon hawl galin baa isbedelka noocaan ah uu ku imaadey oo ku dhacay, markaas 9 xubnood kaliya ayay ahaayeen oo ka kala imaanayay xafiisyo iyo goobo mucayin ah oo kooban marka guddigaan naftiisa waa in ay guddiga dib u eegaan insha allah.

Ugu danbeyntii isla qodobkaan golaha sare ee garsoorka faqrada "g" oo ka hadleysa xubin katirsan guddiga xuquuqul insaanka oo ay soo jeedinayso wasaradda ay khusayso maadaama tirada guddigan ama golahaan uu badanyahay, waxaan soo jeedin lahaa talada Xildhibankii iga horeeyay ayaan xoojin lahaaa, guddomiyaha guddiga xuquuqul insaanka si "Automatically" ah uga dara si uu uga mid noqdo, sidaas ayay hufnaanta iyo madax bannaanidu kujirtaa, marka aad iyo aad baad umahadsantihiin.

**Kulanka 21aad (Febraayo 22, 2026)**

| | |
|---|---|
| **Baarlamaanka:** | 11aad |
| **Kalfadhiga:** | 7aad |
| **Kulankiisa:** | 21aad ee labad Aqal |
| **Goobta:** | Golaha Shacabka |
| **Furmay:** | 11:20 a.m |
| **Xirmay:** | 3:15pm |
| **Shir-guddoomiye:** | Xil. Sheikh Adan Mohamed Nur<br>Guddoomiyaha Golaha Shacabka |

**Ajendaha:**

(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka
(2) Ansixinta Ajendaha
(3) Dib u -eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad: ka doodista Soo-jeedimaha wax-ka beddelka Dastuurka. Sii wadida Cutubka 9aad Garsoorka. (Qodobada 130 ilaa 154aad)






**Xil. Bashir Mohamed Jama**

Bismilaahi raxmaani raxiim, guddoonka baarlamaanka, xildhibaanada sharafrta leh dhamaantood asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu, waxaan toos u galayaa qodobada, amaanta iyo boggaadinta guddiyada hawsha adag soo qabtay waxaan la wadaagayaa xildhibaanadii iyo senatoradii iga horeeyey.

**Qodobka 133aad** qaabdhismeedka maxkamaddaha xeer ama sharci ama dastuur wax kastoo dal dhisanayo, wuxuu ku dhistaa waa baahidiisa iyo siduu dalkaasi nolol iyo amaan iyo xasilooni iyo horumar u gaadhi lahaa. Maxkamaddaha markaan akhriyey safka hore ama qodobka 1aad ee maxkamaddaha waxaan ka waayay maxkamadda ciidanka qalabka sida. Inaga oo og ilaahay ka sakow mahada inay leedahay maxkamadda ciidanka qalabka sida maanta inaynu halkaa fadhino oo haddii ayna maxkamadda qalabka sidaa hawsha aad ogtihiin oo dhinacyadeeda badan ay qabtaan aysan qaban in aminigeena iyo xasiloonideena iyo jiritaanka qaranimadeena ay su'aal gali kari lahayd. Taasi waxay damqaysaa in aynu "institution"-da aynu dhisayno aynu sida baahida u qabno dalka iyo xaalada markaasi taaganahay ee aynu u samayno, waa fiicantahay inaynu caalamka ku dayano laakiin haddaa anigu hadda qaato shaati aad u qurux badan oo "triple xl" foolxumo iyo qaabdaraan kala soo hadhayaa meelkastuu joogo, laakiin waa inaan shaadh ileeg aniga toshaa.

Dasaatiirta iyo kuli shuruucda waxaa lagu saleeyaa danaha dalka iyo dadka markaas uu khusaynayo, waxaan markaa soojeedinayaa iyadoo taas laga duulayo iyo baahida dhabta ah oo qof kasta hortiisa taala la eegayo in farqadaha maxkamaddaha soomaaliya a,b,c,d iyo e bay ku eegyihiin (f) in lagu daro (f) taas oo maxkamadda ciidamada qalabka sida haddayse b ama c ama meelahaas kale la gayn.

Waxaan la akhriyey iyadana **qodobka 139aad** ayaa waxaa ku qoran garsoorka ciidamada in laga tagay maaha, guddigu maa mahadsanyahay way xusen laakiin qodobka 139aad bay ku qorantahay iyadoo ah hal qodob oo kaliya una qoran, garsoorka ciidamada waxaa lagu nidaaminayaa xeer gaar ah. Markaa kaas wuxuu noqonayaa laftigiisu "valid" waaye wuxuu noqondoonaa marka kor lagu xuso inay ka mid tahay maxaakiintii dalka ayaa qodob lagu xusi karaa in loo samaynayo nidaam gaar ah iyo sidii garsoorka ciidamadu u shaqaynayo. Sababta oo ah haddaad akhrisaan isla qodobka kaas 133(2) waxay leedahay, maxkamad kale lama abuuri karo, maxkammadda kale lama samayn karo oo ka baxsan qodobka 1aad, oo maxkamadda gaara ayey noqonayaan. Hoosna 133 waxaa inoog qoran garsoorka ciidamada markaa isma waafaqsana si markaasi hadhawto dood dastuuri ah u abuurin madaama 139 lagu soo qaatay in liiska ama safka maxkamaddaha dalka ka jira lagu qoro oo lagu daro faqrada ama xarafka (f) lagu soo kordhiyo taasna waa baahida ugu weyn oo maanta dalkeenu qabo ah maxkamaddaas aan ka hadlay.

**Qodobka 133(b)** maxkmadda dastuurka saw kama fikiri karno sidii xildhibaano iyo senatoro iga horeeyaa u sheegeen in maxkamadda sare ay isku beddesho maxkamad dastuuri ah, marka arrimo dastuurka iyo tafsiirka dastuurka laga doodayo, intii maxaakiim badan iyo "institutions" badan oo culaab dhaqaale iyo culaab kale kordhiya ay soo kordhi lahaayeen. Maxaa dhacay maxkamadda dastuurka maalin kasta shaqa uma taagna, waxay u taagan tahay markii ay yimaadaan xaalado u baahan tafsiir la isku qabsaday ee dastuurka iyo arrimihiisa ah. Caalamka inta badana iyo dalalka hadda aynu la leenahay isku dhawdhawnahay sida "East African Community" ee hadda aan galnay oo kale, dhamaan maxkamadda sare ayaa ah maxkamadda dastuuriga oo isku beddesha maxkamadda dastuuri markay arrimo dastuuriya galayso, waxaan isleeyahay waxay beekhaaminaysaa "institution"-da badan oo samaynayno shaqadii iyo danihii looga baahnaana waa lagu gudan karaa.

Maxkamadda kore oo "high court" loo fasiray koradaas waxaad moodaa meel ay si bay iila qaabdarantahay, af-soomaaligu waa badanyahay, markaa sidii uu shalayto xildhibaan guuleed soojeedinayey oo kale maxkamadda guud in la yiraahdo "supreme court" la raaciyo, maxkamadda sarena la raaciyo "high court" oo sidaas noqoto midna gobolada taas noqoto, mida kalena maxkamadda guud ay noqoto oo "supreme court" loo raaciyo ama la yiraahdo maxkamadda derajeda 3aad, derajeda 1 aad, derajeda 2 aad, derajeda 3aad ee state-yada la yiraahdo ama kalmad kale oo macaahida dhaqanka iyo afka inta la raadiyo la fiiriyo kalmad kale oo ka fiican, kore waxoogaa si bay u yara dhan adagtay garashadayda.

**Qodobka 134aad** maxkamadda sare ee federaalka faqradiisa 5aad, waxaa ku qoran go'aano maxkamadda sare waa kama dambays, waxaa jira markaa wax la yiraahdo dib-u-eegis oo markii ay dhamaato dhamaan oo maxkamadda sare go'aan qaadato, waxaa jira misna markay qanaacad imaan weydo qaybihii isku hayey, waxay waydiistaan wax la yiraahdo dib-u-eegis, caalamkana waa wax ka jira in "review"-gaas la sameeyo. Laakiin si ay cadaalad ugu shaqayso waxa dib-u-eegista lagu samaynayo waa inay cadaadaan oo qodobo aad u adag laga dhigaa, shuruudo aad u adagna lagu xiraa, haddii kale waxay noqonaysaa waligeed iska daba wareeg iyo waxaan dhamaanayn cadaaladdiina la gaadhimaayo haday noqoto wax iska furan dib-u-eegistu.

**Qodobka 140aad** habraaca magacaabista garsoorayaasha iyo kaaliyayaashooda, waxa hadda ku qoran in golaha sare ee garsoorku soojeedinayo waa fiicantahay. Laakiin golaha garsoorku waa garsoorayaal, waa garsoorihii maxkamadda sare, waa kii rafcaanka waa garsoorayaashii, amay ku fiicnaan la hayd in loo daayo madaxweynaha maadaama la yiri iyagaa soojeedinaya madaxweynaha u gudbinaya

madaxweynuhuna wuxuu u soo gudbinayaa baarlamaanka. Waxay igula fiicantahay in la yiraahdo madaxweynaha in loo daayo maadaama ay isla garsoorkii yihiin, golaha sare ee garsoorka ay u badan yihiin waxaa banaanka ka ah kaliya waxaan isleeyahay bulshada rayidka iyo "lawyer"-rada oo iyaga laftigoodu bulshada rayidka ah laakiin inta kale waa isla garsoorkii waaye. Markaa gasoore si cadaalad u helaan shuruudihii buuxinaaya inuu madaxweynuhu u soo gudbiyo baarlamaanka sidaa saan is oran lahaa oo laga saaro khaanadan kale oo guddiga sare soo gudbiyo misna madaxweynuhu soo gudbiyo in laga saaro.

**Qodobka 135aad** maxkamadda dastuurka waan ka hadlay waxaan aaminsanahay maxkamadda sare inay isku beddesho maxkamadd dastuuriya oo aysan noqon maxkamadd kale oo inagu soo biirtay.

**Qodobka 136aad** waan ka hadlay maxkamadda horay ahayd magaca sidii looga beddeli lahaa ku dheeraan maayo.

**Qodobka 143aad** xilwaayida garsoorayaasha faqrada 5aad, garsooraha shaqada laga joojiyey wuxuu helayaa xuquuqda uu xaqa u leeyahay, faqrada 6 aad na waxay leedahay guddigu waa inuu sida ugu dhakhsaha badan oo ugu macquulsan go'aan uga gaadhaa, ma dhamaystirna sidaan aamisanahay "as soon as possible" maaha wakhti maaha, garsooraha ay guddiga sare ee garsoorku ku qanceen inuu khalad anshax galay waa in muddo loo qabtaa 60 maalmood, 90 maalmood 120 maalmood, 180 waxay rabto ha noqoto. Laakiin waa inay jirtaa wakhti cayiman oo guddiga sare ee garsoorku go'aan ka qaadanayo oo ama garsoorahaasi ku cadaynayo inuu falkaas galay oo xilka laga xayuubiyo ama garsoorahaas laga dhaqaa ceebta loo gaystay oo ah inuu danbi galay oo la yiraahdaa barii ayuu ka yahay.

Laakiin hadday noqoto wax iska furan la yiraahdo markay macquul tahay macnuhu waxay noqon kartaa saddex sano ka bacdi, waxay noqon kartaa lix sano ka bacdi, waxay noqon kartaa maalmo ka bacdi, wax aan caddayn waaye markaa inay caddahay oo wakhti lagu qoro oo wakhti la siiyo intuu raboba ha ahaadee 60 maalmood, 90 maalmood, 180 maalmood laakiin aan cadayno oo la yiraahdo wakhtigaas waa in loo qaataa.

Madaxa saddexaad xeer ilaalinta guud qodobka 153aad, xeer ilaalinta guud **qodobka 144aad dhismaha** xafiiska xeer ilaaliyaha guud, taas kaliya waan u soo qaatay in la cadeeyo oo aysan inagu dhicin sida tii hore, in xeer ilaaliyaha guud iyo garyaqaanka guud lagu wareero. Mararka qaarkoodna ay isku qabsadaan meelaha qaarkood anigaa ilayn la iila jeeday iyo anaa la iila jeedaa. "Solicitor general, attorney general"-ka inay kala cadahay oo halkan marka la qoro hay'addaha qaranka lagu cadeeyo "attorney general" inuu isaga yahay, xeerarka cadaynaya "solicitor general" kana lagu cadeeyo inuu yahay garyaqaanka guud ee dawlada. Haddii kale waxaa dhacaysa sida ayaantii hore oo hadeer dastuurka naan beddelayno dooda badan oo qaanuuniya ayaa ka dhalanayey oo aad la iskugu haystay waana inagu ceeb, maantaan gacanta ku haynaa in arrintaa aynu saxano.

**Qodobka 153aad** sanduuqa garsoorka, waa wax wanaagsan garsoorku inuu leeyahay maamulkiisa u madaxbanaan yahay oo ka madaxbanaan yahay laanta fulinta oo garsoorku uu kharashaadkiisa marka ay dhamaato oo loo ogolaado miisaaniyada guud ee qaranka ilayn halkaas uu bay ka imaanaysaa wuu u madaxbanaan yahay. Laakiin dhinaca kalena aan ka fiirino, laanta sharci dejinta iyo laanta fulinta hantida loo dhiibo tan guurtada iyo ma guurtadaba waxaa u xilsaaran in kormeer iyo baadhis iyo korjoogtayn iyo ilaalin ku hayaan hanti dhawrka guud ee qaranka.

Hadda ka horna waa ogaydeen tii ka dhacday is qabsigii hanti dhawrka qaranka iyo maxkamaddaha, waa inay cadaataa markaa haloo madax baneeyo maamulkooda, laakiin ugu yaraan in la sameeyaa oo maxkamadduhu sameeyaan habraac ama qaab cad oo la ogyahay oo lagu ilaalinayo hantida iyo miisaaniyada iyo maaliyada loo asteeyey maxkamaddaha in laftigoodu si daahfuran ku baxayso. Markaa haddii laga leexinayo hantidhawrka guud ee qaranka oo la leeyahay laanta fulinta waaye, laantii

fulintuna ma ilaalin karto garsoorkii oo waa tiirarkii dawladnimada tiir ka mida waa wax fiican waan aamisanahay, laakiin waa in la dhisaa habraac kale iyo qaab kale oo maxkamaddaha dhexdoodu ay soojeediyaan oo hantidooda lagu ilaalinayo hantida ummaddu leedahay ee meelahaas yaala.
Waxaa muhiim ah in la cadeeyo xeer hoosaadyo iyo habraacyo cadcad oo buuxinaya doorkii xafiiska hantidhawrka guud uu ku lahaa laanta fulinta iyo laanta xeer dejinta, waad mahadsantihiin.



**Xil. Nur Ahmed Dirie**

Bismilaahi raxmaani raxiim, guddoonka labada aqal, xildhibanada iyo sanatorada guddiga madaxabannaan ee dastuurka iyo guddiga kalo oo labada aqal, dhammaantiin marka hore asalaamu caleykum waraxmatulahi wabarikaatuh.

Mudanayaal iyo guddoomiye waxaad ogtihiin marka hore dalkan inay ka jirto abaar aad u ba'an oo ummadda soomaaliyeed ay la dhibaataysan tahay, labadan aqalna waa wakiiladii shacabka soomaaliyeed, markaa marka hore waxaan leenahay abaarta dadka allaah ah qaado oo roob khayr qaba allaah ha inoo keeno. Marka xiga waxaan leenahay dadka abaarhaas inay wax ka gali karaan isku haysta oo soomaaliyeed, haday dawlad tahay, haday ganacsade tahay, haddii qof kale oo qurba joog ay tahay, haddii ay yihiin dad kale oo macquula, waad la socotaan waxa ka socda soomaaliya qof walba mobile kiisuu ka arkaa arrintaas waxaan leeyahay ha loo soo isaago qurba joog, qaran joog, dawlad. Tan kale waxaan leeyahay xildhibaanada labada aqal markay waxan oo kale dhacaan talaabaa la qaadi jiray, xildhibaanada wax bay iska ururinjireen arrimahaas si ay ku wahajaan in walba ha lee kaatee arrintaana waa u soo jeedinayaa guddoonka labada aqal inay dhaqaajiyaan doorka horena inaan mar ka hadlaan umalaynayaa, markaa abaartaas aan u soo istaagno dhamaanteen, Intaas markaan ka sii socdo.

Mudanayaal iyo marwooyin marka hore waxaan ka shaqayneyno horta waa dastuurkii soomaliya oo aan rabno in uu meel fiican ku danbeeyo oo ummadda soomaaliyeed, maanta waxa taagan ma aha waxaan ka shaqaynaynaa ee ummadda soomaaliyeed masiirkeedii waaye, waxa aan hada ka hadleyno. Waxaan qabaa markaa waxyaabo badan oo hordhac ah marka hore in bal aan ka fikirno awal way ahayd laakiin hadda waan sii xoojineynaa.

Dastuurkaan marka hore in aan ka ilaalino sidii aan horey ba iskugu ogayn wax ka hor imaanaya diinta islaamka taas waa taas, waxaan kaloo rabaa dastuurka ereyada ku qoran oo ay kamid tahay dowlad goboleed, arintaas waxaan rabaa dhammaan meesha ay dowlad goboleed ku qorantahay dastuurka in laga saaro oo lagu qoro maamul goboleed. Sababtoo ah waxaan meesha ka saarney madaxweyne waxaan u bixiney hogaamiye ayaa u haboonaa markaa dowlad iyo madaxweyne way isla socdaan, hogaamiye iyo maamul goboleedna way isla socdaan taas in la sameeyaan qabaa. Dhammaan xildhibanada arintaas waan qabaa in ay badi qabaan si ay waxan mustaqbal u noqdaan maanta hebel ayaa joojo iyo hebel ayaa ka maqan ma aha labadaas in ay israacaan maamul goboleed iyo hogaamiye, madaxweyne iyo dawlad saas in aan wax udhigno ayaan qabaa marka hore taas waa hor dhacii.

Waxaan usoo galayaa qodobadii waxaan ku hilabayaa haddii Alle yiraahdo **qodobka 133aad,** kaas oo ka hadlaaya qaab dhismeedka maxkamaddaha dalka, maxkamaddihii waa la soo tiriyey maxkamad sare ayaa la yiri, dastuur baa la yiri, maxkamad kore baa la sheegay, ereygaas waa erey taagan sii wad ilaa raacfaan. Waxaa meesha ka maqan maxkamadda ciidamada maadaama siiqada ay tahay farqadda 1aad siiqadeeda waxaa waaye maxkamaddaha jamhuuriyada soomaaliya waxay ka koobanyihiin mar hadii la yiri maxkamada ciidanka kuma jirto meesha, markaa waxay ka koobayihiin maxkamaddaha la soo tiriyey tii ciidanka waa in lagu daraa oo farqadaas lagu siyaadiyo heerarkeeda kala duwan waa in lagu daro, sida ay ushaqeyneyso meel kale halagu qeexo haddii la rabo arintaas sidaas ayaan ka qabaa qofobkaas in la yeelo.

Guddiga aad inuu ii dhageysano waan umaleynayaa, Xuseen bey wararkagu dhaafeen ayaan dhoweyd, waxaan kaloo ku dari lahaa magaca kore iyo sare farqi weyn uma dhexeeye marka fasiraad la'aado, magacaasna in loo raadiyo macno fiican oo bal dadkii qaamuusyada aad uga fogaaday in ay baadi goobaan labadaas magac hab lagu kala saarana waan soojeedin lahaa oo sare iyo kore la kala qaado, halkaas saas ayaan udeynayaa.

**Qodobka 136aad** oo maxkamadda kore laftigeeda ka hadlaaya, waxaan leeyahahay qodobkaas waxa uu leeyahay, maamul goboleed kasta wuxuu yeelanayaa maxkamad kore xaruuntiisa waa caasimada awoodiis waa saas halagu daro ayaan leeyahay qeybta u hooseysa, sababtoo ah muranba hadhow si uusana u imaanin maxkamaddaas kore ama magac kale haloo helo maamul goboleedka ugu danbeyn waxay hoos tageysaa maxkamadda sare ee dalka.

Isla **qodobkaas 136aad(c)** waxay leedahay ku dhawaaqista natiijada kama dambaysta ah ee doorashooyinka golaha wakiilada, hogaamiyaha iyo ku xigeenka waxaa iska leh maxkamadda maamul goboleedka, arintaas sax ma aha farqadaa "c" meesha in laga saro waaye. Sidaad ogtihiin ba doorashooyinka meeshaan guddi baan ku ansixiney guddiga doorashooyinka qaranka iyo soohdimaha halkaan baan ku ansixiney, cid kale oo doorasho natiijadeeda ku dhawaaqi karto majirto. Wixii dacwad ku yimaado waa gaar laakiin doorashooyinka soomaaliya heerarkooda kala duwan waxaa iska leh, ku dhawaaqistooda iyo ka shaqeyntooda guddiga aan udooraney ee doorashooyinka, qodobkaasina meesha in laga saaro ayaan qabaa.

Sidoo kale **qodobka 140aad** oo magacaabista garsoorayaasha ku saabsan wax badan ugama noqonaayo qodobkaas, waxaan uga noqonayaa khibrada 10ka sano ah. Maadaama qodobo badan oo "pension" iyo hawlgab ka hadlaya ay jiraan, khibradaas 7 sano in laga dhigo ayaan soojeedinayaa waa farqada "A" meshaas 10 ka ah in 7 laga dhigo ayaan soojeedinayaa.

Sido kale **qodobka 141aad** oo dhaarta garsoorayaasha iyo ku saabsan, masuuliyiinta dalka dhammaantood waa isku mid dhaartu in ay hal nooc noqotaan soojeedinayaa, tii aanku dhaaraney anaga, tii madaxweynaha lagu dhaariyey, tii ra'iisul wasaaraha lagu dhaariyey, agaasimayaasha la dhaariyaa waad ogtihiin, markaa dhaarta hal nooc in ay noqoto oo qofka hadduu garsooryahay iyo hadduu agaasinyahay intaba dhaarta in ay isku mid noqoto baan soojeedinayaa taasna dhinaca dhaarta qodobka 141aad.

**Qodobka 142aad** oo ku saabsan mudada xilhaynta iyo da'da hawlgabka, saraakiisha garsoorka waxay hawlgab iskooda ugali karaan 65, waxayna toos uga dhamaaneysaa 70 jir. Arrintaas waxaan leeyahay dalkan wuxuu soo galey burbur fara badan oo waliba burburka ugu daran uu yahay kii maskaxda, waxaa loo baahanyahay dadkii hore in ay wali soo layliyaan dadka yaryar, markaa si dadkaasi muddo dhow meesha uga bixin oo waayo aragnimadoodii iyo aqoontoodii looga faa'iideysto. Meesha 65 jirta ahna 70 jir in ay noqoto meesha 70 jirka ahna 75 jir laga dhigo, si ay isku soo gaaraan dadkii hore iyo dadkii danbe khibradoodana looga faa'iideyto dadkii hore. Meeshan waxaa jira nin jaamacad dhiganaya oo haddaad tiraahdo Badhaadhe xagay ku taalaa aan garanayn baa laga helayaa dadka soomaaliga ah oo soomaaliya inuu ka shaqeeyo raba, markaa dadkii hore waa inay meesha ku sii nagaadaan si looga faa'iidaysto waa loo baahanyahay.

**Isla qodobkaas 142(2)** oo ayna sheegeysa guddomiyaasha maxkamadaha mida dastuurka, mida sare, mida maamul goboleedka da'adooda 75 baa layiri laakiin waxaan dhihi lahaa 80 halaga dhigo. Mudada xilhaynta oo 7 sano lagu sheegey maadaama qofka uu garsoora yahay la sameeyey sababo uu xilka ku weyn karo inaan muddo loo qabanin baan soojeedinayaa, qofkii waa garsoore mudda xilhayn ah in loo yeelin taas ayaan ku darayaa.

Qodobka iigu danbeeya waa qodobka 153aad oo sanduuqa ku saabsan farqadiisa 1aad waxa uu yeelanayaa garsoorka sanduuq, sanduuqaas waxaa maamulayaa la yiri xoghayaha guud, sidaad ogtihiinba maamulka dadka yaqaana sanduuq ama "account" ay hay'ad leedahay hal qof ma maamulo, lacagta laga bixinaayo "account" kaas waxaa lagu saaraa labo warqadood foojar iyo waaran baa lagu saaraa. Waaranka waxaa saxiixi kara qof laakiin foojarka iyo waraanka isku qof ma saxiixi karo waa labo qof in ay noqdaan, qofna waxa uu saxiixayaa waaranka qofna koojarka haddii kale dadka maamulka yaqaana way joogaan. Markaa meeshaas waxaa ka maqan in lagu biiriyo agaasin maamul in l helo oo ahayn xubin ka mida guddiga sare ee garsoorka iyo xoghaya inay isla saxiixaan bay noqonaysaa. Markaa mar walbo labo qof baa loo baahanyahay meeshaas xoghayaha ayaa maamulaya ayaa meesha ku qoran sida la ogyahayna isla xisaabtanka xagiisa marka la'aado labo qof waxa looga dhigey foojarka iyo waaranka qarash bixinta waa in labo qof meeshaas laga helo si hadhow loola xisaabtamo.

Waxaan xoojinayaa ereygii ahaa garsoorka iyo hanti dhowrka wax badan baa waxoogaa jiray waaranka hadda lacagta lagu qaadayana hanti dhowrkuu maraa kow, wuxuu marayaa wasaradda maaliyada, xisaabiyaha guud, hanti dhowrka intaasuu marayaa. Waa in lagula xisaabtamaa markaa maadaama hanti dhowrka uu maray arrintaas markaa waxoogaa waa la kala madaxbanaan yahay ma aha waa dhaqaale wixii arintaasna waa in lagu cadeeyo dastuurka. Aad iyo aad ayaad umahadsantihiin qodob oo waxaa jirey 154 aad oo ahaa kala fadhiga 3 bilood mar ayuu fadhiisanayaa guddiga garsoorka taas waxaan qabaa in lagu beddelo laga dhigo "**60 cisho**", maadaama garsoorka la yagleelaayo oo garsoorkii hore loo mariyo larabo in kala fadhigooda la soo gaabiyo 3 bilood 45 ama 65 cisho la keeno, aad iyo aad baad umahadsantihiin.



### Xil. Mohamed Abdukadir Mohamed

Runtii waan ku faraxsanahay in markale ay noo socoto dastuurka doodiisa si aan udadjino ama doodeyna aan ku saleyno wixii maslaxad dalkaan u'ah.

Waxaan rabaa dulucda doodeyda inaan u galo waxaan rajeenayaa dadka note-garenaya inay muhiimad gooni ay isiin doonaan si aan u arko waxa muhiimka ah oo aan ku dari karo "*comment*" ah aan ugu darsado.

Runtii cutubyada aan ka doodeyno doodeena maanta socoto waa cutubyo aad iyo aad muhiim u ah gaar ahaan garsoorka dalka, maanta wixii aan halkaan ku ansaxino oo aan note-gareeno ayaa noqon doono wax 30,40 iyo 100 sano ee soo socda dalkaan dastuurka u noqon doona ama heshiis bulsho u noqon doono.

Waa inaan indhaha aad u kala furnaa tilaabo waliba aan qaadeyno si taxadar leh aan uqaadno, doodeydu waxay daba socotaa xil. Bashiir Goobe,waxaan u arkaa Qodobka qaab dhismeedka maxkamadaha dalka, Qod 133aad ee qaab dhismeedka maxkamadaha dalka wuxuu tilmaamayaa maxkamadaha dalkaan ay yeelanayaan inta ay yihiin,Waxaa ku qoran maxkamadaha Jamhuuriyada Federeaalka Soomaaliyia waxay ka kooban yihiin: Maxkamadda sare dalka; Maxkamadda dastuurka; Maxkamadda kore ee dowlad goboleedyada iyo caasimadda jamhuuriyadda; Maxkamadda Racfaan iyo dowlad goboleedyada iyo Maxkamadda darajada koowaad ee dowlad goboleedyada iyo caasimadda jamhuuriyadda.

Halkaas Waxaa lagu xiray cutubka ah maxkamadaha dalka uu yeelanayo inta ay yihiin ayaa lagu qoray.

Fakhradda 2aad ee isla qod.133aad waxaa la leeyahay lama dhisi karo hay'ad garsoor ama maxkamad gaar ah haddii uusan ogoleyn golaha saree e garsoorka baahi jirta awgeed, micnaheedu waxay cadenaysaa qodobka koowaad in aysan maxkamadahaasi la tiriyey maxkamad aan aheyn dalka dastuurku uusan yeelaneyn.

Qodobka 139aad wuxuu dhigayaa in maxkamadda ciidamadu lagu nidaaminayo xeer gaar ah micnaha waxaan rabnay in lacadeeyo haddii garsoorka ciidamadu maxkamadda ciimadu dastuurka lagu xusayo maxaa diidayo qaab dhismeedka dalka iyo maxkamadaha dalku uu yeelanayo lagu cadeeyo maxaa diidayo haddiiba lagu sheegay.

Waxaan kaloo rabaa aragtidaas xildhibaano fara badan waxey qabaan ama aragti ahaan ay leeyihiin maxkamadda ciidamada duruuf ayaa keentay duruuftaas waa laga gudbi doonaa, sidaas darteed shaley majirin waa dood kale laakiin waxaan rabaa, amniga,kala dambeynta iyo waxyar oo Soomaaliya maanta ay haysato Waxaa sabab u'ah garsoorka ciidanka.

Aqalkaan baarlamaanka askartaas albaabka joogto waxyaabaha ay noogu leexanayaan, dambi hadey galaan waxay ogyihiin garsoor ay leeyihiin ciqaabna ay ku marayaan kaliya ma ahan ciidanka, maxkamaddan Waxaa loo sameeyey afarta ciidan iyo cid waliba oo hubeysan oo qaab ciidan udiyaarsan.

Maanta argagixisada ayey maxkamaddu wajahdaa beri markii argagixisada dalka laga nadiifiyo oo lagu guuleysto, waxaa imaan kara jabhado kale oo hubeysan oo qaabka noocaas oo kale u hubeysan, Soomaaliya ayaan joognaa geeska Africa ayaan joognaa marwaliba waa ma hurto in qolo jahwareersan oo jabhada ah iney soo baxaan.

Garsoorka kale oo madaniga ah kiis ka dhacay baadiyaha fog ee ceelbuur oo dambi lagu galay in ay baxaan ama dambiyadii lasoo qaaday inta lakeeno waa wax adag, laakiin garsoorka ciidamadu Waxaa usahlan inay baxaan isla goobtii ku soo xukmaan sharcigana ay kumariyaan, waana waxa lagu kala nafisay. Waxaan codsan lahaa gudiga dastuurka mas'uulka noogu ah arinta garsoorka ciidamada il gooni halagu fiiriyo halagu soodaro qaabdhismeedka maxkamadaha dalka ay yeelanayaan.

Saaxiibkey Burhaan ayaan lakaftamayaa xoogaa lawyer ayuu ahaa maxkamadaha madaniga ayuu u badnaa ishiisa garsoorka ciidamada uma jeedo, marka waxaan leeyahay saaxbkey Burhanow, waxaad aad ugu cabirtaa maxkamadda ciidamada muhiimadda ay leedahay waad fahamsan tahay waxaan idinka codsanayaa in lagu cadeeyo maxkamadda ciidamada qaab dhismeedka maxkamadaha dalka taas ayaan u'aragnaa muhiim.
Qofwaliba aan fahamsaneyn makamadda ciidamaduna maalin maalmaha kamid ah ayuu fahmi doonaa uusan waxba ka qaban doonin aad iyo aad ayaad umahadsantihiin.



**Xil. Abdikariim Abdow Heydar**

Awalan waxaan salaamayaa golaha baarlamaanka sharafta leh, guddoomiyaasha guddiga noo soo diyaariyey dastuurkan quruxda badan aan ka shaqeynayno iyo howl-wadeenada, media-yaha dhammaantiin waxaan idin salaamay, salaanta islaamka, salaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu.

Salaan kadib, ramadaan kariim baan idin leehay, cutubkii ugu dambeeyay ayaan kujirnaa insha'allah waajibaadkeenii waa noo gebogabo ilaahay ayaa mahadaas iska leh, si wanaagsan inoogu dhameeyey insha'allaah ilaahay ajar hanaga siiyo umadda Soomaaliyeed meelkastoo ay joogaan way nadaawanayaan.

Waxaan rabaa inaan ka hadalo cutubka 9aad **Qodobka 131(5**) oo ka hadlaysa go'aanka garsoorka waxa ay qabanayaan dhammaan dhinacyada ay khusayso ha noqoto hay'ad dowladeed ama shaqsi, hay'addaas waxay ku fiicnaan laheyd in layiraahdo markii inta aan ka aheyn xildhibaanada ama dadka xasaanada leh in lagu daro ayaa arintaas ku meersan tahay.

Macnaheed waxa waaye qodobkaan xildhibaanada, madaxweynayaasha, gudoomiyaasha way soo qabaneysaa isla qodobka ka hooseeya farqada 6aad waxay leedahay, xubin katirsan garsoorka laguma oogi karo dacwad, ciqaab ama madeni ah oo ka dhlatay fal la xariira gudashada xilkiisa.

Guddoomiyuhu waa qof shaqsi ah waana bani'aadam qalad waa kadhici karaa, wax buu qaldi karaa, musuq maasuq buu gali karaa "jareexa" ayuu sameyn karaa, waa qof bani'aadam ah. Waa in uu ogyahay haddii uu qaldo ama uu si cadaalad daro ah u qaado fal uu asaga gacanta ku haayo ama "case" uu gacanta ku haayo in ay isaga wax ku soo laabanayaan beri waa in uu ogyahay. Laakiin hadduu ogyahay inaan lala xisaabtami Karin macnaheed waxa uu rabo ayuu sameyn karaa waaye, taasna qodob labaad waaye. Waxaan ku darayaa laba faalo ayaan ku darayaa, faalada koowaad waxa waaye "quraan alif katoosin baqara kama tooso ayaa la yiri". Garsoorka maadaama waxa aan kahadleyno garsoorkii dalka uu yahay in loo sinaado ay tahay in ma aragtey cadaalad aan ka hadleyno waxa aan dhisaynaa dastuurkii dalka uu yahay, horta waxaan aad u jeclaan lahaa sida awoodda dalka loo qaybsado in garsoorka loo qaybsado oo 5 beelood loo qaybiyo.

Beesha layiraahdo beesha 5aad garsoorka waxba kuma haysato waxna uguma jiraan, marka ladhisaayo garsoorka, garasoorayaal badan ayaa beeshu leedahay in lagu qaybiyo 5 beelood oo si cadaalad ah loo qaybiyo, waxa laga hadlaayo cadaalad waaye Meesha kama muuqano iskagama jeedno inaan ka muuqano aad ayaan u daneynayaa, waa midda koowaad.

Midda labaad waxaan rabaa inan idin sheego arin adinka dhan aad ka wada dharagsantihiin oo jirta oo ah qof dhulkiisa 30-40 sano leh aa nin "document fake" intuu soo sameysto uu ku qabsanayaa. Waa la is jiid jiidayaa maxkamad ayaa la isla tagayaa racfaan ayaa la isla aadayaa, maxkamad sare ayaa la isla aadayaa waa la is wadayaa, hadhow markii dambe ninku xaguu ka baxayaa haddii wax ku waayo. Haddii kale lacag in lasiiyo Waxaa la leeyahay ku qabso ku qadi maysid ayaa loo baxshey waxoogaa looga fujinaa.

Waxaan rabaa markaa inaan idin sheego haddii qofkaas "vilification document" soo sameystay marka koowaad laqabto oo asaga la xiro oo inuu "valification" uu wato lagu xiro qof dambe kuma dhiiranaayo inuu qof dhulkiisa ku qabsado, ciladaha jira oo ugu weyn dalkeena kajira ayey kow ka tahay. Qofaa "document fake" soo sameysanaayo markuu wax waayana xaguu ka baxayaa, Waxaa la rabaa qofkaas in lagu xukumo markuu wax waayey uu cadaado qofkaas dhulkaas inuu laheyn, wax alla wixii "cost" galay qofka wixii iska lahaa ee dulmaha ahaa qarashkii in isaga la saaro oo ladhaho qarashkan bixi haddii kale xiro oo loo maxbuuso.

Sidaas daraadeed qof waliba wuxuu kacabsan lahaa inuu qof wixiis ku qabsado laakiin markii la argo qofkii "document" soo sameyto la iska deynaayo ama la baryaayo oo lacag lasiinayo hadhow waxay ka dhalaneysaa dhiiragelin in midkale wixiis ku qabsado arintaasna waa "comment" labaad oo aan dhiibanaayo waaye.

Mida saddexaad waxaa waaye, Qodobka 133aad oo xildhibaan Maxamed C/qaadir ka hadlaayey oo ahayd maxkamadda ciidamada qalabka sida, sidaad ogtihiin maxkamadda ciidamada qalabka sida qabiilo isdiray oo askar udilay qabiil ahaan intey baxday inay soo xukuntay waad ogtihiin, waxaad ogtihiin inay qabiilaadka isdirira ay dhex galaan ciidamada qalabka sida waad ogtihiin oo maxkamad lagu saaro.

Waxaad ogtihiin waxa alla wixii "jareexa" ciidamada qaarkood kadhici jiray ciidamada qalabka sida in lagu maxkamadeeyey oo lagu dilay waad ogtihiin. Ciidamada qalabka sida maxkamadooda, (E) meeshaan maxkamadaha ugu dambeyso waxaan jeclahay in (F) lagu soo daro ee farqada 1aad ciidamada qalabka sida maxkamadooda ayaan iyadana rabaa iinsha allaah sidaas ayaan jeclaan lahaa.

Waxaan raacinaa "comment" yar oo maalin dhawyto aan halkaan uga hadlaayey oo cutubyadii aan soo dhaafnay ahaa 30jirka xildhibaanka noqonayo waxaa iiga soo laabatay "*comment*" badan ayaa igu soo dhacay waxa aniga aan kahadlay waxay ahaayeen madaxweynaha, gudoomiyeha baarlamaanka iyo ra'iisal wasaaraha ayaan waxaan dhahay 40 sano hajiro. Dhalinyaro badan ayaa ila soo xariirtay waxaa la igu yiri inaan meesha soo galno ayaad naga hortaagan tahay miyaa, saas maahan xildhibaanimada waa loo ogol yahay, wasiirnimada waa loo ogolyahay, laakiin sedexdaas shaqsi maadaama darajo aad usareyso darajada dalka ugu sareysay ay tahay ayaa loogu maarmeyn inay 40 sano jiraan. Aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin.



**Xil. Abdiqani Ismail Said**

Shiri guddoonka iyo xilibaanada sharafta leh iyo bahda saxaafada dhammaan asalaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatu.

Haddii aan doodayda hore u galo qodobka 105aad qeybtiisa 3aad hanaanka danban xalinta khilaafaadka waa inuusan ka hor imaaneynin, markaa qeybta (b) dastuurka xuquuqaha iyo shareecada islaamka. Halkaa waxaan soojeedin lahaa in lagu daro mararka qaarkood waxaa dhacda inaanu shaygaasi ku cadeyn waxyaabahaasi oo dhan, laakiin laga heli karo curfiga ama waxa loo yaqaano "al-wujdaalu saliim". Markaa labadaa qodob waa muhiim in lagu daro garsoorka, qofka garsooraha markasta xaaladaasi way taagan tahay, waxyaalo yaryar oo waxaa jirta basiid ah oo markasta loo baahan yahay in loola noqdo qeybta curfiga iyo dhaqanka markaa sida wax looyaqaano.

Qaybta 2aad ee qodobka 131aad qaybta 6aad xubin ka tirsan garsoorka laguma oogi karo dacwad ciqaabeed madani ama ciqaabeed. Halkaasi waa halka ay mushkiladu ka taagan tahay, qofka garsoorka salaaxiyaad badan baa la siiyay, xoriyad badan baa la siiyay lakiin waa in qofka lala xisaabtamaa wuu ogyahay inay masuuliyadaa loo dhiibay ciqaabi ka hanbeyso. Markaa taasna waa in la adkeeyaa walibana la cadeeyaa qofku maaha shaadh, garsoore aan ahay aniga xasaanad baan heystaa la ila xisaabtami maayo in lagu daayo maaha, halkaasi qofka wuxuu ku gafay waa in ciqaab adag lagu muujiyaayoo lala xisaabtami karaa, haddii kale dadka xuquuqdooda in shaadh garsoor nimo lagu qaato maaha.

Qodobka kale ee 132aad habka dacwada qaadista maxkamaddaha qaybta 4aad, waxay leedahay go'aanka maxkamadda waa in la soo saaraa oo aan la daahin haddii aysan jirin sabab maan gal ah. Halkaasna haddaad u fiirsato garsoorkeena, dadka dacwadaha inta badan ku leh, marka qofka xaqiisa u soo dhammaado ee waxwalba loo dhammeystiro waxa mararka qaarkod la sameeyaa *file*-kii baa la iska xareysanayaa waa la haynayaa, qofka waala jactadinayaa ilaa intuu ka dhimanaayo ama uu duruufa kale imaaneyso waala heynayaa, taana waxaan oran lahaa qolada dastuurka waa in lagu qoraa inaanu mudo in qofka aanu garsooruhu haysan kareynin. Haddii kale sidaynu arkeyno qofka xuquuqdiisa dadka muwaadin way ku lumeysaa, waana waxyaalaha u badan ee dulmigu ka dhaco ama la taagan yahay.

Qodobka 133aad qaabdhismeedka maxkamadda dalka, halkan waxaa la taxay maxkamadda fara badan waxaas oo dhan qaadi kari meyno, sida imika inoo dhisantahay maxkamadduhu ha lagu daayo baanu anugu soojeedin lahaa. Maxkamadda dastuurigana hala hoosgeeyo maxkamada kale maadaama shaqada ay qabanaysaa ay yartahay si aanu garsoorka is barbaryaacin, sidaa hore halagu daayo.

Maxkamadda ciidankana hadda waa in lagu soo daraa meesha oo lagu qeexaa baarlamaanka ayaa qeexaaya ku qora maxkamadda ciidamada, laakiin waxay ku fiican tahay inay imika ku qornaato waajibaad keeda ma ba badna waxay qabaneyso maxkamada ciidanku waa askarta dhexdooda, khilaafaadkooda waxyaabaha ay sameeyaan. Marmarka qaarkooda waxyaabaha amniga qaranka taabanaaya hadday jiraana way ka shaqaysaa, maadaama ay kooban tahay waa inay ku qornaato meeshaa.

Qoboka kale halka ay ku qoran tahay cida fasiraysa qaanuunka dastuuriga ah ee shuruucda waxaa ku qoran waxaa fasiraya maxkamadda dastuuriga ah ama maxkamadda kale, waa in lagu daraa dadka fuqahaa'u qaanuunka ee sharciga yaqaana ee khubarada u ah qaanuunka iyo shareecada oo ka haboon kana awood sareeya kana "*quality*" sareeya. Maxay dadka garsoorka jooga inta badan mararka qaarkood weyna dhacdaa dad badan oo aqoonyahano ah jira oo sharciyaqaana oo dibada iska joogo oo marjacoo oo howl badan galiya, waqti badabna soo galiyay ama garsoorka mudda badan kasoo shaqeynaayay kuwaasna waa in lagu daraa oo lagu soo daro, haddii kale waxay noqoneysaa waxaa lumaaya aqoontii iyo khibradii loo baahnaa.

Adeega garsoorka waxaad moodaa un in lagu sookoobay maxkamada sare iyo laba qofaad kale, anuga halkaa waxaan oran lahaa oo kale hala kordhiyo hana lagu soo daro dad farabadanoo aan xukuumada ka tirsaneyn si markaa loo heli isku dheelitirka bulshada iyo xukuumadda.

Waxaan kusoo koobayaa hadalkayga, dawlad nimadu waa garsoor iyo cadaalad taasina waxay u baaahantahay in si dhab ah loola xisaabtamo dadka shaqada qabanaya iyo garsoorka iyo shuruucdiisa iyo wixiisa inaynu sifiican aynu ula xisaabtano loo eego. Inta badan waxaynu ka cabanaa maalgalinta iyo dowladnimada iyo waxyaabo badan waxyaabaha u badan ee sababta u ah waxa weeyaan dadku marka u horaysa waxay eegayaan garsoorkaagu sida uu yahay, haddaanu garsoorkeeda aanu awood badan laheyn wax badan oo inoo shaqeynaayo ma jirto dawladnimaduna waa garsoorka intaasaan kusoo koobayaa waad mahadsantihiin.



### Xil. Mohamed Adan Dahir

Ramadan Mubarak, guddoonka, xildhibaanada labada aqal, guddoonka labada aqal, saxaafada dhammaan iyo bahda dastuurka ka soo shaqeysay, guddiga dastuurka way mahadsanyihiin, shaqo fiican ayay soo qabteen oo aad iyo aad muhiim u ah. Maanta chapter-ka 9aad, koley dadkii ehelka u ahaa oo sharciyaqaanada dalka ahaa oo ugu muhiimsanaa way ka hadleen, haddii uu ahaan lahaa ra' iiysul-wasaare ku-xigeen hore iyo wasiir Xasan Xaaji iyo dhammaan iyo Xildhibaan Burhaan iyo dhammaan waa laga hadlay, aragti badan ayaa laga dhiibtay, si fiican ayaa loo soo diraayay, qaab qurux badan ayaa loo soo diyaariyay.

Sidaan wada ognahay garsoorka waa saddexda laan mid ka mida oo dawladnimada ah, waxaana ogtihiin waa laamaha fulinta iyo sharcidejinta iyo garsoorka, waxaad moodaa laanta garsoorka inaysan labada laamood ee kale aysan ku awood aheyn, ay ku xuquuq ahayn dhan walbana aysan kala sinayn oo aad iyo aad, aad moodaa inay tahay waax yar oo hoostagta wasaaradda cadaaladda ayaad moodaa. Mana ahayn in intaas ka badan oo madaxbanaani iyo xuquuqaad ka badan intaas ay hesho. Mushaharka waxaa in badan oo saaxiibaday oo inta ka hadashay waxay ku eedeeyeen in meesha ugu daran oo ka imaan kara "corruption" ka ay tahay garsoorka, wuxuu u imaanayaa waxay tahay qofka mushaar ku filan maba qaato, qofka marka mushaar ku filan uu qaato ayaa lagula xisaabtami karaa. Markaa waxaan dhihi lahaa in si gaar ah loo fiiriyo, xaruumaha ay deganyihiin ayaa daliil idiin ku ah, maxkamadda sare iyo maxkamadda gobolka Benaadir, maxkamad wadajir ah ayay ku leeyihiin dalka oo dhan, saddexdoodana waa saddex meelood oo duq ah oo aan dayactir fiican iyo xitaa aanan mandaq qurux badan lahaynin.

Waxaan ku talinayaa in ayaga wixii ay soo saaraan loo daayo si meelahooda iyo guryahooda ay si fiican ugu dhistaan, mushaaraadka ay qaataanna, mushaaraadka baarlamaanka iyo golaha wasiirada uu lamid noqdo si loola xisaabtamo, si corruption-ka uu u yaraado, waa meesha ugu khatarta badan Nabiga Scw wuxuu yiri:

نحن نحكم بالظاهر والله يتولى السرائر

Waa meel khatar teeda leh oo markastana qofka meesha uu xukunka u rido cadaalad daro laga tirsanaayo.
Haddaan galo qodobka 108aad, garsoorka federaalka waxaan ku talin lahaa inuu ku yeesho xaruumo maamul goboleedyada si qofka la doorto, hadduu doonayo maxkamaddan inuu tago oo federaalka iyo maxkamadda maamul goboleedyada midka uu rabo uu tegi karo oo xoriyad loo siiyo. Haddii kale aysan saas dhicin waxay noqoneysaa qofkii in la juujuubay oo si gaar ah uusan xaqiisa u helin, waayo maxkamaddaha maamul goboleedyada tababarka ay heleen maxkamaddaha federaalka ma aysan helin ama xitaa halo qiyaaso, dhaqaalaha badan iyo dilka ha galaan.
Midda kale waxay tahay maxkamaddaha oo halkan lagu tiriyay waxaa laga tagay maxkamadda ciidamada qalabkasida kuma jirto oo aan ognahay maxkamad aad iyo aad dalka muhiim ugu tahay, waa maxkamadda keliya oo qisaas fuliso. Aniga mar haddaan fiiriyay oo dhan ka fiiriyay, afartii chapter ee hore waxaa laga tagay saddex qodob oo waxaa ku jiray qodobka qisaasta, tii ayay daba soctaa, waa maxkamadda keliya ee dalka qisaas fuliso, waa maxkamadda ciidamada qalabkasida, ilaahay subxaanahu qaadirka wuxuu yiri:

وَلَكُمْ فِى ٱلْقِصَاصِ حَيَوٰةٌ يَـٰٓأُو۟لِى ٱلْأَلْبَـٰبِ

Qisaasta ayadaa fuliso, Maxkamadda Gobolka Benaadir iyo Maxkamadda Sare, dad ay ku xukumeen dil 2022-dii ayaa ilaa hadda u xiran oo aysan dilin, ayadana argagixisada ha ahaato, ciidamada ha ahaato, cid kasta ha ahaato, marka waxaad moodaa buuggaan ay walaalaheen noo keeneen in lagala diriraayo qisaas aan meeshaan laga maqli karin.

Saddex qodob oo ayaantii la celiyay ayaa jirtay, da'da, saddexdu ba diinta quseeyeen, xorriyada Diinta iyo qisaasta, haddana tii ayay daba soctaa meeshaan maxkamadda keliya oo qisaasta fuliso oo lagu diirsaday oo maanta askariga adigoo agtaagan aad dhihi karto xabbada soorid. Maanta qof waxyeeli karo qof kale ma leh, ma maanta ayaa inta askari iyo bajaaj la isku daayo, ma maanta ayaa askari iyo shacab inta la isku daayo oo maxkamaddaha madani ay qaadaan oo xabsiyada buuxdhaafiyaan ay meesha joogaan sax maahan. Anaga waxaan ku kala badbaadi karno oo nolosheena iyo caafimaad keena ay ku jirtaa qisaasta, maxkamadda qisaasta fulisana waa Maxkamadda Ciidamada, saaxiibaday waxaan leeyahay hadday ahaan lahayd labada heer oo ka soo shaqeeyay dastuurka far ayaa idinku godan, marka bal ka soo garbaxa. Idinkuma sii fogaanaayo laakiin waxay ahayd hadda in xoogaa jag la idin dhaho ayay ahayd oo dhanka shareecada Islaamka waxoogaa inaad ka leex-leexaneysiin oo meel dhexe inaad madaxa ka baxsaneysiin ayaad moodaa, marka taasna ma ila fiicno.

Qodobka 150aad ee ku saabsan golaha sare ee garsoorka, waxaa la yiri waxaa lagu soo daraa Maxkamadda Sare ee dawlad goboleedyada iyo xeer ilaalinta, aniga waxaan qabaa marka todobo ruux inay noqonayaan, Gobolka Benaadir iyo haddii lagu daro maamul Waqooyi Bari, todobo iyo todobo ayay noqonayaan, 14 ruux. Haddaa waxaa dhib lagu qabaa madaxweynayaasha maamul goboleedyada shirarka iyo wasiirada maamul goboleedyada oo maalin kasta dhahaayo, Wasiirka Diinta iyo Awqaafta ayaan cilaaqaadka u jarnay, Wasiirka Xanaanada Xoolaha ayaan cilaaqaadka u jarnay, Wasiirka arimaha gudaha ayaan cilaaqaadka u jarnay, marka haddii la yiraahdo 14 ruux oo keenis tooda lacag tahay, dejin tooda lacag tahay, qaar dhahaayo anaga waan qaadacnay, aniga ilama guddoono in lagu daro oo 14 taas ruux aan qabaa, in lagu soo daro dhib lee keenayaan maahanee wanaag ma keenayaan. Anaga dhan ayaa gobolo kawada nimid, qofka la keenaayo maahan qof cirka ka soo dhacay ama qof ajnebi ah oo naloo keenaayo maahan, tusaale ahaan haddii aniga golaha garsoorka la igu daro, aniga nin reer Hiiraan ayaa ahay, Hiiraan ayaa ka yimiday waa la iyaqaana, markaa sidaas 4.5 ayaan wadanka ku wada joognaa. Markaa ani waxaan qabaa taas ayaa matalaadooda ku filan tahay.

Marka la eego qodobka 135aad ee cusub ee ku saabsan Maxkamadda Dastuuriga ah, waxaan qabaa Maxkamadda Dastuuriga iyo ciidamada qalabkasida, waxaan qabaa aduunyada waxaa ka jiro Maxkamadda Dastuuriga waa in ciidamada qalabkasida iyada la hoos geeyaa, ileyn Askariga wuxuu ku dhaartaa sharciga maahine madaxweynaha kuma dhaarto, yaanan madaxweynaha la hoos geenin. Waxaa laga yaabaa madaxweynaha markaas joogo inuu mucaarad kiisa u adeegsado ama uu inqilaab u adeegsado, markaa aniga waxaan qabaa maxkamadda dastuuriga ah in la hoos geeyo, hadhow kale madaxweynaha ayaa dambi galay, yaa soo xiraayo? Madaxweynaha waxaa soo xiraayo Maxkamadda Dastuuriga ayaa soo xireyso, marka waxaan qabaa in la kala madaxbaneeyo.

Qodobka 144aad, waxaan qabaa sida police-ka iyo military-ga ay ugu leeyihiin xarumo maamul goboleedyada, waxaan qabaa xeer ilaalintana inay maamul goboleedyada xarumo ku yeelato, si xeer ilaalinta guud iskugu xiran tahay, qofaa inta ka fakaday Xamar ka fakaday, hadduu Gubedleey dhaafo, Hiirshabeele ayuu galay, hadduu Siinkadheer gaadhana Southwest ayuu galay. Markaa waxaa qabaa xeer ilaalinta inay noqoto sida police-ka guud oo xeer ilaalin guud oo hal xabo ah laga dhigo ayaan qabaa oo intaas lagu soo koobo. Marka qodobada way badanyihiin, saaxiibo badan ayaa shalay ilaa iyo hadda ka hadlaayay. Ayaan dhaweed sharci aad u wanaagsan ayaa naloo keenay oo ah sharci ciqaabta Soomaaliyeed ah oo aad iyo aad qisaasta iyo waxkasta oo saaxiibaday ka gambadeen oo waafinaayo oo si fiican isaga ku cad yahay. Waxaan jeclaa inta aan hadda baarlamaanka xirmin, sharcigaas in la dhameeyo waayo dalka iyo dadka sharci dhaxal ah aan uga tagi karno waaye, waa sharci aad iyo aad loo diyaariyay oo aad iyo aad u fiican waaye. Markaa waxaan leeyahay saaxiibaday afartii, saddexdii oo laga soo tagay oo maalin hore uu reysul-wasaare ku-xigeen Mahdi Guuleed uu ka hadlaayay in lagu soodaro midka da'da, xoriyada diinta iyo qisaasta.

Qisaasta iyada waaba la diidan yahay, Ilaahay si kale haku badbaadiyo, aniga meeshaan uma arko in qisaas laga oggolyahay oo hadda dadkan waxay soo qoreen mana ogola, marka saaxiibaday waxaan rabaa inay isbariyeelaan, waa mahadsantihiin.



**Xil. Abdi Ibrahim Warsame**

Mahadsanid Guddomiye, guddoonka iyo xubnaha labada Aqal waa idin salaamaya, Asalaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatuhu.

Runtii dooda ku saab saneyd cutubka 9aad ee dastuurka oo ka hadlaaya garsoorka, waxaan la qabaa in badanoo ka mid ah saaxibadeydii iiga horeeyay ilaa iyo shalay dooda ka waday, waxaan rabaa inaan si gaar ah ugu hal qab sado doodii inaan ku raaco ra'iisul wasaarihii hore garyaqaan xildhibaan Mahdi Guuleed, in badanoo ka mid ah inaa ku sikingareeyo ayaan rabaa oo halkaan isku taagay,  kaliya waxaan u kaceynaa inaan xoojiyo laba arimood.

Mid waxa weeyaan qodobka 135 oo ku saabsan maxkamadda dastuuri ga ah, maxkamadda waxaan soo jeedinayaa oo aan aad u cuslaynayaa in lagu daro maxkamadda sare oo hal maxkamad la iskaga dhigo, waana sida hadda wadamada badan oo aanu dariska nahay oo "member" ka nahay "East Africa Community" maxkamadooda ay u dhisan tahay, markaa awoodii maxkamadda dastuuriga un baa loo rarayaa oo lagu xoojinayaa tan kale, markaa labadaa maxkamaddood inaa hal maxkamad la iskaga dhigo ayaan xoojinayaa.

Arinta labaad ee aan rabo inaa sigaar ah uga hadlo oo aan xoojinaya waxa weeyi qodobada 131(4) iyo qodobada 153aad, labadaba waxay ka hadlayaan miisaaniyadda garsoorka, garsoorka waa hay'adda inoogu muhiimsan, waa hay'adda ay mudantahay in la dhiirigaliyo xagga dhaqaalaha si ay cadaaladda u sugaan weeyi ee runtii si weyn loo tix galiyo. Laakin waxaa rabaa inaa halkaan ka sheego qodobka 153 oo ka hadlaya sanduuqa iyo habka ay miisaaniyada ay u dalbanayaan nidaam kaasii nidaam ma aha hadda inoo shaqeynaya, madaxbanaanin bay leeyihiin. Madaxbanaanida ay lee yihiin waxa weeyi

miisaaniyada loo qoondeeyo, inay si madaxbanaan u helaan "account to account" ku helaan madaxbanaani wataa, laakiin hay'ad gaar intay miisaaniyad u sameysato Baarlamaanki keenaysa oo Baarlamaanku ka doodaya ka dibna ansaxinaya waa nidaam qilaafsan hanaan keena maaliyadda.

Markaa waxaan oron lahaa qodobka 131 farqada 4 aad iyo qodobka 133 aad dhamaantood waa in loo wareejiyaa oo lagu soo koobo garsoorku inuu leeyahay madaxbanaani miisaaniyadeed oo macnaheedu yahay in marka miisaaniyada lasoo sameeyo qaranka oo ay qeyb ka yihiin waliba lagu soo tixgaliyay ay golayaashu ansixiyaan dabadeedna si gaar loo maamulo "account"-nadooda oo iyaga toos looga wareejiyo. Laakin haddii baarlamaanka gaar u doono miisaaniyad madaxbanaan oo isagu golaha keesanayo, "resource"-kaa aan haysano haddii la eego Soomaaliya oo dhan "budget"-keedu baahida maxkamaddaha ku ma filna, markaa cid waliba fikrad bay iskala imanaysaa taasi wax aan laga shaqeyn karin bay noqoneysaa. Markaa guddiga waxaan u soojeedinayaa in qodobka ku saabsan miisaaniyadda garsoorka ee lagu koobo in badaxbanaani miisaaniyadeed loo sameeyo oo macnaheedu yahay inay wixii loo qoondeeyo si toos ah u helaan, dhinaca kalana "budget"-ka qaranka kala mid noqdaan. Aad iyo aad baa u mahadsantihiin.



**Xil. Abdiqafar Elmi Hange**

Maalin wanaagsan salaamu caylakum waraxmatulaahi wabarakaatu, marka hore waxaan rabaa inaan bogaadiyo oo aan aniguna u mahadceliyo guddiyadan dastuurka soo diyaariyey maalmahana aan ka shaqaynayno, wakhtiga iyo juhdiga ay galiyeen. Runtii in la qoro dastuur dhan oo la leeyahay oo haddana xasaasi ah oo 20 sano ku dhawaad soo taagnaa in la "concise"-gareeyo aragtiyada kala duwan aad iyo aad ayey u dhib badantahay markaa waxaan leehay waan bogaadinayaa shaqada aad qabateen.

Intaas ka dib dooda maanta chapter ka 9aad oo saaxiibaday xildhibaanada maalmahan, shalay iyo maantaba sifiican looga dooday aaday u qurux badan tahay. Mida koowaad waraan rabaa inaan sheego dhawr qodob oo uu ka mid yahay nidaamka ay hadda soojeediyeen oo ah nidaamka "integrated" ka ah ee garsoorka oo runtii aan isleeyahay waa nidaam ku haboon nidaam federaal oo la yiri dalka hala galiyo. Maadaama "option" ka kaliya ee soo haray sidii halkan laga sharaxay uu yahay in la aasaaso maxkamaddo is dhinac socda oo nidaamka loo yaqaaney "dual judiciary system" kaas oo ciladihiisu ay badan yihiin, kharash ahaan dawlada soomaaliya aanay ka bixi karin, shaqo ahaana ay inaanayso in aad la isku qabqabsado.

Dabcan kan laftigiisa cilada ugu weyn oo ka dhex arkaa waxay tahay in ay tahay dhanka kala xadaynta awooddaha ay kala yeelanayaan maxkamaddaha maamul goboleed ka ama dawladaha xubinta ka ah dawlada federaalka iyo awooddaha kaleeto oo marka kale ay qabanayaan. Markaa sidee maxkamad isku mida shaqooyin kala duwan haddan isku mida loo kala xadaynayaa, "very technical" weeye oo marwalba khilaaf halkaa waa ka imaandoonaa.

Laakiin waxaa jirta dood aduunka kaba jirta oo ah adigoo waddan dunida saddexaad ku yaala ah oo dhaqaalahaagu uu tabar daran yahay oo haddana burbur ka soo kabanaya, kharashka "government size" sidee ahaanayaa. Haddaa dawlad balaadhan oo baahsan dhisto oo yacnii "institutions" ka dawladu ay bataan oo tirada shaqaaluhu ay bataan oo xafiisyadu bataan waxay dabcan la badanayaan "cost-tiga" dawladay badinayaan. Waxaana meeshaas markaa "efficiency iyo effectiveness" kii wixii lagu fadhiisinayey oo dhana meesha ayey ka baxayaan markaasi sidaasi darteed waa taageersanahay waan ayidsanahay nidaamka ay soojeediyeen wal issue-gaas lahaan doon oo dhankaa kala xadaynta awooddaha iyo khilaafkaas, laakin haddana waxa ugu haboon oo la heli karo oo nidaamkeena suurta galka ku ah weeye.

Arrinta sanduuq maaliyadeed xildhibaan Cabdi Qawdhan baa halkan hadda ka sheegay ani waxaan arkaa madaxbanaani baa lagu macneeyey garsoorku u baahanyahay, madaxbanaani iyo sanduuqa maaliyadeedna laba arrimood oo kala duwan weeyi. Madaxbanaanida garsoorku u baahanyahay waa mida haddaba uu ku madaxbanaan yahay waa sida loogu magacaabayo, sida xilka looga qaadayo, sida uu shaqada u gudanayo, habraacyada uu marayo, inuu siyaasad ka madaxbanaan yahay taas weeyi. Laakiin haddii la yiraahdo madaxbanaani maaliyadeed buu u baahanyahay oo macnaheedu yahay sanduuq gaara loo samaynayaa, waxa weeyaan waxa la dhaawacayaa nidaamkeenii maaliyadeed ee dalka u yaalay, siday u dhacaysana waxa weeyi dalkasta waxa uu leeyahay "single treasury account" khasnad midaysan oo qoran oo wax lagu ururiyo. Khasnadaas midaysan oo wax lagu ururiyana macnaheedu maaha inay hay'add gaara ah leedahay waxa weeyi "budget" ka uu baarlaanku ansixiyo oo uu jideeyo ayaa markaa madaxbanaanida siinaya.

Madaxbanaani waxaa ah in miisaaniyada ay hay'addaasi leedahay oo hay'addaha dawladeed ee baarlamaanku oo kale jideeyo ay helaan oo iyagu ay maamushaan. Laakiin macnaheedu maahan baarlamaankay u soo gudbisanayaan intay soo "pass"-gareeyaan nidaamkii kale oo jiray oo dhan, iyadoo wasaaradii maaliyada la waydiin, iyadoon la fiirinin "availability" iyo inay suurtagal tahay iyo in kale, waa la "pass"-garaynayaa kaliya waxay burburinaysa 15 kii sano ee la soo dhaafay dib u habayntii maaliyadeed ee aduunku inagala shaqeeyey ee aynu gaarnay ee "single treasury account" ahaa.

Waxaan ku khasbaynaa hay'addaha "donors"-ka iyo deeq bixiyayaasha in ay isticmaalaan "country system" ka oo lacagahan mashaariicda la fuliyo oo hay'adduhu ay fuliyaan ama wasaaraddo ama meela kale ay dhexmariyaan in "single treasury account" ka la soo mariyo. Anaga markaa ma bilaabi karno nidaamkeena inaan "fragmentation" ku samayno, waxay keenaysaa wax la yiraahdo "fragmental financial management". Waxa kale oo ay abuuraysaa "system"-yo is dhinac socda oo "budget"-yo ah oo aan hal meel laga maamulin uu yimaado, sidaa darteed waxaan soojeedinayaa garsoorka miisaaniyadoodu waxay maraysaa inay sidoodii hore ahaato sida hay'addaha kale ee dawlada oo maalinta uu baarlamaanku ansixiyo madaxooda ee lacagta loo ansixiyo sidaasay ba ku madaxbanaan tahay. Wasaaradda maaliyadu waxay u maamushaa hay'addahaas helitaanka ayey ku "base"-garaysaa sidaasay u bixisaa, laakiin hay'ad hebla qoondada baarlamaanku u sameeyey cidna wax kama beddeli karto baarlamaanka ayaa wax ka beddeli kara.

Mida kale waxaa weeyi dawladeena haynteeda anaga waxaa la yiri waa loogu shubayaa dakhliga dawlada soomaaliya ay ururiso horta bishaa la soo ururiyaa intaa bishaa la bixiyaa, dawlad isku filan oo dhaqaale haysata oo halkaa bishaa loogu sii shubaa ama labadaa bilood ha loo shubo ama saddexdaa bilood ha loo shubo baa waxaa samayn karta. Sideedaba dawlad soomaaliyeed intay jirtay waligeed ma'aanaan gaadhin isku filaansho miisaaniyadeed, inta soomaaliyeed oo dastuurka ka doodayo waxaan rabaa marwalba inaan maskaxda ku hayno dalka aan dastuurka u dejinayno oo go'aamada u qaadanayno xaaladiisa dhaqaale, xaaladiisa siyaasadeed, xaaladiisa taariikheed mida wax soosaar mida kasta inaan ku "base"-garayno.

Maalin dalka soomaaliya uu nidaam maaliyaydeed oo isku filan uu gaadhay ma jirin haddana iskaba daa ma ba joognaba, waxaan markaa leeyahay waxaa imaandoonta haddii aan aqbalo sanduuqa nuucana oo dastuurka sidaas loo galinayo dabcan labadaa aqal oo baarlamaanka ayaa dhihidoona miisaaniyadayada hana loo madaxbaneeyo oo anagana saduuq gaar ah ha naloo shubo. Baarlamaanku waa hay'addo kale oo dawladeedo oo dhinac u taagan oo golaha fulinta waa ka madaxbanaan yihiin. Waxa imaan doonta in hantidhawraha guud yiraahdo, okey hantidhawrihii guud aan ahay baadhisbaan shuqulku leeyahay anigana miisaaniyadayda ha la ii madaxbaneeyo oo maaliyad madaxbanaan iyo sanduuq gaara ha la iigu shubo. Waxaan adkaynayaa ku soo celinayaa in dalku leeyahay "single treasury account" oo uu leeyahay nidaam maaliyadeed oo uu leeyaahy hanaan "budget" labada aqal oo baarlamaanku ansixiyaan oo sidaa lagu fuliyo micnaheedu maaha inaan hay'addaha dawladu madaxbanaabayn. Hay'addaha dawladu oo shaqooyinkooda markay qabanayaan garsoorka iyo hantidhawraha iyo baarlamaanka iyo hay'adkasta

oo kale way madaxbanaan tahay kaliya nidaamka maaliyadeed oo dalka u degsan ayaa sidaas ah oo adkaynayaa in qodobkaa meesha laga saaro, hadduu ilaahy idmo.

Waxaan kaloo ugu danbayn soojeedinayaa oo xildhibaano iga horeeyaa ay sheegeen isla iyadoo laga doodayo haynta maxkamadaha, maxkamada sare iyo maxkamada dastuuriga ah in la mideeyo waa midii hadda aan ka hadlayey "government size" ayey ku soo noqonayasaa "instututions" kaaga baaxadoodu intay leegyihiin. Adiga dawlad ahaana dhaqaalaha aad bixinayso inteey leegyihiin waa inaa isku jaangoynaa dal yar baan nahay, dal faqriyaan nahay, federaalkaaba nagu cuslaa, waxaan rabnaa faderaalka inaan u qaadano sida noogu suurta galsan oo noogu shaqaynayo wax "rocket science" oo meel gaar ah ku qoran. Wixii inoo shaqaynaya aan u qaadano waxa jirta, wax ay yiraahdaan ma jirto hal *"there is no one size fits all"* nidaam kasta oo wadan kale u shaqeeya siduu u shaqeeyo "literally" inuusan inoogu shaqaynin si uu dhaqankeena iyo maaliyadeena iyo dhaqaalaheena iyo diinteena uu markaa ugu shaqayn karo oo caqligeena aanu ku soo darno sidaas ayuu wadankaa uga jiraa kaliya yaanu ku fadhiisinin ayaan qabaa.

Markaa waa takiidinayaa waa taageersanahay in la mideeyo maxkamaddahaas oo markii ay wax dastuuriya ay qaadayaana yacnii arrin dastuuriya qaadayaana oo dastuur iyo "constitution" khusaysana ay sidaa u qaadaan. Markii arrin maxkamad sare oo rafcaana oo shaqooyinkii caadiga ah ku timidna ay sidaa u qaadaan, laakiin midaytooda iyo kharashkooda iyo garsoorayaasha iyo shaqada la qabanayo oo dhan ay sidaas inoogu midaysan tahay. Aad iyo aad ayaa umahadsantihiin, salaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaatu.



### Xil. Dr. Suleiman Ali Hussien

Bismilaahi raxmaani raxiim, guddoonka golaha labada gole, xildhibanada sharafta leh, bahda warbaahinta iyo guddiga dastuurkaba waan idin salaamaya slaamu caleykum waracmatulahi wabarakatuhu.

Waxaan rabaa inaan dhawr kalmadood marka hore saaxiibaday xildhibanada iga horeeyey aan la wadaago, waddanku maadaama uu xaalado abaareed ku jiro oo duruufta waddanka wakhti rabadaan ahna waliba lagu jiro, dadka soomaliyeed dal iyo dibadba meel ay joogaanba in ay iscaawiyaan oo qoomiyada soomaaliyeed maanta marka la eego inta jamhuuriyadda dexdeeda iyo kuwa dariska ku noolba abaartu aad iyo aad ay u saamaysay. Markaa wakhtigaa waxaan uga faa'iidaysanayey inaan xoojiyo in wakhtigii la iscaawin lahaa baa la taagan yahay waliba bishii rabadaan ee aad iyo aad dadka loo garab istaago haday raashin iyo biyo ba tahay intaa markaan kaga baxo.

Waxaan rabaa in maadaama aan ka hadlayney dastuurkii qodobadii maalmihii hore ay ahaayeen qodobo inta badan quseeya golaha shacabka iyo shuruudaha madaxweynaha iyo maanta cutubka aan ka hadleyno cutubka 9aad oo ah marka dowladnimada laga hadlayo seddaxda xeer ee ay kala yihiin oo ah

1. Tii xukuumada oo sideeda u madaxbanaan
2. Golayasha aan ka tirsanahay oo iyaguna ah golayaal ayagana madaxbannaan
3. Bahda cadaalada iyo garsoorkana ay yihiin bah sideeda u madaxbannaan.

Marka dowladnimada laga hadlayo seddaxdaas xeer waxaa la yirahdaa ayaa is "balance" gareeya waliba cadaalada iyo garsoorku way kasii adagyihiin. Marka federaalka laga hadlayana waxyaabaha inta uga fara badan leh markasta dowlad goboleedka iyo nidaamka federaalka la qaatey laga wada hadlaa waxaa waaye in sidii loo federaaleyn lahaa bahda garsoorka, maaliyada, ciidamada oo qodobada uga muhiimsan ay yihiin. Marka cutubkaan waa cutub aad iyo aad umuhiim ah waaye guud ahaan dadka soomaaliyeed oo dhan, marka kala madax bannaanta hay'addaha ee waxaa waaye qeyb ka mid ah bahda garsoorka.

Waxaan la wadaagaya ana kalmadeyda aan ku xoojin lahaa, marka aan ka hadleyno qodobka 133aaad qaabshismeedka maxkamaddaha dalka lagagala hadlayo, waxaa la xusey maxkamaddaha jamhuuriyada federaalka soomaaliya waxa ay ka koobanyihiin, maxkamadda sare ee federaalka, maxkamadda dastuuriga ah, maxkamaddaha kore ee dowlad goboleedyada iyo caasimada jamhuuriyada, maxkamaddaha racfaankaha dowlad goboleedyada iyo maxkamadaha darajada 1aad ee dowlad goboleedyada iyo caasimada jamhuuriyada, markaa way badanyihiin marka waa qodobkaa 1aad halkaa labada maxkamadood ee ta dastuuriga ah lagu soo darey.

Maxkamada sare badankeeda shaqadeeda waxaa waaye qabashada waxyaabaha dacwadaha federaaliga ah markaa iyada uun baa ku filan marka runta laga helo, markaa in halkaa mid laga wada dhigo ayaan rabay oo aan ku dari lahaa. Arrinta maxkamadda ciidamada qalabka sida runtii shaqo wanaagsan bay qabataa, haddana mar kastaba waa lagamamaarmaan in maadama dowlad goboleedyo uu yahay dalku in lala ogaado kiisaskooda ka dhax socda iyo wixii bahda cadaalada ah, marka awoodoodu in ay xadidnaato oo xukunkoodana uu xadidnaado ayaan ku dari lahaa.

Waxaan kale oo aan soojeedin lahaa in ay kala cadaadaan shaqooyinka xeer ilaalinta iyo garyaqaanka guud ee dowlada oo mid walba shaqadiisa u madax bannaanyahay baadhitaanada dacwadaha, galalka dacwadaha iyo soo oogitaankooda midna waxaa weeyi baadhitaankii hantida iyo daba galkooda, markaa in labadaas aad loo sii kala cadeeyana waan xoojin lahaa, intaas ayaan kusoo koobayaa, salaamu caykum.



**Xil. Aweis Moalim Hussien**

Dhamaan guddigaan kasoo shaqeeyay barnaamijkaan dib-u-eegista dastuurka oo aniga laftaydu xubin ayaan ka ahaa markii la aasaasayay Guddiga Lasoccodka iyo Guddiga Madaxabannaan labadaba oo Burhaan uu la socdaa. Runtii dastuurkaan wax badan ama juhdi badan ayaa la geliyay, waqti badana uu qaatay, hawlo badana waa lasoo geliyay, dhaqaale badana waa ku baxday, marka maanta waxa Illaahay mahadiis ah iyadoon dibbed la aadin, iyadoon waqti meelo kale lagu bixin, iyadoon loo baahan juhdi kale ama *Facilitators*-ajanebi ah aysan na taageerin in inagu aan awood yeelanay oo dastuurkii inagu aan qabyatirno ama dastuurkii dib-u-eegistiisa lagu sameeyo.

Aad iyo aad ayaan uugu faraxsanahay dadkii kasoo shaqeeyay, wixii mulaaxadaat ah ama siiqo ahna waxa ku filan xildhibaanada oo iyaguna doorkooda qaatay, cutubka ugu dambeeyaa oo ah cutubka 9aad intii hada dooda dib-u-eegista jadwal ahaan baarlamaanka ugu qornaa. Cutubka 9aad wuxuu ka sheekaynayaa Garsoorka Dalka oo ah runtii laanta sadexaad ee dawladnimada marka waa muhiim, ummada sideedana waxa deeqdaba waa cadaalad, garsoorkana waa inay sal u tahay cadaaladdu.

Rutii Garsoorka, maxkamadaha qaybaha ay ka koobantahay oo kale: Maxkamada Derajada Koowaad, Maxkamada Derajada Labaad iyo Maxkamdda Derajada Sadexaad waxa kale oo jira sida laga dhawaajiyay Maxkamadda Ciidamadda Qalabka Sida, Maxkamada Ciidanku runtii waxay waqtigan hada aan ku jirno waxay qaadatay doorka ugu waynaa sababtoo ah wadanka arrimo xaasaasi ah ayuu ku jirey, xaalad burbur ayuu wadanku galay, sharcigii inoo deganaa iyadoo aan lagu dhaqmayn oo ay dhalatay niman hubeysan oo ay *Armed People*-dadkii dhami ay noqdeen. Marka Maxkamadda ciidamadu runtii amaan ayay mudantahay, heerka maanta iyo deganaanshaha iyo xasiloonida wadanka ayay qayb ka tahay in waliba lasii hormariyo waaye, waligeedna waa jirtey laakiin sida hada bulshada ay caan uugu tahay ugumay

ahayn caan oo ciidamada ayay ku koobnayd laakiin hadeer sida la sheegayo awoodo badan oo hubeysan markii ay soo baxeen doorka ugu muhiimsasn ee wadanka maanta iyada ayaa qaadatay wayna ku mahadsanyihiin.

Maxkamadaha kale oo madaniga ah inta badan wadankeena sida kale way u dhamaystiranyihiin, maxkamadaha derajada 1aad, 2aad iyo 3aad waxa keliya ka dhiman waxa waaye inay noqdaan kuwo dastuuri ah oo hadii ay hay'adaha dawladu is qabsadaan gaar ahaan xiliga doorashooyinka oo kale waxa loo baahanyahay in maxkamad kala saari karto go'aana ka gaari karto la helo marka hadii aan soo koobo khulaasadeyda cutubkan 9aad waa muhiim waana rukniga 3aad ee dawladnimadda marka in maxkamada dastuuriga ah la abuuro iyadoo markaas habraacyo iyo nidaamyo iyo shuruudo koleyba lagu dooran doono nimanka madaxda u noqonaya garsoorayaasha waa muhiim ayaan isleeyahay. Maxkamadda keliya oo wadanka ka dhiman waa Maxkamada Dastuuriga ah, aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.

# CUTUBKA 10AAD

## SHAQAALAHA RAYIDKA EE DAWLADDA

# CUTUBKA 11AAD

## NIDAAMKA MAALIYADDA GUUD



**Kulanka 22aad (Febraayo 25, 2026)**

| | |
|---|---|
| **Baarlamaanka:** | 11aad |
| **Kalfadhiga :** | 7aad |
| **Kulankiisa:** | 22aad ee labad Aqal |
| **Goobta:** | Golaha Shacabka |
| **Furmay:** | 12:06 a.m |
| **Xirmay:** | 3:15 p.m |
| **Shir-guddoomiye:** | Xil. Sh. Adan Mohamed Nur "Madoobe"<br>Guddoomiyaha Golaha Shacabka |

**Ajendaha:**

(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka
(2) Ansixinta Ajendaha
(3) Dib u -eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad: Ka doodista Soo-jeedimaha wax-ka bedelka Dastuurka. (Cutubka 10aad: Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda iyo Cutubka 11aad: Nidaamka Maaliyada Guud)






**Sen. Saed Abdi Hussien**
Xoghayaha Guddiga Lasocodka Dastuurka

Madanayaasha sharafta leh waxaa maanta idin horyaala afar cutub oo ka mid ah cutubadii dib-u-eegista dastuurka lagu soo sameeyey waa afartii cutub ee ugu danbaysay, kuwii hore waxay ku eekaayeen cutubka 9 aad oo ahaa garsoorka oo "week"-kan horaantiisii inaga dhamaaday. Sidaad wada ogtihiin dastuurka aan dib-u-eegista ku samaynaynay ama dastuurkeenii 2012 waxa uu ka koobnaa 15 cutub dhamaanba 15 ka cutuba dib-u-eegis baa lagu wada sameeyey. Markaa farsama ahaan waxaan rabaa inaan kor maro, maadaama aan 9 cutub ka soo shaqaynay hadda kuwa ina horyaala ay yihiin afar cutub "total"-ka tirada guudna ay noqonayaan 13 cutub, cutubkii 10 aad ee dastuurka ku meelgaadhka ahaa waxaa la oran jiray cutubka guddiyada madaxabanaan.

Markaa dastuurkan cusubi si ka duwan sidii kii hore ayuu u qaabeeyey guddiyada madaxabanaan sida in horyaala ama page ka 2aad waxaa ku qoran in guddi madaxbanaan oo walba lagu xaliyey cutubkii ay khusaysay. Tusaale, ahaan golaha adeega garsoorka wuxuu ahaa guddi ku dhisan kaas waxa la geeyey cutubkii ku haboonaa waxaad ku soo aragteen cutubka 9 aad. Guddiga xuquuqul aadamiga waxaan ku soo aragnay cutubkii 2 aad oo ku jiray afartii chapter ee hore eenu asixinay, guddiga la dagaalanka musuqmaasuqana waxaynu ku arki doonaa cutubka maaliyada.

Markaa guddi walba waxa uu ku jiraa cutubka uu khuseeyey, mabaadiida guud ee la rabo inay yeeshaan guddiyada madaxabanaan oo ahayd mabaadii guud oo guddi walba oo madaxbanaani in dastuurku uu sugo ay tahay. Waxaan nuxurkeeda gaynay cutubka qodobada guud oo ah cutubka ugu danbeeya, kaasi ayaa faahfaahinaya mabaadiida guud ee laga rabo guddiga madaxabanaani inuu yeesho oo ay dhamaantood ka siman yihiin.

Waxa kale oo iyana farsama ahaan ka war qabnaa markii aynu maraynay guddiga qaran ee madaxabanaan ee doorashooyinka in lagu dhafay guddiga xuduudaha oo labadaa guddi la isku dhafay tiradii xubnahana la badiyey. Markaa cutubkii 10 aad sidaas ayuu ku baaba'ay, hadda cutubka 10 waxaa galidoona shaqaalaha rayidka, maanta waxaan rabaa in xildhibaanada iyo senatorada sharafta leh doodooda ay ku simaan labada cutub. Waa laba cutub oo koobkooban "total"-ka qodobada ay ka kooban yihiin waa cutubka shaqaalaha rayidka oo 8 qodob ah iyo cutubka finance oo 14 qodob ah, 14 kaa qodobay maanta doodu ku salaysnaan doontaa.

Waxa kaloo markaa inoo hadhi doona labo cutub oo kale oo ah cutubka "security"-ga iyo ka qodobada guud. Afartan cutub aad bay uga kooban yihiin cutubadii aynu hore u soo aragnay mar labaad way ka duwan yihiin cutubadii hore waxayna uga duwan yihiin waa cutubo 99% cutub farsamo ah ama "technical" ah kuma jiraan wax siyaasad ah waa laga yaabaa cutubka "finance" oo kale in looga hadlo arrimo lagu xaliyey heshiisyadii khayraadka oo aynu ku soo argnay cutubka 5 aad. Haddaa ku aragtaa cutubka 2 aad ee hadda idin horyaala ama cutubka "finance" ka oo ah cutubka 11 aad, waxaa jiri doona in jadwalkii 2A iyo 2B ee daadajinta awoodda ama awood qaybsiga aad ku aragtaan waxa markaas oo kale xigan doontaan jadwalkii aynu kaga nimid cutubka 5 aad. Sidii awalba aynu codsan jirnay xildhibaanada sahrafta leh waxaanu mar labaad iyo mar saddexaadba ka codsanaynaa in ay qodobada ay ka doodayaa ay kortaagaan si ay hawlwadeenadana ugu sahlanaato meesha dooda xildhibaanku taabanayso inay si fiican u abaaraan. Guddoonka sharta lehna waxaynu ka codsanaynaa in xildhibaanka wakhti ku filan oo uu sifiican oo dooddiisa u gudbiyo la siiyo oo aan makarfoonka laga joojin, intaa ayaan kaga baxayaa.

Waxaan kaloo idiinku bishaaraynayaa in la dhammastiray maxdar qoraalkii ama "minutes"- kii shantii cutub ee hadda aynu ka baxnay, xildhibaan walba aragtidiisii iyo araartii uu halkan ka jeediyey la "keep"-gareeyey la idina horkeeni doono sida ugu dhakhsaha badan leh. Waxa kaloon idiin sheegaynaa in dastuurkeenii hore aanu lahayn araar ama gogol dhig oo sida nuxurkiisa, dastuurkan cusub waxaynu rabnaa inuu sido gogol xaadh ama araar sidaa ku arkaysaan "page" ka 1 aad ba. Waxaan rabnaa xildhibaanadu iyagu inay halkaa aragti nagaga kabaan oo meelahaa laftigeeda aragti ayeynu uga baahanahay oo doodooda ay ku darsadaan maanta, ilahaas ayaanu idiin soojeedinaynaa, Aad iyo aad ayaana u mahadsantihiin.



### Xil. Mohamed Harun Abdillahi

Guud ahaan guddiga dastuurka labadiisa heer waan u mahadcelinayaa shaqo fiican oo aan marar badan uga mahadceliney bey runtii noo haayaan marka hadii aan doodeyda ku bilaabo oo qodobkaan 10aad oo ka hadlaya shaqalaha rayidka sida uu sheegey waaye wuu koobanyahay.

Qodobka 154aad farqadiisa 3aad oo tirada xubnaha guddiga shaqalaha rayidka ah ka dhigaya 15xubnood waa ay nagu cusubtahay sida aan ku naqaano guddiyadeena waxay ku dhisnaayeen sagaal 9 ee sabab shaqalaha rayidka ah looga dhigey 15 magaranayo sidii aan wax ku qeybsaneyney wey yara khilaafeysaa marka taa waxaan qabaa guddiga shaqalaha rayidka in lagu soo celiyo sida guddiyada kaleba ay yihiin oo laga dhigo 9 xubnood halka ay 15 ka yihiin tiradooda wey badanyihiin hadii cudur daarka yahay shaqadooda badan guddiga shaqada ma qabato guddoonka iyo waxaa qabta shaqaalihiisa marka waxaan rajeynayaa in aad guddiga ka dhigi doontaan 9 xubnood.

Qodobka 159aad oo ka hadlaya xuquuqha shaqaalaha rayidka ah farqafiisa 4aad shaqalaha rayidka ah waa in laga ilaaliyaa fargelinta siyaasadeed ama aargoosi ka dhasha gudashada xilkooda laakiin meelna kama aynaan xusinnin ay shaqalaha rayidka ah ka ogaadaan siyaasada ku biirida xisbiyada, u ololeynta siyaasiyiinta iyo xisbiyada ku mid ah marka sida aad uga sheegteen in shaqaalaha rayidka aan siyaasad ahaan loo beegsan si lagu mid ah lagu sheego in shaqaalaha rayidka ah siyaasada faraha lasoo galin " the more" ay ka fogaadaan "the more" ayagana ay dhowrsanaadaan waana runtii dowladnimada ayeyna bileysaa in shaqalaha rayidka ay noqdaan kuwo ka dhaxdhaad ah xuquuqda muwaadina waa ay leeyihiin weyna codeynayaan marka ay doorasho gaarto lakiin in ay noqdaan "active members" oo siyaasada dhax boodaya ayaa runtii meesha lagu muujininee sax aheyn.

Qodobka 160aad qodobkiisa 1aad waxa uu sheegayaa shaqaaleysiinta shaqalaha rayidka waa in ay ku saleysantahay karti tartan furan aqoon iyo sinaan fursadeed, isla qodobiisa 3aadna waxaad tirahdeen qorista iyo dalacsiinta waa in ay noqotaa kuwo kor u qaadaya matalaad cadaalad ah oo leh dheeli tirnaan dadka soomaaliyeed iyada oo mudnaan lasiinayo haweenka xoogaa takoor oo in haweenka gooni loo takoorey ayaa ka muuqata waa laga yaabaa idinka aragtidiina in aad islaheydeen wax uun tara lakiin in si gooni ah loo xuso haweenka marka shaqlaha laga hadlayo oo xirfad iyo karti laga hadlayo dhaliil baad moodaan aad hoos u dhigeysaan haweenka kartida iyo aqoonta kama liitaan raga marka in dastuur lagu qoro ilama qumano waxaan aminsanahay in qodobkaan ka hor imaanayo qodobka 1aad kan 1aad baa waxaa ka hor imaanayo kan 3aad oo kan 1aad in meesha laga saaro shaqalaheedu oo haweenkeena waa laga yaabaa in latarbin jirey lakiin xaga siyaasada ayaa la garbin jirey lakiin xaga shaqalaha lama garbiyo intaan ogahay si kaloo xuquuqdooda lagu ilaalin karo wey jirtaa lakiin iyadoo karti iyo sinaan iyo cadaalad lasoo sheegey hadan xuquuq gaar ah lasiinayaa iuagaa ayey lid ku tahay baan filayaa marka in laga saaro baan qabaa.

Qodobkiisa 162aad oo ka hadlaya in shaqalaha rayidka ah la tababaro waxaad ka dhigteen waajib sida saxda ahna ay tahay wajib ka dhigtaan ee dowlad wey adagtahay in kumanaan shaqala ah tababar geliso waa laga yaabaa qaarkood in iyagoo tababar helin in ay dhameystaan marka waajib hadaad ka dhigtaan waajib hadad ka dhigtaan waa dastuur jebin lakiin dhiira gelin halagu bedelo halka aad tirahdeen waa in la tababaraa shaqalaha marka waajibnimada aad waajibka ka dhigeysaan ayaan dhihi lahaa ka saara aad baad umahadsantihiin cutubkaas intaas ayaan ka sheegi lahaa.

Cutubkaan 11aad ee maaliyada ka hadlaya mabadi'idiisa guud sifiican baad usoo qorteen marka laga yimaado mabadi'idiisa qodobkiisa 3aad oo ka hadlaya muwaadiniin dhamaan gobolada iyo deegaanada dalka waxay xaq ileeyihiin adeegyo iyo fursado maaliyadeed oo siman iyada oo aan lagu kala eexaneynin deegaanka ama xaalad dhaqaale wuxuu qodobkaas 3aad ee qodobka 163aad ay ka hor imaneysaa aniga aragtidey faqrada 5aad iyo faqrada 6aad runtii waxana ka muuqda dhadhan shuucinimo ee dhaqalaha iyo fursadaha deegaanada iyo falka wey kukala horeynayaan ee deegaan kasta tacabkiisa iyo dadaalkiisa iyo dowlad goboleed kastaaba ayey ku xirantahay lakiin hadaad erey dhadhan aniga igala yara muuqda shuucinimo ayaa ku jira marka qodobkaa seddaxaad 3aad markan in qodobkaa seddaxaad meesha laga saaro ayaan guud ahaan qabaa maadaama waa qodobka 163aad farqafiisa 3aad oo aan qabo in ay ka hor imaaneyso farqada 5aad iyo 6aad .

Isla qodobkaan farqadiisa 11aad ee ka hadleysa dhamaan hanaanka maaliyadeed ee dalku waa in ay ku dhisantahay nidaam ama koonta mideysan ama qasnada dowlada taas waxaan qabaa in la yirahdo koonto mideysan oo heer federaal ah iyo heer dowlad goboleed marka in dowlad goboleed kasta in uu koonta mideysan uu yeeshtaa ee dowlada federaalkana waa in ay koonta mideysan yeelataa waxaa intaa iidheer in lagu xuso in aan qarash laga saari kari oo aan baarlamaan ansixinin hadii khasnada mideysan ee federaalka tahayna qarash aan baarlamaanka federaalka ansixinin hadii khasnada mideysan ee "state"ka ay tahayna qarash aan golohooda wakiilada ansixinin in aan laga saari karin farqadaa lagu daro ayaan ayadana qabaa oo dib usiiqeeyn ay kusameysaan ee farqada 11aad oo A iyo B ah in qasnad

mideysan oo federaal ah iyo qasnad mideysan oo "state" ah iyo in aan wax qarash ah laga saari karin oo aan la ansaxinin.

Waxaa intaa ii dheer qodobka 164aad oo ka hadlaya awoodaha maaliyada ee heer federaal waxaad ku sheegteen awoodaha maaliya ama dowlada federaalka ee soomaaliya waxay leedahay awoodaha maaliyadeed ee gaarka ee ku xusan jadwalka "A" iyo asteynta awoodaha asteynta awoodah heerka kala duwan ee jadwalka "A" farqadiisa 21aad wuxuu sheegayaa go'aaminta ila dakhliga iyo soo saarida canshuuro ugaar ah dowlada federaalka iyo dejinta iyo ansixinta maamulka maaliyada guud ee federaalka, awoodu siinayo jafwalka "A" waa kaa qodobkiisa 21aad.

Qodobka 164aad farqadiisa 2aad dowlad goboleedyada waxa ay leeyihiin maaliyadeed ee ugaarka ah ee ku xusan jadwalka "C" jadwalka "C" qodobo ayuu leeyahay asaguna dhowr iyo labaatan ah ee kiisa 10aad waxa uu leeyahay uruurinta canshuuraha iyo ila dakhliga  ee ugaarka ah "state" ka ama dowlada gobolka marka sidaa la yirahdo ma cada waxay aheyd canshuurihii in aan state iyo federaal u kala saarno waa meelaha hadhow is qabqabsiga ka imaan doono mid walba waxaad sheegteen awoodaha jadwalka "A" iyo jadwalka "C" ayaad ee jadwalka naftiisa ma kala cada in mid walbo awoodo aan qeexaneyn ayuu "mention" gareynayaa marka waxaan dhihi lahaa taa halagu noqdo ee sida saxda ahna oo aduunyada federaalka ubadan tahay canshuuraha waa in ay labo "level" kala yeeshtaan oo ah "level" federaalka ah iyo "level state" ah sida ay ubadantahay afuunyadu markaan xoogaa baarbaarey canshuuraha federaalka ah kastamiska ayaa kamid ah ee shaqalaha federaalka canshuuraha kastamka kasoo xarooda, waxaa kamid ah qanacsiyada waaweyn ama "cooprations" ama "company" ka canshuuraha laga qaado, waxaa kamid ah canshuuraha hawada ka soo xaroota iyo bada ee halka "state" yada inta badan ay leeyihiin canshuuraha kasoo xarooda shaqaalaha "state" kooda canshuuraha kasoo xarooda isticmaalka dhulka, canshuuraha kasoo xatooda "bussines" yada ku kooban "state" kooda ee aan federaalka oo dhan ka howl galin marka hadii canshuurihii sidaa loo kala qeexin oo la yirahdo dowlada federaalka ahna waxay leedahay awoodaha jadwalka "C" ee dowlada "state" ka ahna waxay leedahay awoodaha jadwalka "B" labadii jadwalna ay kala cadeyn iska hor imaad baa imaan doona in la isku qabsado canshuuraha anagaa qaadeyna iyo anagaa qaadeyna ayaa imaan doonta in laba jeer iyo kabadan muwaadiniinta la canshuuro laga yaabo in dowlada "state" in ay canshuur soo rogto isla dowlada federaalkana canshuur kusoo rogto marka  in labajeer la canshuuro ayaa imaan karta ee marka si taa looga baaqsado waxaan oran lahaataas ku noqda labo liis oo toos ukala saaraya canshuuraha "state"ka iyo canshuuraha federaalka soo sameeya.

Qodobka 165aad hay'ada dakhliga qaranka aad baad uga asiibteen aduunyado marka ay abaar jirtaba jeesh ama isbedel baa ku dhaca hay'adeheeda dowlada sida ay u dhisanyihiin hadii ay wasaarad maaliyadeed ay aruurin jirtey dakhliga waa nidaam laga soo gudbey sagaashameeyadii inta bada sagaashankii waxamada caalamka marka wadamada inagu xareereysan ee deriska ahna waa ay leeyihiin "athority" ka madaxa bannaan siyaasada in qodobkaa lagu abuuro ayaa aad u asiibteen waana idinku bogaadinayaa.

Waxaa intaa ii dheer oo iyadana aad u asiibteen qodobka 166aad oo ka haflaya guddiga qoondeynta iyo dardar gelinta dakhliga marka dowlada federaalka guddi madax bannaan oo qoondeynta iyo dardar gelinta dakhliga in la helo oo ukala qoondeeysa "state" yada iyo federaalka sida ay u "share" gareyn lahaayeen wixii dakhli ah oo soo gaara aad baa taana u asiibteen inga bacana wadamada federaalka ah waa ay leeyihiin inaga waxaa inala deris ah itoobiya iyo keenya labaduba waa ay leeyihiin naayjeriya wey leefahay xataa guddigaas iyo "commision" kaas oo qolaba magac uga yeertaan oo "financial artstic commision" uga yeeraan lakiin isku shaqa ah aad baad u asiibteen waana idinku bogaadinayaa.

Qodobka 167aad oo ka hadlaya amaahaha ama deemaha xoogaa in aad dib u qortaan ayaan soo jeedin lahaa waxaa ila quman in aad tirahdaan dowlada federaalka ayaa qaadan karta amaaha dibada oo kaliya lakiin dowlada "state" ka amaah gudaha ah waa ay qaadan kartaa in aad sidaas usoo qortaan bey aheyd in aad dhahdaan dowlada federaalka oo kaliya ayaa awood uleh gelida heahiisyada khuseeya amaahda

caalamiga ah iyadoo la raacayo mabadi'ada habraacyada maaliyadeed ee ku xusan xeerarka ee "state" meelna kuma soo xusin marka "state" ka waa in uu heli karaa tan gudaha ah halka federaalka ay heli karaan tan gudaha ah iyo tan dibadaba xag u yeelaneyso.

Qodobka 168aad faqrafiisa 3aad oo ka hadlayo miisaaniyada federaalka in la horgeeyo mamul goboleedyada muddo ka yareeyn seddax bilood, guddiga maaliya ayaan kamid ahay waxyaabaha qaarkood in aysan "practical" noqoneynin ayey u badanyihiin tan oo kale halkii aad ka oran laheyd muddo aan ka yareyn in aan dhahno uga danbeyn sodon maalin ka hor inta sanad miisaaniyadeedka loo gudbinin ee seddax bil markaad tirahdaan uga yaraan waa in lasoo gudbiyo "september" uma aanan baran "december" ayaa baarlamaanka loo soo gudbiyaa marka uga danbeyn bilowga bisha "december" ee snad miisaaniyadeedka la ansixinayo sanadkaka horeyey "december" uga fanbeyn in lakeeno waa yara badanyahay ayaan gilayaa.

Qodobka 170 oo ka hadlaya iibka ama waxaad dhahdeen biibka guud iyo kan ka dhisista ee kadhimista aniga waxaan u fahmey marka dowlada wax iska iibiso marka erey yara qurxoon ma ahan marka iibka iyo iska iibinta in ay ku bedeshaan ama dowlad kasta wax wey iska iibin karta qaarkood marka inta uu "B" shaqeynayo wuu dhammaadey baa la yiri sida gaadiidka iyo qalabka kale ee mishiinada inta la isticmaali kara la isticmaalaa ayaa iskaraab ahaan loo iibin karaa hanti kale iibin kartaa matka halka aad ka dhimid tirahdeen ee ka dhimid ma ahee waa soo iibin iyo iska iibid.

Isla qodobkaan farqadiisa 3aad waad ku darteen ka dhimista hangida qatanka marka dib u siiqeeyna dib aad ku sameysaan ayaa idin soo jeedin lahaa waxaa intaa ii dheer ee guddiyo badan baan dhisney dhammaantood waxaan uga dan leenahay dalka in uu noqdo fal qurux badan oo hay'adihiisu sifiican u shaqeynayaan oo muwaadiniinta adeeg hufan oo cadaalad ah ay helaan halkiin uga mudnaa oo aan isleyahay waayahay in la dhiso meelna dastuutka kuma aadan sheegin.

Guddiga iibka qaranka si ay dowlada waxa ay iska iibineysaana cadaalad u nqodaan oo umada u dhaxeya iyo wixii ay soo iibsaneysaana cadaalad u noqdaan sida saxda ah dowlada waa iibsadaha uga weyn dalka maadaama bajadka uga weyn hay'adi ay leedahay ay dowlada leedahay waxa uga badan ee la iibsadana dowladaa iibsata marka in hay'ad la dhiso oo hay'ada iibka qaranka la yirahdo sinaba dastuutka aan ka shaqeyneyney iyo dowladnimadeena qurux badnaan meyso hadaan hay'adaan la dhisin ee xeerka iibka qaranka ayaa sheegi jirey oo farayey in la dhiso hay'ada iibka qaranka waa shaqeyn waaye ee waa in dastuuri laga dhigaa in la dhiso hay'ada iibka qaranka markaas ayuu kor ukacayaa "tranceparency" geena markaas ayuu kor ukacayaa in dafka soomaaliyeed ay u sinnaadaan tartanka iyo ka qeyb galka wixii ay dowlada iibsaneyso runtii hada sidey usameyeen ee hay'ad kasta si gaar ah wasaarada maaliyada ayaa xogaa "intevention" ku sameysa lakiin sax ma ahan maadaama dasaatiirta inta badan ama dastuurado ay isku egyihiin wixii cid kale ushaqeeya adigana wey kuu shaqeynayaan marka falkaan aan deriska la leenahay ee kenyana waa uu leeyahay dalal badan oo aduunka ahna waa ay leeyihiin marka marnaba ma qabo in laga gudbo dastuurkaan ama cutubkaan inagoo aan dhisin ama ku darin dhismahahay'ada  iibka qaranka waa hadii aan rabno dal aad u qurux badan oo hay'adihiisa maaliyada ay sifiican u shaqeynayaan.

Qodobka 173aad oo ka hadlaya xafiiska xisaabiyaha guud faqradiisa 4aad oo sheegeysa in baarlamaanka uu soo saarayo xeer faafaahinaya qaab dhismeedka awoodaha iyo waajibaadka shaqo ee xafiiska xisaabiyaha guud runtii kaana aad baan usoo dhoweynaa waana bogaadinayaa.

Xafiiska xisaabiyaha guud laf dhabar ayuu u yahay in dalkaan lagu tilmaamo ama dad hay'adihiisa maliyadu ay hufanyihiin iyo in uu iska noqdo dal la dacaayadeeyo oo wax foolxun lagu tilmaamo matka xafiiskaan qaabdhismeedkiisa iyo awoodihiisaba xeer gaar ah lagu muujiyo waa arin aan aad uso dhoweynayo.

Qodobka 175aad oo ka hadlaya xafiiska hanti dhowrka guud runtii asigana waad asiibteen aduunyada inta ay ubadantahay hanti dhowrka guud in uu noqdo hay'ad u "revord" amawarbixinta u gudbisa baarlamaanka oo la isku racsanyahay in ay noqoto hay'ad farsamo oo caawisa baarlamaan waa la isku raacsanyahay marka mabadi'adiisa markaan arko qodobkaan waa ka muuqataa midbaase ku dari lahaa qodobka 175aad waaye faqradiisa 3aad oo ka hadleysaa hanti dhowrka guud wuxuu baari karaa kana watbixin karaa hantida qaranka, xisaabaadka, qoraalada iyo maareynta maaliyada ee la xariira hay'adaha federaalka "a" baad ka dhigteen hay'adaha dowlad goboleedyada, hay'adaha dowladaha hoose iyo hay'ad kasta oo hesha maaliyad guud oo federaal ah kaa waxaan qabaa in dib u siiqeyn lagu sameeyo oo la yirahdo hay'adaha federaalka lagu soo koobo iyo hay'ad kasta hesha maaliyad federaal oo lakiin ka kooban maaliayada federaalka ay ka hesho.

Waxaa "state" kasta yeelanayaa hanti dhowr isagaa masuul ka ah "state" kiisa iyo bajadka "state" kiisa iyo dhaqaalaha "state"kiisa isagaa masuul ka ah in wakiiladooda u warbixiyo ee federaalba haku koobnaado hay'adaha federaalka iyo halkii ay lacagta federaaka ay taaley isaga lacagta federaalka isga lacagta federaalka marka in ay ka reebtaan dowlad goboleedyada iyo dowladaha hoose ayaan runtii soo jeedinayaa.

Waxaa intaa iidheer isla qodobka 175aad faqradiisa 7aad oo sheegeysa xafiiska ama hanti dhowraha guud in uu xilka heyn karo muddo 5sano ah oo la cusbooynansiin karo waxaan qabaa sida aduunyafu u badantahay in laga dhigo halmar oo 8sideed sano ah ama 7 sano ah in aan marna cusboonaysiin lagu jirikirin waana sida aduunyada ay u badantahay dastuurka kana eegey waa sidaan waa hal teeram oo ay diyarisa, Kenya waa hal tearam oo ay diyarisa, hindiya waa hal teeran oo 6 sano ah matka cusbooneysiinta maadaama hay'ad aan rabno in ay kor uqaado isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta maaliyada ay tahay in laga dhigo hal wakhti lakiin mudada loo kordhiyo 8sideed sano laga dhiho ayaan soo jeedin lahaa.

Waxaa iidheer qodobka 175aad baan wili kujiraa faqrafiisa 9aad hanti dhowraha guud shuruudaha lagu xulanayo ay tahay in uu heysto shahaado jaamacadeed oo heerka labaad oo laxariira xisaabaadka ama sharciga in sharcigaa laga reebo ayaan qabaa oo lagu soo koobo maaliyad iyo xisaabaad cidii sharci xafiiska garyaqaanka guud ayaa looga baahanayahay, xafiiska xeer ilaaliyaha ayaa looga bahanayahay, maxkamadaha ayaa looga baahanayahay maadaama maaliyad iyo xisaabaad laga hadlayo in laga reebo ereyga ama sharciga aad tirahdeen amada in laga reebo waa qodobka 175aad farqadiisa 9aad.

Qodobka 160aad iyo boqol 176aad oo ka hadlaya guddiga musuqmmasuqa ee gaar ahaan farqadiisa 5aad xeeyndaabka awooda guddiga ka hadlayo waxaad tirahdeen musuqmaasuqa ay ku kacaan saraakiisha tan saraakiisha dowlada saraakiisha dowlada iyo tan gudahaba tan saraakiisha dowlada waxay noqonayaan wixii shaqaalaha rayidka ah ama ciidamada markaa siyaasiyiinta waad ka reebteen in aad tirahdaan madaxada iyo saraakiisha dowlada labadaba musuqmaasuqa ay ku kacaan aad iyo aad baad u mahadsantihiin waxaana rajeynayaa in aad tix gelin doontaa aragtiyaheyga.



**Xil. Abdiqani Ismail Said**

Qodobka 155aad qaybtiisa koowaad ee shaqaalaha rayidka dawladda markii la tilmaamayay mabaadi'da waxa qoran "Daacadnimo" waxaan qabaa in lagu daro "Iyo ammaano". Inta badan shaqaalaha waxa u rasmi ah inuu noqdo qof *Qawi*-ah oo *Amiin*-ah.

Faqrada 5aad ee Qodobkaas 155aad, "waa in ay ka fogaadaan" ayaa qoran. Halkaas waxaan oran lahaa "Waxa waajib ku ah inay ka fogaadaan fal kasta oo musuqmaasuq". Waa in laga dhigo waajib waayo waxaad moodaa dadkeeni in si aynu hawlaha u dhayalsano.

Qodobka 156aad, halka ay ku qorantahay "Shaqaalaha rayidka ee dawlada iyo shaqaalaha rayidka ee dawlad goboleedka". Waxaan oran lahaa hal mid ha layskaga dhigo marka dambena kaasi farac hasii noqdo waayo waxaad moodaa marka horeba inagoo meesha aynaan waxba ku hayn inaan sii jajabinayno marka meelaha qaarkood waa inay awoodu koobnaataa.

Qodobka kale ee 157aad ee ka hadlaya dhisidda Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Federaalka hadana Dawlad Goboleedka. Taasina waxaan oran lahaa hal guddi uun ha layskaga dhigo, doorashooyinkaba hal guddi ayaa ku qornaa marka kuwanina hal guddi uun ha noqdaan.

Faqrada 3aad ee Qodobkan 157aad, Guddiga Shaqaalaha Rayidka waxa laga dhigay 15 xubnood. 7 xubnood in laga dhigo ayaan soojeedinayaa waayo wadanku dhaqaale ma hayo, miisaaniyadiisuna way iska kadeedantahay marka waqti kasta waxan lasii badinayo halaynaga daayoo 5 xubnood ama 7 yaan laga badinin.

Isla qodobkaas Faqrada 6aad, halka ay ku qorantahay "xubnaha guddigu waxay xilka haynayaan 5 sano oo 3 mar la cusboonaysiinayo". Hal mar in la cusboonaysiin karo halaga dhigo, sida Guddiga Bankiga Dhexeba ku qoran oo kale waayo sadex jeer qofku isagaaba meesha yeelanayaba.

Qodobka 118aad qaybtiisa 2aad, halka ka hadlaysa shaqaalaha dawladda iyo xisbiyada. Qofka bini'aadamka ah fidnada Illaahay ayaa iskaga abuuray, xisbi ayuu taageerayaa ama koley meel uun buu ka tirsanaanayaa laakiin ha lagu muujiyo uun inaanu noqon xubin firfircoon oo xisbi laakiin inuu qofku xisbi ahaado waa caadi, waxyaabaha lagula dagaalamo qabyaalada iyo waxaasna waxa kamid ah dadku markay yaryaryihiin in lagusoo tarbiyadeeyo aragtida xisbiga oo qofku isagoo dugsiga dhexe marayaba uu lasoo qabsado oo lagaga baxo qabyaaladda iyo qudhunka ina wareeriyay.

Qodobka 160aad Faqradiisa 3aad. Qorista iyo dalacsiinta, waxa lagusoo daray haweenka. Anigu waxaan oran lahaa halagu qoro keliya "Soomaaliyeed" bas, inagu ma nihin qolooyinkii taariikhda madow lahaayee shalay dumarka u ogolaanayay doorashooyinka, shalay u ogolaanayay inay gabadhu shaqaale noqoto, shalay u ogolaanayay gabadhiisa inuu suuqa gayn karo. Inagu taariikhdaas madow ma lihin marka sabab inaga loogu qoraaba ma jirto. Waxyaabaha aad la yaabayso waxa kamid ah gaaladii hooyadii waa iska tuureen, waalidkii waa iska tuureen dabadeed mar dambe ayaa waxay iraahdeen maalin ha loo smaeeyo hooyooyinka, waxaad arkaysaa dadkeena oo maalinta hooyada xusaya, waar inaga maalin kasta ayay inala joogtaaye maxaa laga xusayaa ilayn qof hooyadii tuuray ma nihine marka waybaahaas iyo falsafadahaas kale ee lasoo qaadanayo ha laynaga daayo iyo dumarka meelahaa lagu qorayo, waxyaabo badan ha laga taxadaro sawir xun ayay inaga muujinaysaaye.

Qodobka tababarka iyo iskaashiga dawladda, waxa la sameeyay machad qaran. Anigu waxaan odhan lahaa ha laga bilaabo qofku ha soo maro shaqaalaysiinta 3 biloodna ha ahaatee, dadkan lagusoo daynayo xafiisyada dhibaato ayay keenaysaa oo isagoo 4.5 iyo wasaaradan anagaa iska leh iyo waxyaabahaas aaminsan ayuu soo galayaa marka taasna waxaan odhan lahaa shaqaalenimada ka hor qofku mahcadka hasoo maro waa hadii dawladnimo la rabo.

Qodobka 165aad Faqradiisa 4aad waxa ku qoran "dhisida cashuuraha ama cafiska waxa lagu salaynayaa xeerka Baarlamaanka Federaalku uu soo saarayo. Waxyaabahaas baarlamaanku uu soo saarayo dhibaato badan ayay leedahaye waxaan oran lahaa hada halagu qoro, xeer ayaa qeexayadaasi waxay keenaysaa inay wax badan ku lumaan.

Qodobka 171aad ee ka hadlaysa Bankiga Dhexe. Anuu waxaan oran lahaa halagu soo daro, *Central Bank*-igeenu muxuu ka shaqeeyaa horta lacag aynu leenahayna kama shaqeeyee. Lacag ajaanib ah ayaynu isticmaalnaa, lacag ajaanib ah ayaynu mushaar ku qaadanaa, lacag ajaanib ah oo bankiyo kale leeyihiin ayaynu ka shaqaynaa marka halagu daro lacagta ajaanibka ah sidii loo kaantarooli lahaa iyo bankiyadan ku shaqeeya lacagta qalaad ilayn waxa ku qoran lacagta dawlada iyo lacagta *Cash*-ka ah inuu maamulo, tiina meesha kuma qorna marka meesha halagusoo daro ayaan oran lahaa, waad mahadsantihiin intaasaan kusoo koobayaa.



**Sen. Abdikani Gelle Mohamed**

Mahadsanid Gudoomiye, gudoonka iyo xildhibaanda waad salaamantihiin.
Waqtiga waa nagatay salaadda Ayaan usoo gaabinayaa,qodobka 156aad oo kahadlaya baaxadda qaab dhismeedka shaqaalaha rayidka ah ,shaqaalaha rayidka waxa uu kamid noqonayaa shaqaalaha joggtada ah ee ku howlan maamulka guud.shaqaalahaas wuxuu ka kooban yahay shaqaalaha dowladda iyo shaqaalaha dowlad goboleedyada, waxaa is waydiin mudan yaa shaqaala ah? Intaa miyaa ?shaqaalaha ummadda soomaaliyeed, waxaa jira shaqaale ka shaqeeya hay'ado madaxbanaan, waxaa jira shaqaalo ushaqeeya shirkado kale kuwa dowli ah iyo kuwa aan dowli ahyenba ushqeeya.

Marka shaqaalahaasi xuquuqdooda iyo cabashadooda xagee bey geynayaan dowladdu ma waxey mas'uul ka tahay inta kaliya "bay roll"ugu jirta oo mushaar ka qaata miyey masu'uul ka tahay ?

Waxaan qabaa qodobkaasi in la balaariyo si dadka kale ay u dareemaan oo shaqaalahasi inay xaq leeyihiin ayna harsanayaan nidaamka iyo dowladnimada. waxaan qabaa in laga dhigo meesha shaqaalaha rayidka ah / shaqaalaha Soomaaliya in laga dhigo, sababtu waxa waaye shaqaaluhu way kabadan yihiin intaas qodobkaan intaas Ayaan uga gudbayaa.

Qodobka 157/3aad oo kahadlaya xubanaha shaqaalaha rayidka ee dowladda federaalka wuxuu ka kooban yahay 15xubnood oo uu soojeedinayo wasiirka xukuumadda federaalka Soomaaliya, baarlamaanka ayaana ansaxinaya, waxaan qabaa 15 xubnood in laga badiyo anigu waan qabaa in laga dhigo 19xubnood sababtuna waxa weeye waxaan ku dhisay 7maamul gayiga Somaaliya kajira iyo Gobolka Banaadir 8 in 2 xubnood lasiiyo dowladda federaalkana ay 3 qadato, sidaas daraadeed ay 19 ku noqdaan, nidaamka federaalka uu u daadago oo loo arko in dadku uu ka dhaxeeyo, hadda shaqaalaha gudiga rayidka ah mas'uulka ka ah shaqaalaha siday udhisanyihiin iyo sida hadda arkayey farqi weyn baa u dhaxeeya, si markaa umadduna ugu qanacdo 19 halaga dhigo maamulada gayiga Somaaliya kajira iyo Gobolka Banaadir 8 in 2 xubnood lasiiyo dowladda federaalkana ay 3xubnood yeelato 19kaas in laga dhigo Ayaan ku talinayaa. waxaan kaloo ku talinayaa oo aragtideyda ku boorinayaa in 5sano halmar loo cusbooneysiin karo, aysan noqon 3jeer in la cusbenesiiyo si ay meesha unoqon inay iska haystaan, 5sano markii ay joogaan halamr baa la cusboneysiin karaa taas Ayaan ku biirinayaa.

Qodobka 158aad waajibaadka gudiga shaqaalaha rayidka ah waajibaadkoodu waa badan yihiin ilaa H baa laqoray, laakiin Halmid baan xusayaa waxaa kujira baaridda, cabashooyinka shaqaalaha, anshaxa dacwadda shaqaalaha iyo baaritaanka arimaha wax qabadka , waxaan qabaa in lagu daro farqad kale oo oransysa (raadinta iyo dhowrista xuquuqda shaqaalah soomaaliyeed) oo mar waliba aan laga tagin shaqaalaha rayidka kaliya inaan lagu koobin, shaqaalaha Soomaaliyeed in la yiraahdo si kuwa kale oo

ushaqeeya hay'adaha dowli ga ah oo kamadax banaan wasaaradaha iyo kuwa caadiga ah dadka shacabka u shqeeya, ama sharikadaha ushaqeeya meel ay cabashadooda la aadaan ama ay u dareeraan dowladnimo , in shaqaalaha Soomaaliyeed magacaas laga dhigo Ayaan soojeedinayaa.

Qodobka 160aad oo ka hdlaya shaqo qirista, magacaabista, dalacsiinta shaqaalaha rayidka waxaa lagu xulanayaa farqadiisa koowaad shaqaalasiinta shaqaalaha rayidka waxay ku saleysan tahay karti tartan furan, aqoon, sinaan, taasi miyey dhacdaa? Madhacdo.
Hay'ad kasto Ninka joogo masuulka ka ah hay'adaha ahaato ama wasaarad ha ahaato, reerkoodu ayuu ku soo aruuriyaa meesha ayuuna soo qortaa taa isku inkiri mayno ayey ila tahay, marka hadynaan ka maarmeyn taas, meeshaas sinaanta waxaan oran lahaa qabiil inoogu dara, ileen kaguuri kari maynee in meesha sinaanta qabiil lagu daro,haddii kale oo larabo meesha cadaalad inay timaado hala abuuro hanaan cadaaladeed oo cadaalad kudhisan oo shaqaaleysiinta ka shaqeeya oo qofku ula tago CV-giisa iyo aqoontiisa, oo markuu la tartamo wasiirka Ina adeerkiisa oo ka guulaysto isaga un inuu shaqada helayo uu ku klasoonaado waxaan oran lahaa (hanaan cadaaladeed oo shaqaalaysiin hala abuuro si dadkeynu inagu kalsoonaado inaguna nidaamkaa iyo qabiilka iyo dhibaatadaa Ina dhibay ayna uga guurno mar un uga guurno ilaahayna ugu dhawaano cadaalad).

Cutubka kow iyo tobonaad Qodobka 160aad mabaadi'da maaliyadda 2018 ayaa baydhabo waxaa lagaga heshiiyey heshiis, dowladda federaalka iyo state-yadu nidaamka maaliyadeed iyo kheyraadka waxaa halkaan ku qoran si loo xaqiijiyo nidaamka maaliyadeed ee hufan cadaalad isla markaana waafaqsan qaab dhismeedka federaalka dhaqan galinta siyaasadda iyo nidaamka maaliyadeed ee dalka. waxaa hagaya mabaadii'guud, meelaha gadaal waxaa ku qoran sida Qodobka 164 jadwalkii horey usoo marnay cutubyadii horey ku soo marnay jadwalkaas waxaa saxiixday oo heshiis ku gaaray dowladda dhexe iyo qayb kamid maamul goboleedyada Puntland baa ka maqnayd, sideedaba Soomaaliya waxay isku haysataa marka laga reebo kursiga ugu sareeya oo dadka ku waashteen, waxaa la isku haystaa resources sharing-ka iyo power sharing-ka.

Awoodaha sida loo qaybsanayo jadwalka ayey ku qorneyd, Putland way ka maqneyd horeyna waa uga hadlay, cid ku matalaysay ma jirin goobtaas mana aysan saxiixin, hadana nidaamkan waa nidaam ubaahan "political agreement " waxaan qabaa jadwalka awood qaybsiga iyo nidaamka maaliyadeed wuu nagu soo noqonayaa waan hubaaa shaki iigama jiro sidaas daraadeed waxaan qabaa dib in loo raro ama laga dhigo qodobo furan oo markii laga heshiiyo baarlamaanka ay ku ansaxiyaan dastuurka Aad baad umahadsantihiin.



**Sen. Hassan Hussien Haji**

Muwaadiniintana ay helaan xuquuqdooda ayadoo dawladooda hoos timaado, marka guushaas awoowaheena kusoo qoreen dastuurka waa hirgashay lakiin waxaa ka danbeesay taariikh kale ayaa ka danbeysay, meshaan hadda araarka hada lagu qoray misa *tree Hample-ka* taariikhda danbe inuu ka hadlo waaye, waana ka hadlay hadaad fiirisaan waxa waaye arrimo badan ayaa lagu sheegay, guddiga haday I dhageysanayaan in lagu bilaabo ayaan rabaa, bisinka araarta ka hor in bisinka Ilaahay lagu bilaabo bisinka anagoo ah dadka soomaaliyeed markaas in araaartaas saas loogu qoraa, araarta Meesha ku qoran marka markaad fiiriso 1,2,3, anigoo dareensan dhibaatadii ka dhacday dalka, waxaa la rabaa in meeshaan sifiican loo faahfaahiyo oo looga faahfaahiyo dhibaatadii dalkaan soo gaartay iyo Meesha hadda aan joogno, dhibaatada Meesha ka dhacday dhibaato yar baahan, jiilasha soo socda iney dareemaan dhibkii ka dhacay dalka awoowayaal keena horena ay ahaayeen, awoowayaal soo shaqeeyay gumeysi lasoo dagaalamay oo xuriyad keenay oo dalkaan gaarsiiyay meeshii ugu sareysay jiilkii ka danbeeyayna ay dalkaan dudumiyeen ummadii qaxiyeen, dhibaato rideen ilaa hada ay dhacdo umma soomaaliyeed haybadii iyo qabkii laheed iney meeshii ka baxdo, dhibkaas waxaa geeysatay soomaali ayaa geysatay, waana jiilkii hada aan ku jirno iyo kii naga horeeyay ayaa geestay, marka dhibaaatadaa dadkii geestay

in Meesha lagu qeexo waaye, inaan dareensannahay maaha inaan ka xunnahay arrinta Meesha ka dhacday iney dhaceen in lagu sheego waaye dareen wayka weentahay yacnii inaan garwaaqsano dhibkii meeshaan ka dhacay waaye saan u garwaaqsano waxaan u gudbeynaa marka xuluusha seen dhubaatada ugu gudbeynaa.

Jiilasheena danbe hadii meehsaan la bayaaniyo ay aqriyaan waxay dareemayaan xanuun xanuun awoowayaasheena iney dhibaato u geesteen oo ayagana sookabanayaan waxa waaye dareen wadaninimo iyo hormar dhibki dhacayna in mardanbe soo laabanin, dhibaatadaan dhacday aduunyadana waa ka dhacdaa south Africa oo kale dastuurkeeda waxaa waaye "*true ute regurgitation commission*" ay sameeyeen dad badan dhibaatadaaas geestay baa maxkamad la geeyay Rwanda oo kale dad badan oo dhibaatadaas geestay baa maxkamad la geeyay ka dibna shacabkii hishiis ayay ku wada noolyihiin jiilka hada jooga markay araartooda akhrinayaan qaar ayaa iska ooya dhibaatada Meesha ka dhacday daraadeeda marka waxaan dhihi guddiga inaan ku noqono oo aad aan u bayaanino si jiilka kale ay u arkaan dhibkii dhacay iyo sidii looga gudbi lahaa.

Araarta nafteeda qeybta kale oo dhulka ka hadlaysa anigoo aaminsan dhulka iyo biyaha iyo hawada dabcan dhulkeena biyaha waa la ogyahay, lakiin kheyraadka ku jira inaan qeexna waaye waxaan leenahay bada waxa ku jira waan ognahay bariga waxa kujiro, oo macaadin ee xoolaha aan leenahay waan ognahay beeraha aan leenahay waan ognahay, kheraaadkeena dalka dhan in lagu qeexo oo lagu baraarijiyo, jiilalka soo socda in sifiican ay u ogaadaan markaa ka dib aan dhahno hantidaas in la ilaaliyo si cadaalad ku jirto in aragtidaas loo fiirsado, ararta meshaas ayaan uga baxaa dastuurkii hore kuma jirin in lagu soo darana aad iyo aad ayaan ugu faraxsanahay.

Guddiyada madaxabannaan oo la tiray qodobkaas hadaad fiirisaan page-ka 2aad waxaa ku jira gardoonka dastuurkii hore wuxuu ka ahaa 111 (g) gardoonka ilaalinta dadweynaha, waxa waaye xafiis jiray dastuurkii hore lama dhisin , xafiiskaan shaqadiisa waxa waaye inuu ilaaliyo dacwooyinka dadweynaha, markaan baaray 100 iyo dhoor wadan wey leeyihiin maxkamado maaha, maaha xeer ilaalin, ma'aha guddi madaxbannaan oo musuq-maasuq waa guddi madaxbannaan oo loo furay dadweynaha dhibaatada loogeestay oo u geesteen hay'adaha dowladda yay guddigaas u dacwoodaan, yacni babliga iyo shacabkaas way isku furan yihiin xafiiskaas faa'idadiisa waxaa waaye babliga markay aadaan arrimahooda ay baaraan ka dib hay'adii ayay lasoo xiriirayaan wada xajood ayay la galayaan hadii arrintii cadaato marmar magdhaw ayay usoo helayaan hadii arrinta danbi iyo arrima kale oo madani ay gaartan hay'adoyinka kale dacwada gali lahaa ayaa loo gudbiyaa, markaas dadka badanoo meel ay u maraaan dhibaatadii dadka hay'ada dawladda ka shaqeeya u geesto meel u mari la'aa, waxay mari kareen xafiiskaan gardoonka marka xafiiskaan hada Meesha waa laga saaray aduunyada waxay leedanahay "*institute of international abolishment*" wax la dhaho ayaa jirta, oo gardoonyaalka iskugu tagaan wadama qaar waxa waaye 1808 ayay bilaabeen dad badan ayaa ka faa'ideystay, marka xafiiskaan inaan mar 2aad ku noqono aan fiirino yaan soojeedin lahaa hada waaa laga saaray.

Hadii aan u gudbo cutubka shaqaalaha cutubka 10aad runtii aad ayaa looga faalooday, hal shay un baan ka dhigi lahaa oo ah qodobkka 161aad 159aad Meesha shaqalaha in lagu xad gudbi Karin arrimaha laga hadlaayo xilibaanadii igaga horeeyay ayaan ku raacsanahay, waxa waaye shaqaalaha dawladda iey ka madaxbannaadaan siyaasada, waa arrin ay aduunyadu isku raacsantahay qofka shaqaalaha ah haduusan ka madaxbanaaneen marna ma fulin karo adeeg loo siman yahay, aduunyadana waa "stander" jira waxaa la rabaa shaqaalaha iney ka madaxbannaan yihiin, shaqaalaha iney siyaaasa ka madxbannaan yihiin waxaa shaqaalahan la mid a garsoorka, garsoorkana asagana siyaasada ka madaxbannaan yahay labadaba madaxbanaanidooda mid shaqadooda ayay u madaxbannaan yihiin, mid Kalena si dhexdhexaad-nimadeeda loo ilaaliyo waxay ka madaxbannaan yihiin siyaasada, marka arrintaasna aad iyo aad ayaan u adkeynayaa, cutubkaan waxaa lagu soo kordhiyay guddiga shaqaalaha reyidka horay waa jiray si dadban ayuu u jiray dastuur miyuusan aheen, awooda hada dastuurka siinaaya horay uma laheen hada dastuur dheeri ayaa la siiyay waxa waaye wuxuu la midyahay guddiyada madaxabannaan

madaama guddiga madaxbannaan laga dhigay awoodo badan buu soo krodhin karaa shaqaalaha waxbuu ka qaban karaa shaqaaleyntooda ha'ahaato in markii ay danbi galaan ay ka qaadaan tilaabo, marka guddigaana awood dheeri la siiyo shaqaalaha rayidka lagu soo kordhiyo cutubkaana lagu qoro arrin cusub waaye waa arrin aad iyo aad u wanagsan, waxaan u maleynayaa in meel dheer gaarsiineyso, waxaa kaloo ku jira 162aad in machad lagu tababaraayo shaqalaha la sameyn doono machadka sharciyadiisa shurucda kale ayaa lagu soo qoridaana baarlamaanka in lagu daro ayaan rajeynayaa, machadka tayo weyn ayuu u leeyahay in shaqaalaha ay tayo yeeshaan marka machadkaas in aad iyo aad loo tixgaliyo yaan qabaa.

Hadii cutubka shaqaalaha aan ugu gudbo oo cutubka dhaqaalaha aan galo, 165aad waala sheegay *"public revenue athoraty"* iney aad iyo aad muhiim u tahay waala qabaa xilibaanadii horteyda ka hadlay, waxaa jira hada hay'dooyin aan aheen wasaaradana maaliyadana aan aheen, *"public revenue athoraty"* aan aheen oo qaadaaya canshuur baarlamaanka waxaa la rabaa hay'adooyinkaas iney sharciyeeyaan, hadii ay canshuur ay qaadayaan baarlamaanna aan ansixinin hay'ad kale oo baarlamaanka "level" keeda aan ansixinin canshuurtaas la qadaayo sharciyadeeda waala duri karaa marka taasna waan ku baraarujinayaa.

Qodobka 175aad faqradiisa 3aad hantidhoowrka baaristiisa wuxuu khuseeyaa hay'adooyinka dawladda, hay'adooyinka dawladda federaalka hadii la yiraahdo waxaa soo galaaya baarlamaanka, waxaa soo galaaya golaha wasiirada, waxaa soo galaaya garsorka laamahaan dawladda saddexdaba waa soo galayaan, marka waxaad moodaa in dadka qaar ay ku qanacsan yihiin garsoorka in hantidhoorka uusan baari Karin, arrintaas sax maahan hay'adaha dawladda ayuu ka mid Yahay, dhaqalaha garsoorka iyo hantida garsoorka waxaa waajib ah in garsoorka sida laamaha kale ay ula xisaabtamayaan garsoorka ula xisaabtamo taas waxba kama dhibeyso madaxbanaanida garsoorka, madaxbanaanida garsorka markaan ka hadleyno wuxuu u madaxbanaan yahay go'aamada, garsoorka iyo cases-ka in cid kasareysa iyo cid ka hooseysa faragalin Karin ayaa sharciga qorayaa stander-ka caalamiga ahna waa taas, dhaqalaha waxaa lagu soo kordhiyay guddiga ladagaalanka musuq-maasuqa dabcan guddigan kii lakala diraayay waaye guddi aad iyo aad muhiim u ah waaye guddigaan shaqadiisa, waxaa waaye in musuq-maasuqa ka dhaco sarakiisha dawladd iyo madaxda dawladda baaritaaan uu ku sameeyo, baaritaankaas ka dibna u keeno ku soo oogo dacwo, dacwadaas oo qaadeyso xeer ilaalinta si maxkamadda loogu gudbiyo, marka aad iyo aad ayuu u muhuumsanyahaya asagana waan soo dhaweynayaa.'

Guddoomiye aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin in araaraasha ku qoran oo hada nagu cusub nafteeda xildhibaanada ku baraarugaan wixii ay ku dari karaan ku daraan ayaan soo jeedin lahaa waad mahadsantihiin.



**Xil. Abdiqafar Elmi Hange**

Bismillaahi raxmaani raxiim. Mudane Guddoomiye, Guddoonka sharafta leh, xildhibaannada labada aqal, bahda saxaafada iyo ciidamada qalabkasida, assalaamu caleykum waraxmatullahi wabarakaatuh. Waxaan rabaa inaan marka horre inaan u mahadceliyo guddiyada ka soo shaqeeyay dastuurka waqtigaan adag, shaqo adag soo qabtay oo shaqo fiican halkaan ku soo bandhigay. Waxaan iskudayayaa inaan warkeyga soo koobo maadaama waqti fiican nala siiyay inaan waqtiga lawada qaadan oo wixii muhiim ah wixii markaas kooban oo aan laga hadlin, waqtiguna iska adag yahay, dooduna ay dheer tahay.

Mudane Guddoomiye anigu waxaan rabaa inaan taabto Cutubka Maaliyadda, ayaan rabaa inaan dhawr qodob ka iraahdo, ugu horreyn waxaa hubaal ah in si qotodheer oo cilmiyeesan loo sooqoray oo daraasaad fiican lagu soo sameeyay, ayada waan amaanayaa. Qodobada aan rabo inaan wax ka iraahdo waxaa ka mid ah, qodobka 1aad, Sanduuqa mideysan oo la sooqoray waxaan soojeedinayaa in saddex arrimood lagu sameeyo, koow, Magac bixinta in la iswaafajiyo oo hal magac bixin ay dastuurka ku

qoran tahay oo meelna uu Sanduuqa mideysan ahayn, meel kalena Sanduuq guud uusan ahayn, awalbaa ciladaasi nagu dhacday dastuur keena ku meel gaarka ahaa iyo sharcigii maareynta maaliyadda guud iyo shuruucda kale ee maaliyadda lagu maamulo ayaa magacyo kala duwan ku qornaayeen, mid national reset, baa ku qornaa, mid kale consalolidated fund, ayaa ku qornaa, mid kalena treasury single account ayaa ku qornaa, iyadoo micnaha loo jeedo uu iskumid yahay laakiin magaca in la saxo maadaama tarjumaadu ay marraka qaarkood magacyo kala duwan ay yeelan karto.

Midda labaad, waxaan rabnaa in lagu sooqoro dakhliga lagu qabto halkaa, lama qarashgareen karo haddii aan baarlamaanka federaalka ah ansixin, halkaa qeyb yar oo ay ka tageen weeye guddiga, waan xasuusinayaa, waxaan soojeedinayaa in lagu soodaro. Laba qodob oo kale duwan ayaa midna lagu sheegay qodobka dakhliga oo hay'adaha dakhliga quseeya, midna qodobada kale mid kamid ah ayaa lagu sheegay, labadoodaba in la mideeyo, magac bixintana la mideeyo, qodob kaasna in lagu daro oo ah in baarlamaanka la'aantiis aan la qarashgareen karin. Waxaa soo haray awoodo, arinta ah guddiga, qodobka 166aad, guddiga qoondeenta iyo dar-dargelinta dakhliga, halkaas waxaan soojeedinayaa in lagu soo koobo guddiga qoondeenta, dar-dargelinta dakhliga shaqo kuma lahan, mas'uuliyadoodana kuma jirto,  aduunyada federaalka, horta waan ka mahadcelinayaa in dastuur keyna lagu soodaro guddiga qoondeenta (Allocation Commission), waxaan qabaa in magaca halkaas loogu ekeeyo, ereyada waa lakala xulan karaa, qoondeenta, jaangoynta, waxyaabahaas ereyga ku haboon laakiin dar-dargelinta dakhliga shaqo kuma lahan.

Mas'uuliyaad kooda xaga lagu taxay, waxaan rabaa in laga saaro inay ayagu korjoogteyaan hay'adaha maaliyadda, hay'adaha maaliyadda waxaa korjoogteeya golaha wasiirada iyo golaha baarlamaanka, ayagu waxay leeyihiin inay soo diyaariyaan qaacidada wax loogu qeybinaayo maamul goboleedyada iyo dawlada dhexe lacagaha hormarinta, gaar ahaan lacagaha equalitation fund-ka la yiraahdo, aduunyada qaabkaa ayay u qeybsadaan, waana muhiim mar hadduu dalku federaal yahay oo nidaam kiisa maaliyadda la dejinayo gobolada iyo maamul goboleedyada way kala duwan yihiin, waxay ku kala duwan yihiin dhanka dhaqaalaha, baaxadda, population-ka iyo tirada dadka, waxay ku kala duwan yihiin waxa ay soo saaraan oo dhanka caanshuurta iyo dakhliga ah iyo waxa ay soo saaraan ee economic output oo dhaqaalaha gudaha ay ku soodaraan, waxaa kale ee ku kala duwan yihiin sida environment-iga u ilaaliyaan, marka shuruudo, criteria qodobadaas u badan oo lacagta maamul goboleedyada qaarkood loogu qeybinayo, intaas. Percentage kaas equal baa loo qeybinayaa, percentage kaas waxaa lagu qeybinaayaa baaxadda maxaa yeelay baaxaddu mas'uuliyada dawlad goboleedka laga rabo haddii baaxadda dhulka aad u weyn yahay waxay badineysaa qarashka, haddii baaxadda dhulka yar tahayna waxay yareyneysaa qarashka mas’uuliyadda saaran sababta waxa weeye haddii lagaa rabo oo maamul kaasi aad u weyn yahay oo la rabo adeega  wadooyinka aad dhiseyso dabcan wadadaas dheer oo dadka adeega ugu baahineyso way ka mas’uuliyad badan tahay maamulka dhulkiisa uu kooban yahay, waxaa la mid ah adeega dadka baahsan oo area ballaaran tahay, dadkii baa meelo kala duwan degan, marka adeegii bulshada ayaad rabtaa inaad gaarsiiso caafimaadkii, waxbarashadii, waxaas oodhan. Dhinaca kale maamulada dee isku heen maahan, waxaad rabtaa in maamulka faqriga ah ama maamulada sida ay ukala hooseeyaan in la soo kiciyo, mas’uuliyadaasna dawlada federaalka ayay saaran tahay inaan lakala tagin oo maamulna uu wax soosaar kiisa iyo dhaqaalihii lagu celinayay ay cirkaa marin, maamul kaleetana uusan aad u liidan oo laa isku miisaamo, marka guddiyadaan muhiimadaas ayay leeyihiin, shan sano ayay u soo saarayaan, ayagana in mas’uuliyadooda saas loogu sooceliyo, laguna qoro inuu jirayo xeer lagu nidaaminayo waajibaadkooda, qaabdhismeed kooda, sida lagu shaqaaleysiinayo, sida ay wax u soo gudbinayaan oo baarlamaanka ansixinayo.

Midda kale waxa weeye oo si fiican loo soo qoray oo guddigana aan ku boggaadinayo waa asteynta awoodaha canshuuraha oo jadwalka 2A, 2B, 2C lagu faahfaahiyay oo arimaha ay tahay hadda mugdiga dalalka federaalka ah ka yimaada, caanshuur tee baa dawladda dhexe qaadeysaa, tee baa maamul goboleedka qaadayaa, teebaa dawladda hoose qaadeysaa. Anaga hadda waxaan qaadanay dawlad saddex heer ah, dawladda federaalka, dawlad goboleedyada, dowladaha hoose, sidaas aad u kala

qaadeen oo ukala qeybiseen oo aad uga dhigteen awoodo lakala leeyahay iyo kuwa wadaag ah iyo kuwa maamulka gaar u leeyahay, waxaan soojeedinayaa in lagu soodaro qodob dhahaya caanshuuro cusub haddey yimaadaan dabcan caanshuuraha halkaan ku qoran jadwalka kuma filna, way kooban yihiin hadda, waxaa awoodda caanshuur soorogida iyo astaamaheeda sida loo kala asteenayo iyo sida waxeeda loo qeybinayo, awooddaas waxaa iskaleh Baarlamaanka federaalka oo keliya, waxaan rajeynayaa in qodobadaas la note-gareenayo, awoodaas in marwalba sidaas ay u qoran tahay oo ay cadahay oo bahalka soo bixi doono, si kale marka loo dhaho hadda ma aanan qeexin dawladaha caanshuur tooda, marka yaa qeexi doona ayaga laftooda, waa inay halkaas ku qoran tahay oo xeer uu baarlamaanka federaalka ah soo saaro ayaa lagu nidaaminayaa ayadana inay ku qoran tahay, markasta oo caanshuur cusub la soo rogayo, sida caanshuur taas cusub loo kala qaadanaayo, sida loo kala uruurinayo, mas'uuliyaad keeda siday u kala fuuleyso in loo daayo baarlamaanka.

Bangiga Dhexe si fiican ayaa loo qoray, keliya waxaan dhihi lahaa maamul kiisa oo aad dastuurka loogu faahfaahiyay in ayadana loo daayo sharciga lagu dhisay, xeerka gaarka ah ee baarlamaanka soo saari doono sida ay isku dooranayaan iyo maamul kiisa iyo qaab kiisa iyo faahfaahin tiisa iyo structure-kiisa halkaa in loo daayo oo dastuurka laga raro, waa soojeedin taas, waana loo deen karaa laakiin aniga aragtideyda waxaan qabaa in halkaas loo raro.

Qodobka 168aad, Miisaaniyadda, faqrada 3aad waxaa lagu soo sheegay, waxaa lagu qeexay in muddo saddex bilood aanka yareen loogu soo gudbiyo sanad maaliyadeedka baarlamaanka, aniga waxaan qabaa qodob kaas aan u deyno miisaaniyaddu nidaam bay martaa, waxay leedahay budget Calander la diyaariyo saddex bilood ah, mid-term ah bay leedahay oo strategy ah oo la ansixiyo, waxay leedahay qiimeyn, waxay leedahay budget paper oo intaa bil, laba bilood, saddex bilood, afar bilood qaata oo golaha wasiirada ay tahay inay tagaan. Marka xiliga ay u imaanayso baarlamaanka, haddii xitaa Nofeembar u timaado, marwalba baarlamaanka la'aantiis inaan la isticmaali karin baa asal ah, baarlamaanka hadaanu ansixin miisaaniyadda inaan la isticmaali karin laakiin waqtigaan lagu xirayo oo gacma iska xirka in laga daayo, loona daayo nidaamka in lagu faahfaahiyo xeerka maaliyadda guud ee qaranka.

Waxaan kale ee soojeedinayaa maadaama aan dhisnay "Allocation Commission" oo aan hadda sharaxayay shaqooyinka federaalka sida uu muhiimka ugu yahay, waxaan qabaa in lagu soodaro Sanduuq la yiraahdo equalisation fund oo dakhligaas hadhow lagu wareejiyo percentage dakhliga guud ee qaranka ka mid ah oo lacagta hadhowto maamul goboleedyada sidaas loogu qeybiyo, equalisation fund waxyaabihii hadda aan sheegayay oodhan lagu fariisinayo, qaacidadaas ayay guddigaas keeni doonaan dabcan Soomaaliya waa dal sabool ayaa hadda nahay, dhaqaalaheena sida hadda u dhisan yahay, anaga dal sabool ah ma nihin marka la eego waxaan heesano laakiin waxaan ku jirnaa conditions-kii saboolka, waan ka bixi doonaa. Marka inaa dastuur keena boqol sano, laba boqol sano iyo waqti dheer inuu dadka u adeego ayaan u dejineynaa, marka iyadoo la fiirinaayo good practices-ka wadamada federaalka inooga horreeyay, waxaan qabaa in equalisation fund halkaa lagu xeeriyo oo maamul kiisa iyo structure-kiisa iyo ay ka mid yihiin qasnada guud ee dawladda, ka soo qaad in la yiraahdo, baarlamaanka uu garto 0.5 percent ama 5 percent dakhliga guud oo dalka soogala waxaa loo qoondeenayaa in lagu shubo sanduuqaas si loogu qeybiyo maamul goboleedyada oo dalka loogu soo kiciyo waxyaabaha aan ka hadleenay oodhan.

Midda iigu dambeysa waxa weeye, jadwalka awoodaha lakala asteeyay, caanshuuro waxaa jiri kara isdulsaar ah oo iska hor imaanaya, marka qodob kaas in dastuurka lagu qoro, isdulsaarka caanshuuraha ama tartan dhaqaalaha waxyeeli kara waa mamnuuc oo shuruucda dambe oo la develop-gareenayo qodob kaas mabaadiida hagaysa uu ka mid noqdo, canshuuraha dhibka ugu badan oo aduunka ka haysta ayay ka mid tahay, caanshuuro tartamaayo oo iska soo horjeedo oo distort sameeya, dhaqaalaha dhib u geysta,maamul goboleedka mid soo rogo, dawladdii federaalka ahayd ka soo daba keento, mugdi keena,

marka inay noqoto haddii xataa maamul goboleedyada iyo dawladaha hoose awoodaha caanshuuraha la siiyo inay haddii ay waxyeelayaan dhaqaalaha guud iyo xasiloonida in la mamnuuco.

Ugu dambeyntii, waxaan soojeedin lahaa kheyraatka dabiiciga oo gaarka ah oo geli kara Sanduuqa equalisation fund-ka iyo wax qeybinta geli kara oo dalka uu leeyahay in lagu daro habka loo wadaagayo inuu ku saleysan yahay xeer hufan oo daah furan oo aan abuurin kala duwanaansho dhaqaale oo baaxad leh, mid waafaqsan waa inuu yahay mabaadiida federaalka, haddii shidaal laga soo saaro maamu ka mid ah maamulada dabcan wuxuu yeelan doonaa qeybo u gaar ah asaga sida dakhliga in qaar loo badiyo laakiin dadkii kale sidee loogu qeybinayaa, uusan ku oolin ceel kaas shidaalka ah ee la soo saaray, marka shuruudahaas lagu qeybsanaayo inuu dastuurka qeexo, faahfaahinta iyo criteria-da ha loo daayo xeerarka laakiin shuruudo guud oo dadka Soomaaliyeed gees ilaa ka gees ay yaqaanaan ceelka shidaalka ah ee Galmudug laga soo saarayo ama Puntland laga soo saarayo ama Waqooyi Bari laga soo saaro ama meel kale oo Soomaaliya laga soo saaro, maxay ku leedahay gabadha Kismaayo joogta ama dawlad goboleedka halkaas jooga muxuu ku leeyahay inay u caddahay, equaly dhinaca kalena ay sidaas u caddahay. Sidookale marka la qeybinayo in la tixgeliyo baahiyaha iyo adeega dadweynaha, dheelitirnaanta iyo hormarka dalka iyo xasiloonida dhaqaalaha guud. Aad iyo aad baa u mahadsantihiin.



### Xil. Abdirisaq Abdullahi Moallin

Waxaan rabaa qodobka 56 aad baaxada iyo qaabdhismeedka shaqaalaha rayidka ah ee dawlada, waxaan la qabaa senator Xuseen oo ka hadlay oo si fiican u faahfaahiyey iyo dadkii kale shaqaalaha rayidka ah waa shaqaalaha dawlada u shaqaysa. Waxaa jira shaqaale intaas ka badan oo aad uga baaxad weyn oo shaqaalaha “private” ka ah oo ka shaqeeya “company”-yada gaarka loo leeyaahy, iyaga laftigoodu xuquuq iyo waajibaad ayey u baahan yihiin waxaa la rabaa in sharciga dastuurka iyaga laftigooda difaaco wixii xuquuqdoodana uu siiyo wixii looga xaq leeyahayna uu ka qabto. Markaa sidaa darteed waxaa la rabaa in lagu soo daro shaqaalaha rayidka haddii ilaahay yiraahdo.

Waxaan rabaa horta waan iska kala iloobay warkiiye inaan ku bilaabo maahmaah soomaaliyeed oo dadki lahaana ay hadda meesha ka tageen “geel jire geela waa wada jiraa waan kala jiraa”. Geelaydii waa baxeen hadda ma fadhiyaan badankoodii meesha kama arko laakiin waxaan rabaa inaan sheego, dastuurka qodobadii hore oo laga soo dooday waxaa ku jiray oo aad looga dooday dhismaha maamul goboleedyada, waxaanan rajaynayaa in la isla qaatay 100% in dhismaha maamul goboleedku uu noqdo hal maamul iyo wixii ka badan, taas waxaan rabaa in odayaasha dhagahooga ku shubo oo marlabaad xusuusiyo.

Waxaa kaloo qayb ka ahaa dhismaha gobolka Banaadir iyo qaabka loo dhisaayo iyadana 85 % waxaa la isla qaatay in gobolka Banaadir uu noqdo maamul la mida maamul goboleedyada dalka jira, uu yeesho xuquuq la mida xuquuqaha ay leeyihiin gobolada dalka ka jira iyo maamul goboleedyada, iyadana taas waxaan rabaa in dadka iyo guddiga ka shaqaynaya uu dhagahooga ku dhaco.

Waxaa kaloo jirtay hawl la yiri senator-ada ayaa haddii maamul goboleedyada ay wax ka soo cusboonaadaan senatoradaa xalinaaya iyada laftigeeda dad badanaa ka hadlay guddiyo dastuur oo isku dhafaa meeshan fadhiya. Senatorada kaliya ma xalinkaraan wixii meeshan looga wadda shaqeeyey labadii xildhibaano oo isla fadhiya iyagaa lagu soo celinaya oo ka shaqayn doona, wax senator gooni loo siin doono yeysan jirin.

Mid afraad oo waxaa jirtay maangalka ama ninka madaxweynaha noqonaya bad qabka caafimaadkiisa, runtii taas waxaan rabaa inaan ka boodo markaa waxooga waa xasaasiyad idhaha dadkaan fiiriyey markaa waa iskaga boodayaa taas.

Haddaan u soo noqdo qodobka 157 aad faqrada 6aad page-ka 5aad waxaa ku qoran dhismaha guddiga shaqaalaha rayidka ah ee federaalka waxaa faqrada 5aad ay sheegaysaa in saddex jeer la soo dooran karo. Runtii dad badanaa ka hadlay ma qabo anuu saddex jeer in la gaadhsiiyo hal term oo 8 sanno ah ama 7 sano ah la gaarsiiyo, waxaan qaabaa inay noqoto halmar iyo halmar oo loo cusboonaysiin karo lab jeer oo labo term ah, wixii ka badan qofkaasi dhinacuu iska dhigayaa waa iskaga sii tagayaa shaqo kaluu raadsanayaa.

Qodobka 158aad, farqada (b) waa page ka 6aad xeerka anshaxa shaqada shaqaalaha, waxaan qabaa qof walba anshaxa meel buu kala yimaadaa gurigii hooyadii uu ku soo barbaaray iyo duleelkii uu wax ku soo bartay iyo madarasadii dugsi quraankii ayuu kala yimaadaa. Laakiin shaqaalaha wasaaradaha waxaa laga yaabaa in wasaaradan anshax leedahay oo anshaxaas u oglaanayo qofku wuxuu rabo inuu qaybahaas ka samayn karo laakiin iyo hay'add kale ay waxaas mamnuucayso. Ani waxaan qabaa markaa in anshaxa shaqada loo daayo wasaaraddaha iyo hay'ddaha ku shaqada leh oo aan laga dhigin wax dastuuri ah sababta oo ah haddii uu wasiir hebel yiraahdo teleefanada waa ka mamnuuc wakhtiga shaqada la soo galo, wasiir hebelna ay ba tahay shaqada ugu badan oo laga shaqeeyo oo laga in jawaabo oo dadka la caawiyo, waxoogaa waa iska hor imaanaysaa. Markaa waxaan qabaa anshaxa in loo daayo qolada markaas samaysanaysa waxay samaysanayso awooddaha maaliyadeed page ka 20 aad qodobka 165 faqrada 1aad waxaa ku jirta abuurista hay'addaha dakhliga qaranka.

Runtii dakhliga qaranka waa jiraa oo waa shaqeeyaa wuxuuna hoos yimaadaa wasaaradda maaliyada dhibna iskuma qabaan waxan abuuritaanka hay'addan hala abuuro la leeyahay, hadda wax ka beddelka dastuurka waxaan akhriyey ilaa iyo page ka 11aad. Waxaa ku taala laba shay oo la dhisaayo, hay'adda dakhliga iyo midii kale oo ahayd machadka toobabarada. Maanta dhan haddii la yiraahdo wax hala dhiso oo nin madaxa haloo raadiyo oo shaqaale haloo abuuro waxa dhan waa macno beelayaan, hay'adda dakhliga waxay ku hoosjirtaa wasaaradda maaliyada waxaan qabaa in meesheeda loo daayo dhib iskuma qabaan meeshaas ayuu ku dhex jiraa shaqo fiican ayey qabtaan. Waxaan qabaa inaan laga soo dhex saarin hay'addna aan laga dhigin ee loo daayo, haddii hay'add laga dhigo markaa waxaa imaanaysa in la iskhilaafo oo hadhaw isku dhac uu yimaaado oo hay'addii la tartanto wasaaraddii oo hadhaw iska hor imaad yimaado waxaan qabaa in laga saaro taas oo loo daayo siday tahay.

Waxaa la mida sidaas oo kale qodobka 162aad faqrada 1aad oo ah page-ka 5aad tobabarka iskaashiga hay'adda dawlada, waa meeshii la dhahaayey hala dhiso tobabarka machadka shaqaalaha rayidka qaranka, ma qabo isaga in la dhiso haddii ha'yadda tobabar samaynayso hoolal waaweyn ay qabaan shaqaalaheedii intay iskugu yeeraan ama gobolada ay uga yeeraan waa ku bixin karaan tobabaro waana siin karaan. "Totally ma qabo hay'add cusub oo lagu soo kordhinaayo dastuurka aan ka ahayn kii maxkamadda sare iyo wixii aan isla ogayn, waxaan kaloo doc galiska ah waxaan qabaa in laga daayo. Markaa haddee aniga saddex daqiiqaan ku dhamaysteen waanan soo noqon doonaa haddii ilaahay yiraahdo.



**Xil. Mohamud Abdirahman Omar**

Labbada Guddi ee Dastuurka u qaabislasan aad iyo aad baan u hambalyeynayaa una bogaadinayaa sida fican ee ay usoo qoreen hawlwadeenada baarlamaanka iyo saxaafada iyo cida kastoo inala joogtaba aad iyo aad baan u salamayaa salaam ka bacdi horaan ka galayaa aaraarta ayan ku darsanayaa qodob sida araartu erayo dhowra ah aya ku jira waxa ka mida inagoo dareensan dhibaatooyinkii ka dhacay dalka iyo colaadihii baa aad looga hadlay waxaan ku dari lahaa aniguna markaa dalkeena waxyaalaha ragaadiyey waxa ka mida qabyaalada oo colaadasi markay timid dadku way kala irdhoobeen oo qabiil iyo qabyaalad baa loo kala irdhoobay markaa waxan ku darsan lahaa anagoo garowsan qabyaaladu siday u ragaadisey umada soomaliyed iyo dhibaatooyinka ay u gaysatay qabyaaladna aan meel lagu gaardhi karin waa

inaynu kaga gudubno nidaam Dastuuri ah oo dadkoo dhan u simanyihiin marka aaraartasaan ku darsan lahaa qodobkaas.

Cutubka 10aad Shaqalaha rayidka ah ee dawlada kaliya uunbaa la qoray halkan markaa cinwaankaasi waxan ku dari laha shaqalaha rayidka ah ee dawlada iyo shaqooyinka gaarka loo leeyahay in laga dhigo markaa shaqalaha rayidka oo kaliya ee dawlada oo kaliya inan lagu soo koobine shaqaala waynaha soomaliyeed ee meel kasta ka shaqeeya ama dawlad haka shaqeeyaan ama si gaara ha u shaqeeyaan iyada ha laga dhigo.

Isla Qodobka 156aad oo baaxada iyo qaab dhismeedka shaqalaha  sidaan ciwaanka ugu badalay farqadaasi waxay ka koobantahay labbo xaraf oo ( a, b) ah oo la yidhi shaqalaha rayidka waxay ka koobnanayan shaqalaha rayidka ee dawlada federaalka iyo shaqaalaha rayidka ee dawlad goboleedka, (c) ha lagu daro oo ha la yidhaahdo shaqalaha rayidka ee shaqooyinka gaarka loo leeyahay marka xarafkaasna waan kusoo kordhinayaa.
Qodobka 157aad dhismaha gudiga shaqaalaha rayidka ee federaalka ah farqadiisa 3aad oo ka hadlaysa tirada gudiga oo 15ka laga dhigay anuu waxan kusoo kordhin lahaa habraacyadii hore ama inay 9 noqdaan ama 18 oo la laban laabo  sidii guddiga doorashooyinka oo kale markaa taa dambe ayn xoojinayaa tirada xubnahaa gudiga shaqalaha rayidka ah ha laga dhigo 18 xubnood

Qodobkaas 157aad isla farqadiisa 4aad waxa lagu sheegay gudoomiyaha iyo ku xigeenka waxa iska dhax dooranaya xubnaha gudigada waxan kusoo dari lahaa iyo xoghaynta   xoghayntana isla gudigu uun ha doortaan

Isla Qodobkaasi 157aad Farqadiisa 6 aad xubnaha gudigu waxay shaqaynayaan 5 sanadood oo seddex jeer oo kale la kordhinayo  anuu waxan odhan laha  hal mar uun ha la kordhiyo 5 sano markay hayaan 5 sano oo kale haddii loogu dari karo waa sax lkn 3 jeer yaan laga dhigin  muddo xileedkoodu waa 5 sano hal marna la kordhin karo.

Qodobka 159aad ilaalinta xuquuqda shaqalaha dawlada ee rayidka ah iyo shaqaala waynaha soomaliyeedba waa in horta qodobkaa laga dhigo mar walba waanu raacinaynaa marka la yidhaahdo shaqalaha dawlada markasta waa in la raaciyo iyo shaqaala waynaha kale umada soomliyeed   ama dawlad ha u shaqeeyaan ama meel gaar loo leeyahay haka shaqeeyaane

Farqadiisa 4aad shaqalaha rayidka ah waa in laga ilaaliyo faragalinta siyaasadeed ama aargoosi ka dhasha gudashada xilkooda sidaasoo kale mar hadii fara galin siyaasadeed laga ilaalinayo  iyagana waa in siyaasada laga ilaaliyo oo shaqaalaha dawladu inay siyaasada ku dhax milmaan maaha waa inay shaqaala dawladeed oo gaara uun ahaadaan oo ayna iyagu siyaasada galin  haday doonayaan in aan siyaasad lala dhax galin marka halaga ilaaliyo siyaasada iyagana

Qodobka 160aad shaqa qorista iyo magacaabista dalacsiinta shaqalaha rayidka ah farqadiisa 3aad waxalagu qoray  qorista iyo dalacsiinta waa in ay noqdaan kuwa kor u qaadaya matalaad cadaalad ah oo leh dheeli tirnaan dadka soomliyeed  iyadoo mudnaanta la siinayo haweenka horta qodobka haweenka in mudnaanta la siiyo anuu aadban u taagersanahay  waayo haweenku bulshada soomaliyeed lafdhabar ayay u yihiin dhaqalaha iyo jiritaanka  waana la hagradaa inta badan ama waa la gacan bidixeeyaa sidaa darteed in dastoorka lagu qoro haweenka in la siiyo mudnaan aad iyo aadban u taageersanahay una hambalyeynayaa waxa kale oon isla qodobkaas ku darsanayaa si dheeli tiran in hay'adaha dawlada looga shaqeeyo baa la yidhi  taasina ma jirto imika hay'adaheena dawlada qof waliba qaraabo kiil iyo yaaa ku xiga ayuu kuso qortaa  sidaa darteed in hay'adaha dawladu ay ku dhaqmaan qodobkan oo dheeli tirnaanta iyo sinaanta umada soomliyeed u simantahay shaqada soo baxdaaa.

Isla Qodobka 160aad farqadiisa 5aad dawladafederaalku waxay soo saaraysaa xeerarka siyaasada iyo halbeegyada shaqalaha rayidkee dawlada ee heer federaal iyo heer dawlad goboleedba qodobkan waxan odhan lahaa dawlada federaalku heer federaal ha soo saarto lkn xeerarka u gaarka ah dawlad goboleedada ha loo daayo inay iyagu soo saartaan.

Qodobka 162aad tababarka iyo machadka tobobarka shaqaalaha dawlade la furayo aad iyo aad baan u bogaadinayaa waxkale ku darimaayo waayo shaqaalaheenu xirfad iyo tobobar ayay u baahan yihiin dadkuna markasta oo ay aqoon yeeshan hogaantuna way wanaagsananysa

Cutubka 11aad Qodobkiisa 165aad hay'ada dakhliga ee qaranka faqrada 5 waxa lagu qoray dhamaan dakhliga ay ururiso hay,adaasi ama ay hayso dawlada fadaraalka waa in lagu shubaa sanuuq guud hal sanduuq marka laga reebo lacagaha loo qoondeeyay ujeedooyin gaar ah si waafaqsan xeerarka lacagahaa ujeedooyinka gaarka ah loo qoondeyay waa in la cadeeya u jeedada gaarka ah ee loo qoondaynayo dawladu waa inay hal meel uun dakhligeedu soo galaa oo hal sanduuq ah oo aan lakiin wax kale la garab eryin oo mugdi keenaya lacaga gaara baa la yidhi ama qoondooyin gaara oon imika la garanayn markaa taas meesha hala saaro oo halagu daayo uun dakhliga dawlada waxa lagu shubayaa sanduuq guud oo kaliya

Qodobka 170aad ee ka hadlaya iibsiga guud iyo ka dhimista taana anuu waxaan codkayga ku biirinayaa oo aan adkaynyaa sida xildhibaano horeba u sheegeen in lagu qoro iibsiga guud ee dawladu wax soo iibsanyso ama sii iibinta wax yaalaha ay ka maarantay sii iibinayso ciwaanka waa in la saxo oo ka dhimistaa laga daayo ama markaa waa in soo iibsasho iyo sii iibin hantida dawlada lagu qoro

Qodobka 175aad hantidhowraha guud ee jamhuriyada federaalka waxa aynu halkan ku sheegnay farqada 3aad waxyalaha uu hanti dhowrku baadhitaanka ku samaynayo waaa xaraf (d) hay'ad kasta oo kale oo hesha maaliyad guud oo uu federaalku leeyahay iyadana waan ka hadlaynaa oo sidaan soo sheegnay waxan so sheegnay hay'ado u madax banan hantidooda ama maaliyadooda oo iyagu Audit kooda gaarka ahna wata marka waxan kuso dari lahaa anigu halkan hay'ad kasta oo hesha maaliyad guud marka laga reebo ha'adaha uu dastuurku madaxbananida maaliyadeed siiyey ha lagu daro halkaas.



**Xil. Bashir Mohamed Jama**

Cutubka 10aad qodobka 157aad dhismaha guddiga shaqalaha ee rayidka farqada 3aad guddiga shaqalaha rayidka ee federaalka wuxuu ka koobanyahay 15 xubnood waxaan aaminsanahay in 15 kaan xubnood loo daayo waa "number" fiican hada anagoo 329 baa nahay baarlamaanka soomaaliya labadiisa aqal inta imaada maanta 173 baa ku qoran marka waxaan ka baraney soomaalida guddi marka la yirahdo markasta waa ay kala maqanyihiin marka 15 ka waa tiro aad iyo aad u wanagsan.

Isla qodobkaan farqadiisa 4aad shaqaalaha rayidka ah waa in laga ilaaliyaa faragelin siyaasadeed ama aargoosi ka dhasha gudashada xilkooda waa sax waa wax aan bogaadinayo.
Qodobka 161aad anshaxa iyo isla xisaabtanka waxaan soo jeedin laha in lagu daro farqad afar farqafood buu ka koobanyahay qodobka 161aad farqad shanaad oo cadeyneysa hubinta shaqaalaha rayidka ah in ay mamnuuc katahay dhaqdhaqaaga ama horboodka arimaha siyaasada sababtoo ah hadii la siiyey difaac in siyaasad waxbo lagu yeeli karin ee dhinaca kalena waa in ay damaanad jirtaa asaga in uusan siyaasad fara gashaneynin hadii wasaaradii dhaxdeeda ama wakaaladii ama hay'adii xisbi ka dhax furto ama ka ololeeyo markaas waxaa imaanayo iska horimaad in xuquuqdiisii la ilaaliyey oo isgau xadgudub sameynayo marka muwaadhinka shaqaalaha ah waa in shaqadiisa uu ku ekaado oo siyaasada wacna lagu yeeli asaguna uusan ku dhax milmin marka qodobkaas waxaan soo jeedinaa in farqadaas lagu daro.

Cutubka 11aad nidaamka maaliyada guud qodobka 170aad iibsiga guud iyo kan dhimista kadhimista xoogaa dhadhankeeda fiicneyn waxaan uqaatey in loola jeedo katanaasul, kamaarmis oo ah iyo sidii xildhiban mohamed haruun ayuu ahaa baan umaleynayaa oo soo jeediyey aheyd iibsasho iyo iska iibin marka kalmado noocaas ah in loo raadiyo lakiin ereyga ka dhimis aniga uejedada ufahmey ama ay tahayba markaad sii akhriso in ay tahay dowlada waxna iibsan karto waxna iska iibin karto marka iibin iyo iska iibin ama iibid iyo kaaarasho ama wax saas oo kale ah in loo raadiyo oo kalmad ka wanaagsan kana fahan dhow loo raadiyo.

Qodobka 165aad hay'ada dakhliga qaranka farqadiisa 5aad dhammaan dakhliga ay aruuriso ama hesho dowlada federaalka waa in lagu shubaa sanduuqa guud marka laga reebo lacagaha loo qoondeeyo ujeedo gaar ah si waafaqsan xeerka ee ujeedadee waaye ujeedadaas oo ujeedada gaarka ah waa maxay oo anagu ku heshiino hoos kasii in aysan jirin ee ujeedada hala cadeeyo oo ujeedada lagu siinayo lacagtaas umada lagu bixinayo waa in ay cadahay ee ma cada marka waxaa ku qoran ujeedo gaar ah marka laga reebo lacagaha loo qoondeeyo ujeedo gaar ah in la ogolaado mahan hadalka in la qoraa ayaaba dhadhan xun marka taas waxaan soo jeedin lahaa in laga bixiyo ama lacadeeyo ujeedada waxay tahay.

Qodobka 175aad hanti dhowrka guud ee jamhuuriyada federaalka ee soomaaliya farqadiisa 3aad hanti dhowraha guud wuxuu baaraa ka warbixiyaa hantida qaranka xisaabaadka , qoraalada iyo maareynta maaliyada la xariira iyo hay'adaha dowlada federaalka iyo hay'adaha dowlad goboleedka, hay'adaha dowlada hoose iyo hay'ad kale oo kasta oo hesha maaliyad guud ee federaal bal aan la akhrino cutubkii 9aad ee aan soo dhaafney qodobkiisa 153aad sanduuqa garsoorka xaga waxaan ku sheegney in garsoorka maaliyadiisa uu madaxa banaanyahay oo wixiisa umadax bannaanyahay lama baari karo looma tagi karo lama fara gelin karo looma dhowaan karo halkaana waxaa ku qoran hanti dhowraha guud eeqaranka in uu awood uleeyahay dhammaan maaliyad falkaan uuleeyahay iyo hay'adaha marka garsoorka waxa uu soo galayaa hay'adihii qaranka ama hay'adihii dowlada ayuu soo hoos galayaa oo tiirarka dowlada tiir kamid ah waaye in ay cadahay waye meshaas marka hadii kaleeto hadhowdii waxaa iska hor imaanayo labadii qodobna waa ay is diidayaan iska hor imaad baana ka imaanaya marka hanti dhowrka in shaqo ku leeyahay in uu baari karo hantidaas marka laga reebo garsoorka oo xeer gaar ah kusoo baxaya la yirahdo meya matahay hala yiraahdo dhammaan xaq buu uleyahay waa baarey waa in ay wax u kala cadaadaan oo hada aanan la abuurin wax mugdi kujiro.

Farqada 3aad mas'uuliyada isla qodobkaan 173aad mas'uuliyada waxaan ka hadlayaa guddiga ladagaalanka musuqmaasuqa qodobka 176aad guddiga madaxa bannaan ee ladagalanka musuqmaasuqa farqadiisa 3aad waxaa kamid ah hormarinta siyaasada iyo talaabooyinka ka hortaga musuqmaasuqa siyaasad shaqo kuma lahan guddi siyaasad shaqo kuma lahan kalmadaas halaga saaro waa in ay u qornaataa hormarinta talaabooyinka ka hortaga musuqmaasugqa lakiin siyaasad xukuumad baa dejisa xeerna baarlamaan baa dejiya xeerarka siyaasada xukuumada ee guddiga ayuu fulinayaa ee ka hortaga iyo ladagaalanka musuqmaasuqa lakiin guddiga xeerna masameyn karo siyaasadna masameyn karo marka meshaas awooda la yiri hormarinta siyaasada ee siyaasada halaga saaro maxaa dhacay siyaasada guddi shaqo kuma lahan waad mahadsantihiin.



**Xil. Mahad Abdalla Awad**

Runtii cutubyadaan si wanaagsan ayaa loo soodiyaariyey, guud ahaantooda, waxyaabo yar yar oo talooyin ah ayaan ku darsaneynaa.

Qod 155-156aad aas-aasida gudiga asiga si fiican buu usameesan yahay, waxaan si cad usheegayaa gudiyadu, dastuurku inuu "standard" leeyahay ayaa fiican oo wuxu ay isku si ay usocdaan dastuurku waa sharciga ugu sareeya ee dalka hagaya gudiyadu waa 9 wax 9 ku ba'anna oo ku soo aragteen maydaan noo sheegin, walaalayaalow 9kiisa ku daaya,15 xubnood meel aad ka keenteen manaqaan, meel ay usocdaanna manaqaanee.

Qodobka dhahaya sedex jeer la cusboo neesiinayo 5sano oo sedex jeer la cusbonesiinayo tiradeedu guud mataqaanaa 20sanadood waaye, waa 5sano hore oo sedex jeer la cusbonesiinayo waa 20sano "generation" dhan weyaan, taas waxaan soojeedinayaa in mar la cusbonesiiyo waaba 10 sano arinkaas waan adkeenayaa 20 sano aad bey udheer tahay.

Qod 156/3aad xiriirka gudiga oo heer faderaal iyo heer dowlad goboleed yacnii xiriirka ay yeelanayaan gudiyadu macada, dastuurkana halagu cadeeyo malihin, dastuurku waa mid fikir guud bixinaya, waxaan qabaa in layiraahdo xeer ayaa cadeenaya aan udeyno hay'adaha ku shaqada leh xeerka iyaga haka soodiyaariyaan oo cadeenaya sida ay xiriirka uleeyihiin.

Qodobka ku saabsan dhex dhexaadnimada siyaasadeed ee shaqaalaha rayidka ah sida uu wasiir Bashiir sheegay waxa weeye waa in si cad loogu daraa kareebidda ku lug laanshiyaha howlaha siyaasadda iyo xisbiyada siyaasadeed, waxa weeye difaacna waa heleyaan iyaguna waa iney ka reebanaadaan arimahaas.

Muwaadinkaasi haduu doonayo inuu siyaasad galo oo uu "active" noqdo waa ubanaan tahay laakiin uun shaqaalihii rayidka ahaa ha iska soo fasaxo kadibna siyaasadda ha usoo jeesto.

Difaacii iyo ka madax banaan shiyihii baa isyeelanaya dhex dhexaadnimada oo siyaasadeed,Waxaa Meesha ku qoran shaqaalaha rayidka ah ee soo sheega musuq maasuq waa qayb aad muhiim u'ah ka hortagga iyo musuq maasuqa yacnii qof muwaadin ah oo hortiisa ama xog hela in wax la isdaba marinayo inuu sheego,waxa waaye arin aad muhiim u'ah waaye in Meesha lagu soodaro difaaciisuna waa inuu cadaadaa intan waa inuu kasii faah faah sanaadaa qofkaasi inuu difaac sharci helayo "protection" in la "protect" gareeyo oo la ilaaliyo qofkaas muwaadinka ah ee qaatay khatarta ah inuu soo sheego musuq maasuq kasocda ama xafiiskiisa ama xafiis kale ha'ahaatee,haddii arintaasi waana marqaati gal weeye waa qofku inuu marqaati galo weyaan.

Markuu marqaati galo dhibaato ku dhacaysa gaar ahaan haddii qof ka sareeyey ay arintu ay quseyso qofkaas shaqaalaha wuxuu dhahayaa ani maxaa igu wata Allahe ka Alla ayuu leeyahay, markaa in lagu dhiiri geliyo waa in dastuurku si cad usheego sida loo ilaalinayo.
Qod 160aad waa fiicanyahay sinaan halagu kabo xildhibaano hore iyo senator hore ayaa kahadlay walaalayaalow arimaha oo qoondada leh ama in lamiisaamo loo baahan yahay shaqaaluhu kama mid ahan, shaqaaluhu waxa waaye imtixaan baa lagalayaa qofkii ku soo baxa cidda qaadeysaana ay cid hufan tahay,waxa la qaadayana ay wax cad tahay labadaas haddii lahelo waxa waaye reer hebel baa ubatay waa fiican tahay iney ubataan,haddii ay imtixaanka ku baasaan waa loo baahanyahay, halagu daayo xirfadda.

Waxaan galayaa nidaamka maaliyadda Waxaa loo baahanyahay Qod 163-164 cadeynta awoodaha maaliyadeed, waxa waaye heer federaal heer dowlad goboleed waa daqliga kasoo xaroodo kheyraadka dabiiciga ah waa in lagu qaybiyaa qaacido cadaalad ah.

Qod 163-164 waa cadeynta awoodaha maaliyadeed ee federaalka iyo dowlad goboleedyada awoodaha wadaaga ah waa arin horumar weyn leh sida loo soodhigay.
Waxaan soojeedinayaa iyadana canshuuraha wadaaga ah waa in xeer federaal ah si cad unidaamiya cidda dajineysa, cidda uruurineysa iyo cidda qaybineysaba intaba.

Hay'adaha cusub ee la abuuray ee gudiga waxa waaye qoondada iyo dar dargelinta daqliga waa in lagu nidaamiyaa xeer gaar ah, anigu hay'adahaan badan ee la abuurayo labadaba waxaan umaleenayaa mid qoondada ah iyo midda daqliga ayaa lasoojeediyey, gudiyadaan aadka utirada badan "system federaal" haddaan qaadanay dowladdu waa iney yaraataa waxa waaye hadda ayey tirade ka badatay oo wada hay'ado lawada sameeyey.

Wasaaradihii waad ogtihiin walaalayaalow wasaaradihii waaweynaa, wasaaradihii "A" ahaa waa sarifmeen, wasaarad A majirto mid waliba shan qaybood inta loo kala tuuray ayaa qolof baa meel taala, markaas qof laguu magacaabayaa markaas buu wax ka dhex qabta garan weynayaa.

Hadana Waxaa muuqata in wasaaradii maaliyadda qaybteeda daqli uruurinta iyo qaybteeda qaranka in loo sameynayo hay'ad iyo gudi loosamenayo. Sideedaba waxaan soojeedinayaa in waqtigaan xaadirka ah laga daayo oo sideedii hore lagu daayo.

Qod 163 khilaafaadka maaliyadeed ayadana xeer lagu xalinayo heer federaal iyo heer dowlad goboleed inuu jiro ayaa iyadana soo jeedinaynaa inaad ku soo dartaan oo fursad loosiiyo markaa wasaaradaha iyo hay'adaha ay khusayso iney xeer kasoo diyaariyaan. System-ka federaalku wuxuu ku saleysan yahay wada shaqeyn iyo khilaaf ayuu ku saleysan yahay oo marna khilaaf baa yimaada khilaafkaas markii laga gudbana wada shaqeyn baa timaada waana system aan ku talo galney inaan awooddii hoos ugu dhigno oo aan dadka u dhaweyno.

Dhibaatooyinka kayimaada waa inaan usameysanaa xeerarkii loogu hortagi lahaa lagu xalin lahaa, maaddaama dastuurkii dib-u-eegistiisii aanu sameynayno inaad noogu soodartaan meel waliba fursad usiineysa xukuumaddu iney xeer kasoo diyaariso arimahaas lagu xaliyo. inta kale gudiga guud ahaan aad baan u bogaadinayaa fursadda yar ay haysteen sida ay uga soo shaqeeyeen oo runtii aad iyo aad "professional" u ah af-soomaligu laftigiis waa heer sareeya, waan idinkaga mahadnaqayaa waana idinku bogaadineynaa waad mahadsantihiin.



**Xil. Sharif Mohamed Abdalla**

Bismillaah, Alxamdullilaah Wasalaatu Wasalaamu Calaa Rasuulillaah.

Guddoomiye iyo guddoonka oo dhan waa mahadsantihiin, xildhibaanada iyo inta kale oo joogta waan salaamayaa ramadaan mubaarak, madaama aan shaqale dawladeed 53 sano ka hor markii laga hadlaaya shaqaale, si gaar ah ayaan u daneynayaa waxaan la qabaa guddoomiye mahad iyo intii kale ee u mahadcelisay guddiga soodiyaariyay dastuurkaan dhinac kastaaba hadii aad qoraalka aad tiraahdo, hadii afSoomaaliga iyo tafaftirka la yiraahdo iyo hadi nuxurka la yiraahdaba aad bay u sareeyaan saas ay tahay dabcan waxaan sii baraarujinayaa in aad looga feejignaado xaga tafaftirka afSoomaaliga iyo hingaado.

Qodobka 159aad faqradda 1aad waxaa ku xusan shaqaalaha reyidka wuxuu xaq u leeyahya doorashada shaqada iyo xirfada u leeyahay mushaar cadaalad ah, mushaar cadaalad ah ayaa fasir ahaan u baahan.

Mushaar cadaalad ah waa mushaar lagu noolaan karo qofka "catorergy" uu yahay guriga ijaaranaaya nolashiisa si musuq-maasuq ah iyo waxyaalaha loola dadaalo, mushaar acadaalad ah 1000 waaaye iyo 1,000 waaye maahee mushaar qofkaas ku noolaan karo inuu ahaado hadii kaleeto xoola dawladeed oo amaan helaayo majiraayo, qof kalsooni isku qabaayana ma uu jiro, marka in lagu daro mushaar cadaalad ah ee lagu noolaan karo ayaan ku talin lahaa.

Qodobka 160aad faqrada 3aad, waxaa ku xusan in mudnaan lasiiyo haweenka, haween keenkeena uma baahna in mudnaan gaar ah helaan cilimigooda iyo kartidooda ayaa ku filan waligeeda way ahaan jirtay dadka imtixaanka isla gala shaqaalaha noqdo mudnaan marka laga hadlaayo nuujin iyo uur iyo arrimahaas gaarka ah ayay noqoneysaa maahee waxaa weeye wax looga baahanyahay majirto.

Arrintaas totally codsi baan u qori lahaa ama u akhrin lahaa waaba ku ihaano, maxaa yeelay dadka imtixaanka isla galaayo tacliinta ayaan ka warqabaa iskoolaadka waxaa weeye gabdhaha ayaa sareeya laga bilaabo gurigeyga ilaa iskoolaadka aan ka warqabo.

Meelkastaba waxaa weeyaan umma baahna, faqradaas sideedaba sida loola jeeday oo xishmeynaayo waxaan u maleynaa in laga maarmo faqrada 6aad isla qodobkaas dawladd goboleedyadu waxay dajinayaan ama dajisanayaan xeerka shaqaalaha reyidka.

Dawladooda si waaqfaqsan dastuurka iyo xeerarka federaalka soomaaliya, marka si waafaqsan xeerarka iyo dastuurka shaqaalaha in lagu daro, meel halkaan ah qoraal ahaan baan u sixi lahaa.

Qodobkii aan kaso gudbay faqrada 3aad xarafka (b) hadii aan sidaan u fahmay ay tahay xilka qaadid darajo dhimis hadii aysan jirin sabab sharciyeed oo cadaalad ah loona marin, aniga Meesha loo marin la leeyahay loo maro nidaam sugan oo shaqaaluhu xaq u leeyahay in la maqlo waxa weeyana loona marin badalkeeda waxa weeye loo maro iney noqon laheed baan u arkayaa, guud ahaan runtii maanta guddiga aad loo amaanay aniga waan ku darsanayaa arrimahaan hadal aga hadlaayo oo kaleeto siyaasad inta badan bataabanayaan waa arrin mustaqbal waaye marka xilibaanda dhammaanteena inaan saas u arakno aan fududdeyno dhankeena guddigana soofududeeyo aad ayaad u mahadsantihiin.



**Xil. Mahdi Mohamed Guleid**

Mudane Guddoomiye, shir guddoonka, xildhibaannada sharafta leh ee labada aqal, dhammaantiin waan idin salaamayaa. Ugu horreen waxaan rabaa dadka in yar inaan ku baraarujiyo ee xildhibaanada ah ee halkaan doodoodu ka dhiibanaya, intaas oo ah marka shaqaalaha rayidka ah aad ka hadleysaan, waxaa la isku qasaa shaqaalaha rayidka ah iyo shaqaalaha gaarka ah ee madaxabanaan ama shirkad ha u shaqeeyo, shaqaale iyo loo shaqeeye xiriirka ka dhaxeeyo, waxyaabahaa ka sheekeenaya, taas waxaynu ku soodhaafnay cutubkii labaad ee xuquuqda Beni-Aadamka iyo xuquuqul insaanka ka hadlaayay, qodobka 22aad, Xoriyadda xirfada shaqada iyo mihnada ayuu ka hadlaayaa. Qodobka 23aad, xidhiidhka shaqada shaqaale iyo loo shaqeeye,marka xuquuqda ay lahaayeen, shuruucdii ayaga xaqooda ka hadleysay oo faahfaahsaneed ee "Labor Code" ka hadleesay, waxaas oodhan cutubkii 2aad baynu kaga soo hadalnay, marka waqtiga yar ee heesataan, shaqaale iyo loo shaqeeye hakaga hadlinee, shaqaalaha rayidka un kaga hadla, shaqaalaha rayidkana waa kaa dawladda u shaqeeya ee "civil servant" la yiraahdo, sharci gaar ah ayaa ayagana maamula, marka intaa horta waan ku baraarujin lahaa xildhibaannada halkaan soo istaagayo oo doodooda dhiibanaya inay sidaa ugu kala saarnaadaan.

Waxaan u imanayaa mowduucan labada cutub ee ina horyaala, mar labaad waan u hambalyeynayaa labada guddi shaqada ay qabteen muddada gaaban ee ay ku shaqeeyeen. Waxaan gudagalayaa lifaaqa ugu horreeya ama araarta ama biraambarka oo sida aad adinkuba sheegteen oo ka dhawaajiseen, dastuur keena horre 2012-kii muu lahayn, marka arar horta araar baan oran lahaa waa arar baa tiraahdeen laakiin aniga waxaan u aqaanaa ama loo yaqaanaa sida ay ila tahay araar. Anagoo ah dadka Soomaaliyeed, marka anigu waxaan is iri tolow dastuurka ma isirka Soomaaliyeed baa loo sameynayaa oo dadka Soomaaliyeed ma dhammaan isirka Soomaaliyeed baa, dadka Soomaaliyeed ma shantii Soomaaliyeed baa dastuur kaan loo sameynayaa, marka si uu u xadidnaado, anigu waxaan oran lahaa, anagoo ah dadweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliyeed, dadka Soomaaliyeed waa 60-kii wixii ina lumiyay oo aynu iskugu qaadnay dawlado xoog waaweyn oo Faransiiska ka mid yahay oo Ingiriiskii Kenya heystay ka mid yahay oo Boqor Xela selaasilkii Ethiopia heystay oo Mareykan dabada ku hayay uu ka mid yahay.

Marka dastuur kaan haddaynu dadka Soomaaliyeed ama isirka Soomaaliyeed u sameyneyno iyo bal intan Jamhuuriyada un degta ee isdiidan ee kala irdhowday, aynu dib u uruurineyno, bal araarta aad

inoo keenteen waad ku mahadsantihiin ee ha caddeeyaan cidda loo sameeyay, isirka Soomaaliyeed iyo soomaliweyn iyo shantii Soomaaliyeed haddii dib loo raadinayo, waxba kama qabno, taa intaas ayaan oran lahaa.

Waxaan ku dari lahaa anigu farqad u dhaxeysa, paragraph-ka saddexaad, anagoo xasuusan halgankii dheeraa ee gobonimo doonka Soomaaliyeed eey soogaleen 60-kii iyo wixii ka horreeyey, waa ku mahadsantihiin, waana saxantihiin laakiin markiiba waxaad ku boodeyn anagoo dareensan dhibaatooyinkii ka dhashay colaadihii daba dheeraaday iyo burburkii dawladeed, anigu waxaan aaminsanahay halkaa in laga booday mowduuc dhexe, wixii keenay burburkii dawladnimada Soomaaliyeed oo ah dhibaatada ay leedahay in xukunka qori caaradii lagu qaato, taas oo asaas u ah nidaam keligii talis oo military, xanuun kii laga soomaray in la xuso ayay ila tahay, milil korkii lama dhayo, waxjirana in indhaha laga qariyo, waa laga yaabaa taarikh daas, dadka qaarkii 21-sano weeye, dawladnimadeena sodon sanadood ayay jirtay, kow iyo labaatan kamid ah waynu ku dhib mudanay, nidaamkii keligii taliska ahaa ee military-ga ahaa, ayaana inoo horseeday, inaynu kala irdhownana keenay, qabyaaladii uu yiri waa la aasayna soo faqay oo maantay waxa maskaxaheena ka guuxaya sabab u ahaa.

Waxaa laga yaabaa dadka qaarkii inay qabiil gaar ah u arkaan marka kacaankii iyo keligii taliskii laga hadlaayo laakiin group dad Soomaaliyeed oo kala duwan oo cidwalba leh buu ka koobnaa, xanuun kii ay ina badeen, dhib kii ay inoo geesteen, saxariir kii ay ina badeen, waa in taariikhdeena siyaasadda iyo dastuur keena dadow lagu xusaa. Anigu marka paragraph-ka xukunka sharci doorasho iyo kalsooni dadweyne un in lagu qaadan karo, xusaya, sheegayana xanuun kii uu ina soo marsiiyay nidaam kii keligii taliska ahaa ee military-ga in lagu daro ayaan qabaa, haddaa doontaan waan idinkala shaqeen sida loo draft-gareeyo. Anagoo ogsoon dhisidda nidaam federaal oo dimuqraadi ah oo isla xisaabtan leh kuna dhisan, marka way yara dhadhan tireysaa dhisidda iyo kuna dhisan, halkaa kuna saleysan baan oran lahaa, ku badelay, saleysan taa nuxu bay u yeeleysaa, araarta intaas ayaan kaga baxayaa.

Waxaan u gudbayaa qodobka 156aad, faqradiisa 1aad oo shaqaalaha rayidka ah, shaqaalaha rayidka ah ee federaalka iyo shaqaalaha rayidka ah ee dawlad goboleedka, marka anigu waxaan isleeyahay shaqaalaha rayidka ah ee dawlad goboleedka, dastuurka dawlad goboleedka iyo sharciga shaqaalaha rayidka ah ee dawlad goboleedka ayaa quseeya oo faahfaahinaya, inaga haddaan heer federaal ka hadleyno, dastuurka inuu shaqaalaha rayidka ah ee heer federaal xoogga saaro ayay ila tahay, haddaan si un u xuseynin wada shaqeyn iyo xiriir ka dhaxeeyo.

Qodobka 157aad, faqradiisa 3aad, sidii la sheegay anigu waxaan qabaa sagaal xubnood in laga dhigo, dad keena waad ogtihiin, markasta oo tirada dadka badato, khilaafka wuu bataa, marka 15 waa classroom, iyagaa iska shaqeenaya halkii ay ka shaqeen lahaayeen, 9-xubnood baa ku filan, haddii beelihii iyo wax la miisaamayana, 9-xubnood beelaha waa lagu miisaami karaa, marka anigu 9-xubnood baa halka 15-ka oran lahaa. Halka mudada shanta sano ee saddexda jeer la cusbooneysiin karana, anigu laba goor oo min todobo sano ah, hal mar oo todobo sano ah iyo hal mar oo labaad oo todobo sano ah14 kaas institutional memory wee yeelan karaan, wayna ka shaqeen karaan meesha, dad xogoggaal ahna way ahaan karaan.

Qodobka 159aad, faqradiisa 4aad, waxaan raacsanahay in shaqaalaha rayidka ah laga ilaaliyo farageln siyaasadeed laakiin ayaguna waa inay siyaasadda ka madaxabanaan yihiin, marka faqrad 5aad oo sheegeysa oo taa ku xigta 4aad, shaqaalaha rayidka ah inay siyaasadda ka madaxabanaan yihiin, aynan geli karin, marka uu doono qofka inuu galo waa inuu shaqadii iska casilaa, dabadeedna urur ama xisbi, cidduu doono uu ku biiraa oo arimaha siyaasada lagaga shaqeenaayo.

Qodobka 160aad, faqradiisa 6aad, shaqaalaha rayidka ah ee hawlgabka ah, da'da hawlgabka halkaan kuma aydaan sheegin oo maadaama mabaadiidii guud uu ka hadlaayo, garsoorkii aynu hawlgabkii

sheegnay, in da'da guud ee lagu hawlgabi karo, waa standard buu u noqonayaa xataa dawlad goboleedyada mardhow, marka da'da hawlgabka ee shaqaalaha rayidka ah, isaguna inay shaqo qoridda iyo magacaabidda meelahaa marka aynu kaga hadleeno aynu soogelino da'da qofka shaqaalaha rayidka ah, faqrad ka hadleysa da'da uu hawlgab ku noqonayo oo anigu ilaa 70 ugu yaraan soojeedinaayo ama 75. Intaa waxaan kaga baxay cutubkii 10aad.

Cutubka 11aad oo ka hadlaya Maaliyadda, qodobka 164aad, awoodaha kala xadeynta canshuuraha, waa ku soo sheegteen runtii si faahfaahsan, lifaaqa 2A oo weliba ay muhiim tahay in xoogga la saaro canshuuraha federaalka qaadayo ama ha noqoto Madaaraha, Dekedaha, kaabayaasha dhaqaalaha ee waaweyn, shirkadaha waaweyn iyo wixii la mid ah. Capital gain-ka halka aad kaga hadasheen, oil and gas, shidaalka, gaaska, petrol-ka iyo energy-ga waa waxyaabaha dhaqaalaha ugu badan iminka laga soo raao, weliba capital gain-ka marka ay tahay, marka ay shirkadi sii iibiso, dhaqaalaha ka soo baxo faa'iido weyn oo xajmi leh marka ay heshana, canshuurta la saaro marka in lagu daro gaaska iyo petrol-ka iyo energy-ga dhaqaalaha laga helo, ayaa iyaduna waxaad ku soo koobteen maalgashiga , maalgashigana wax kasta ayuu noqon karaa laakiin dhaqaale xajmi leh waxaa laga helaa oil and gas and energy.

Qodobka 165aad, anigu waxaan la qabaa xildhibaannadii halkaan yimid, walaalayaalow dal yar oo waxaynu nahay kala googo'an oo aan israacsaneyn oo duruufta ina haysa iyo dhaqaalaheena taagta uu leeyahay aad ogtihiin, hay'adahaan faraha badan ee la dhisayo oo khilaaf hor leh keenaya oo iminka hay'adda dakhliga qaranka marka la dhiso, hadana la dhiso hay'ad wax la yiri asteynta, qoondeenta, wasaaraddana wasiir kii iyo wasiir ku-xigeenkii iyo wasiir dawlahii aynan shaqo kaleba haynin oo iyada qudheyda sida wasaaradaha kale la sii qurbay oo dhaqaalihii la geeyay meel gaar ah, golaha dhaqaalaha qaranka, hormarinta dhaqaalaha, saaxiibkey waa uu fadhiyaa, asagana wasaarad kale uu joogo, wasaaradihii waa lakala qurbay hadana waynu sii kala qurbeynaa,marka hay'adahaan faraha badan ee shaqaale iyo keenaayo guddi in la dhiso, dal kaan oo federaalku keenay awoodihii inay dhaadhaceen ee baahsanaadeen oo dawladda federaalka waxay qabaneyso aan la garanhayn. Anigu waxaan soojeedinayaa, war hay'adahaan faraha badan naga daaya oo hey'adaan dakhliga, wasaaradda inta yar ee dakhliga ay uruuriso soomaahan Madaarka iyo Marsada, bal maxay wasaaradda maaliyadda dakhliga ay uruuriso, yey ka qaadaa dakhliga, hey'ad kalena u sameyso, wasiir kii iyo wasiir ku-xigeenkii iyo wasiir dawlahii iyo agaasimihii maxay kaloo qabanayaan iyo shaqaalihii iyaga hoos imanayay, markaa hadana tiraahdo, qoondada guddigaas oo weliba qodob aad ku qorto, talooyinka guddiga waa waajib ay tahay in la raaco, waxaana lagu diidi karaa oo keliya haddii baarlamaanka federaalka uu ku diido cod aqlabiyad ah, parallel structure wasaaraddii iyo hay'adii madaxa iyo mijaha aynu isku gelinay, wax soo ma aynaan kordhiyin e khilaaf hor leh baa hay'adii jiray ee yaraa aynu u horseedeynaa. Marka anigu waxaan soojeedinayaa, adkeenayaaana, war marka aan dhaqaale ina jiiro oo baaxadweyn leh ina helo oo Soomaaliya israacsanaato Raas kambooni ilaa Seylac cidhifkeeda, miyeynu u baahannahay dakhli, dhulka intaa la eg ee ballaaran ee nabada ah, hay'ad ka soo uruuriso shaqada iyo culeyska waa bateen, waqtigeeda waa la gaari doonaa. Miyeynu u baahannahay dakhliga cid qoondeesa, iyadana waa la gaari doonaa laakiin hadda aynu ku uruursannahay magaalo madaxda, hay'adahaan faraha badan ee la sameynayo, walaalayaalow aynu iskadeyno ayaan anigu cod keyga ku biirinayaa.

Qodobka 170aad, kadhimis, iibsiga guud iyo kadhimisba, kadhimis dhawr qof baa inagu isku weydiinay, kadhimista aad baa looga hadloo, ama dadka u balbalaariya kadhimis waxay tahay ama erey bixin kale hala raadiyo, ma iibsiga iyo xaraash kaa, haddii la sii iibinayo, soo iibsiga iyo sii iibinta miyaa, ka saaridda hantida dawladda miyaa, diiwaanka dawladda ee iibinta miyaa, bal adinka erey bixin kale la kaashada ama sharci yaqaanada kale ama Af-Soomaali yaqaanka kale oo hala sii caddeeyo waxa ay kadhimistu tahay. Intaas ayaan ku soo gabagabaynayaa doodayda. Waad mahadsantihiin.



**Xil. Yusuf Mohamed Adan**

Cutubkan 10aad markaad fiirisid cutubkan si nidaamsan ayey u soo diyaariyeen waxaan qabaa aragti yar inaan ku daro, number waxaan qabaa cutubka in magaca laga beddelo oo loo beddelo shaqaalaha iyo adeega rayidka ee dawlada in loo kala qaado, si iyaga laftigooda shaqaalaha soomaaliyeed ay "space" ku helaan xuquuqdooda meel fiican oo lagu cadeeyo in la helo markaa waxaan qabaa si khaasa in looga hadlo. Marka sidaas loo kala qaado waxaan lablo qaybood in loo kala qaado kuwo shaqaalaha soomaaliyeed qayb gooniya xuquuqdooda kuwana meesha ku xusana ay noqdaan kuwa 2 aad ay noqdaan. Markaa taas talo waaye muhiimad gaaray leedahay iyagaana u badan shaqaalaha xuquuqdooda iyo ilaalintana iyagaa ugu badan.

Arrinta labaad ee aan qabaa talada ay soojeediyeen xildhibaanadii iga horeeyey ah guddi in cusboonay siintu ay noqoto labo jeer kalaiyaan qabaa. Waxaan kaloon qabaa arrinta hawlgabka militeriga shaqaalaha rayidka, aarinta hawlgabka militeriga shaqaalaha rayidka waxa ku qoran sahrciga meeshan aan marinay ayaa ku qoran sharciga hawlgabka militeriga oo ah 65 waaye lab iyo dhidig ba markaa uma baahnid in dib u laabano in xuquuqdooda lagu xuso kaliya hawlgab inay xaq u leeyihiin labada heer ayey noqotay haddana oo kaliya aanay noqonin shaqaalaha rayidka ilayn shaqaalaha private ka qaaraa waxa jira iskuula ka shaqeeya 20 sano, maalinta 21 sano waa la iska burinayaa iyadoon xuquuq la siin markaa dhankaa xuquuqdaro saa'ida ka jirta markaa meeshaa waxaan u baahanahay inaan ku baraarugsanaano.

Arrinta kale ee aan rabo in xildhibaanadu ku baraarugsanaadan ay u baahantahay meeshan maadaama dastuurkii maanta aan qorayno waxay tahay maalmaha fasaxa runtii dhibaato weynaa naga haysata anaga markaan shalay shaqada ka shaqaynaayey intii karaankayaga ahayd waan ka shaqaynay laakiin xildhibaanada iyo senatorada qaar waxay soojeediyeen markii dastuur la qoraayo halagu daraa la dhahay fasaxa. Markaa waxaan qabaa fasaxa maalmaha inaan ka dhigno sabti iyo axad in laga dhigaan qabaa diiniyanna way banaan tahay oo diinta kama soo horjeedo aayada markaad fiirisid oo culumada waa la waydiin karaa waxay leedahay "marka salaada aad tukataan foofay leedahay shaqaysta" in kastoo aan ahayn nin "expert" ah haddana waxay u baahantahay in la wadiiyo, maalmaha fasaxa oo u baahanahay waa labada maalin oo sabti iyo axad ayaan qabnaa. Carabtii oo iyaga nooga dhaw way beddeleen dastuurkooda waxay ku qoreen sabti iyo axad ayey ku qoreen, markaa anagana waxaan rabnaa in sidaas lagu cadeeyo.

Dhibaatada ay lee3dahay maxay tahay anaga fiiri saddex ayaa la shaqeeyaa wadankan ilsan sabti iyo axad inaga aan soojeednay adduunka aan la shaqaysano iyaguna "system" ka kuma jiraan saw laba maalin aan hurdayno oo khamiis iyo jimco ah iyo laba maalin oo iyagu hurdayaan afar maalinaa afar maalinaa na dhaafay, meeqa aan haysanaa saddex maalin aan haysanaa.

Xildhibaanada waxaan ka codsanayaa arrintan in lagu baraarugsanaado oo lagu xusaan qabaa sabti iyo axad dastuurka ha ka muuqdo "please".

Arrintaa markaa ka gudbo mabaadiida 155aad waxaa ku qoran mabaadii ama qiyam, markaa qiyam iyo mabaadiidan waxaan qabaa in lagu xuso oo halkan lagu daro haddii uu qofku intaa jabiyey maxaa "consequence" uu yeelanayaa ilayn eex inuu ka fogaadaa la rabaa musuqmaasuq anaga hawshaan ka shaqadeenii tahayba, anaga maxaa ka shaqaynaa eex iyo musuqmaasu baa ka shaqaynaa maahoo. Markaa qofkii waa la isku mujaamaalynayaa, qofku hadduu ka shaqeeyo maxaa "consequence" uu leeyahay in lagu cadeeyaa la rabaa haddii kale shimbirayahaw heesay noqoni.

Qodobka 156 aad baaxada iyo qaab dhismeedk shaqaalaha rayidka, meeshaas waxaan qabaa qodobkaa haddii laga bixin karo way fiicantahay, haddii aan laga bixin karina in lagu xusaan qabaa qaabkey u wada shaqaynkaraan labadoodu dawlad goboleedka iyo dawlada federaalka, qaabka ay u wada

shaqaynkaraan in meesha lagu xuso qabaa. Waxaan ogahay dhibaatada markaan joogay wasaaradda dhibaaatada aan ogahay dhanka markii loo samaynayo shuruuc, system markii la dejinaayo dawlad. Markaa arrintaasi waxay u baahantahay qaabka ay uwada shaqaynayaan, guddiga shaqaalaha rayidka ayaa xaq u leh inay dejiyaan habraacyadii guud dejiyaan kuwa dawlad goboleedyadu ay noqdaa kuwa fuliya ama habraacaas kadib kuwa dhaqan galiya inay noqdaan, markaa aadaa u mahadsan tihiin.



**Xil. Mohamud Abdulkadir Haji**

Bismilaahi raxmaani raxiim guddoonka iyo xildhibadanada iyo guddiyada kasoo shaqeyey dastuurkaan waan salaamaa Asalamu caleykum waracmatullahi wabarikatuh salaan kadib waxaan uga mahadcelinaa marka hore guddiyada kasoo shaqeeyey dastuurkaan.

Waxaan rabaa in aan ka hadlo cutubka 10aad qodobkiisa 157aad ee farqada 3aad guddiga shaqaalaha rayidka waxaan rabaa xildhibanada inta badan waxaa ku qufulan sagaalka xubnood ee guddiyada lakiin guddigaan 14 xubnood ayuu ka koobanyahay marka cod dheeri ayaa lagu soodarey oo hal xubin ah ee xildhibanka hada halkaan ka tagayey xildhibaankii ka horeyey saxiibkeey raisulwasaarihii hore waxaad moodaa dastuurka waxa uu ka hadlayaa cadaalad iyo sinaan marka masuuliyad asagna dalkaan waa uu kasoo qabtey sagaal xubnood ayuu wuxuu kusaleyey in ay cadaalad tahay in lagu dhaafo matka taa waa nasiib daro waxaan rabaa saaxiibkeey cudurdaar in uu ka boxiyo cadaalad iyo sinaana ma ahan sagaal xubnood 15ka xubnood ee guddiga kusaleeyeen ayaa cadaalad ah mid seddax xubnood ee 5ta beelood ee soomaliya ka koobantahay ayey kusoo aadeysaa hadii 15 xubnood laga dhigo marka sidaas darteed markii hore 14 ayuu ahaa hal xubin ayaa lagu soo darey oo cod dheeri ah oo hadii doorasho lasameynaayo ee cod dheeri so looga kala baxo marka waad mahadsantahay.

Qodobka 158aad waajibaadka guddiga shaqaalaha rayidka ee federaalka xarafkiisa “C” dhiiri gelinta sinaantaa qeybaha bulshada ee hannaanka shaqo qoris waxaad moodaa sidey usoo diyaariyeen in ay wanagsantahay lakiin hada laguma shaqeeyo ee shaqo qoristaasna qaabka hada lagu shaqeeyo waa la yaqaanaaye hadii sidaas ay usoo qoreen lagu hirgelinaayo wey fiicantahay lakiin waxaan soo jeedin lahaa sida ay usoo qoreen loo hirgeliyo.

Qodobka 159aad ilaalinta xuquuqda shaqalaha dowlada ee rayidka ah farqadiisa 1aad shaqaalaha rayidka wuxuu xaq uleeyahay doorashada shaqada xirfada ama xirfada uu leeyahay waxaad moodaa hadeer in aan lagu shaqeynin ee shaqaalaha rayidka ah ee wasaaradaha joogo waxaad arkeysaa qof xirfadiisa ay sareyso oo aqoontiisa ay sareyso ee “master degree” ama “bacholar degree” wato oo shaqaduu qaban lahaa loo diraayo qof laga keeney badiyo oo laleeyahay shaqadaan qabo marka wasaradana wey dameysaa waxaan soo jeedin lahaa talo ahaan in shaqalaha rayidka ah ay daba gal ku sameeyaan arimaha noocaas oo kaleeto ah.

Qodobka 6aad shaqo qorista iyo magacaabista iyo dalacsiinta shaqaalaha rayidka ah ee tan ayey so dhoweyneysaa shaqaaleysiinta shaqaalaha rayidka ah waxay ku saleysantahay karti tartan furan, aqoon iyo sinaan faursadeed wey fiicantahay waana arin lasoo dhoweynaayo ee lakiin waxaan qabaa in ay kusoo daraan guddiga in dabagalka shaqaalaha rayidka ah awoodiisa ay kordhiyaan sababtoo ah sinnaana kama jirto , cadaaladna kama jirto, daah furnaana kama jirto ee dastuurka kii hada aan ka guureyney waxyaabo noocaas ah ayaa ku qornaa wey jireen dastuurkaana wuxuu qeexaa inta badan kii aan ka gureyney iyo midka hada noo cusub oo aan hada hirgelin doono in cadaalad iyo sinnaan meel walbo ay ku qorantahay lakiin cadaalad iyo sinnaan in aysan ka shaqeyneynin waxaan rabnaa marka in illahey looga baqo shaqaalaha rayidka ah waxaad arkeysaa tusaale ahaan shaqaalo kumeel gaar ah oo labo sano ama seddax sano oo wasaarada joogo oo ubaahan in shaqaalo rayid ah laga dhigo oo ubaahan hadii tartan la gelinaayana oo xoogaa aqoonta heysto hadana qof wasiir ah ayaa imaanayo wuxuu sameynaa wasarada markii uu yimaadob 10kii fursadood ee uga horeyso ee shaqaalo rayid soo baxaana qaraabadiisa iyo xigtadiisa hoose ayuu wasaarada keenaa taa waxaa kaga sii daran jikadiisa qof ka

shaqeeyo ayuu keenaa oo jikada ujoogo wuxuu ka dhigayaa shaqaalo rayid ah aawey kii masaakiinka ahaa ee shaqaalo kumeel gaarka ka ahaa oo mudada labada sano iyo kabadan joogey ama seddaxda sano joogey ama afarta sano joogey ama lix sano joogey oo wasiiro horey lasoo shaqeyey aawey xuquuqdoodii.

Marka waxaan rabaa shaqaalaha rayidka ah in loo xoojiyo shaqada ay ka qabanayaan horta guddiga shaqaalaha fayidka ah in loo xoojiyo awoodohooda si ay dabagal usameeyaan mida oo ah 15ka cubnood ee guddiga ee shaqaalaha rayidka ahna waa arin fiican in lagu taageeraa guddigaana waa muhiim si ay soomaali usinaato 9sagaalkaan xubnood lagu daba wareegayana meesha laga saaro ee dastuurkaan waxa uu tilmaamayana si sax ah loo raaco sinnaanta iyo cadaalada ka sheekeynaayana in laraacaa muhiim ah waad mahadsantihiin.



**Xil. Nur Ahmed Dirie**

Waxaan rabaa inaan u mahadceliyo guddiga dastuurka habka ay usoo dhigeen cutubkan 10aad ee shqaalaha, aad iyo aad ayaan ugu mahadcelinayaa marka hore, anigu dee shaqaalihii dawlada ayaanba kamid ahaa waxaan moogahayba keliya intaa hada aan baarlamaanka ku jiro. Waagii aan kamid ahaa shaqaalaha dawlada ee xiligii gaashaan ilaa iyo baydhabo waan dhex joogay oo Mahad iyo ragaasi waa ogyihiin. Guddigaan Shaqaalaha Rayidka Dawladu horta shaqo badan ayuu soo maray oo wax wanaagsan ayuu soo qabtay, shaqooyinka hada uu hayana waan ku amaanaynaa, runtii habka ay hada guddigani usoo dhigeen markaan fiiriyayna aad iyo aad ayuu u qurux badanyahay, waxyaabo yaryar oo in lagu daro u baahan uunbaa jira, tusaale ahaan.

Qodobka 157aad, dhismaha guddiga oo ka hadlaysa tirada uu ka koobnaanayo guddigu oo la iri 15ka xubnood, guddigan dee ilaa Baydhabo ayuuba 14 xubnood ahaa wayna kusoo shaqeeyeen in lagu abaalmariyo ayayna mudanyihiin runtii shaqada ay soo qabteen marka hada 15 hadii la iri waan soo dhawaynayaa halagu qaato, mida kale waxaaba jira guddiyaal ka badan 9ka xubnood oo kamid ah guddiyada madaxabannaan.
Qodobka 159aad Faqradiisa 2aad oo dhahaysa, shaqaalaha rayidka ahi way is urursan karaan oo way wada hadli karaan si ay xuquuqdooda u raadsadaan. Arrintaas waxaan leeyahay is urursiga iyo kale leeyihiin ayaynu hadalka xuquuqdooda waa in laga dhigo siday aniga ila tahay “Waxa jiraya urrur shaqaale oo xuquuqda shaqaalaha ka hadla”. Urrur dhisana uu ahaa oo anigaaba guddoomiye ku-xigeen ka ahaa imikana inuu dhisanyahay ayaan filayaa.

Isla qodobka 159aad Faqrada 4aad, ee ka hadlaysa qofka shaqaalaha ah ee in la ilaaliyo u baahan xuquuqdiisa, siyaasiyan inaan loogu xadgudbin, waxaan la qabaa saaxiibadii iga horeeyay oo dhahay qofka shaqaalaha ahi waa inuu isaguna faraha uusan la gelin barnaamij siyaasadeed oo isagana u keenaya in la beegsado, waxaan ka warqabnaa shaqaalo badana oo dawlada ka tirsan oo dawlada lafteeda caaya, marka taasoo kale waa in meesha lagu adkeeyo oo halkaas lagu soo qoro.

Sidoo kale waxaan rabaa inaan ka hadlo Qodobkan 159aad ee ka hadlaya xuquuqda shaqaalaha dawlada waxaa maqan waxyaabo badan oo xuquuqda shaqaalaha kamid ah oo laga tagay, waxa kamid ah arrimo in badan muran dhalin jirayoo ay kamid tahay sida qofka shaqaalaha ah loo bedalayo, hadii uu qofku xanuusado sidee loo bedalayaa. In meeshaas lagu cadeeyana maanta aad iyo aad ayay muhiim u tahay xuquuqda shaqaalaha ayayna kamid tahay, qofkii shaqaalaha ahaa haduu dhinto ama qarax haku dhinto ama bes ha u dhintee wax xuquuq ah oo u qoran ma jirin marka habka loo bedalayo qofkaas geeriyooday inaan caddayno aad iyo aad ayay u fiicnaan

lahayd, sidoo kale qofka xanuunsada ee xanuunada aan caadiga ahayni ku dhaco isna sida loo bedalayo oo kale, labadaas qodob horta waa muhiim.

Waxa kaloon soojeedin lahaa shaqaalaha kumeelgaarka ee dawladdu aad ayay u farabadanyihiin waxaanad mooda in muddo badan ay kumeelgaar ahaayeen, inkastoo aan dareemayo hab miisaaniyadeed inuu jiro hadana shaqaalahaas kumeelgaarka ah inta *Grade*-koodu saxanyahay oo ay isku miisaamanyihiin *Grade*-kooda iyo mushaarka ay qaataani in lagu daro shaqaalaha joogtada ah.

Sidoo kale waxa jira shaqaale badan oo in badan soo shaqaynayay oo ka mid ah shaqaalihii tobaneeyadii sano ee u dambaysay shaqaynayay oo tusaale ahaan *Grade*-koodu B ahaa kadib dalacay oo *Grade* A noqday hadana aan ku qaadan mushaarka marka koley in dhinaca miisaaniyada uu dhibku ka jiro waa suurtagal hada ka horna waan ka hadlay mar laga hadlayay miisaaniyadda iyo shaqaalaha iyo waxaas marka waxaan soojeedinayaa in mushaarkooda la gaarsiiyo darajadooda.

Da'da hawlgabkana xuquuqda shaqaalaha ayay kamid tahay inkastoo meel hore loogu sheegay hadana da'du si ay dadkaanu iskaga daba imaadaan 75 inay ahaato ayaan soojeedin lahaa.

Cutubka awoodaha maaliyadeed ee labada heer oo tusaale ahaan dawlada federaalka iyo dawlad goboleedyadu cashuuraha ay isla qaadaan oo kale, in cashuurahaas aad loo qeexo sida loo kala leeyahay. Sidii ay horeyba u ahaan jirteyna xuduudaha kastamyada wixii kasoo gudba oo dhan, *Transit*-ka, *Airport*-ka iyo Dekadaha waxaasoo dhan Dawlada federaalka ayaa lahaan jirtey, dawladaha hoosena waxay lahaan jireen wax la iraahdo Ardiyad iyo wax noocaasa ayay qaadi jireen laakiin hadda xaaladaasi ma dhawee in la kala qeexo oo cashuuraadkaas la kala caddeeyo aad iyo aad ayaan usoo dhawaynayaa maadaama awoodahaas muran badan uu ka jirey.

Waxa kaloon soo dhawaynayaa ama halagu daro aan leeyahay Qodobka 169aad oo ka hadlaya xisaab xidhka, misaaniyada sidaad ogtihiinba waa odoros. Odoroskii waxa la keenayaa halkan, kharashkii baxay iyo miisaaniyadii hore waxaan rabnaa in lasoo raaciyo oo meeshaas lagu caddeeyo tusaale ahaan missaniyaddii odorod ayay ahayde ma aysan soo wada xaroonin, dakhliga soo xarooday iyo miisaaniyadii la ansixiyay iyo kharashkii baxay, sadexdaas oo is dabataala waa muhiim in meeshaas lagu caddeeyo. Sababtoo ah miisaaniyadii hadii ay dheeri noqotay oo miisaaniyad dheeri ah sanadkaas la helayna in meeshaas lagu caddeeyo haduu dakhligii uu gaasirmay ama uu hoos u dhacayna inay meesha ku caddahay labad midkood. Mar kale waan u mahadcelinayaa guddiga, runtii arrimahan shaqaalaha iyo cutubka kaleba waxaan u malaynayaa runtii labadaan cutub maanta labo cutub oo si fiican looga soo shaqeeyay ayay ahaayeen muranku waa dambeeyaaye waan idin salaamayaa dhamaantiin.

# CUTUBKA 12AAD
## AMNIGA IYO DIFAACA QARANKA

# CUTUBKA 13AAD
## QODOBBO GUUD

**Kulanka 23aad (Febraayo 26, 2026)**

| | |
|---|---|
| **Baarlamaanka:** | 11aad |
| **Kalfadhiga:** | 7aad |
| **Kulankiisa:** | 23aad ee labad Aqal |
| **Goobta:** | Golaha Shacabka |
| **Furmay:** | 12:00 a.m |
| **Xirmay:** | 4:00 p.m |
| **Shir-guddoomiye:** | Xil. Sheikh Adan Mohamed Nur<br>Guddoomiyaha Golaha Shacabka |

**Ajendaha:**

(1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka
(2) Ansixinta Ajendaha
(3) Dib u -eegista Dastuurka: Marxaladda 2aad: Ka doodista Soo-jeedimaha wax-ka bedelka Dastuurka. Cutubka 12aad: Difaaca Amniga Qaranka. Cutubka 13aad: Qodobada Guud






**Sen. Saed Abdi Hussien**
Xoghayaha Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka ee BFS

Subax wanaagsan, waxaa farxad weyn noo ah guddiyada dib-u-eegista dastuurka, guddiga madaxabanaan ee dib-u-eegista dastuurka iyo guddiga la socodka dib-u-eegista iyo hirgalinta dastuurka inaynu maanta soo gaadhnay labadii cutub ee ugu danbeeyey wax ka beddelka ama dib-u-eegista dastuurka. Labadaas cutub oo kala ah cutubka difaaca iyo amniga qaranka iyo cutubka u danbeeya ee ah qodobada guud, waxay ka bilaabmayaan qodobada 177 waxayna ku eegyihiin 198 haddii aan isbeddel muuqdaa dhicin dastuurkeena cusub wuxuu ka koobnaan doonaa 198 qodob.

Qodobka 177 aad ee mabaadiida amniga qaranka iyo 178 ee hay'addaha amniga iyo difaaca lagu dhisayo, waxaan rabnaa sidii caadiga ahayd in xildhibaanaduna wakhtiga ilaaliyaan doodoodana qodobada ay abaarayaan u abaaraaab sidii aan uga baranay. Shalay xildhibaanadu waxay toos u guda galayeen, marka laga reebo dhawr xildhibaan qodobada cutubadii shalay idin horyaalay, way yaraayeen xildhibaano abaara araarta dastuurka u noqonaysa araarta, wali waan idinka sugaynaa inaad ku biirisaan araarta oo way inoo furantahay, si sidan ka fiican aan hadhaw ugu soo dhigno araarta. Aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin.



**Sen. Ahmed Ibrahim Mohamed**

Salaamu calaykum Baarlamaanka goobta fadhiya sida senatarada iyo xildhibanada, howl wadeenada warbaahinta dhammaanteed Asalaamu caleykum waraxmatulaahi wabarikatuh salaan kadib aniga baryahaan waan idinka maqnaa koleey waa tii la yiri dastuurka xoogaa "virus" ayaa lagu yara tuhmey waa laga buuginayaa. Markaa waxa laga buugiyo waxay ahaadaanba way iska yaryihiinee waxaa la yiri "nin weyni wuxuu cunaana waaaxan wuxuu yiraahna waa dardaaran" axanka malaha halkaan waxaa looga yaqaanaa tolow ma sab baa looga yaqaanaa ma garanaayo laakiin aniga deegaankaan ka imid waalidka marka uu dhinto sanad kadib hilib la qali jirey oo sadaqo aheyd baa la oran jirey ax wax waayahay.
Kolka hore ummadda soomaaliyeed abaar baa haysa ducana waa u baahan yihiin gurmadna waa u baahan yihiin ilaahay abaaraha ha inaga soo qaboojiyo, wax yar baan odhanayaa: Soomaali falaneey isku feera weyneey; fara sheegadkii iyo faankii iyo afxumadi; maku foogantihiin wali ma feedantihiin wali; 4.5 kii federaalku hawshuu faraqyada inuu suray; maku faraxsantijiin wali.

Waa goos goos yar intaasi tix geeraar ah oo derdaaran ah ayaan tirinayaa maanta hadii illaah yirahdo inaan dib isku arkeyno Allah baa garanaya bishaan bisheeda dad badan oo noolaa baa dhintey oo maqan maanta wayahay.

- Geeraarbaan gobadiisiyoo gulucduu ka bilaabmiyoo gacankiisa hayaayoo waa illah galadiiyee.

- Sidii aarka gadoodaa ama goolo cartameysaa ama roobka gu'yaada mar hadaan godol qaadey caawa gaagixi mayo.

- Caawa gaagi maayee hadday geeri raagto gabaow waa ma huraanee gaabis baa noqotaayoo waajib aad gudan weydaa hadba soo gocataaye.

- Xaajadaan la gorfeyninee waayeel guudka cadaadiyo garyaqaanka ku raagin gocashaa ka danbeeysa.

- Qudcur reeraha guurey dugaag xoolaha goostiyo kol lagaado ma waayoo gocashaa ka danbeeysa.

- Guntu wey ka dhismaan kii guudka ka waabi gadaal waa ka dumaayoo gocashaa ka danbeeysa.

- Carabkeena iyo gowska nabaraa kala gaara gadaalna waa is dhonkadaan

- Gadaa weeye xigaalkiyoo gacal waa is dilaa gadaalna waa ismutaayoo soomaalaay gedigii miyeeydaan garaneynin.

- Dagaalkii gudanheena soomaalaay gedigiina miyeynaan garaneynin

- Gefku wuu iska dhacaa idinkaa gardaraa iyo anagaa gar lahayn iyo garowshi la'aan iyo dagaal goor walba joogiyo nabad aan guntameynin soo garaad xumo maaha miyeeydaan garaneeynin.

- Miyeeyfaan garaneynin dagaalkii gudaheena wixii duule gumaadey ama geesi ku hoobtey guulle ha u naxariistee miyeydaan garaneynin.

- Maah maah aad u gundheer baan golaha soo dhigayaayee geel jiraha gacamihiisa uska aan go' aheyn iyo habeed baa ku gedaaman oo hadaad guudka ka meydho gedaal looma dhowaado,

- Gadaa weeye qabiilkuyoo niman aan garanaayaa ku gabraara yaqaana hoos usii gali maayee.

- Shimbirtii garab beeshiyoo gorgor haada uweyn hadii baal laga gooyo geed mafuuli karaa.

- Hadii googaa xoog waa ama wax la garoodana gadaasee noqotaa cadow kaa guda weeyn maalintaa is gashaan dhanna guul filan maayee ninkii geel yaro soocday baa uga geeri horeeyee miyeydaan garaneynin.

- Shisheeyaa garabkaaga iyo kuwii guudka cadaabaa soo gabaara gudeeyoo gurmad baan u aheyn iyo gargaar baanu sidnaa bay kuugu soo gabadaanoo iyagoo gurdamaayo arimaha gudahaaga faraha soo gelinayo miyeydaan garaneynin,

- Gaas dhagooli iyo ayax geedaha diirtiyo odayaal garba beelayoo isticmaarka ku guurey xilka loo galbiyaa.

- Geel qalaadkii iyo tuug iyo shilin aan ka go'aheyn iyo gafaan ayaa ka dilaacoo garow wax ku tolaanee miyeydaan garaneynin.

- Miyeydaan garaneynin dhulka waa gadiyaanoo gumeystihii na boobiyoo gabraba waad aragteenee

- Maansadaan galbinaayo waan gunaanadayaayee soomali kala guurtoo jeesba gooni uyaaloo.

- Dilaalkii gurxamaayey nin ba goosan kaxeysto sidii xeyn lagadaayoo dilaalkii gurxamayey nin ba goosta kaxeysto rag baa guul uyaqano gun nimaaan u arkaa

- Labadeyda gacamood midna goyn kari maayoo intaan toori afeysto isku gowrici maayo wa dauunyo gaddoone ilaa waagu gaduuto.

- Caqligeena gablooley soo gadaal noqonaaye gabay iima bannaanee ha wareegto.

- Gablool haweenka waxay yirahdaan hooyooyinku marka ay ilmahooda u heesayaan ma geeli baa aroorey, arooro ooda jebiyey, ma naaskii baa gablooley, gablooloo godol ka weydey.

- Marka waxaan uga socdaa caqligeena waa guray waa gablooley aslaamu waleykum waracmatulahi wabatikatuh.

- Waxaan raacinayaa afar erey oo aan ka soo goostey meel kale.

- In kastoo waxaan gocanayo iyo xaas gabarowdey. In kastoo waxaan mahanayo iyo malihii beenoowey.

- Macbuudkaan ku dhaartey inta cadowga ii muuqdo

- Miyirka aseen maanka qabo mowla igu beerey mabda'ayga kama meyrayo.
- Midnimaan maqaarka usidaa meedey leeyahay.
- War yaa magacii soomaaliyeed meel ku garanaaya.
- Magac xumada yaa naga dhaqoo meyri kara ceebta
- Midutuushu wey muuqataa waana maqalnaayee
- Midigteena iyo bidixdeena yaa meel iskugu geeya

Wabilaahi towfiiq wasalaamu caleykum waracmatulahi wabarikatuh.



**Xil. Mohamed Harun Abdillahi**

Mudane guddoomiye, xildhibaanadda labada gole aslaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatu, ramadaan mubaarak. Guud ahaan waan u mahadcelinayaa guddiga shaqadan mudan ee mudaba gacanta ku haynay soo qabtay, waxaanan rajeynayaa inay maanta inaga soo gabaggaboobi doono dastuur mudo dheer soomaali mashruuc u ahaa, dastuur qodob kasta oo ka mid ah ay malaayiin dollar ah ay ku baxay, marka maalin guuleed ayay noqon doonta mar haddii aynu doodahan soo gabaggabeyno.

Waxaan ka bilaabayaa doodayda Qodobka 178aad oo ka hadlaya hay'addaha amniga iyo difaaca gaar ahaan Xarafkiisa (d) oo ka hadlaya Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugida, inkastoon iyada iyo Asluubtaba aan dood ka qabo oon gadaal ka sheegi doono haddana magacaas Sirdoonka iyo Nabadsugidu isma qaato, waxaan qabaa in lagu soo celiyo Hay'adda Sirdoonka. Nabadsugidda waxa masuuliyadeeda leh Booliska iyo Hay'addaha kale ee hubaysan iyadu hay'add hubaysan inay noqoto maaha, marka sidii uu qabay Qodobkii 126aad Faqradiisa 1aad Xarafkiisa (b) ee Dastuurkii kumeelgaarka ahaa in magicii nabadsugida ahaa oo koobnaa inaan sidaa kusoo celino ayaan runtii qabaa, markaa la reebno magacan kale ee aynu dabada kasii raacinayno oo aynu leenahay nabadsugida Qaranka oo hay'adda sirdoonka uun ku dayno, taasaan idinku boorinayaa.

Qodobka ku xiga ee 179aad ee ka hadlaya Golaha Amniga Qaranka, Faqradiisa 2aad ayaan dood ka qabaa. 1) Madaxwaynaha oo ah Taliyaha Ciidamadda Qalabka Sidda waa sax, Ra'iisul wasaaraha isagana waan soo dhawaynayaa, Wasiirka Arrimaha Dibedda iyo Wasiirka Gaashaandhiga iyaguna. Laakiin wasaaraddahan kale oo tirada badan oo ay ku jirto arrimaha guddaha, oo ay ku jirto gaadiidka, oo ay ku jirto cadaaladdu, oo ay ku jirto maaliyadu waxaan rabaa in meesha laga saaro, keliya maaha inay ku jiraan uun Golaha Amniga Qaranka ee waxaan diidanahay in hay'addo dastuuri ah laga dhigo hay'adahan waayo waa hay'ado Administrative-ah oo la beddeli karo hadba duruufta lagu jiro iyadoo lagu salaynayo, tusaale ahaan Wasaarada Arrimaha Guddaha iyo Amniga ayaa beri la dhihi karaa oo hal wasaarad ayaa layskaga dhigi karaa, Wasaarada Cadaalada ayaa meeshaba laga saari karaa marka hadii aynu halkan ku xusno macnaheedu waxay tahay wasaaradahaasi waa dastuuri waligoodna sidaasay

ahaanayaan. marka waxaan qabaa uun in Wasaaradahaas Arrimaha Dibbeda iyo Gaadhaandhiga oo kale iyo loo daayo.

Waxa ii xiga Qodobka 180aad oo ka hadlaya Ciidanka Qaranka oo ka kooban dhulka iyo bada iyo cirka. Faqrada 2aad oo sheegaysa masuuliyada ciidanka qaranka in kow laga dhigo "Inuu ilaaliyo dastuurka iyo xeerarka dalka" si uusan u noqon ciidan beri dalka intuu afgembiyo dastuurkiisa laali kara ee uu noqdo ciidan ilaaliya dastuurka iyo *Rule of Law*-ga.

Waxa intaas ii xiga Xarafkiisa (B) oo hadlaya, Ilaalinta gobanimada, madaxbannaanida dalka iyo difaaca, intaas waan soo dhawaynayaa laakiin meel halkan ah oo lagu qoray ilaalinta midnimadda waxaan aaminsanahay inaanu ciidanku midnimo ilaalin, wixii loo dirana waa dagaal iyo isjujuubin. Midnimada siyaasad ayaa lagu ilaalin karaa, wada xaajood ayaa lagu ilaalin karaa, wada-hadal ayaa lagu ilaalin karaa laakiin hadii ay gasho ciidan ayaa midnimo ilaalinaya waa aan is dilno iyo aan is qasabno, horeyna uma ilaalin, gedaalana kama ilaalin maayo, marka eraygaas midnimada gaar ahaan gobolada aan ka soojeedo oo tabasho qaba cabsi ayaaba na gashay in beri layiraahdo dastuurka ayaa ciidanka u ogolaaday inay laayaan ama weeraraan xaq bay u leeyihiin. Marka eraygaas midnimada waa in siyaasad lagu ilaaliyo horeyna dastuurka meelo badan waan ugu soo sheegnay dhamaantoodna waan soo dhaweynaynaa, laakiin halkan ciidanka ee lagu qoray midnimo ayuu ilaalinayaa, dareen ayaan ka qabnaa marka in laga saaro ayaan soojeedinayaa.

Qodobka 181 aad oo ka hadlaya Booliska, Booliska waxaan u samaynay labo xeer oo kala ahaa Boolis Federaal iyo Boolis *State*-ka ah. Marka Faqradan 2aad waxaad ku sheegteen "Booliska Federaalka Soomaaliya oo hoos yimaada wasaaradda ay khusayso ee Xukuumada Federaalka Soomaaliya" horey waxaad usoo sheegteen Wasaarada Amniga Gudaha, laakiin tani sida aad usoo qorteen ayaa saxan waayo beri ayaa la hoos geyn karaa Wasaarada Arrimaha Guddaha. Waxaad dhahdeen Booliskaasi wuxuu u xilsaaranyahay ilaalinta nolosha, hantida, amaanka, nabadgelyada muwaadiniinta iyo dadka kale ee degan Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya. Booliskii *State*-ku muxuu qabanayaa marka? Marka uu waxaas oo dhanba ilaalinayo Booliskii Federaalku saw beri isku qabsan maayaan shaqadii, marka anuu waxaan qabaa in Booliska *State*-ku uu ilaaliyo amaanka *State*-kaas laakiin wixii *Inter State*-ah ama laba state ka dhexeeya iyo wixii qaranka taabanaya uu Booliska Federaalka masuuliyadiisa noqoto.

Qodobka xiga ee 182aad oo ka hadlaya Ciidanka Asluubta, General Bashiirna uu i hor fadhiyaa oo si adagna uu iisoo eegayaa oo aan filayo inaan aad u kala aragti duwanahay. Dasaatiirta wadamada caalamka ma jiro Ciidanka Asluubtu wadan uu ku xusanyahay dastuurkiisa, ciidanba xataa looma aqoonsana waayo waa "*Correction Center"* xabsiyadu oo ilmo yar oo dambi galay ayaa la rabaa in lagu hayo xabsiyada. Marka inaynu wax kasta ciidamayno waa yara foolxumo markaa Hay'ada Asluubta oo sida magaceedaba ka muuqata ay tahay Asluub waa hay'ad sixitaa, waa hay'ad dhaqanceli iyo toosin marka ma qabo in lagu daro liiska ciidamadda ee laga dhigo hay'ad caadiya. Sidoo kale saraakiisha iyo ciidanka hadda ka shaqeeya ee gacanta ku hayana abaal ayaan u haynaa laakiin dawladnimadu waa koraysaa oo way is bedelaysaaye si kale in loo meeleeyo oo hay'adani ay noqoto Hay'ad *Civilian*-ah.

Waxa kale oo ku xigta Hay'ada Nabadsugidda iyo Sirdoonka Qaranka oo aan horey ugasoo hadlay magaceeda oo aan iri ha lagusoo koobo Sirdoonka. Hay'adaasi aduunka wadan ay dastuurkiisa ku jirto waxa ka jira Kenya oo basaasid ayay ka shaqaysaa si ayaana loo asturi

jirey laakiin inagu intaan bannaanka soo dhignay ayaynu niri waxay basaasaysaa oo xog iyo xooraanba ay ka keenaysaa dal iyo dibedba, marka waa *Illegal* marka si loo eego oo dalalkii kale ayaynu leenahay waan idin basaasaynaa wayba inagu diraysaa marka sida caadiga ah hay'adani waxay ahayd hay'adaha *Statutory*-ga ah iyada iyo Asluubtuba maba ahayn inay *Constitutional*-noqdaan hadiise laga tagi waayay in magacaasna laga saxo hay'adanina ay noqoto Hay'ad Statutory-ah ee xeer fulin lagu magacaabo xeer baarlamaana lagu abuuro ha noqoto.

Qodobka 186 aad oo ka hadlaya xaaladaha degdega ah, Faqradiisa 5aad oo ka hadlaysa "Marka uu madaxwaynuhu ku dhawaaqo xalada degdega ah uu mudo 7 cisho gudahood ah u gudbiyo baarlamaanka runtii aad iyo aad ayaan usoo dhawaynayaa waanad asiibteen oo maaha inuu madaxwayne intuu xaalad degdeg ah ku dhawaaqo inuu muddo iska haysto maahee inuu 7 cisho gudahood kusoo gudbiyo waa sax.

Isla Qodobkaas 186aad Faqradiisa 7aad oo ka hadlaysa qaabka lagu meel marinayo baarlamaanka *Number*-ahaan waxaad qorteen 2/3 qoraal ahaana waxaad qorteen sadex meelood hal meel marka xooga *Error*-yar ayaa halkaas ku jira waxaan rajaynayaa inaad sixi doontaan.
Cutubka 13aad oo noqonaya cutubka u dambeeya dastuurka oo ka hadlaya habraaca wax-kabedelka dastuurka, Qodobka 188aad oo ka hadlaya habraaca wax-kabedelka dastuurka Faqradiisa 2aad Xarafka (E) halka aad tiraahdeen "codsi ay soo gudbiyeen ugu yaraan 150 saxeexayaal codbixiyayaal diwaangeshan ah" tiradaasi aada yay u badantahay oo waxaan filayaa malaha *Zero*-ga dambe ayaa idinkaga darsamaye in laga dhigo ugu badnaan 15,000 oo codbixiyayaal diwaangeshan ah ayaan taasi qabaa.

Qodobka 189aad oo ka hadlaya sareynta iyo sii socoshada sharciga dastuurka "Inta si kama dambaysa ah dastuurka loogu ansixinayo afti-dadwayne oo heer qaran ah dastuurku wuxuu ahaanayaa xeerka ugu sareeya ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya". Halkaa waxa loo baahanyahay inaynu ku muujino magaca Dastuurka Kumeelgaarka ah ilaa inta uu kama afti dadweyne helayo, waxaanan ku dari lahaa in mudo 7 sano gudahood ah afti-dadwayne loogu qaado hadii kale dee "document"-ti layska dhigto oo layskaga shaqeeyo ayuu noqonayaa, kan hadda aynu wax kabedelayno ayaaba muddo dhawr iyo toban sano ah wax-kabedel sugayay intaan aftiba la galin. Aftina waxay noqon doontaaba malaha inaynu sugno inta cimrigeenu ka dhamaanayo hadii aan muddo loo qaban marka waxaan qabaa in muddo 7 sano gudaheed ah uu ku helo afti-dadwayne.

Qodobka 190aad, dawlad goboleed kasta inuu ka jiro maamul dawladeed oo shaqaynaya. In maamul dawladeed oo shaqaynaya uu ka jiro dhamaan geyiga Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya ayaan qabaa in lagu badalo halkaas. Waxa kaloon qabaa isla Faqradaas 2aad Xarafkeeda **(B)** "ugu yaraan 80% goobaha codbixinta ee qorshaysan dhamaan dalka oo dhan inay yihiin kuwo amaan ah oo la gaari karo" *Totally* waxaan qabaa in halkaas laga saar ooo marka geyiga soomaaliyeed isku soo dhamaystirmo ee dhamaan maamul dawladeed gaari karo ayaa afti-dadwayne loo qaadayaa markaa faqradaa 2 aad Xarafkaas (A) in la toosiyo oo geyiga jamahuuriyada federaalka laga dhigo, faqradda **(B)** in la tiro ayaan qabaa.

Waxa intaas ii dheer oo mar labaad aan rabaa inaan ku noqdo tii cadanka, waxaad moodaa mudaba inay soomaali si uun u kala aamin baxday oo dawladnimaduna ay inooga luntay oo aad moodo inaynaan is qancin karin. Sideedaba waan ognahay inay dalkeena midnimadiisu dhaawacantahay laakiin inaan marna xoog iyo *Force*-lagu dayin ayaa sax ah, berito ayay

dadkaasi ra'yigooda beddeli karaan ee fursad in la siiyo, tusaale ahaan waxaan usoo qaadanayaa maalin dhawayd waxaan daawanayay guddoomiyahan iga dambeeya ee Timacade oo maalin meel ka khudbadaynaya oo leh "Waa in gacan bir ah dadkaasi lagu qabtaa". Hadda dhinac kale marka laga yimaadana wax u dhaartay dalka in la kala gooyo oo Baarlamaanka Soomaaliland kamid ahaana isaga ayaa jira marka shalay uu u dhaartay in la kala gooyo maantana uu beddelay fikirkii oo wuxuu ka shaqaynayaa Jamhuuriyad isku dhan, sidaas si lamid ah ayay beri uga shaqayn karaan marka xoog iyo qasab inaan marnaba fursad la siin ee wadahadal iyo wadaxaajood la siiyo ayaan jeclaan lahaa. Aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin waxaanan rajaynayaa inaan shaqo sharaf leh qabanay oo dastuurkii mudada badan socday aniga doodiisii sidaasay igaga dhantahay. Aad iyo aad ayaan idinku mahadcelinayaa.



**Xil. Bashir Mohamed Jama**

Cutubka 12aad difaaca iyo amniga qaranka qodobka 178aad hay'adaha amniga iyo difaaca farqadiisa 1aad, Ciidanka xooga dalka Soomaaliyeed; Booliiska; Asluub; Hay'adda sirdoonka

Ciidanka xooga dalka ayaa layiri, ciidanka booliiska hala gudaro,(b) ciidank booliska inay noqoto  (c) inay noqoto ciidanka asluubta dhammaan, faahfaahinta qodobadooda ayaan tagi doonaa laakiin hadda waxaan ulajeedaa iswaafajinta qodobada Meesha ku qoran.

Qodobka 179aad golaha amniga qaranka xildhibaankii iga horeeyey waa kahadlay waa wax is bad beddeli kara oo hay'adaha kamid noqonaya. Markaa anuu waxaan qabaa in layiraahdo golaha amniga qaranka ayaa jiraya howlihiisa aan qorno kadibna aan dhahno hay'adaha ka qaybgalaya waxay ku soo bixi doonaan xeer dambe, si aysan dastuur u noqon aysan hadhow qasab u noqon maxaa yeelay hadda anigana ha igu cabirin laakiin maanta aduunka deegaanka ayaa ugu muhiimsan kuma jirto, amniga qaranka deegaanka ayaa kow ah halkaan kuma jirta markaa.

Taas dib baan udhigaynaa waqtigeeda halala sugo laakiin wasaarad hebel yaan la oranin, hadda tusaale wuxuu usoo qaatay xildhibaankii iga horeeyey wasaaradda gaadiidka cirka iyo dhulka oo tii badda iyo maraakiibta aaway, wadankeena bariga iyo badda, baddaa dheer waxay ku fiican tahay hay'aduhu inay ku soo baxaan xeer gaar ah laakiin aan dastuuri inay nagu noqon. Goluhu wuxuu yeelanayaa xubno farsamo B,C, Waxaa layiri taliyaha booliska iyo taliyaha asluubta ku qoran, marna hay'ad ayaan leenahay marna taliye ayaan leenahay waxeena dhan baa isdhex yaacsan waa inay israacaan, markaa miday ku fiican tahay waa taliyaha Asluubta iyo taliya Booliska.

Qodobka 181 faqrada1aad, Booliiska maxaa loola jeedaa? Maciidanka booliiskaa? Ma booliiska shacabkaa? Ma booliiska dadweynahaa? Waa inay cadahay, ciidanka booliiska Soomaaliyeed waaye.

Waa in si cad loo qeexaa ciidanka booliiska Soomaaliyeed, hadda aynu golaheena joogno oo halkaan doodii dastuurka ku jirno guutooyin iyo cutubyo katirsan geesiyaasha ciidanka booliiska Soomaaliyeed iyo kuwa Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed ayaa waxay kujiraan furinta injir kugashay, godad ku jira ama difaac ku jira ama bacsanaya cadowga.

Dalkastana wuxuu leeyahay sharciga iyo xeerka dastuurka uu dajinayo, dalku danahiisa ayuu ku dajinayaa America kaa leh aan lahayn, French ayaa leh aan lahayn, natherland baa leh aan lahayn, anaga nama quseyso, inaga duruufteena iyo dalkeena iyo ummadeena maxaan uqabaneynaa. Xildhibaankii iga horeeyey haddan magac sheego "point of order" ayuu iga qaadanayaa markaa xildhibaankii ayan ku ekaanayaa, wuxuu yiri aduunka meel loogu dhaqmo lahan ciidan Asluub oo dastuur kujira, aduunka meel looga dhaqmo oo 4.5 dastuurka kaga jirta ma iisheegi kartaa?

4.5 danteena ayaan u'aragnay soomahan, ciidan booliiska Soomaaliyeed waa ciidan kuwa Asluubta waa ciidan waxeynu u'aragnay waa danteena, difaaceyna, bad baadada iyo badqabka umadeena waaye, waan rabaa waan jeclahay maalin inaan gaarno ciidan oo dhan xitaa ka xooga dalka Soomaaliyeed inaan ka maaranno, buug aan aqriyey magaaladii nabadda iyo magaaladii barwaaqada oo dadka booliis laheyn,aysan Asluub laheyn, ooysan laheyn ciidan xoog, dadku wada shaqeeyo oo wada la nool yahay oo lawada faraxsan yahay, waa mala awaal.

Midda dhabta ah waxa waaye in aynu yeelano ciidamada qaranka oo ka kooban ciidanka xooga dalka soomaaliyeed o oleh colalkiis badda, dhulka, cirka. Ciidanka boliiska Soomaaliyeed oo hormuudka amniga gudaha ah, ciidan asluubta soomaaliyeed oo ciidankii sixida toosinta iyo ilaalinta xabsiyada mesena guud ahaan ay wada leeyihiin markey timaado difaaca dalkan iyo udhimashadiisa iyo ka difaacidda cadowga.

Waligeedna waa dhici jirtay dagaalkii 1977 aan galnay ciidamada ugu culu oo aagagga qaarkood xoreeyey oo dagaalamayey waxay ahaayeen xooga dalka Soomaaliyeed, booliiska Soomaaliyeed iyo Asluubta Soomaaliyeed.

Maanta oo halkaan joogno madaxtooyada aynu fadhino markii ay ka baxeen ciidankii ethopian-ka haynjiray, ciidanka qabtay dowladda gacanteeda ku simay wuxuu ahaa ciisanka boliiska Soomaaliyeed anaana xogheynta booliiska ahaa markaas wax la iiga sheekeenaya ma'ahan.
Markaa yeynaan ku ekaanin buugaagta aan soo aqrino iyo media-yaha waxaan ka aragno oo ah America ayaa leh aan lahayn, franch ayaa leh aan lahayn, Canada leh aan lehayn, war annaga waxa aan ubaahannahay iyo baahideena, amnigeena iyo jiritaankeena iyo qaranimadeena aan waxkasta ku saleyno, ciidamadeena qaranka oo ah afartii horey ugu tala galnay sidoodii bey inoo ahaanayaan.

Qodobka 184aad mabaadii'da ciidamada difaaca iyo amniga, waa in ciidamada difaaca iyo amnigu ay dhowraan markey gudanayaan waajibaadkooda mabaadii'da, qodobka 184 iyo qodobkii 182 oo layiri hay'adda asluubta ma iskeenayaan marna ciidan baan leenahay marna hay'ad baan leenahay.

Qodobada anoo aaad iyo aad ugu  mahadcelinayaa gudiyada oo dadaal galeen oo shaqo adag inoo qabteen, misne waxaan arkayaa halkaan markii la qorayey askarta ma aqaan halkaan way ka reebeen malaha askar diid miyaa ma ogi, lama ayna tashan dad "terminology"-yada ciidanka yaqaano umaleynayaa. Markaa marna inaad tidhaahdid taliye oo tidhaah hay'ad marna aad tidhaadid ciidanka qodobadaas oodhan wey isdiidan yihiin waxay ubaahanyihiin in si fiican loo akhriyo oo la iskula noqdo oo la iswaafajiyo maxaa yeelay, waxaan waa dastuur ummadeed oo yaali doona oo taariikhda gali doona.

Hadaad eegto qodobka 184 faqradiisa 2aad waxaa ku qoran xubnaha ciidanka waa in lagu taba baraa wadaniyad, asluub wanaag, tixgelin, xubnaha ciidanka xubnaha ciidankee? Mesna waxaa loola jeedaa ciidanka boliiska iyo ciidamka asluubta. Mesna halkaan maxaa ku qoran, halkaan waan kaga sootagnay inay ciidan yihiin, xaqiiqada aynu unoqono cagaheena aan dhulka dhigno dalkeena iyo dadkeena waxa uu yahay iyo baahida uu qabo dastuurkeena aan ku saleeno dastuurkani waa "document" nool berito insha'allah waan ka gudbi doonaa.

Boliis ciidan ah, asluub ciidan ah, milatery laftigood oo yareyno waxaas ilaahey waan ka rajenaynaa waana u shaqeesaneynaa, laakiin xaqiiqada sida aynu ku joogno yeynaan wiilka iyo gabadh Soomaaliyeed ee difaaca kujirta ee injirtu gashay ee labaacsanaya ama wax baac saneysa haddii maanta baarlamaankii loogu yiraahdo ciidan matihiin walaahi billahi banaankay usoo baxayaan. Ciidannimadu waa qab, hadda xabad baa la isku qaataa waagii hore laba askari markey dagaalamaan, cayda ugu weyn waxay aheyd "civil civil" dhalay.

Wiilkas iyo gabadhaas difaaca kujira miyaa maanta ayaan leenahay ciidan ma'ahan oo dastuurkeena kasaaraya iney ciidan yihiin, kuwa soo socda saaxiibaday ahna oo raba inay yiraahdaan hadhihina waan idin sheegayaa. Kuwa dhihi doona badiya kuwa kale ka noqda , afkiina yeysan kasoo bixin ciidanka qaranka waa ciidankeenu aynu naqaanay waa afartii ciidan, ciidanka xooga dalka soomaaliyeed iyo colalkiisa, waa ciidanka boliiska Soomaaliyeed, waa ciidanka Asluubta Soomaaliyeeed. Waliba asluubta aad loogu daarnadee laba goorne waan ku soo noqday waan ku celinayaa (Asluubta) waan adkeenaya cololkoodii waa kuwa hadda la loolin waaye xaaji Cali nimanka difaacaya oo halkaan ku fadhino waaye. Hanoolaadaan ciidamada hanoolaadaan, aad halooga fiirsado saaxiibadayna waliba odayaasha sharafta leh oo soo hadalnay afkiina kadhowra,waad mahadsantihiin.



**Sen. Mohamed Abdi Osman**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, guddoonka labada aqal, baarlamaanka labadiisa aqal, marti sharafka iyo dhammaan ka soo qeyb galayaasha waxaan idinku salamaya salaanta islaamka, Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.

Mahadsanid guddoomiye waxaan rabaa waxyar inta aan u gudagalin inaan ku laabto araartii, senator Xuseen Allaah kheyr hasiiyo, bisinka buu yiri halagu bilaabo ayuu yiri, runtii wax aad iyo aad ugu dayasha mudan waaye oo aad u fiican. Runtii labada guddi ee kasoo shaqeyay arrimahaan waxaan ku bogaadinayaa inay u sameeyeen arar, arartaasoo wax badan runtii ka muuqato, arrimo loobaahnaa inay mid walba wax kasoo qoreen, waxaan rajeynayaa in sida ay codsadeen wixii lagu biirinkaro lagu biiriyo, hadii aan akhriyo guud ahaan araartu inta ay ka kooban tahay sifiican baa loo soo qoray waxaan kaliya oo rabaa waxyar "*edit*"-gareeyaan oo xarafo qaarkood iyo hadalada qaarkood xoogaa ay iswaafajiyaan. Lakiin runtii guud ahaan waan soo dhaweynayaa waaana wax aad iyo aad u wanagsan oo la rabo oo loo baahnaa, weyna ku mahadsanyihiin guddigu. Arrintaan araarta, xildhibaan xildhibaanada ka mid ah ayaa maalin dhaweyd isagoo araarta wax ka akhriyaya wuxuu soo qaaday wuxuu yiri dawladii kacaanka gaboodfalkii ay sameysay waa in dastuurka lagu qoraa, anigu waxaan qabaa arintaasu Meesha maqabato, arintaas laguma qori karo dastuurka intaas markaan dhaafo.

Waxaan u guda galayaa doodeydii qodobka 177aad hay'adda amniga qaranka waxaa kormeeraaya oo la xisaabtamaaya hey'adaha rayidka, hay'adaha rayidka aniga waxaa halkaa ku dari lahaa waxaa kormeeraaya oo la xisaabtamaaya hay'adaha korjoogteenta ku leh ayaa la xisaabtamaaya. Isla qodobkaas faqradiisa 4aad marka la xaqiijoyo baalayiri danta khuseysa amniga qaran, danta arrinkaas waxaan dhihi lahaa marka la xaqiijiyo arrinta khuseysa amniiga qaranka danta aminga qaranka in lagu badalo, waxaa la dhawrayaa mabaadi'da dastuurka marka kalmadaa danta waxaan dhihi lahaa arrimaha in lagu beddelo.

Qodobka 179aad oo ah golaha amniga qaranka wuxuu ka koobanyahay, waxa ku jira golaha amniga qaranka oo u xilsaaran kormeerida aminga qaranka, jihenta, qorsheynta iyo hawlaha amniga qaranka, meeshaan ku gacansiinta waxaa kaga haboon waxaa qabaa  waxaa ka gacansiinta madaxweynaha federaalka gudashada xilalkiisa, marka halkii la dhihi lahaa ka gacansiinta, isla qodobkaaan faqrada 2aad amniga qaranka wuxuu ka kooban yahay madaxweynaha janhuuriyada oo ah talyaha guud ee ciidamada  qalabka sida guddoomiyaha iyo amniga qaranka reysalwasaaraha halkaas markii tii hire la fiiriyo waxaa siyaado ku ah mar haddii la yiri xeer halagu soo saaro wasaaradaan duulista hawada kuma aysan jirin arrimaha guddaha tii hore kuma aysan jirin.

Waxaa jira guddiga amniga ee heer dawlad gobleed oo ah kuwaas oo kaabaaya shaqada amniga qaranka baa la yiri, marka sidaan ognahay dawlad gobleedyada waxay leeyihiin amni qaran bay leeyihiin oo hay'adahooda ay korjoogteeyaan, marka amniga qaranka oo federaalka iyo amniga dawlad goboleedyadu waxa weeye wey iskaabayaan waxaa ka dhaxeeyo xiriir shaqo ayaa ka dhaxeen kara.

Qodobka 180aad oo ah ciidanka xooga dalka oo ah ciidanka qalabka sida ee jamhuuriyada federaalka wuxuu ka kooban yahay halka kan saddex ciidan baa lagu qoray lakiin ciidanku waa afar ciidan weeye, waa ciidanka cirka, waa ciidanka difaaca cirka, ciidanka bad aiyo ciidanka lugta afartaa ciidan weeye. Isla qodobkaan faqradiisa (d) gacansiinta boliiska marka ay jiraan xaalado deg-geg ah ama xaalada dagaal si looo ilaaliyo amniga iyo hantida dadka si waafaqsan dastuurka iyo xeerarka jamhuuriyada federaalka soomaaliaya, waxaa isticmaalkooda ogolaanshaha golaha amniga qaranka oo si joogta ah ugu warbixinaaya baarlamaanka federaalka soomaaliya. Taasu waxaan u maleynayaa inaysan dhicin baarlmaanka inuusan wax warbixin ah amniga qaranka iyo hay'addaha amniga mid inuusan ka helin, waxaanse rajeynayaa in arrintaasi lagu baraarugsanaado hadda ka bacdi warbixinta ay soo gaarto baarlamaanka.

Faqradda 4aad ciiidanka difaaca qaranka waxaa loo adeegsan karaa guud ahaan dalka, gudaha dalka marka ay jiraan xaalado deg-deg ah, ama xaalada kale oo lagu xusay dastuurka iyadoo lagu saleynaayo go'aan u gaar ah oo baarlamaan ansixiyay, iyadana waxa waaye go'aamadaas waxaa la doonayaa oo Meesha ku jirta in baarlamaanka ay hoos yimaadaan.

Qodobka 181aad waxaa halkaan lagu dhisaayaa booliis, xilibaankii iga horeeyay arrintaasu waa taabtay waxaa la dhisaayaa boliiska soomaaliyeed waxaa in jumalada sifiican loo qoro oo la gaarsiiyo boliiska kaliya ee aan la garane boliiska soomaaliyeed.

Faqrada 5aad isla qodobkaas xukuumada federaalka ayaa dajineysa siyaasada guud halbeegyada qabsoomida qorista xilalka dalacsinta iyo mida garaadaha howl-gabnimada iyo habraacyada kale ee dhammaan boliiska ee heer federal, waxaa lagu soo saarayaa xeer uu

ansixiyo baarlamaanka federaalka somaaliya. waa runti waan soo dhaweynayaa waxaana ajeynayaa inay dhaqangasho.

Qodobka 182aad xilibaankii iga horeeyay ayaa sheegay ha'ada asluubta ayaa lagu qoray, marka runtii waa ayaan daro khalad uun dhacay weeyi, waxa weeye ciidanka asluubta waa ciidan maahan hay'ad madaxbannaan, hay'ada asluubta ayaa lagu qoray waxa la yiri waa ciidanka asluubta soomaaliyeed ama dawlad gobleed ha'ahaato ama dawlada federaalka ha ahaatee, mid walba waxa weeye ciidanka asluubta waaye. Runtii oo ka mid ah afarta ciidan aynu lenahay, waxaa aad iyo aad u faahfaahiyay xilibaankii iga horeeyay oo arrimahaan ciidan nimadana khabiir ku ah, aniga afar ciidan baan leenahay ciidankaasi midwalbaa waajibaad gooni waa leeyahay waajibaad ay iska kaashadaan oo wada fuliyaanna waa jirtaa, marka waxaa rajeynaa in arintaas la saxo oo halkaas hay'ad majirtee waa ciidan waaye.

Faqrada 4aad isla qodobkaan 182aad xabsiyada dawlad gobleedyada waxaa lagu xiri karaa laguna heyn karaa maxaabiista ku xukuman danbiyada dhaca awooda xeer dawlad goobleedka si waafaqsan dastuurka iyo xeerka federaalka iyo xeerka dawlad gobleedyada. Runtii waxaa waaye haddii ay dhacaan dawlad gobleedyada danbiyada waaweeyn "crime" ee dilka khatarta ah ama kuwa aad u khatarta ah oo ay suuragal tahay in maamul goboleedyada awoodooda ay ka baxsan tahay, inta badan waxaynu ognahay dawlada dhexe ayaa xabsiga loo soo gudbiyaa walaw xabsiyadaas lagu haayo maamul gobleedyadu ay ku hayaan wixii dil ha noqoto ama ama "crime" weyn ha noqoto cid kasta ha noqotee waxaa weeye, maadaama *fasilatis*-kaan ka xoog badan yahay mid dawladda federaalka in wixii danbiyada culus ah lagu xero runtii waan qabaa.

Qodobka 184aad waa in ciidamada iyo difaaca amnigu ay dhowraan markay gudanayaan waajibaad kooda markay gudanayaan mabaadi'da soo socota (d) waxaa la yiri daahfurnaan iyo la xisaabtan hay'adda rayidka u xilsaaran, ciidankii waxaa la leeyahay waxaa la rabaa in uu ka amarqaato hay'adda rayidka ciidankasta wasaarad buu hoos yimaadaa oo u ah in wixii inay "report-gareeyaan". Markaa waxaan halkaa dhihi lahaa tii hore ayay la midtahay rayidka u xilsaaran, wasaarada u xilsaaran in la yiraahdo oo rayidka ah, waayo korjoogteyta waxaa ku leh wasaarad baa ku leh, wasaarada korjoogteynta ku leh iney u "report"-gareeyaan.

Isla qodobkas isla faqradda 4aad xubnaha ciidama nabadgalyada iyo kuwa difaaca waa in lagu magacaabo laguna dalacsiiyo qaab ku saleysan aqoon mudnaan iyo tartan furan iyadana waa arrin fiican waan soo dhaweynaya. Qodobka 5aad dawladda federaalka waxaa waajib ka saran yahay iney hubiso habraacyada la xiriira shaqaaleynta tababarada iyo adeegsiga ciidamada amniga lagu saleeyo matalaad cadaalad ah oo ay ka dhex muuqdaan dhammaan deegaanada dalka. Markaa tan iyo labadooda waxaad moodaa midna waxaa la yiri matalaad oo goboladii baa la yiri midna waxaa la yiri waxa noqonaayo waa "mert" oo qofka yacnii shakhsiyan ama in lagu dalacsiiyo waa "mert". Halkaana waxaad moodaa waxaa ka dhadhamaaya 4.5 waxaa la leeyahay waa inay ka wada muuqdaan gobolada oo dhani ka wada muuqdaan, marka intaas ayaan kusoo gabagabeynayaa waad mahadsantihiin.



**Xil. Mahdi Mohamed Gulied**

Waxaan gudagalayaa oo u gudbayaa doodda labada cutub ee inoo harsan. Qodobka 177aad, faqradiisa 5aad, xarafka (b), wuxuu ka hadlayaa gobannimada iyo midnimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo idil, ay ku jiraan barriga, badaha, jaziiradaha iyo uurkooda hoose, hawadooda sare, geyi-qaaradeedkooda, dhul iyo biyo-goboleed kasta oo ku soo biira Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Anigu, "dhulka inagu soo biiraya" iyo "biyo-goboleedka inagu soo biiraya" ayaan xoogaa fahmi waayay. Kuwii inaga maqnaa iyo wixii inaga raacay waa la og yahay, balse "dhulka inagu soo biiraya" iyo "baddaha inagu soo biiraya" maxay tahay? Sidaa darteed, halkaa waxaan soojeedinayaa in labada guddi ay sii faahfaahiyaan marka ay mar dhow ka shaqeynayaan, insha Allaah.

Qodobka 178aad, hay'adaha amniga iyo difaaca, waxay ila tahay qodobkaas sidaas in loo soo dhigo waan raacsanahay; in la yiraahdo hay'adaha amniga qaranka waa sax. Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed amniga iyo qaranka way ku fooganyihiin. Laakiin aniga waxaan qabaa, saddexda dambe maadaama aynu dhisayno ummad dawladnimo casri ah, dimuqraadi ah, oo dastuur ku salaysan—inaan dib u eegno.

Marka hore, police-ka waxaan qabaa inuu noqdo *police commissioner*, oo hoggaanka police-kana uu noqdo qof khibrad ciidan leh ama police soo bartay; qareen (lawyer) wuu noqon karaa; qof human rights soo bartay wuu noqon karaa; qof political science ama management soo bartayna wuu noqon karaa. Waddamada federaalka badankood *police commissioner* ayay isticmaalaan, laakiin anaga maskaxdeena taariikhda aynu soo marnay awgeed waxaa inagu jirta "police force" iyo xoog. Waxa laga hadlayaa waa maskaxda; police-kuna wuu labisan doonaa, dress-kiisuna wuu xirnaan doonaa, qalabkii uu amniga ku sugaayay wuu yeelan doonaa, waana leeyahay. Sidaa darteed, anigu waxaan qabaa police-ka inuu noqdo *police commissioner* oo uusan noqon "police force", sharciga police-kana sidaas lagu faahfaahiyo. Asluubtana waxaan qabaa inay noqoto sixitaan; meel lagu saxo, lagu dhaqan-celiyo dadka fal-dambiyeedada geysta, waxna lagu tababaro.

Sidoo kale, hay'adda sirdoonka iyo nabad-sugidda qaranka, anigu inay madani tahay ayaan qabaa. Waxaan qabaa inaanay ciidan noqonin, oo si qarsoodi ah xogaha iyo xuuraanka loo baahan yahay ay u sameyso. Marka laga reebo dhinaca amniga iyo sugistiisa ay kaga jiraan mooyaanee, anigu ciidamada inay ka mid yihiin ma qabo. In la yiraahdo hay'adaha amniga waa sax; in saddexdaas hoose aan ciidan laga dhigin ayaa inoo fiican, oo halka aynu u sii soconno hadda ayaynu u sii sahansaneynaa.

Qodobka 179aad, faqradiisa 2aad, anigu waxaan qabaa halkaan Golaha Amniga Qaranka inuu ka kooban yahay Madaxweynaha Jamhuuriyadda oo ah taliyaha guud ee ciidamada qalabka sida, ahna guddoomiyaha golaha; dabadeedna waxaa la taxay ilaa sideed mas'uul, sida Reysul-wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo Wasiirka Gaashaandhigga. Laakiin wasiiradu way is beddeli karaan: awal horreba arrimaha gudaha laba ayaa loo jebiyay, oo arrimaha gudaha iyo amniga gudaha ayaa la yiri; waxaa dhici karta in mustaqbalka la mideeyo, waana suurtagal. Cadaaladda iminka, sida ay u taal, uguma jirto; "cadaaladda dastuurka" ayaa ah, haddana cadaaladda oo keliya ayaa la yiri. Wasaaradda gaadiidka iyo duulista hawada ayaa lagu soo daray, halka gaadiidka badda aan la sheegin.

Sidaa darteed, waxyaabaha halkaan dastuurka lagu qoray ee lagu xaddiday, waxaan qabaa in xeerka la soo saari doono loo daayo: in gole amni qaran la dhisi doono, faahfaahintana sharci gaar ah ha qeexo. Halkii aynu dastuurka ku xaddidi lahayn liis iyo faahfaahin, doodda, liiska ay noqonayaan, waxay kala ahaanayaan, faahfaahintooda, iyo guddiga farsamada ay yeelanayaan—sharci Baarlamaan oo labada aqal ee Baarlamaanka ha faahfaahiyo, ha sheego cidda ka kooban iyo waxa ay kala yihiin. Sharciga waa la beddeli karaa, laakiin dastuurka afti dadweyne hadduu galo waa adagtahay in la beddelo; iminkana qudhiisana wadooyinka lagu beddelayo way xaddidan yihiin. Sidaas awgeed, yeynaan halkaan wixii sharci faahfaahin karo mabaadi'da ku soo uruurin. Waxaan soo jeedinayaa in faqrada 2aad iyo faqrada 3aad loo daayo sharci ama xeer Baarlamaan oo faahfaahiya.

Qodobka 180aad, Ciidanka Xoogga Dalka oo ah ciidamada qalabka sida ee Jamhuuriyadda Federaalka, wuxuu ka kooban yahay ciidamada difaaca dhulka, badda iyo cirka. Tan qudheeda anigu waxaan qabaa in xeer lagu faahfaahiyo. Kuwana kale ayaa soo bixi kara, sida *cyber space* iyo meelo kale haddii teknoolojiyadu inoo saamaxdo. Sidaa darteed, taana xeerka ha lagu sii faahfaahiyo; yaanaan halkaan lagu sheegin qaybaha uu ka kooban yahay ayaan leeyahay. Laakiin mabaadi'da kale—sida difaacidda dalka, ilaalinta gobannimada, badbaadinta iyo gurmadka dadka tabaaleysan haddii ay dhacdo, gacan siinta police-ka waqtiga loo baahdo—waxyaabahaas oo dhan waa fiicanyihiin.

Waxaase mooddaa in Qodobka 177aad (faqradiisa 5aad) iyo Qodobka 180aad (faqradiisa 2aad) ay isku soo noq-noqonayaan; waxyaabihii Qodobka 177aad, faqradiisa 5aad lagaga hadlay ayaa haddana halkaan looga hadlay. Sidaas darteed, in dhinac la iskugu minguuriyo, oo redundancy-ga la yareeyo, ayaan soojeedinayaa, maadaama ku-celcelintu ay macno tirto dhadhanka sharciga uu leeyahay—iskaba daa dastuurka oo loogu talagalay inuu mabaadi' kooban oo cad, nuxur ballaaranna ku fadhiya uu ka shaqeeyo. Sidoo kale, Qodobka 177aad (faqradiisa 5aad), Qodobka 180aad (faqradiisa 2aad) iyo Qodobka 184aad (faqradiisa 1aad) way isku soo noq-noqonayaan; bal adinku isla akhriya mar dhow saddexdaas qodob. Waxaan soojeedinayaa in meel lagu uruuriyo, wixii halkaan looga hadlayna aan meel kale looga hadlin.

Qodobka 182aad oo Asluubta lagaga hadlayo, faqradiisa 2aad, waxaad laba jeer ku qorteen "daryeelka maxaabiista"; marka halkaasna maxaabiista ayaa lagu soo celceliyay laba goor, taasna waa in la saxo.

Waxaan u gudbayaa Qodobka 186aad, wuxuu ka hadlayaa xaalad degdeg ah. Xaalad degdeg ah waxaa lagu dhawaaqi karaa oo keliya marka ay jirto. Marka ugu horreysa, in la adkeeyo ku dhawaaqista xaalad degdeg ah waan idinku raacsanahay, waayo fulinta hadba ciddii joogta *state of emergency* ama waddanka xaalad degdeg ah inuu galo way iska jeceshahay. Sidaa darteed, in la adkeeyo dariiqooyinka loo marayo iyo sababaha keenaya waa fiican tahay. Hase yeeshee, Qodobka 186aad, faqradiisa 1aad, wuxuu leeyahay xaalad degdeg ah waxaa lagu dhawaaqi karaa oo keliya marka ay jirto "gadood ballaaran." Gadoodka muxuu noqon karaa? Marar badan shaqaale ayaa gadoodaya ama ciidanka qudhiisa ayaa gadoodaya. Haddaba, gadood ballaaran muxuu nuxur ahaan noqonayaa? Inahaas ayaan amniga kaga hadlayaa. Haddana waxaan u gudbayaa cutubka ku xiga ee wax-ka-beddelka dastuurka iyo habraaca wax-ka-beddelka.

Qodobka 188aad, faqradiisa 2aad, yaa soojeedinaya? Waan idinku raacsanahay in dastuurka laba siyaabood wax looga beddelo: inuu noqdo *Rigid* oo ay adagtahay wax-ka-beddelkiisa aan si fudud loo taaban karin, iyo inuu noqdo *Flexible* oo ay fududahay siyaabaha wax looga beddelo. Dastuurkeennu wuxuu u badan yahay inuu *Flexible* yahay wax-ka-beddelkiisu. Marka talaabooyinka Qodobka 188aad, faqradiisa 2aad la eego—yaa soojeedin kara iyo sida loo soo jeedinayo—waxaa ka mid ah: xubnaha Golaha Shacabka ama Golaha Aqalka Sare (saddex meelood hal, 1/3), Golaha Wasiirrada, mid ka mid ah dawlad-goboleedyada, madaxda fulinta ee heer federaal iyo dawlad-goboleedyada oo heshiis galay; waxaana kale oo aad ku dartay 150,000 codbixiyeyaal diiwaan gashan.

Halkaas, waxaad xoogaa u cusleyseen 150,000. Toban kun (10,000) sida loo helo ayaa iska adag, dadka ma abaabulna. In kasta oo 10,000 haddii la helo codkoodu meel uu gaaro ay iskaba adkaan doonto, oo haddii Baarlamaankii iyo dawladdii aan u jeedin oo riixayn waxyaabo badan jiri karaan, haddana 150,000 qof sida loo helo way adagtahay. Bal u fiirsada dadka yaa isdiiwaangeliyay ilaa iyo hadda; bahashu aad bay u sarreysaa. Malaha 40-kii kun ee markii horre la lahaa "wuu fara badan yahay" ayaad 3-laab, 4-laab wax ku dhow ka dhigteen. Sidaas darteed, malaha 10,000 iyo meelahaa in lagu celiyo, ama 40,000 kiisa in lagu celiyo ayaan soo eedinayaa—ileenn meelahaan kaleba waa *Flexible* oo way fududahay sida wax looga beddeli karo. Marka laga yimaado mabaadi'da guud ee Qodobka 188aad, faqradiisa 6aad ee aad ku sheegteen qodobadii 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee dastuurka ayadu *Rigid* tahay oo ay adagtahay si wax looga beddelo, taa dadweynaha dib ha loogu noqdo ayaan oran lahaa; haddii 10,000 meelahaa laga dhigo, 40,000 kiisana ha lagu celiyo.

Qodobka 191aad, guddiga la socodka dib-u-eegista iyo hirgelinta dastuurka, faqradiisa 1aad, wuxuu leeyahay guddiga la socodka iyo hirgelinta dastuurka wuxuu ka kooban yahay: 5 xubnood uu dooranayo Golaha Shacabka, 5 xubnood uu dooranayo Golaha Aqalka Sare, iyo hal ergay oo ka socda dawlad-goboleed kasta. Halkaa, ergayga meeshii waxaa jooga 5 xubnood oo halkaa aynu ku dooranay, oo aad aragteen ololaha iyo xamaasadda iyo sanduuqa lagu rido. Waa saddexda doorasho ee aynu sameyno: madaxweynaha, iyo shir-guddoonka (3 xubnood). Waxaa inoo soo raaca oo aynu dooranaa shanta xubnood ee guddiga dastuurka ka mid noqoneysa—ha noqoto Aqalka Sare ama Golaha Shacabka iyo maalintii dhaweyd ee Baarlamaanka East Africa xubnihii inoo matalayay aynu dooranay.

Marka anigu waxaan oran lahaa: 5 xubnood iyo 5 xubnood 10 xubnood oo la soo doortay ayaa fadhiya—xubin qof iska soo magacawdayna way la fadhidaa. Sidaas darteed, hal xubin oo ka socda golaha wakiillada ee dawlad-goboleedyada waa in loo soo doortaa si la mid ah sida xildhibaannada Golaha Shacabka iyo xildhibaannada Golaha Aqalka Sare loo doortay: in loo soo codeeyo. Dawlad-goboleedka, tusaale ahaan Baarlamaanka Galmudug ama Koonfur Galbeed ama Hirshabeelle, xubnaha tartan furan hala siiyo; qof baa ku guuleystay oo aqlabiyadii soo doorotay. Markaas qof tobankii xildhibaan oo kale la siman ayuu noqon lahaa. Taa ayaan soojeedinayaa.

Qodobka 193aad oo waajibaadka caalamiga ah iyo heshiisyada caalamiga ah ka hadlaya: waxaa fiican, Baarlamaankaow, inaanan degdegin haddii dawladdeennu soo saxiixdo oo Baarlamaanka la keeno ama convention-ka halkaan aynu kaga doodno. Waa in aynu eegno qodobadooda; observation-ka aynu ka qaadan karno, weliba guddiyada Baarlamaanka ee labada aqal ayay quseysaa. Dawladdu way soo saxiixi kartaa, wayna inoo imaan doonaan,

laakiin qodobada mar dhow dabarka inagu noqonaya ama ina xanibi kara, ama dhaqanka, diinta, ama danaheena ka hor iman kara, waa in aad loo faaqido. Sida heshiiska caalamiga ah uu qeyb uga noqonayo dastuurka waa in la adkeeyaa. Dood weyn baa jirta international law marka la adkeeyaa public international law: sidee buu sharcigu ugala mid noqdaa, sidee bay aragtiyadu u kala duwan yihiin, iyo sidee buu wadooyinka sharcinimo u maraa.

Marka anigu waxaan oran lahaa: heshiisyada caalamiga ah ee dastuurkeennu sheegay, heshiisyada caalamiga ah ee Baarlamaanka Federaalka ansixiyo waxay qeyb ka noqonayaan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; marka (1) dastuurka mar walba ha ka sareeyo, iyo (2) dariiqa ay uga qeyb noqonayaan aynu ku faahfaahinno habraaca wasaaradda arrimaha dibadda ee heshiisyada caalamiga ah lagu faahfaahiyo; iyo (3) in la xuso reservations-ka aynu ka qaadaneyno meelaha aan inagu qaadanin ee ka mid ah heshiisyada.

Maalin dhaweyd East Africa ayaynu isku qaadnay, waanu ka mid noqonay, halkaan waa taa ogeedeen. Convention-kooda waa weyn yahay, ballaaran yahay, lifaaqyo badan oo shuruuc baa ku lamaan. Dabadeedna dalaq baynu niri; dabadeedna Baarlamaankii aanu halkaan ku ansixinay ee ogeedeen, sida lagu doortay ayaa baaxasoorihii ugu horreeyay dhawr bilood iminka maxkamad ku xaniban—inkastoo aakhirkii la inoo xukumay in wada sax ah ay ahayd. Sidaa darteed, waxaan soojeedinayaa inaynu heshiisyada derisno, Baarlamaankaow, inta aan la meel marin oo aanay gacan u taagin.

Qodobka 195aad, dhaqan-galka dastuurka iyo aftida dastuurka, faqradiisa 2aad, wuxuu leeyahay: aftida waxaa la qabanayaa marka la xaqiijiyo in shuruudahan soo socda la buuxiyay—(1) in maamul dawladdeed oo shaqeynaya uu ka jiro dawlad-goboleed kasta; yacnii dawladda federaalka inay saameyn ku leedahay oo gaari karto, dawlad-goboleedka qudhiisuna uu maamulkii oo dhan gaari karo; (2) in ugu yaraan 80% goobaha cod-bixinta ee la qorsheeyo dalka oo dhan ay yihiin kuwo ammaan ah oo la gaari karo.

Anigu 80% dastuurka ku qoran ma haboona ayay ila tahay. Miqiyaaska noocaas ah, sharciga doorashooyinka ama xeerka aftida dastuurka ayaa ka hadli kara: maamulka sanaadiiqda, meelaha la geynaayo, sida loo geynaayo, iyo inta loo baahan yahay. Miqiyaaskaas aynu labada xeer u dhaafno—sharciga doorashooyinka iyo kan aftida dastuurka oo Baarlamaanka meel marin doono—ayaa fiican. Sidaa darteed, in halkaan 80% sanduuq codbixin aan dastuurka ku sheegno aynu ka dayno ayaan soojeedinayaa; marka xarafka (2)(b) meesha malaha ekee ha laga saaro.

Ugu dambeyntii, Qodobka 197aad oo xafiiska garyaqaanka guud ka hadlaya: anigu maalintii horreyna waan sheegay, intii dastuurkeennu 2012 jiray ilaa iyo hadda dood weyn baa garyaqaanka guud iyo xeer ilaaliyaha guud ka taagan. Marka, si ay u kala cadaato oo aanay shaqooyinka iskugu qabsan, xiriirka lala soo sameynayana iskugu qabsanin, aynu garyaqaanka guudna (Solicitor General) ku hor qorno, xeer ilaaliyaha guudna (Attorney General).
Waad mahadsan tihiin. Wassalaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.



**Xil. Mohamud Abdirahman Omar**

Bismilaahi raxmaani raxiim, alxamdulilaahi rabil caalamiin, wasalalaahu calaa nabiyinaa muxamed wacalaa aalihii wasaxbihii salam tasmiican kasiiraa.
Aad iyo aad ayey u mahadsanyihiin shirgudoonka iyo guddiyada u xilsaaran dib-u-eegista dastuurka iyo dhamaan xubnaha labada aqal ee barlamaanka iyo hawlwadeenada inala jooga iyo martiduba.

Horaan ka bilaabayaa cutubka 12 aad qodobkiisa 178 oo ka hadlayaa hay'addaha amniga iyo difaaca, sida la sheegay hay'addaha amniga faqradiisa 1 aad waxa la qoray hay'addaha amniga ee qaranka waa kuwa soo socda markaa (a) baa la qoray, ciidanka xooga dalka, inta kale waxaa lagu qoray, booliska, asluubta iyo hay'adda sirdoonka. Markaa waxaan xoojinayaa oo ku darayaa cokayga in sidaa ciidanka xooga dalka ba ciidan loogu horaysiiyey, kuwa kalena loogu horeysiiyo ciidanka, ciidanka xooga dalka, ciidanka booliska soomaaliyeed, ciidanka asluubta qaranka soomaaliyeed iyo hay'adda sirdoonka iyo nabad suggida. Markaa kalmada ciidan waa in laga horaysiiyaa halka boolis kaliya ama asluub oo lagu asteeyaa inay ciidan yihiin ama ay ciidamada qaranka ay kamid yihiin.

Qodobka 179 golaha amniga qaranka faqradiisa 2 aad, waxa la qoray oo ay sheegaysaa golaha amniga qaranka wuxuu ka koobnaanayaa (a) Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka oo ah taliyaha guud ee ciidamada qaranka, ra'iisal wasaaraha iyo wasaarado ayaa lagu qoray meesha. Cida xubinta ka noqonaysa waxaan anigu soojeedinayaa in la qoro kolka laga reebo madaxweynaha iyo ra'iisal wasaaraha golaha amniga cida xubinta ka noqonaysa ama wasaaradaha xubinta ka noqonaya in lagu dhaafoo kaliya waxaa lagu xusayaa ama lagu soo saaridoonaa xeer uu baarlamaanku soo saaro ayaa lagu xeerin doonaa. Oo imika sidan faahfaahinta ah ee wasaaradaha loo qoray aan loo qorin ee xeer uu baarlamaanku soo saaro xubnaha ka mid noqonaya lagu xaddido.

Qodobka 180 oo ka hadlaya ciidanka xooga dalka faqradiisa 4 aad waxaa la qoray ciidamada difaaca qaranka waxa loo adeegsan karaa gudaha dalka kaliya marka ay jiraan xaalado degdeg ah ama xaalada kale ee lagu xusay distoorka iyagoo lagu salaynaayo go'aan gaar ah oo baarlamaanku ansixiyey. Markaa xaaladahaa kale ee marwalba taladaa la sheegayo ee aan meesha ku caday anuu waxaan soojeedinayaa xaalado ah in faqrada loo sameeyo oo a,b,c ah markaa xaaladihii meesha lagu muujiyo si aanu madmadaw ba u galin, xaalad heblaayo markay timaado, sidaa loo cadeeyo oo xaalada kaliya uun lagu deynin ayaan taana ku xoojinayaa.

Qodobka 182 oo ka hadlaya ciidanka asluubta oo kaliya la qoray sidaan xaga hore ba ku soo sheegay hay'adda asluubtaa la qoray markaa waa in hay'adda laga dhaafo oo lagu qoro ciidanka asluubta jamhuuriyada federaalka soomaaliya. Qodobka ama faqradiisa 5 aadna waa sidaas oo kale hay'adda asluubtaa la qoray markaa hay'adda inta laga dhaafo in lagu qoro ciidanka asluubta jamhuriyada.

Qodobka 183 oo ka hadlaya hay'adda sirdoonka iyo nabad sugida soomaaliya hordhaca ama araarta la qoray waxa ku qoran baarlamaanka federaalka soomaaliya ayaa soo saarayaa lagu xeerinayaa qaab-dhismeedka iyo hawlaha ay qabanayso hay'adda sirdoonku. Waxaan filayaa inaynu ansixinay xeer lagu dhisay hay'adda qaranka ama sirdoonka soomaaliyeed. Markaa halkaa laga leeyahay baarlamaankaa soo saaraya in la yidhaahdo sida ku xusan xeerkii aynu

hore u ansixinay ama baarlamaanka soomaaliya hore u ansixiyey ee lagu dhisay in sidaa lagu daayaan soojeedinayaa oo laga dayoo xeerdanboo lasoo saarayooo lagu dhisayo, wayba dhisantahay hay'adduye xeer baynu ku dhisnee.

Qodobka 184 oo ka hadlaya mabaadiida difaaca iyo amniga, faqrada 5 aad, waxa la qoray dawlada federaalka waxa waajib ka saaran yahay inay hubiso in habraacyada la xiriira shaqaalaynta tababarka iyo adeegsiga ciidamada amniga lagu saleeyo metalaad cadaalad ah oo ay ka dhex muuqdaan dhamaan deeganada dalka. Waa hadal wanaagsan oo distoorka lagu qoray waana siday tahay in loo raaco laakiin ficil ahaan imika markaynu dib ugu noqono ciidamada dalka ee kala gedisan, ciidanka xooga dalka soomaaliyeed, ciidanka booliska, ciidanka asluubta, dhamaantood waad aragteen kama muuqdaan taliyayaashooda metalaad cadaalad ah oo ku salaysan sida uu distoorku qoraayo. Markaa anigu waan soojeedinayaa xukuumada ama fulintu distoorka inay dabaqdo oo cadaalad lagu saleeyo sida dadka loo dalacsiinayo ciidamada ah ama deegaanada dalka soomaaliyeed oo dhani inay ka muuqdaan ayaa waajiba sidaa uu distoorkuba waajibka uga dhigay.

Qodobka 186 oo ka hadlaya xaalada degdega ah faqradiisa 7 aad waxa la qoray iyadoo laga soo hadlayo baarlamaanka federaalka wuxuu ogolaan karaa xaalad degdeg ah oo aan ka bednayn muddo saddex bilood ah ayey faqrada 6 aad qortay. Faqrada 7 aad na waxaa la qoray haddiise ay baahi timaado xukuumadu waxay baarlamaanka ka codsan kartaa muddo kordhin aan ka badnayn saddex bilood, waana inay ogolaadaan saddex meeloodow hal meelood. Qoraal ahan saddex meeloodow hal meel baa la qoray number ahaana waxaa la qoray two-third, saddexdii meeloodba laba meelood baa la yiri two-third inay ku ansixiyaan markaa taasi, waa khada madbiciya ayaan umalaynayaa oo in ay tahay saddex meeloodow laba meelood inay ku saabsantahaan filayaa.

Cutubka 13 aad qodobkiisa oo ka hadlaaya qodobada guud, qodobka 188 habraacyada wax ka beddelka distoorka faqrada 2 aad waxaan xoojinayaa oo anigu codkayga ku biirinayaa qaababka wax looga beddelayo dadka soojeedinaya markii laga hadlaayey xarafka (d) waxa la qoray ugu yaraan 150,000 oo codbixiyayaala oo diwaangashani inay soojeedinta ka qaybqaadan karaan ama ay soojeedin karaan distoorka wax kamida in la beddelo. Waxaan anuu soo jeedinayaa 15,000 kaliya laga dhigo halka 150,000 ka tahay ee dadweynaha codbixiyayaasha ah waa in 15,000 lagu soo koobo faahfaahintana xildhibaanadii iga horeey baa sheegay markaa tirada 150,000 aad bay u badan tahay 15,000 halaga dhigo, intaas ayaan anigu ku soo gaabinayaa, aad iyo aad ayaa u mahadsantihiin, salaamu calaykum waraxma tulaah.



**Sen. Ahmed Mohamed Ali**

Guddoonka labada aqal iyo xildhibanada labada gole dhammaan dhaqaalaha waan idin salaamey wax yar ayaan waxaan rabaa in aan ka taataabto ciidamada anagoo cutubka 12aad ay ku koobantahay arintayda wax badan ka dhihi maayo rag iga horeeyaa ka Hadley.

Qodobka 179aad golaha amniga wuxuu ka hadlayaa golahaan amniga dadka ay ka kooban yihiin waa lasoo qorey wasiiro laga bilaabo madaxweynaha oo ciidamada qalabka sida ah lakiin marka layiri kaaliyaal ayey yeelanayaa sida taliyaha xooga oo kale, taliyaha ciidanka asluubta iyo wixii lamid ah oo lawaday nabad sugid, xeer ilaaliyaha iyo lagaliyaha amniga qaranka

meeshaas waxaa ka maqan aan isleyahay aniga hadda Mugdisho oo marka aad joogto marka nimankaas ay yihiin oo taliyaha xooga iyo guruubkaas ay kujiraan waxaa ka maqan "governator"-reha gobolka.

"Governator"-aha gobolka markaas laga hadlaayo ha noqdo "state" ama ha noqdo sidii caasimada oo kale wuxuu kamid yahay dadka amniga ka shaqeeyo ayuu kamid yahay.
Qodobka 180 oo ka hadlaayo ee ka hadlaaya ciidanka xooga dalka soomaaliyeed ciidamada qalabka sida waxaa lagu sheegey in ay afar ciidan yihiin: Ciidanka Asluubta; Ciidanka xooga dalka soomaaliyeed; Ciidanka booliiska soonaaliyeed; Iyo ciidanka nabad sugida iyo sirdoonka qaranka soomaaliya
Lakiin halkaa ciidamada xooga dalka soomaliyeed ayaa waxa uu ka koobanyahay afar ciidan intana waxaa ku qoran 3 ciidan, afarta ciidan ee ciidanka xooga dalka soomaaliyeed ka koobanyahay dadka qalad baa uga jira, waxbaa isku qaldan lakiin in lafahmo ayaa loo baahanayahay. Fahanka waxaa kamid ah ciidanka dhulka waan fahaney waa "land forces" ciidanka la yirahdo iyo "air forces" oo ah ciidanka cirka "air divensive force" kuwa la yirahdo ayaa jira waa ciidanka difaaca cirka meesha waa ku qoranyahay laakiiin waxaa ka maqan ciidanka cirka ayaa ka maqan, bada ku xigta oo "sea forces" oo ciidanka bada ah marka dadka waxaa iskaga qaldan ciidanka cirka iyo ciidanka difaaca ee cirka.

Ciidanka cirka waa nimanka diyaaradaha wata ama miiga wata ama ciidamada daabula kana qeyb qaata taakuleynta ciidanka laakiin difaaca cirka waa nimanka ku shaqeeya gantalada raadeerada ciidanka uga xarada badan soomaliyana ayaga waaye ayaga ayey ahaayeen. Meel kasta oo magaalada xamar aad joogto meel uu ciidanka difaaca uusan degneyn malahan waa ciidanka diyaaradaha soo rida, gantalaha ku dagaalama, suuga ku dagaalama, taransataha kuli waxa diyaarad dalkaan kusoo xadgudba raadeerada kuli difaaca hawada oo dhan ayaga ayaa masuul ka ah. Markaa meshaas halaga dhigo afar ciidan oo ciidanka xooga dalka soomaaliyeed waxa uu ka koobanyahay afar ciidan oo kalah. Land forces; Air forces; Sea forcer; Air difensive forces

Ciidanka difaaca cirka ama ciidanka cirka labadaas waa ay isku dhow yihiin laakiin in la kala saaro saas ayey ahayd dowladii hadda ciidanka xooga dalka soomaaliyeed saas ayaa anaga nalagu soo barey saas ayuuna ahaan jirey. Ciidanka difaaca cirka waa ciidanka uga xooga badan ciidanka soomaaliya waana ciidanka ilaaliya hawada waaye wax Alle wixii kusoo xad gudba hawada soomaaliya oo diyaarad ah nimanka masuulka ka ah waaye in ay la dagaalamaan oo ay soo ridaan.

Waxaa kaloo jirta meelaha qaarkood ciidanka asluubta soomaaliya iyo booliiska waxaa lagu shaagay in ay hay'addo yihiin, ciidanka booliska soomaaliya waxay ka qeyb qaateen dagaalkii 1977dii ciidanka soomaaliya iyo itoobiya ka dhacay, aniga anoo xidigla ahaa oo miinyar ah ayaa waxaan tagey qeybta 54aad meel la yirahdo dogob yar, waxaa garabkeyga ka dagaalamaayey ciidanka booliiska soomaaliyeed gaar ahaan daraawiishta oo labo urur ah. Haatan hadda aniga furumahaan ayaan ka imaadey ciidanka asluubta soomaaliya ayagoo labo urur ah waxay difaac uga jiraa "area" xaaji Cali marka ciidanka asluubta soomaaliya iyo ciidanka booliiska soomaaliyeed, ciidanka xooga dalka soomaaliyeed, ciidanka nabad sugida iyo sirdoonka qaranka soomaaliyeed waaye. Nabad sugidu dadka qalad ayey ka fahansanyihiin waxay u arkaan wax hoose oo yar oo gaaban nabad sugid ayaa la iska yirahdaa ma ahan ee ciidamada ugu quwada badan soomaaliya waa ciidamada sirdoonka waaye, haatan dan ayaa qasabtey in

ay ciidamada ay heystaan hub laakiin aniga nolosheyda inta aan joogey dowladaan dowladii hore dhaxdeeda ma arkin nin laleeyahay ninkaas ayaa nabad sugid ah isheyda masaarin mana arag. Haddana wey jireenoo taliyayaal ayey lahaayeen taliyaha ciidanka nabad sugida waan maqli jirey laakiin aniga ma arkin nin laleyahay ninkaan ayaa nabad sugid ah laakiin taliyayaalba hadey yimaadeen meesha ciidan ayaa kujira.

Qodobka 184aad dalacaada ciidanka dadka qaladaad badan ayaa uga jira saraakiisheena yaryarka ahna hadda ma yaqaanaan nidaamka dalacaada ay ku dhisantahay, qofka dalacaada bixiya iyo taliyaha ciidanka xooga awoodda uu leeyahay darajada uu bixiyo iyo daraja xidig yaa bixya yaana qaada waa labo meelo meeli ku jirto waaye. Ciidamada booliiska soomaaliya waxa ay leeyihiin kormeere seddaxaad waa ninka xidig sugaha laakiin wixii kale soo buuxiyey ninkaas darajadaas ilaa halkaas laga gaaro ilaa aliflaha waxaa awood uleh in uu bixiyo darajadaas taliyaha ciidanka ama asluub ha noqdo ama mileteri ha noqdo, ama booliis ha noqdee. Nabad sugida aniga ma aqaano sida ay ku dalacdo hadda xaqiiqda dhabteeda ah ma ogi aniga ee xidig wixii ka bilowdo waxaa iska leh madaxweynaha jamhuuriyada asaana ka qaada haddii qofka aysan maxakamada ka qaadin.

Waxaa laga yaabaa in labedelo ciidamada oo la isku bedelo nin asluub ah lageeyo miletariga nin milateri ahna lageeyo booliiska yaa isku beddelaayo kuma cado intan. Madaxweynaha ayaa xaq uleh in uu isku beddelo arintaas madaxweynaha qaranka ayaa iska leh mas'uuliyadaas wuxuu hadday xidiq noqotana madaxweynaha ayaa saxiixa ilaa wixii kasareeya golaha wasiiradana waa lamarsiiyaa sida jananada oo kale nidaamkaasna waa jiraa. Markaa qofka xidig ayuu qaatey markaa waxaad arkeysaa nin xidig qaatey 2000 labadii kun oo ilaa hada xidigle ah yancnii mesha dhibka uu kajiro halkaas waaye, qofka matka uu xidig qaato labo sano in uu tirsado waaye labo sano markuu tirsado galkiisa ayaa lasoo bixinaa ninkaan danbi muu galey meya xidigtiisa labaad ayuu qaadanaa shurrud la'aan hogaan ka shaqeeya ayaa jira asaana shuqul ku leh. Aniga hadda waxaan aqaanaa 2000 iyo ka hor dad xidig qaatey oo wali xidigle ah waa toban iyo dhowr sano ama labaatan sano ku dhow, kuwo aan waligood waxna qaafanoo iska joogoo meelaha iska socdoo oo aan xataa ciidan meela aan ka shaqeyn gaashaanlayaal iyo waxay noqdeen "high" waa ka tageen. Marka xidig hadduu qofka qaato labo sano tirsanaa hadduuna qaranka denbi ka galin galkiisa la fiirinaa labada sano markuu tirsado waa lasiinayaa si uu kabtan ku tago waa in uu seddaxsano tirsado haddey kuu dhamaatana xidigtaada ayaad qadaneysaa.

Sida shuruucda ku qoran ciidanka xooga dalka soomaaliyeed waxa uu leeyahay labo buug oo lagu xukumo labadaas buug waa la yirahdaa

1. Buuga xara jooga ciidanka wuxuu ka shekeeya askariga kicidiisa, cuntada markuu cunaayo, calanka marka lasarayo, marka uu ordaayo, wakhtiga uu nasashada leeyahay iyo jiifkiisa ayuu ka shaqeeyaa.
2. Midna waxa uu ka shaqeeyaa xeerka ciqaabta ciidamada waaye buugaasna gooni waaye ninka sida lagu xukumaayo 24 saac nidaamkaas ayuu ka shaqeeyaa.

Markaa dalacaad way ku qorantahay meesha laakiin lama fahansana qofka bani aadamka ah goormuu dalacaad qaadanayaa hadduu qaatana meequu wadanayaa, markaa guddiga waxaan ka codsanayaa ama aan usoo jeedinayaa kow giidamada afarta ah horta in ay noqdaan ciidamada qalabka sida in ay noqdaan oo la yiraahdo ciidanka asluubta soomaaliyeed sida ragii iga horeyey sheegeen. Ciidanka xooga soomaaliyeedna waa afar ciidan afartiisa ciidana in

meesha lagu muujiyo hadda seddax ayaa idinku qoran ciidanka difaca cirka waa sax, ciidanka dhulka, ciidanka badda waa sax laakiin ciidanka cirka kuma qorna meesha, ciidanka difaaca cirka oo kaliya ayaa idinku qoran waa sax ciidan waaye lakiin ciidanka cirka gooni ayuu utaaganyahay afartaa ciidan ku muujiya. Waana mahadsantihii, salaamu calaykum waraxma tulaahi wa barakaatu.



**Xil. Mahad Abdulla Awad**

Waan salamayaa dhaman gudoonka iyo xubnaha labboda aqal iyo labada guddiyada ee hawsha inooga soo shaqeeyey mudane guddoomiye cutubka 12aad difaaca iyo aminga qaranka waa cutub aasasi u ah jiritaanka dawladnimada, nabada iyo ilaalinta xuquuqda muwaadinka ciidan la'aan lama ilaalin karo xuquuq.

Qodobka 177aad wuxuu qeexayaa mabaa'diida amniga qaranka wuxuuna si wanagsan u muujinayaa in amniga lagu maareeyo dastuurka iyo shuruucda dalka taasi waa tiir muhiim ah, laakiin waxan ku adkeynayaa in amni aan loo fasiran si aad u balaaran oo wax walba lagu darsado, si aan looga dhigin albaab furan waxan soo jeedinayaa in qeexida khataraha aminaga qaranka iyo talaabooyinka amniga ay si cad u qeexdo xeer uu baarlamanku dajiyo. Arrintaasi waxay u bahantahay xeerinbay u bahantahay si loo xadeeyo waxa ay khataraha amingu ay yihiin haddii kale wax walba laga dhigi karaa ha la ogaado.

Qodobka 179aad ee dhisaya golaha aminga qaranka isaguna waa tiir dhexaad muhim ah madaamo uu dajinayo hayad isku duwida heer istaraatijiyaded haddana waxan arkaa in awoodaha kormeer iyo jihayn iyo fulin ay isku dhax jiraan sidaas daraadeed waxan qabaa golaha amiga qaranku inuu noqdo heer istaratijiyaded iyo kormeer oo keli ah. Halka fulinta hawlgalada iyo maamulka malinlaha loo daayo xukuumada iyo wasaradaheeda, dastuurka aya qoraya in damaanad qaadka amnigu ay leedahay xukuumadu markaa hay'adan oo golaha amnigu qaranku waxa weeyi inay kormeerid iyo jihayn inay ahaato ayan soojeedinayaa sidaasna ha loogu cadeeyo.

Mudane gudoomiye mudanayasha sharafta le waxa noo muuqatay oon aad uga xumahay yacnii inay jirto isku day lagu badalayo tiirar aasaasi ah oo uu qaranku leeyahay dib-u-eegista dastuurku maaha Dastuur samayn, waa Dastuur sixid iyo Dastuur toosin weyan sidaas awgeed arrimo asaasi ah oo qaranku leeyahay hay'ado aasaasi ah laguma tirtiri karayo dib-u-eegista Dastuurka in sidaas loo fahansanado aya muhiima. Hadii la beddeli karayo bal golaha shacabka 10 xubnood aan ku darno wax suurta galaya maaha, waxa weeyi aan "system"-ka federaalka iska dayno wax suurta galaya maaha waa wax lagu soo heshiiyey dalku inuu leeyahay ciidan qaran oo military iyo police iyo Asluub leh waxa weeyi waa lagu soo heshiiyey, dastuurka ayay ku xardhan yihiin Hay'ado dhisan weeyi. Ma la idinka la doodayo hay'ada NISA guddoomiyaha golaha shacabku xaadir ayuu ahaa markii ay dawlada ku meel gaarka ahayd jirtay baarlamankeedii oon baydhabo joognay ayaa hay'ada Nabad sugida iyo ciidanka Nabad sugida laga dooday, doodii halka kaso bilaabantay ayay hay'ad ku noqotay.

Markaa waxa weeyi arrintaas iyada ah hay'ad ahaan ayay u dhisantahay inaad hay'ad ahaan markaas aan u xeerino oo aan dastuurka dib u eegistiisa ku cadayno ayan qabaa. Laakiin walalayaalow seddexda ciidan ee kale ee jira ee abuuran ee qaranka lagu aasaasay aas aaskiisii

ugu horeeyey ee sanad walba loo dabaal dago dib u eegis dastuur aynu ku badalanay wax soconaya maaha, awoodaas maba lihinba in hay'ado jiro oo dastuuri ah oo jamhuuriyada lagu aas'aasay waxa weeyi haddii dastuur la samaynayo waa la tirtiri kara waana la badali karaa. Laakiin xadka dib-u-eegista dastuurku ma dhama awood la idhaahdo boolisku ciidan maaha arintaas iyada ah waxa weeyi runtii aad baan uga xumaaday inaan arko in meelaha qaarkood ciidan laga dhigayo hadana marka cabaar la socdo hay'ad laga dhigayo. Maxay macnaheedu tahay markaa ma inaga is khiyaamayna walaalayalow arintaas iyada ah waxa weeyi mudane gudoomiye dib u eegista dastuurku qaybi waa sixitaan waxa weeyi sixitaan farsamo, arimaha qaarkoodna waa is khilaaf qodobo laysku qilaafsan yahay oo ubaahan in go,aan laga gaadho, arimaha qaarkoodna arimo siyaasiya oo waawayn oo wixii ay ka soo heshiin jireen dawlada heerarkeeda kala duwan weeyan. Arintaan haddii lanagu khilaafsan yahay si lagu daayo ciidanku siduu ahaa ee uu udhisnaa waxaan qabaa inay tahay arin khilaaf oo cod loo kala qaado haddi kalena walalayalow hay,adahaas waxa weeyi ciidamadaas uu qaranku leeyahay yaan la qalin daarin.

Dalkani dagal buu ku jiraa waxa weeyi xaalad adag buu ku jiraa haddii ay qolyo hay'addo ka dhigi doonaan ama ay shacab ka dhigi doonan qolyo danbe ha ahaato laakiinse anaga oo ah madashii ugu horaysay ee dib u eegista samaynaynay inaan hay'addihii inaan ciidankii qaranka aan hay'addo u beddelno walalayalow arintaas nama qabato sharafteenana ma dhama. Waxa weeyi labadan aqalna inay taariikhdiisu noqoto inay booliskii iyo ciidamadii jiray ay wax aan la garanayn u beddelaan oo meelna ciidan la leeyahay meel wax kale la leeyahay waxaas walalayalow wax shaqaynaya maaha arintaasi aadbaan u adkaynayaa. Hadii lagu adkaysanayana waxaan gudoonka ka codsanayaa in cod naloo kala qaado cida waxaas rabta anuu garan maaye, haday meesha fadhiyaan waxa weeyi hasoo istagan anaguna cod baan qadaynaa arintaas iyada ah ma soconayso in sidaas lagu daayo. Waxa weeyi in dhamantood ciidamada iyo hay'adda oo nabad sugidu ay noqdaan kuwo kormeer rayid ah oo fulineed iyo baarlamaan ay leeyihiin iyadana waa la cadeeyy laakiinse kormeer fulineed uu jiro oo heer golo wasiiro ah iyo mid baarlamaan in sidaas loo kala cadeeyo ayaan soojeedin lahaa. Waxaan sidoo kale ku dari lahaa qodob dhexdhexaadnimada siyaasaded ee ciidanka lagu qeexayo oo si cad oo lagu qeexayo oo lagu sii adkaynayo siday hada u qoran tahay way yara jilicsantahay. Mudane gudoomiye cutubka 12aad wuxuu ubaahan yahay in la adkeeyo saddex tiir oo kala ah: 1) jiritaanka ciidamada qaranka, 2) sharciyaynta iyo xadaynta awooddaha, 3) kormeerka rayidka ah ee fulineed iyo mida baarlamaan. Yacnii kormeer rayid uu ku jiraa ee waxa weeyi inay tahay heer wasiir iyo heer baarlamaan labbadaba ayaan soo jeedinayaa.

Hadaan u gudbo Cutubka 13aad waxa weeyi isaga wax wayn oo ka khaldan sida kii hore oo kale waxyaabo oo khatar ah kuma aanan arag laakiinse waxyaabo lagu kordhin karo ayaa jirta waxa ka mid ah ciwaankiisu waa Qodobo Guud wuxuuna ka bilaabmayaa oo uu ku dhamaanayana waa dib-u-eegis dastuur markaa in cinwaanka la balaadhiyo oo laga dhigo Wax-kabedelka Dastuurka iyo Habraacyadiisa ayaan soo jeedinayaa arintaas iyada ah inta qodobo guud kaliya la dhahayo.

Waan ku amaanayaa siday ku sii cadeeyen Qodobka 188aad qaabka wax looga beddeli karayo dastuurka mudane gudoomiye waxa weeyi arrinka dhahaya qaybaha wax ka beddeli kara ee soojeedin kara dastuurka tirooyin 40,000 iyo 150,000 iyo waxbaan arkayey arimahaasi wax "realistic" ah ma idiinla muuqdaan? Yacnii dasaatiir kale oo ummaddo abaabulan oo waxa weeyi 40,000 iyo 100,000 inay isa soo abaabulaan oo farqad dhahaan wax halaga badalo ay

fududahay ayaa jira. Lakiinse dadkeenan tuulo, tuulo ugudbi karin ee xaaladan ku jira inaan wax mala'awaala iska sheegno oo aan 150,000 iyo 40,000 iyo yacnii iska sheegno sidii inay tahay xisaab oo kale waxa weeyi 40,000 oo qof meel fadhido oo soomaali ah oo abaabulan oo qodob dastuur in wax laga beddelo soojeedin karta ma jirto 150.000 majirto 10,000 ma jirta. Waxa weeyi aniga soojeedintaydu waa wax oo 10,000 ka yar haddii 5,000 laga dhigayo waxa weeyi iyadaanba *"Realistic"*-ahayn bal *"for now"* dadkeenu uma abaabulna siyaasad dastuurka waaqiciisa meesha uu marayo kama war qabaan, xaalada ay ku jiraan ayaa dadka lagala jaanqaada laakiin dastuurka south Africa iyo dastuurka talyaaniga hadan kasoo qaato tirada oo dadka soojeedin kara wax-kabedelka wax *realistic*-ah ma noqonayso.

Markaa arrintaa tirada ahna in dib-u-eegis fiican lagu sameeyo ayaan soojeedinayaa iyada laftarkeeda waa in la raaciyaa tiradaas la shegayo sidee loo xaqiijinayaa? Markaa waxa weeyi habkii xaqiijinta iyo habkii loo diwaan galin lahaa ma tiro dhab ah baa mise waraaqo intan iska soo samaysto ayaa dhihi karaa 10,000 oo qof ayaan kasoo sexeexay mala iga yeelayaa? Sideed ku cadaynysaa inay sax yihiin iyo inkale? Waxa weeyi in wax lagu qoro ayay meeshasu baahan tahay may be diwaangalinta codbixiyayaasha oo doorashooyinka halagu saleeyo haddi la doono qaabkee 40,000 oo qof 150,000 oo qof iyo 10,000 oo qof ayaa soojeedisay wax hadda haadanu anagu soojeedino waad na tirin kartaan see laga yeelayaa dadkaas? Waa u baahan tahay walaalayaal in laga hadlo hadii kalena haba layska daayo. Yaadhahayo oo idin haysta hadda haddii tiradaas aad ka saarataanba yaa idin qabsanaya oo dhahaya 150,000 oo shacaba ayaad ka saarteen.

Haddii qaabka loo tirinayo iyo qaabka loo xaqiijinayo aydaan garanynin ha layska daayo aad baan idiinkaga mahad naqayaa sida wanaagsan eed usoo diyaariseen arrintii ciidanka ahaydna hadda dardaarankeedii waan idiin dhiibnay gudoonka ayaanan markhaati u qabsanyna arintaas haddii ay ku sii jirto soojeedinta guddoomiye arintaas waa in loo kala codeeyaa. Laakinse iyadoo duuduub ah intay guddigu noo keenaan yaan ha loo codeeyo lana dhihin, arrintaas iyada ah aadbaan idinkaga mahadnaqayaa labada guddi na aad baan ugu mahadnaqayaa shaqada fiicaan eey soo qabteen xildhinaanada labada aqal ee sida sharafta leh doodooda uso gudbiseyna iyagana aad iyo aadbaan ugu mahadnaqayaa.



**Xil. Mohamed Abdukadir Mohamed**

Bismillaah, waxaan rabaa inan gudaha u sii galo ujeedadayda iyo "comment"ga aan qabo.
Marka koowaad waxaan rabaa inan ayido oo aan la qabaa fikirka ah ciidanka qalabka sida ee Soomaaliyeed siduu ahaan jiray oo ah afarta ciidan oo mid kamid ahna hay'ad laga sii dhigay sedexdii kale ay soo hartayna maanta aan ujoogno soojeedinta ay ku jirto in laga dhigo laba kamid ah qaab hay'adeed. Waxaan qabaa fikirkaas ineysan aheyn maanta doodeeda iyo hadalkeeda mana ku fakireynin in halkaas la isla aadayo, siduu xildhibaankii iga horeeyey uu sheegay isbedelka waxyaabaha sharciga dib-u-eegis loogu samenayo waxay aheyd waxna in lagu daro waxna in laga dhimo wixii maanta aan la jaan qaadi Karin sharciga ama qaanuunka dalka u yaalana laga reebo wixii faa'iido u ahna lagu soo daro.

Laakiin in maanta ciidan boliiska iyo Asluubta layiraahdo waa hay'ad oo aysan aheyn ciidamadii qalabka sida oo muddo ku soo caano maaleyney aragtidaas maqabo, waxaan laqabaa xildhibaanadii iga horeeyey mana ahan arin yaroo fudud oo lagu fududaan karo ma'ahan.

Waxaan soojeedinayaa siduu uu xildhibaankii iga horeeyey uu yiri ayaan ayiidayaa haddii arintaasi ay lama huraan ay noqoto in cod lagaliyo. Maanta ciidan boliiska Soomaaliyeed uma dhaqmaan ciidan boolis kaliya furimaha dagaalkana way joogaan, waxayna buuxinayaan garabka malateriga.

Ciidan Asluubta Soomaaliyeed joogi jiray waagii horey xabsiyada oo dagaaladii horey ka qayb gali jiray sida 1977 taariikhda lagu haayaba isla maantana waxay joogaan furimaha dagaalka, markaa waxaan leeyahay guddiga arrintaas dib ha ugu fiiriyaan.

Qodobka kale oo aan rabo inaan abaaro waxa waaye qodobka 191 oo asagana tilmaamayo xubnaha guddiga dastuurka 5 aqalka hoose iyo 5 aqalka sare iyo xubin ergo ka'ah waxaan qabaa fikirka ah xubinta ka imaanaysa maamul goboleedyada in ay soo doortaan xildhibaanada state-ka doorashada sida annaga isku dooranay inay iyagana isku doortaan, meeshana ay ka baxdo. Hadda xubinta maamul goboleedka waxay ku timaadaa qaab magacaabis ah oo madaxweynaha state-kaas joogo qofka uu rabo uu soo magacaabo si taas loogu baxo waa in soo doortaan xildhibaanada maamul goboleedkaas isla xubintii ay usoo dirsanayaan guddiga dastuurka ee madaxabanaan, labadaas "comments ayaan qabay". Aad iyo aad ayaad umahadsan tihiin.



**Sen. Saynab Ismail Mohamed**

Bismillaahi Raxmaani Raxiim, waxaan salamayaa guddoonka iyo dhammaan xilibaanada labada gole, howlwadeenada, Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh. Waxaan horta guddoonka iyo guddiga ku boorinayaa sifiican baynu usoo soconay markii hore, cutubkii iyo labadii cutub waxaynu ka hadli jirnay dhow cisho oo araaraada oo dhan ku dhammeystirno, anuu maata waxaan ku soo tlagaly kii shalay inaan sifican ugu hadlo waana laga gudbay. Markaa waxaan leeyahay kuley wixii waan ku jirnaayee boobsiiska aan ka deyno oo sifiican halooga bogto wuxu waa dastuurkii qaranka waa "*docment*" noolaanaaya marka yaynaan boobsiin.

Cutubka labaad baan ka hadlayaa difaaca iyo amniga qaranka, qodobka mabaadi'da amniga faqradaa 3aad oo hay'adda amniga qaranka waxaa kormeeraaya oo la xisaabtamaaya hay'adaha rayidka, hay'adaha rayid, waxaan jeclaan lahaa in lagu cadeeyo baarlamaanka iyo golaha wasiirada si aanay wax kale u galin, halkaan ciidamada afarta ciidan waan qabaa ciidamadii soomaaliya lahaan jirtay oo sida xooga dalka oo lahaan jiray ciidankii cirka iyo bad iyo oo aan hadda sifiican "active" u aheyn in la xoojiyo. Waxaana qabaa afarta ciidan soomaaliya laheyd inagoo eegeyna context-geena sidaynu u jirno, xaalada aad moodid aduunka iney ka sii dhamaaneyso shuruucdii iyo wixii dadka kala hagaayay oo leysku xoogsheeganaayo, waxaan qabaa in ciidamadeena la xoojiyo maahee wax nusqaan inaanu loo sameyn. Qodobada dhammaantooda waxay xusayaan waajibaadka lagu leeyahay Meesha waajibaad hadduu soo galo xuquuq baa soogaleysa, waxaan jeclaan lahaa muxuu askarigu xuquuq leeyahay in dastuurka loogu xuso si hadhow ugu xisaabtamo, sida hada uu sheegay afcadey oo kale general-ku. Kuwaa iska xiran darajooyin waa hore ah, waa inay ogyihiin laftirkooda inay xuquuq leeyihiin xidigta markay xiligaa qaatan tan kale iney xiligaa qaadan karaan ama xeerarkana lagu xuso, markaa waxaan cadeynaya ama akidayaa adkeynayaa ciidankeena, ciidanka asluubta anugu dhal asluubeyd baan ahay, ciidanka asluubta howsha uu qabto waxay ka xuug badan tahay ciidama badan shaqo ay qabtaan. Sababta waxa weeye waa meeshii dilaaga iyo tuuga iyo

cidwalba lagu xiraayay, waxay sameeyaan farsamo gacmeed bay baraan, aduunka xabsiyadooda jaamacado ayaa looga soo baxaa marka waxay sameeyaan farsami gacmeed bay sameeyaan waxay ku sameeyaan asluubtii oo dhan asluubtii waxa laga yaabaa qof dambi loo xiray asagoo tuusan inuu kasoo baxo ciidanka asluubta waxaan qabaa in xoojiyo maahee inaanan xiligaan u qalmin inaan dhahno hay'ad halaga dhigo ama uma qalanto.

Ciidanka NISA waxaan ku xoojinayaa oo aan halkan ayada laftirkeeda ku dardaarankeyga ku darsanayaa qof ciidan inuu sidaa u shaqeeyo in la bartaa inaysan aheyn ba wax sharci ah, waayo ciidanka NISA wuxuu ka shaqeynayaa sirdoonkii gudaha ah iyo mid dibada ah. Markaa qofka in la aqoonsado asagoo macalin jaamacadeed ah waa inuu sirdoon noqon karaa, asagoo asluubta ka shaqeynaaya ayuu sirdoon noqon karaa, asagoo shaqo kale heysta laakiin "identity"-tigiisa haddeerna waxaa jirta in qofka ID-kaarkiisa qof siinaayo oo ku faanaayo inuu NISA yahay taasoo aan sharciyan aheyn in la aqoonsadaba qofka ka shaqeynaya ama ku howl leh.

Halkaan wasaaradaha ama golaha amniga qodobka 179aad wasaaradaha ku jira runtii waa kuwii ugu haboonaa waan ugu mahadnaqayaa, sababtoo ah markii la eego amniga wasiirka maaliyada waxaa lagala hadlayaa maaliyadii, cadaaladii xabsiga laftirkiisa wuxuu hoosyimaadaa ciidanka asluubta, wasaarada cadaalada gaadiidka iyo duulsita hawada iyo airport-yada, meelihii amniga laga kantarooli lahaa, wasaarada amniga iyo gudaha runtii waan bogaadinayaa waxaanana leeyahay waa intii ugu habooneyd in laga qeyb galo.

Ciidanka booliska soomaaliyeed waa ciidan qaran la xuso xili hore soo bilaabmay waxaana ka maqan oo general Bashiir uu xusay ciidamadu tafiiro ayay siin lahayeen ciidankii *forest*-tariga la oran jiray ama ilaalada deegaanka waan jeclahay in dib loosoo celiyo sababtoo ah wadankii oo dhan dhulkii xooluhu daaqeeyeen iyo dhulkii kale waxaad moodaa in la deegaameeyay inaanu waxba kala xadidneen in dhulboob lagu wado oo qofka iska xiranaayo intuu doono. Marka shurrcdii iyo waxyaabihii lagu soosaari lahaana wasaaradaha ku shaqada leh inay soo diyaariyaan ciidanka booliiskana hoos imaanayay oo ciidan bulshada hoos ula shaqeeya ciidankaa booliska ah oo guud iyo kaas *forest-t*ariga ah.

Mida kale ciidanka booliska qaranka guud ahaan waxaa laga rabaa xarumaha maamul gobleedyada oo dhan inuu xafiisyo ku leeyahay, kana howl galo oo federaalka iiyo dawladaha xubnaha ka ah inay kala miirmaan maahan, waa inay shaqooyinkooda isku jiraan si loo xoojiyo guud ahaan amniga iyo wada shaqeynta guud. Booliska wuxuu hoos yimaadaa wasaarada amniga halkaan ah faqradda 2aad oo 181aad oo oranaysa booliska wuxuu hoos imaanayaa wasaaradda ay khuseyso, ay khuseysada halaga daayo wasaaradda amnigay hoosyimadaa wsaaradda amniga halgu qoro, ma qaba anigu in wasaarad kale maadaama wasaaraddii amniguba ay jirto in wasaarad kale lagu sheego.

Ciidanka booliska iyo ciidanka asluubta oo federaalku marka loo eego maamul gobleedyada waxaa laga yaabaa in ciidanka qofkii xirfad lahaa ciidan iyo qofki sarkaalka soo ahaaba inuu federaalka wax usoo doonto, marka waxay tareysaa in maamul goboleedyada 'interrelation" yeeshaan ay tababaraan is dhexgalaan marka taas ayaan waxaan ku boorinayaa inay xarumahoogaas xoojiyaan. Faqradaan 5aad xukuumada federaalka ayaa dejinaysa siyaasada guud ee halbeega qaabdhismeedka qorista xilalka dalacsiin. Waa inuu jiraa xeer qoran oo ciidanka dhiirigalinaaya ama xuquuq dooda ay ku helayaan, waayo ciidanka hadeer ah iyo ciidanka soomaaliya marka loo eego xuquuqaad ayay helijireen aadbay u kala weyn yihiin.

Ciiidankii hore ciidan xuquuqdoodii oo dhameystiran heysta ayay aheyd waddankuna sida waa ka duwanaa, markaa ciidanku waa waalid oo *"school"* dhiganaaya aad ogtihiin maanta lacagta la'iska qaado gurri kiro ah ku jira si loo hagaajiyo waxan "community" la dhaho ciidanka iyo bulshadu isku soo dhawaadaan inay helaan iyaguna waxay xuquuq u lahaayeen dawlada ka helaan.

Qodobka 83aad hay'adda sirdoonka, hay'adda sirdoonka waa hay'ad aan anaga xeerar badan ayaan u ansixinay labadeena goleba oo qaabdhismeedkooda iyo awooddahooda intaba ka sheekaynaysay sidii aan kula balamayna waan qabaa inay "identity"-gooda aan la ogaan lana xoojiyo waxqabadkooda. Runtiina inay hubeysmaan duruuftaa keenaysa duruufta aan maanta ku nool nahay afarteena ciidan qaranba waa inay hubeysan yihiin, oo xoogeysan yihiin waayo waxaan ku dhexjirnaa dagaal gudaha oo xoog badan, waananna u bisil nahay oo u ceyrin nahay in cidii ina doontaayi isku dayi karto wadankaas qaniga ahoo hadana is hey-heysi ku jira mudo 40 sano ku dhaw.

Faqrda 2aad oo qodobka 184 aad waxa oraneysaa xubnaha ciidanka waa in lagu tababaraa wadaniyad, asluub, tixgalin, wanaag iyo hogaaminta dastuurka iyo xeerarka kale waxaas oo dhan waxaa keenaysa, marka uu helo xuquuqdiisa. Askarigu waa inuu mushaarkiisa helaa hadii iyo shidaal iyo dhaqaalo fiican helnana cida ugu horeysa oo mushaar loo kordhiyo ama xuquuqdooda sida hoy iyo wabarasho caruurahooda helaan in looga horeysiiyo *"priority"*-ga 1aad la siiyo ciidanka soomaaliyeed anoo kala saarin markaas ayay noqonayaan kuwa ixtiraama sharciga, kuwa ixtiraama bulshadooda lana shaqeyntoodana ay soo dhawaato.



**Xil. Dr. Elmi Mohamud Nur**

Waxaan ka bilaabayaa Araarta oo runtii araar balaadhan aad ku soo darteen, marka hore waan uga mahadcelinayaa guddiga aad iyo aad sida aadka u quruxda badan usoo bandhigay wax ka beddelka iyo dib-u-eegista dastuurka asalkana dib-u-eegista dastuurku waa sixid dastuurka weeye ee ma'ahan inaynu dib u qoreyno dastuurkii ama dastuur cusub sameynayno laakiin meelaha ubaahan in la saxo uun inaynu saxno ayaan ubaahanahay.

Waxaad runtii soo bandhigteen arar aad ku bilawdeen taariikhdii Soomaaliya hore oo waliba qadiimiga aheyd oo jiritaankeena taariikhiga ah ee qadiimiga ah aad ka bilawdeen, waxaan oran lahaa halkaas waxay ku haboon tahay in laga bilaabo sida dasaatiirta dunida islaamka oo dhan hadaad eegto. Waad ogtihiin ummad muslimiin aynu nahay horta inaynu magaca ilaahay ku bilawno oo bisinka ka bilawno, iyadoo dadkii hadlayaan, innagoo rumeysan aaminsan mulkiga iyo xukunkaba Allah Subxaanhu Watacaalaa leeyahay ayaan kuna dhaqmeynaa shareecada islaamka oo ah sharciga ugu sareeya dalkani leeyahay inaan soo bandhigno taas.

Markaa inay halkaan ka bilaabato ayaan runtii aad ujeclaan laheyn oo ay ka muuqato in umaddeena iyo waxaynu hiigsaneyno. Midda labaad inuu dastuurkani diyaarinayo, dhiiragelinayo, kobcinta iyo ku dhaqanka mabaadii'da asaasiga ah ee islaamka, marka taas lafteed in meesha aad loogu muujiyo ayaan door bidi lahaa.

Waxaa kaloo kujirta annagoo dareensan dhiibaatooyinkii kadhashay colaadihii waxaan jeclaan lahaa inaan waxyaabihii dagaaalka qabiilka uu keenay oo ummadda Soomaaliyeed waligeyd ka

dhici jirtay xili markii laga soo gudbo xili kale dhacaysay ilaa hadda oo suuragal ah oo taagan inaynu xasuusinteeda aynu ku dheeraanana ma'ahan oo inaan is xasuusino ma'ahan.

Waxa weeye inaynu ka hadalno annaga oo rumeysan khataraha nugleyn kara qaranimada Soomaaliyeed waxaan dhisaynaa dastuurkan in lagu kala bad baado oo go'aankeena lagala gudbo arrimahaasi burburka iyo nuglaanshaha oo uu sameeyo dib-u-heshiisiin ummad wadajirta oo mid ah in markaasi ujarsiiyo. Taas ayaan ubaahannahay runtii inaynu ka hadalno oo inaynu ka hadlin arrimihii colaadaha.

Waxaa kaloo meeshan ka yar muuqata oo marar badan lagu soo celiyey kala duwanaanshiyaha iyo qaybsanaanta arrimahaas inaynu yareyno ayaan ubaahannahay inaanu dastuurka ka muuqan arartiisana aan aheyn in ummadda Soomaaliyeed oo halka hore aad ku sheegteen inay ummad daqankeeda, dareenkeeda, midnimadeeduba iyo ilbaxnimadeeda ay ku saleysan tahay isku duubni bulsho oo ixtiraam ku dhisan ay tahay. Inagoo halkaan horey ku soo sheegnay inaaney halka dambe a ka muuqan wax u muuqda qaybsanaan inay jirto ummadda Soomaaliyeed.

Ummadda Soomaaliyeed waa ummad isku isir, dhaqan, isku diin iyo isku asal ah inay meeshaas qaybsanaan ay kajirto inaynu ka saarna waa mid muhiim weeye oo aaney qodobka hore dhaawacin. Waxaa kaloo iyadana ku jirtay annagoo qirsan kala duwanaanshiyaha goboladeena ereygaasi erey ku haboon ma'ahan inan nidhaahno kala duwanaanshiyaha goboladeena, gobaladeenu Makala duwana. Laakiin baaxadda dhulkeena ayaa kala duwan oo markaa ubaahan in federaalka lagu mideeyo arinta kala duwanaanshiyaha in lagu beddelo baaxadda dhulkeenna iyo goboladeenna inagoo ka duulayna in loo sameeyo nidaamka federaaliga ah.

Markaa ereyada qaybinta ah kala duwanaanshiyaha ah ama colaad horey jiri jirtay inaynu sheegno halkaan kuma haboona maxaa yeelay dastuurku waa taariikh ilana noolaaneyso oo runtii "document" inala yaala weye, markaa xagga midnimada iyo wadajirka iyo waxa dastuurkani adkenayo ee midnimadeena ah inaynu runtii ereyada aynu aad ugu doorano ayeynu ubaahannahay. Waxaan jeclaa cutubyadii hore maaliyadda wax ka yiraahdo laakiin gudoomiyuhu siduu sheegay iyadoo qoraal ah ayaan usoo gudbin doonaa hadduu Allah yiraahdo.

Waxaan ugudbayaa cutubka nahor yaala hadda arimaha amniga ah dabcan aad baa loo falanqeeyey loogana hadlay ku dheeraan maayo waana ku waafaqsanahay xildhibaanadii dhammaan intii ka hadashey ee runtii sida quruxda badan uga hadashey arrimaha amniga aad baan ugu taageersanahay.

Meelo yar yar oo kooban kaliya ka ishaari lahaa, waxaad moodaa farqooyin badan oo runtii la tir tirey sidey ugu soo noqdeen kuwa kale anay aad u cadeyn ayaa jira, taasna inaad aad uga fiirsataan ayaan aad ujeclaa.

Haddaan u imaado qodobka 177 faqradiisa 5aad, waxaa ku qornaa waxaa la hiigsanayaa dhowrista danaha Qaranka ee ku saleysan. Kama hadlo dastuurku hiigsi kama hadlo hiigsugu waa "vision" iyo aragti iyo waxa soo socda ayey sheegaysaa, laakiin wuxuu ka hadlaa waxa la xaqiijinayo ee la qabanayo dastuurku uu dabaqayo ayuu runtii laga hadlaa. Markaa waxaan oran lahaa waxaa la hiigsanayaa halka laga dhahay in layiraahdo waxaa la xaqiijinayaa

dhowrista danaqaha qaranka ee ku saleysan in layiraahdo ayey runtii u haboon tahay. Maxa yeelay hiigsigu malahan "macaayiin" halkan aad kaga qiyaasi karto majirto, dastuurku waa in la dabaqo, waa in lafuliyo, waa in laqabto shaqo la qabto ayuu u baahan yahay.

Qodobka 187aad sidoo hore uu u qornaa sida looga soo gaabshey hay'addaha amniga qaranka waa kuwa soo socda kaliya layiri, waxaa ka qurux badnaa hay'adaha qaranku waxay u taagan yihiin oo ku qornaa sidiisii hore ku qorneyd. Waana waa faqsanahay in arrimaha ciidamada aan laga tagin in lagu qoro, maxaa yeelay ciidanka xooga dalka, ciidan boliiska iyo ciidanka Asluubta waa ciidamo weeye oo soojireen ahaa, marka sidaas darteed in laga tagaana sax ma'ahan.

Mida kale ee lasoo jeediyeyna hay'adda nabad sugidda lafteeda in ciidamada lagu soo dhex daraa aniga ilama toosan, sia horey looga dhawaajiyey.

Waxaan kaloo runtii ku waafaqsanahay wasaaradaha qodobka 179aad oo ah golaha amniga qaranka waxaad moodaa in aad loogu dheeraaday golaha amniga qaranka in xeer loo sameeyo gaar ah oo xeer kaas uu faahfaahinayo oo faahfaahinta faraha badan halkan lagu sameeyay laga daayo. Maxaa yeelay sida laga dhawaajiyey dastuurku waa mabaadii'guud oo kooban oo macna balaaran samenaysa ee shuruucdii soo wada hoos galayaan ayuu markaasi noqon karaa, laakiin tafaasiisha hay'adaha iyo shuruucda u dhisan meelo fara badan ayey arrintaasi soo noqnoqotay oo lagaga hadlay in tafaasiisha lagalo waa laga fiican yahay.

Markaa hadday xeerar jiraan oo udegsan yihiina mabaadii'da guud ee xeerkaasi un baa la qaataa oo laga soo dhambalaa si ereyada xitaa lafteeda iskugu mid noqdaan, haddii ayna horey ujirinna xeer baa lagu soo saarayaa waa inuu sheegaa dastuurku in xeer lagu soo saarayo. Markaa nigu gali maayo tafaasiishu intay ka kooban yihiin laakiin guud ahaan waxaan rabaa qodobkaasi faahfaahintiisa faraha badan ee ku qoran halkan in laga gaabsado oo lagu ekaado in kooban nuxurkiisu cadahay loona daayo inta kale tafaasiisha ah in xeer lagu soo saaro.

Waxaan isweydiinayaa marka latirayo qodob weyn ama hay'ad ku jirtay dastuurka ku jirtayna waxaad ubaahan tahay in "justification" la sameeyo "why" looga maarmay hay'addaas marka hore dastuurka ku jirtay ee ku qornayd in laga saaro maxaa looga maarmay "justify"-gareeyey laftigeeda waa mid muhiim ah oo in halkan lagu sheego ama si kale loo soo qadimo ayey ku haboon tahay. Mesalan, waxaa qornaa marka layimaado qodobka 185aad oo gabood falada xuquuqda aadanaha waxaa halkaan ku hoos qornaa qodob ahaa dasturkii horey 129aad u qornaa ee xafiiska gardoonka.

Xafiiska gardoonku wuxuu kamid ahaa xafiisyada madaxbanaan ee dastuurka kamid ah ayuu ku jiray dastuurka ku qoran, haddii gardoonkii laga maarmay waxay ku fiicnaan laheyd in la sheego oo layiraahdo xafiiskaasi sababahaa darteed baa loo baahneyn. Berigii baarlamaankii 9aaad baa mar lakeenay in sharciga gardoonka laga shaqeeyo oo la soo diyaariyey laakiin xiligaasi oo shuruucdii asaasiga ahayd ee faraha badnayd ee dalku ubaahnaa ba ay diyaarna u'ahayn waxaan dhahnay "priority" ma'ahan shuruucda kale horta hala keeno ayey ahayd, xiligaa "priority" ma ahayn ayaa dib loogu dhigay laakiin sharcigaasi baarlamaanka ayaa la horkeenay xiligaasi.

Markaa in gabigiisaba laga maarmo wuxuu ubaahan yahay "justification" in la sameeyo maxaa yeelay wax yaabo fara badan oo dulmi ah oo dadweynaha ku dhacaya ayuu gardoonkani bad baadinayaa "Ombudsman" bay dhahaan, mesalan waa tii diyaarad baad tikidh ka goosaneysaa "airport"ka bay kugu balamisay waa tagtay waxaa laga yaabaa inaad gobol ama tuulo ka timid waxaa lagu yiri diyaaraddii hadda ma shaqeynayso beri usoo noqo lagu yidhi, waana lagu balamiyey. Qofkaa dhibtaas ku dhacday yaa mas'uul ka ah, maahee waadba timid waxaa lagu yiri diyaaraddii waa ay buuxdaa adigoo tikidh kii haysta iska noqo lagu yidhi, qofkaasi yaa marka dhibta ku dhacday ee hotel qaadanaya, qarash bixinaya.

Waxyaabaha "service" ka bani'aadamku bixiyo qaladaadka ka yimaada oo faraha badan leh ama dhakhaatiirta ha noqoto ama "service" ka diyaaradaha adeega 'transport' ga ha noqdo ama jidadka maritaankeeda laftigeed ha noqoto xadgudubyo fara badan waxaa jira bani'aadamka lagu sameeyo oo aan qofku qaadi Karin. Laakiin hadhow keeni kara iska hor yimaadyo bulsho keeni kara, bulshado inay iska hor timaado meesha uu dhib ka dhaco oo dagaal kadhaco, rabsho kadhacdo kadibna ay sii fido halis bey keeni kartaa.

Waxyaabaha yar yarka ee noocaas ah ee qofku dulmiga uu dareemayo in qalad lagu sameeyey kharashkii iyo dhibtii isaga ay saarmayso waxay ubaahan tahay xafiiskani waxyaabaha uu qabanayo uu fulinyo ayey kamid tahay loogu soo dacwoonayo wixii magdhow ubaahan oo dhami ee loogu magdhawi karo ee qofkan xadgudub baad ku sameysay waa inaad bixisaa qarashkii uu geystay. Markaa way islaalin lahaayeen "service" ka inta bixisa way islaa in lahaa yeen wayna ka waantoobi lahaayeen. Markaa inaynu ka maaranno waxaynu u baahannahay inaynu "justifiy" gareyno sida aan uga maarasano maadaama baahidii ay jirto.

Haddii aan ugudbo cutubka 13aad ee qodobka 188aad wuxuu ka hadlayaa dastuurka iyo sida dib-u-eegis loogu sameyn karo. Waxaa iswaafajin ubaahan waxan dhanay waxa keeni kara wax kabedelka dasturka waxaa soojeedin kara: a) Saddex meelood meel saddex meelood meel tirada Guud ee xubnaha Golaha Shacabka ama Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; b) Golaha Wasiirrada, dabcan galaha wasiirada oo isku dhan miyaa, golaha wasiirada oo isku dhan waa keeni karaan.

Ugu yaraan dowlad goboleedna waa keeni karaan, Codsi ay saxiixeen ugu yaraan 150,000 codbixiyaal diiwaangashan ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa ay keeni karaan, markaa haddii an nidhaahno aqalka sare saddex meelood meel baa keeni karta kasoo qaad waxaa keenaya 18 xildhibaan baa keenaya ayaa wax kabedelka dastuurka keeni kara. Markaa18 xildhibaan inay soo qoraan dastuurka wax halaga beddelo ay yiraahdaan waxaan isleeyahay dhinacaas markii la eego aad bey ugu yar tahay inay 18 xildhibaan dastuurka wax ka beddelkiisii ay keenaan.

In 150,000 ay dadweynihii dastuurkii wax halaga badalo yiraahdaan aad bay ugu badan tahay, waxaan isle yahay 150,000 sida laga dhawaajiyey way adag tahay inay keenaan dastuurka wax ka badelkiisa ay keenaan, see la isku waafajin karaa marka inaan halkan 18 xildhibaan kaliya keeni kara aan dhano halkana 150,000 oo qof baa keeni kara ama dowlad goboleed.

Marka waxaan ubaahannahay runtii arintaa waxaan leeyahay dhinacaa 150,000 waa badan yahay aad halooga hoos mariyo dhinacan 18 xildhibaan baa keeni kara ay tahayna aad bay u yar tahay iyadana waxay ubaahan tahay in aad loo fiiriyo.

Qodobka 189 faqrada 1aad inta dastuurka si kama dambeys ah loogu ansaxinayo afti dadweyne oo heer qaran ah dastuurkan wuxuu ahaanayaa xeerka ugu sareeya ee jamhuuriyadda faderaalka Soomaaliya. Halkaas waxay ubaahan tahay sixid yar hagaajin bay ubaahan tahay, maxaa yeelay inta kama dambeys oo afti dadweyne lagalinayo loo qaadayo heer qaran ah dastuurkan wuxuu ahaanayaa xeerka ugu sareeya jamhuuriyadda faderaalka Soomaaliya. Dastuurkani waaba yahay ba xeerka ugu sareeya jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya markaa in layiraahdo mahaboon waxa uu hadda leeyahay ku dhaqan si kumeel gaar ah uu u'ansaxiyey baarlamanka labada gole ay ansaxiyeen ayuu leeyahay. Laakiin waxaa si kama dambeys ah ugu noqonayaa oo dastuurka kama dambeyska ah uu noqonayaa markii afti dadweyne loo qaado.
Waxaan oran lahaa farqadaasi wax u yara baahan tahay xagga siiqada in toosin yar lagu sameeyo oo lahagaajiyo sidaas ayaan oran lahaa.



**Xil. Abdikarim Abdo Heydar**

Cutubka 12 aad qodobkiisa 179 ee ciidanka ka hadlaysa ayaan rabaa inaan ka hadlo, awalan ciidanka xooga dalkaa la yiri waxaan rabaa ciidanka booliska soomaaliyeed inay ahaato meeshaas, waxaan aaminsanahay haddana qaldanayn ciidamada dalku leeyahay ciidanka ugu da'da weyn inuu ciidanaka booliska soomaaliyeed. Ciidanka booliska soomaaliyeedna ama gobol ha ahaato ama caadimad ha ahaatee dalka oo dhan ciidanka suga saldhiyada amnigooda waa ciidanka booliska soomaaliyeed in la yiraahdo ciidan maaha hay'add maaha arrintaasi sax maaha, waxaan qabaa in la yiraahdo ciidanka booliska soomaaliyeed in la yiraahdo. Sidoo kale waxaan qabaa ciidanka asluubta soomaaliyeed iyakana in la yiraahdo, hay'adda nabad sugidana sirdoonkuna waa sidaas markaa taas qodobkaas ayaanku biirinayaa.

Golaha amniga ee laga hadlay, dhawr xildhibaanaa waxay ka hadashay wasaarada gaadiidka oo la yiri waa lagu soo daray, waxay ila tahay wasaaradda gaadiidku inay wasaaraddaha laf dhabarka u ah amniga inay ka mid tahay. Waxaa lagayaabaa dhulka kaliya inaad moodo in aminga laga sugo meelaha ugu sareeya ee hadda aduunyadu u guurayso cirka waaye "integrity territorial" ka iyo "sovereignty"-ga dalka waxaa ka mid ah xuduudaha cirkuna xuduuduu leeyahay.

Waad ogaydeen waa dhawayto oo hawadeena lagu soo xadgudbay waxa laga dagaalamay oo lagu dagaalamay waxay ahayd cirka ayey ahayd, markii danbana meeshaan ka guulaysanay cirkay ahayd. Markaa wasaaradda gaadiidku iyo duulista hawadu sidaad ogtihiin waxay kantarooshaa wax alla wixii "travel licence " ka dalku uu leeyahay qofkasta oo muwaadin ahi wato iyo wax alla waxa taariko ama "number plate" dalku leeyahay. Markaa meesha kaliya ee alaga monitor garaynkaraa ama amigooda laga ilaalin karo ama laga sugi karaayi waxay ila tahay waa wasaaradda gaadiidka waa qabaa in lagu soo daro wasaaradda gaadiidka bada in lagu soo daro waa qabaa laakiin wasaaradda gaadiidku lafdhabaray u tahay taasna intaasaan uga baxayaa.

Midayda saddexaad ee fikir ahaan aan ku biirinayo guddiga waxa waaye guddiga iibka qaranka in la sameeyo aad iyo aad ayey muhiim u tahay soo iibsadaha ama iska iibshaha, iska iibsadahaa ugu weyn dalkeena waa dawlad. Dawladuna agabka ay iibsataayi waa wax aad ufara badan

waxa ay iska iibisaana waa wax aad u fara badan markaa in guddigii iibka qaranka lagu soo daro aad ayaan u xoojinayaa, aslaamu calaykum waraxmatulaahi wabarkaatu.



**Xil. Omar Ali Abdi**

Inta badi xildhibanadii iga horeyey ayaa ka hadley maadaama cutubyadaan ay muhiim uyihiin wasaarada aan wasiiru dowlaheeda ahay ee wasaarada gaashaandhiga waxaan rabaa in aan wax yar oo talooyin ah oo nuqdooyin la tosinaayo aan kuso daro inta badan ciidamada waa afar mid waa hay'ad nabad sugid ah iyo taliska ciidanka xooga soomaaliyeed iyo booliiska soomaaliyeed iyo ciidanka asluubta. Markaa ciidan soo jireen ah waddanka kasoo shaqeeyey xaalado badan soo gudbiyey haddii ay tahay cadowga laga keeno furumaha iyo kuwa kujiro gudaha dalka ciidanka gacanta ku haya ee lafdhabarta ah ma qabo in la yirahdo hay'ad marka koowaad.
Marka hay'ad laleeyahay marna waxaa lagu sheegey sidii asluubta qodobkaas waan tagi doonaa marna ciidamadii ayaa qaab waxaa loo sheegey hay'ad ah sida qodobka 178aad hay'addaha amniga iyo difaaca ayaa kujira meeshaas markii lasii socodo waxay noqoneysaa farqada 1aad hay'addaha amniga ee qaranka waa kuwa soo socda ayaa la yiri.

1. Ciidanka xooga dalka soomaaliyeed
2. Booliiska in ay ciidan yihiin lama sheegin ee booliiska in la cadeeyo waaye
3. Asluubta oo meesha ku qoran oo "c" ah ayadana in lacadeeyo waaye in ay ciidan tahay.
4. Hay'ada sirdoonka iyo nabad sugida qaranka sideeda in lagu dhaafo ayaan qabaa, markaa ciidannimadii waa in la cadeeyo.

Mida labaad waxaan rabaa in aan ka hadlo qodobka 179aad golaha amniga qaranka, waxaan rabaa golaha amniga qaranka saxiibada hadda aan ka hadli doono haddey joogaana ha iga raali noqdaan anagu dowladnimada waxay ku fiicantahay in aanan shaar la iskugu tolin. Maanta wasaarada gaashaandhiga oo aan joogo wax waliba ku fiican wasaarada gaashaandhiga oo bari idhibi karo haddii maanta aan usameeyo bari isla anagii ama ummaddii soomaaliyeed ayey culees ku noqoneysaa. Waxaan qabaa marka meeshan marka 1aad waxaa ku qoran qodobka 179aad golaha amniga qaranka farqafiisa 2aad golaha amniga qaranka waxa uu ka koobanyaay madaxweynaha jamhuuriyada federaalka oo ah taliyaha guud ee ciidamada qalabka sida ahna guddomiyaha golaha. Waa ku saxanyahay, ra'iisul wasaraha oo "b" ah meeshan waxaa ku qoran wasiirka gaashaandhiga, wasiirka arimaha dibada waxa wax matala wasiir ma ahanee waa wasaarad marka koowaad. Haddii wasiirka uu maqanyahay ama wasiiru dowlaha uu joogo ama wasiir ku xigeenka jooga shaqadu in aysan shakhsi u istaagsanaanin ee hay'ad ay wado shaqada marka meelahaan lagu qorey wasiirka waxaan qabaa guddiga in ay "note" gareystaan in laga dhigo wasaarada oo tusaale wasaarada gaashaandhiga, wasarada arimaha dibadda.

Mida aan ka afeefanayey waxaa ka mid ah wasaarada arimaha gudaha oo kale wasaarada arimaha gudaha waxay ahaan jirtey wasaarada arimaha gudaha iyo amniga ayey ahaan jirtey waxaa laga dhigey wasaarada arimaha gudaha ayaa la keeney oo jirta shaqeysa. Markaa aniga ma qabo wasaarada arimaha gudaha in ay kamid ahaato amniga qaranka ma qabo sidaas si lamid ah waxaa hadda lagu soo darey hadaa ayada laftirkeeda "extera" ah oo la wadaa wasiirga gaadiidka duulista iyo hawada ayaa ku qoran halkaan waxaan qabaa in laga reebo oo meesha aan xaro geel laga dhigin. Saaxiibada qaar ayaa waxay sheegeen baabuur ayaa qarxaa layiri taargaa loo baahanyahay ayaa layiri amniga kuma koobna afarta qofood ama farta wasaarafood mesha kujirto laakiin faraaciyo badan ayuu leeyahay hadda waxaa kamid ah wasaarada beeraha

oo kale “food security” ayaa jira waa muhiim. Haddii la yirahdo wax walibo meel ayey kasoo gashaa wasaarada isgaarsiinta oo kale haddii la yirahdo “cyber security” ayaa jira halagu daro maa laleeyahay amniga qaranka waxay noqoneysaa markaa golihii wasiirada meesha hala geeyo ayey noqonee markaa sax maaha. Waxaan qabaa markaa hay’addihii horey u jirey ama faraacyada waxa la xariira amni dara oo ay oo ay ubaahdaan in ay kala xariiraan hay’adaha kale ee jiilkooda ah oo xukuumada katirsan taas ayaan qabaa.

Marka maqabo in wasaarada gaadiidka duulista iyo hawada lagu daro golaha amniga qaranka qodobkaas wuu cadyahay waana qodobka 179aad si lamid ahna wasaarada arimaha guddaha xaq uma lahan.

Qodobka 180aad ciidanka xooga dalka qodobkaas waxaa la yiri farqada 1aad ciidanka xooga dalka oo ah ciidamada qalabka sida ee jamhuutiyada federaalka ah waxa uu ka koobanyahay waa sax ciidamada waxaa waaye ciidanka dhulka, ciidanka badda, ciidanka cirka waana sida uu u qoranyahay. Lakiin difaaca marka la yirahdo ciidan xooga dalka soomaaliyeed dhan ayaa ah oo ciidankii difaaca ah, maqabo marka in halkaan ay kujirto difaaca ay ku cadahay oo lagu ekeeyo waxaan qabaa in lagu ekeeyo ciidamada dhulka, ciidamada badda, ciidamada cirka intaas ayey ka kooban yihiin oo faraacyada uga waaweyn ah weyn ah, way jiraan talisyo hadda aan sameyney oo xeer madaxweyne kusoo baxay shaqeeyo laakiin muhiim ma ahan in lagu soo daro halkan oo intaan intii horey ku qorneyd yey ku qurux badantahay in lagu dhaafo.

Waxaan rabaa in aan kusoo daro qodobka 181aad wuxuu sheegaa booliiska farqadiisa 5aad waxaa ku qoran dalacsiinta ee dalacsiintana waa waxa uga muhiimsan dalka. Waxaa arkeysaa sidii saraakiishii iga horeysey xildhibaanada ahaa ay horey usheegeen qof xidigle ah oo xidigle aad ku ogtahay ayaa waxaad arkeysaa oo sanad kadib gaashaanle sare noqdey, waxaad atkeysaa qof aad dable ku ogtahay oo noqdey gaashaanle, waxaad arkeysaa mid xiligii siyaad bare looga tagay xidigle ahaa oo ilaa maanta xidigle ah. Waa galaangalka xildhibanada isku taga sida ay wax uraadiyaan waaye waxaan rabaa markaa sharciyada halkaa ku qoran oo ay soo qoreen guddiga aan uga mahadcelinaayo in ay ciidanka dhan ka dhigaa qaabka wax loo dalacsiinayo.
Waxaa ku qoran lambarka 5aad xukuumada federaalka ayaa dejineysa siyaasada guud halbeegyada qaab dhismeedka qorista xilalka dalacsiinta iyo dhimista garaadada, howl gabnimada iyo hanraacyada kale ee dhammaan booliiska ee xeer federaal waxaana lagu soo saarayaa xeer uu ansixiyo baarlamanka jamhuuriyada federaalka soomaaliya in lagu daraa qabaa. Meeshaas baarlamanka soomaliya bes ayaa lagu qorey ee jamhuuriyadana in lagu daro sidaas si lamid ah waxaa jira anagoo la akhrineyna qodobka 184aad, mabadi’ada ciidanka difaaca iyo amniga, qodobkaan mida uga danbeysa oo ah farqada uga danbeyso oo qodobka 6aad ah waxaa lagu qorey xeer uu soo saara baarlamanka federaalka soomaaliya ayaa looga nidaaminayaa dalacsiinta iyo howl gabka hay’adaha amniga iyo ciidamada. Waxaan qabaa markaa in aan lakala fadilin lakala duwin lakala qaad dhoweynin, ciidanka xooga dalka soomaaliyeed waa ciidanka kaliya inta badan aan dalacsiintooda aad degdeg u aheyn hadda. Sidaas silamid ah booliiska inta loo sameyey ee aheyd in ay xukuumada federaalka ayaa daadejineysa siyaasada guud ee meesha booliiska ay ku qorantahay in la soo raro halkaan oo qodobka 6aad ah lakeeno oo ciidanka xooga dalka soomaaliyeedna habraacaas iyo qaabkaas nidaamsan ay ku dalacaan.

Qodobka 186aad xaalada degdega ah maku dheeraanaayi qodobkaas meesha uga danbeysa ayaan ka hadli doonaa. Qodobka 4aad, madaxweynuhu waxa uu ku dhawaaqi karaa xaalad

degdeg ah marka ay soojeediyaan golaha wasiirada xukuumada federaalka soomaaliya ama uu codsi uga yimaafo dowlad goboleedka aa ku qoran, dowlad goboleedyada miyaa meshaas ma labo dowlad goboleedaa, codsiga imaanayo ma hal dowlad goboleedaa oo dowlad goboleed kaliya ku dhaafeysaan meshaasna in aad kala cadeysaan ayaan qabaa. Intaas ayaan kusoo gabagabeyn doonaa aniga ee cutubyadaan maanta aan ka doodey wax yar oo wax iska jira laxniyaad yaryar oo iska jira intaasna waxaan la kaashan doonaa iyada oo qoraal ah dhanka wasaarada ka imaadeyna guddiga ayaan la wadaagi doonaa haduu illah yirahdo. Waxaana adkeyna oo mar kale aan ku celinaa ciidanka asluubta waa ciidan dalka iyo dadka muhiim u ah mana ahan hay'ad waa ciidan in muddo ah sidaas kusoo shaqeynayey ee ciidanka iyo hay'adaha ha laka saaro hay'ad waxaan u naqaanaa nabad sugida inta kalena waxaan u naqaanaa ciidan waana seddaxda ciidan ee kasoo hartey ciidanka xooga dalka soomaaliyeed, ciidanka booliiska, ciidanka asluubta waad mahadsantihiin.



**Xil. Dr. Suleiman Ali Hussien**

Kolay xildhibaanadii iga horeeyeyaya si fiican u wada taxliiliyey waxan rabay inan dhowr qodob oon anigu Is idhi malaha kuwasaad wax ku dari karaysaa aan soo eegay tusaale ahaan, Cutubka 12aad Difaaca iyo Aminga Qaranka Qodobkiisa 177aad ee Mabaadiida aminga qaranka farqadiisa 2aad waxay sheegaysaa sidee aminga qaranka loo maaraynayaa si wafaqsan dastuurka iyo xeererka kale ee dalka u yaala iyo waxaan ku dari lahaa maadamo dalka dib u heshiisiintu wali socoto iyo dib u heshiisiinta dadka soomliyeed in loo marayo habka dhaqanka soomaliyeed ee soo jireenka ah ayan ku dari lahaa farqadaas.

Qodobka 179aad ee Golaha Amniga Qaranka farqadiisa 2aad golaha amnigu qaranku waxa uu ka koobanyahay Madaxweynaha Jamhuuriyada federaalka soomliya ahna Taliyaha guud ee ciidanka qalabka sida iyo Raysalwasaraha ka dibna golaha wasaaraddaha la galiyey madaamoo xildhibana badan soo jeediyeen ay wasaraduhu is bedbedali karaan iskuna biiri karaan waxan soo jeedin lahaa dhowr wasaradood inay macquul tahay inay ka maqnadaan ama la raaciyo iyo wasaraddihii iyo hay'adaha kale ee muhiim u ah inay ka mid noqdaan golaha aminga qaranka oon anigu odhan karo in lagu soo daro Wasarada Diinta iyo Awqaafta. Madaamay mashaakilka ugu fara badan ee dalka ka jira ay tahay tan Argagixisada, Takfiirka, mashaakil khilaafiya oo diimeed, oo malinba urur diimeed kale uu dhalan karayo in Wasarada Diinta iyo Awqaafta lagu soo daro ayan soo jeedinayaa.

Farqada 3aad goluhu wuxuu yeelanayaa amniga qaranku xubno farsamo oo kala ah Taliyaha Xooga Dalka, Taliyaha Ciidanka bookiska, Taliyaha Ciidanka Asluubta halka laga yidhi waxan odhan lahaa ha laga dhigo Ciidanka booliska Soomaliyeed, Ciidanka Asluubta Soomaliyeed in intaas lagu daro.

Qodobka 180aad ee Ciidanka Xooga dalka qodobkiisa 1 aad xarafkiisa (b) Difaaca Bada iyo ilaalada xeebaha ayaan odhan lahaa ha lagu daro madaamo ilaalada difaaca Bada la yidhi iyo ilaalada xeebaha qodobkaa halagu daro.

Cutubka 13aad qodobkiisa 191aad Guddiga Lasocodka iyo Hirgalinta Dastuurka Faqradiisa 1aad "Guddiga Lasocodku waxa uu ka koobnan yahay 1) 5 xubnood oo uu dooranayo Golaha Shacabku, 2) 5 xubnood oo ay dooranayan Aqalka Sare 3) 1 xubin oo ka socota Dawlad

Goboleed kasta 4) 1 xubin oo ka socota Casimada Jamhuuriyada Federalaaka Soomaaliya". Waxaan odhan lahaa waa in dawalad goboleedyadu ay soo doortaan 5ta xubnood Golayaashooda Wakiiladu ay soo doortaan.



**Xil. Mukhtar Mohamed Guled**

Runtii marka hore waxaan rabaa inaan umahadceliyo guddiga labada heer wax kabadalka dastuurka ka soo shaqeeyey sida wanaagsan ay usoo diyaariyeen, marka hore waxaan rabaa inan ku dhiirageliyo shaqadooda wanaagsan.

Labo kale waxaan rabaa inaan usheego laftigooda shaqadooda waxaa kadhiman inyar qodobada qaar dastuurka hadda wax ka beddelka ku socda sababaha loo beddelayo ama isbeddelka lagu sameenayey ay ahayd in qodobada qaar ay iska hor imaanayeen walina waxaad moodaa qodobada qaar ay si hoose wali usocdaan laga yaabo inay ka hoos baxeen guddiga labada heer. Waxaan ka codsanayaa guddiga qodobadaasi intaan la ansaxinin ama asagoo dhameystiran aan la keenin inay dib ugu laabtaan oo dib usoo saxaan ayaan ka codsanaynaa.

Hadaan toos ugalo qodobada cutubka 12aad "difaaca iyo amniga qaranka" runtii aad bey u kooban yihiin labadaan cutub oo dambe waxaad mooddaa in si fiican loogu soo shaqeeyey, laakiin qodobo yar aan dareemayo inay "error type" ubadan yihiin ayaan rabaa inaan ka saxo. Qodobka 178aad oo ciwaankeeda aad ka dhigteen "hay'adda amniga difaaca" aniga waxaan meesha hay'adda ah in laga beddelo oo laga dhigo ciidamada amniga iyo difaaca ama talisyada amniga iyo difaaca, maadaama ciidamadeena aan u isticmaalno taliska booliska soomaaliyeed, taliska ciidanka Asluubta Soomaaliyeed, taliska ciidanka xooga dalka Soomaaliyeed. Markaa waxaan soojeedinayaa Meesha hay'adda ah inaad ku beddeshaan talisyada amniga iyo difaaca ama ciidamada amniga iyo difaaca inaad ku beddeshaan cinwaan kaasi.

Sidoo kale qodobka 178 faqrada 1aad wuxuu dhigayaa hay'adaha amniga ee qaranka kuwa soo socda meesha aad ku qorteen. Iyadana isla hay'addaha waxaan qabaa inaad beddeshaan oo ciidamada ama talisyada aad ku beddeshaan, xarafka (A) waxaa qoran ciidanka xooga dalka soomaaliyeed. Laakiin B,C waxaad soo qorteen booliska iyo asluubta kaliya ayaad soo qorteen, sida xildhibaanada iyo senatoradii  iga horeeyeen ay soojeediyeen, ayaan laqabaa oo waxaan qabaa inaad ku qortaan ciidanka boliiska Soomaaliyeed iyo ciidanka Asluubta Soomaaliyeed B,C inaad ka hormarisaan.

Sidoo kale qodobka 179aad golaha amniga qaranka farqadda 2aad oo ku qoran tahay golaha amniga qaranka wuxuu ka kooban yahay :-
(a) Madaxweynaha Jamhuuriyadda oo ah Taliyaha Guud ee Ciidammada Qalabka Sida ahna Guddoomiyaha Golaha Amniga Qaranka;
(b) Ra'iisulwasaaraha Xukuumada Federaalka Soomaaliya;
(c) Wasiirka Gaashaandhigga;
(d) Wasiirka Arrimaha Dibedda
(e) Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaan qabaa gabi ahaanba in laga saaro xarafkan (E) sida xildhibaanada iyo senatorada qaar ay soojeediyeen,  maadaama ciidama iyo amniga oo dhan shaqo aysan ku laheyn wasaaradda arimaha gudaha oo wasaaradda amniga oo ay booskeeda ay ku jirto taliska booliska iyo taliska nabad sugidda ayna hoostagaan wasaaradda amniga. Waxaan qabaa marka in laga saaro golaha amniga qaranka wasaaradda arimaha gudaha.

Sidoo kale xarafka (G) wasaaradda gaadiidka iyo duulista hawada iyadana waxaan qabaa in laga saaro iyadana meel ay kasoo gasho golaha amniga qaranka “totally” majirto, qodobkaas 179aad waxaan soojeedinayaa in laga saaro labadaasi wasaaradood.

Sidoo kale waxaan ku talinayaa meesha laga dhigay wasiirka gaashaandhiga iyo wasiirka cadaaladda iyo wasiirka amniga, oo magaca wasiirka in lagu badalo magaca wasaaradda si hadduu wasiirku umaqnaado wasiir kuxigeenka ama wasiir dowlaha uu shirka uga qayb gali karaan oo aysan noqonin meesha meel qof uu iska leeyahay waxaan qabaa in wasaaradda lagu beddelo meesha wasiirka laga dhigay.

Qodobka 180aad oo kahadlaayo ciidanka xooga dalka Soomaaliyeed, Ciidanka Xoogga Dalka oo ah Ciidamada Qalabka Sida ee Jamhuuriyadda Federaalka wuxuu ka koobanyahay: (a) Ciidammada Difaaca Dhulka; (b) Ciidammada Difaaca Badda; iyo (c) Ciidammada Difaaca Cirka. Waxaan qabaa in laga saaro ereyga difaaca oo ay noqoto Ciidammada Dhulka, Ciidammada Badda, Ciidammada Cirka, sababtu waxay tahay dhammaan ciidamada Soomaaliyeed waxay utaagan yihiin difaaca qarannimada jamhuuriyadda Soomaaliyeed ayey u taaganyihiin.

Qodobka 181aad oo aad ku qorteen boliiska kaliya waxaan qabaa in ciwaanka laga dhigo ciidanka boliiska Soomaaliyeed oo ciwaankaa magaca si saxa aad u sheegtaan, isla qodobka 182aad oo aad ku qorteen ciwaankiisa Asluubta waxaan qabaa iyadana in laga dhigo ciidanka Asluubta Soomaaliyeed.

Cutubka 13aad hal qodob kaliya ayaan “coment” ka qabaa inta kale waxaan laqabaa xildhibaanada iyo senatoradii iga horeeyeen. Qodobka 188aad Habraaca Wax-ka beddelka Dastuurka gaar ahaan xarafkiisa (d) codsi ay saxiixeen ugu yaraan 150,000 codbixiyaal oo diiwaangashan ee jamhuuriyada fedreaalka soomaaliya, waxaan qabaa number-kaasi inuu aad u badan yahay waxaan soojeedinayaa in number-kaasi laga yareeyo oo lagu soo koobo 40,000 codbixiyaal ah sida asalka dastuurka ay ku qorneyd, haddii laga sii yareeyo number aad u yar ayey noqoneysaa.

Sidoo kale isla qodobka ama xarafka ka hadlaaya xildhibaanada ama senatorada soojeedin kara number-kiisna aad buu u yar yahay 18 xildhibaan, waxaan qabaa in la kordhiyo oo ugu yaraan 30 ama 50 xildhibaan laga dhigo, waad mahadsantihiin.



**Xil. Shariif Mohamed Abdalla**

Keliya waxaan yara tilmaamayaa, marka laga hadlaayo ciidamada Asluubta iyo Nabad sugidda, Nabad sugidda laba farac oo ka kala timid police-ka iyo military-ga ayay ahayd, Asluubtana waa la ogyahay oo Wasaaradda Cadaaladda bay ka timid. Waxaanan garaneynin Ciidanka Asluubta ma heer federaal baa mise laba level ayuu leeyahay, haddii uu laba level leeyahay, sidee ayay u suurtagaleysaa, horta taas waxa weeye hordhac ahaan ayaan u sheegayaa.

Waxaan xusaayaa waxaa la sheegaa 21-sano kii military-ga dalka xukumaayay, military-ga Soomaaliyeed oo sharafta leh, 5 sano iyo dhawr bilood ayuu dalka xukumaayay, wixii ka

dambeeyay Xisbiga Hantiwadaaga ayuu ahaa, 5 taas sano wax badan ayuu qabtay. Af-Soomaaliga ha ahaato, abaarihii siduu ula tafaaculay ha ahaato, wax ciidaa ka badan, qaladaad badan way jireen, marka intaas waxaan u sheegayaa maadaama ciidan laga hadlaayo.
Qodobka 178, faqrada 5aad, xarafka ugu dambeeya ee da'da ah waxaa ku qoran ka qeybqaadashada xasiloonida iyo amniga gobolka iyo caalamka, gobolkee weeye marka, waxaan qabaa mandiqada in la yiraahdo taas sixitaan baan ula jeedaa.

Qodobka 178, faqrada 2aad ayadana waa toosin, hay'ad amni aan ahayn afar hay'adood ee ku cad faqrada 1aad, waxaa lagu dhisi karaa xeer uu soo saaray Baarlamaanka, afar hay'adood maahanee waa afarta hay'adood si la iskugu xiro, taasna waxa weeye Soomaali ahaantii weeye, dabcan khaatimatu miski ayaan noqonayaa, Shariif gadaashiis wax hadlaayo ma jiraan, sidaan qiyaasaayo. Gadaal anigoo u noqonaayo Araarta, waxaan ku talinayaa in sidaan aan lagu dhaafin oo la tafatiro, ahmiyada ee leedahay iyadoo la eegaayo in la tafaftiro af ahaan, luuqad ahaan iyo nuxur ahaanba in la tafaftiro ayaan ku talinaya.

Qodobka 186, faqrada 4aad, madaxweynaha wuxuu ku dhawaaqi karaa xaalad degdeg ah marka ay soojeediyaan golaha wasiirada xukuumadda federaalka Soomaaliya ama uu codsi uga yimaado dawlad goboleedka, taasna hal dawlad goboleed ha la yiraahdo, taasna sixitaan ayay u baahaneysaa. Waxyaabaha qaar la soo sheegay ayaa jira, marka arimahaan kale ee ii calaamadeysan si fiican ayaa looga hadlay, cadadka iyo waxay rabaan ha ahaadaan, waxaan ku soo gunaanadayaa hadal keyga, kulan keena kheer ayaan u rajeynayaa. Waa mahadsantihiin dhammaantiin. Assalaamu caleykum.



**Xil. Mohamud Abdulkadir Haji**

Waxaan rabaa inaan ka hadlo cutubka 12aad qodobka 178aad, hay'adaha amniga iyo difaaca, hay'adaha amniga ee qaranka waa kuwa soo socda, ciidanka xooga dalka iyo boliiska, asluubta iyo sirdoonka Meesha aad ku qorteen waxaa muhiim ah inaad ka dhigtaan ciidanka xooga dalka iyo ciidanka booliska soomaaliyeed, ciidanka asluubta soomaaliyeed iyo hay'ada sirdoonka waa "okey". Laakiin Meesha boliiska iyo asluubta lagu soo koobay waxaan rabaa in lagu daro ciidanka boliiska soomaaliyeed iyo ciidanka asluubta soomaaliyeed, ciidanka boliiska soomaaliyeed waa hay'adaha amniga ama ciidamada amniga ee ka shaqeeya arrimaha guddaha iyo ladhaqanka bulshada marka in boliiska kaliya lagu soo kobo sax maahan.

Ciidanka asluubta waa ciidan asagana muhiim u ah dalkaan xabsiyadii iyo maxaa biistii iyo asluubtooda iyo akhlaaqdooda ka shaqeynaya, xilibaan hadaayay ka hadlaayo ayaan u jeeda oo dhahaayo ciidanka asluubta dastuurka in lagu qoro sax maahan aduunka dastuur ladooda kuma qorna ayuu yiri. Markaa ma'uusan daraaseyn dastuurada Africa Zimbabwe iyo South Sudan iyo oo ku meel gaar ah dastuurkooda waa ay ku qorteen soomaaliyana 12kii ayaa lagu daraybo, marka sidaas darted dastuurada caalamka qaarkood way ugu qoran yihiin qaarkoodna daraasaad ayay ku wadaan inay ku daraana waa laga yabaa. Laakiin dastuurkaan keenii horeyna aan ka guureyno way ku qoranaayeen kanna in lagu soo qoro waan ku taageer sanahay team-ka kasoo shaqeynaayay dastuurka waxka-beddelkiisa.

Qodobka 179aad, golaha amniga qaranka saaxiibo iga horeeyay ayaa ka hadlay in ay wasaraddo ay kusoo dareen guddiyada in laga sooro ay tahay, laakiin aniga waxaan qabaa haddii wasaarad

laga saaraayo ay noqoto wasaarada arrimaha guddaha, madaama wasaarada amniga ay ku jirto. Wasaarada duulista iyo hawda waxaa la yiri halaga saaro wasaarada gaadiidka iyo duulista hawada waxaa la rabaa dadku inay faham ka qaataan xaaladaha lagu jiro ee dalka maahan xaaladihii hore maahan, wasaarada gaadiidka waxay heysaa macluumaadkii hay'adaha amniga ay ku shaqeyn lahaayeen oo muhiim u ah dalkeena wasaarada gaadiidka iyo duulista hawada waxay bixisaa leysimada cirka iyo dhulkaba, hadii ay diyaarad leysin qaadan laheydna wasaarada gaadiidka ayaa bixiso, hadii gaadid leysin qaadan lahaana wasaarada gaadiidka ayaa bixiso. Dabcan wadankeena hadda ka hor diyaarad ayaa diyaarad daalo diyaarad ka mid ah aa qarax lala beegsaday macluumaadka ugu weyn wuxuu ahaa wasaarada gaadiidka ayaa laga xog wareesanaayay. *For example* oo kaleeto gaadiidka dhulka gaari hadduu qarxo boliiska iyo nabad sugida iyo xooga dalka waxay macluumaad soo weydiiyaan wasaarada gaadiidka gaarigaas yaa is kalahaa yaa ku qornaa yaa soo dagsaday yaa masuuliyadiisa iska leh.

Nootaayooyinka waxay hoos yimaadaan wasaarada gaadiidka ayay wada shaqeyn la leeyihiin, marka waa muhiim amniga qaranka wasaarada gaadiidka muhiim ayay u tahay inay ku jirto, micnaheeda maahan inaan wasiir ku xigeen ka ahay maahan laakiin waa wax mustaqbal ah waxaan la qoraayo oo la rabo in ummadda soomaaliyeed lagu hago. Inay noqoto wax aragti gaaban sax maahan, markaa waxaan rajeynaa arrintaas siday usooo qoreen haddii ay noqoto in wasaarad laga reebaayo wasaarada arrimaha gudaha.

Waad mahadsantihiin qodobka 180aad ciidamada xooga dalka oo ah ciidamaha qalabka sida ee jamhuuriyada federaalka waxay ka kooban yihiin ciidanka difaaca dhulka, ciidanka difaaca bad aiyo ciidanka difaaca cirka. Waxaan rajeynaa meeshaas waxaa ku jirto xoogaa eray bixin in lagu sameeyo oo ah ciidanka difaaca meeshay aheyd in laga saaro ciidanka dhulka, ciidanka bada iyo ciidanka cirka, diacaafa waxay ku imaanee ciidamada markii la yiraahdo ciidama qalabka sida ama hay'adaha amniga markii la yiraahdo waxaa soo galaaya hay'adaha amniga difaaca markii la yiraahdo difaaca meshaas ayay kasoo qaadanayaan, markaa sidaa darteed in laga saaro ayaa muhiim ah.

Qodobka 180aad ciidamada dalka waxay ka koobanyihiin ciidanka difaaca dhulka iyo ciidanka bad aiyo ciidanka cirka meeshaas waxaa lagu soo koobo ciidanka dhulka iyo ciidanka bada iyo cirka si loo fahmo oo looga saaro difaaca.

Qodobka 181aad oo ka hadlaayo qodobka 181aad ee boliiska faqradiisa 2aad boliiska federaalka waxan rabaa in meeshaasna laga saxo laga dhigo ciidanka boliiska soomaaliyeed, boliiska federaalka ka dib hala daadajiyo maamul goboleedyada sida loogu sameynaayo boliiskooda siday iyo siday u sameysanayaan sidaad usoo qorteen. Laakiin marwalba ciidanka boliiska soomaaliyeed in la xoojiyo si ay nuqulada ugu soo baxaan si loo fahmi karo, waxan waa wax mustaqbalka u haraaya dalka, dadka maanta qoraalkiisa ka soo shaqeyay iyo anaga aan ka doodeyno maanta baarlamaankii ah, dad badan oo nooga danbeen doona ayaa jiri doono marka waa sharci dalkaan meel u yaalo waxaan rabnaa sida ugu quruxda badan in loogu qoro. Meesha boliiska loogu soo koobay in laga dhigo boliiska soomaaliyeed ka dibna boliiska federaalka dawlad goboleedyada si loo daadajiyo, waad mahadsantihiin, Asalaamu Caleykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh.



**Xil. Abdulfatah Kassim Mohamud**

"Normally" cutubkana 12 aad markaad fiiriso waxaad moodaa inaan lala kaashani dad markaa ku takhakhusay amniga iyo difaaca waxa loo yaqaano. Sababtoo ah mar haddii "terminology", "terminology"-gu wuxuu ayidaa ama uu xuduud u yeelaa waxa kaloo isaga ka baxsan, eray si qaldan loo isticmaalay ayaa wuxuu dhaawici karaa dhamaan qaybta cutubkan kkusaysa. Tusaale ahaan hadda difaaca markii laga hadlaayo difaacu waa wax ku kooban qayb ahaan waa rayid, qayb ahaana waa military oo curfi ayaa ku jiro sida hadda wasaaradda gaashaandhiga u samaysan tahay weeyaan oo shaqaale ciidana way leedahay talisna way leedahay oo ciidan qalbsida ah oo labisan iyo kuwa aan la bisnayn.

Laakiin amni amarkii la yiraahdo waa hooyada, waa hooyada markii la leeyahay amniga macnaha hadda loo yaqaano dadka qaarkood maskaxdooda ku koobantahay maaha, amniga waxaa soogalayaa hubkaa soo galaaya, amniga technology-da soogalaysa, amniga macluumaadkaa soo galaaya amniga dhaqaalahaa soo galaaya, amniga waxaa soo galaaya fikriga, amniga waxaa soo galaaya dhaqanka, amniga biyahaa soo galaaya, amniga cunadaa soo galayso , aminga ciidka qaybay ka tahay.

Waa waxa loo yiri "geopolitical" marka laga hadlaayo xuduudahaaga wixii ka baxsan, awooddanaha waa "the same thing" "tread"-ka ama waxyaabaha halista ku ah dalka waa isla nuucii "because" amaniga ma jireen hadduusan "tread" jirin. Amni wuxuu jiraa markuu "tread" jiro "tread" ka jirana hadduu dhaqaale yahayna qaab dhaqaalaa lagula dagaalamayaa, hadduu ciidan yahayna qaab ciidanaa lagula dagaalamayaa, hadduu fikir yahayna qaab fikiraa lagula dagaalamayaa, haday technology tahayna qaab technology-ada ayaa lagula dagaalamayaa waa wax isla socda.

Cida markaa u qaabilsana waxay noqoni cidba had ba meesha ay joogto aminigaas ay khusayso tusaale ahaan haddii amniga macluumaadka uu yahay toosay u waxay u noqonaysaa markaa wasaaradda boostada iyo isgaadhsiinta oo technology-da iyo wixii xisaabsan oo la socota sirdoonka. Markaa awooddahan, awoodna waa adiga mid kuu gaar ah markaa aad is dhisayso oo aad ku filaanayso inaad maarayso amnigaag oo ah muwaadinka amnigiisa inaad maarayso ee gudaha ku nool. Marna waa awood ilaalin awooddii aad dhistay inaad cadaw ka ilaaliso inuu kaa burburiyo oo deris ah oo dibad ah marna waa amni xoojin oo markaa is fidin ah oo markaa "geopolitics" aad galaysid aduunya kale iyo xuduudo kale aad galaysid.

Markaa sidaa darteed amniga sidaan u fahanay ama falan qaynta ay ku socoto oo ah amni markii la sheego in boolis iyo nabad sugid uu yahay xataa gaashaan dhigaa amniga ka noqon kara waa wax aad iyo aad u yar weeyaan. Laakin hay'addaha amniga maka layiraahdo waxay noqon karaan booliska iyo nabad sugida ayey noqon karaan.

Markaa sidaa daradeed qodobka 77 aad waxoogaa dhanka erayada ayaa waxa uun moodaa inay u eekaatay amnigiina in boolis iyo nabad sugid la siiyey difaaciina in gaashaan dhigii si toos ah loo siiyey. hay'addaha amniga qaranka waxaa kormeeyaaya oo la xisaabtamaya hay'addaha rayidka ah. Waa sax laakiin kormeerida waa laba nooc, kormeerid fulineed iyo kormeerid sharciyadeed, kormeerida sharciyadeed markay tahay waxaa weeyaan hay'addaha sharciga ah

ayaa u xilsaaran sida golayaasha baarlamaanka oo kale ayaa u xilsaaran aqalkiisa sare iyo golaha shacabka.

Laakiin amni kormeerida fullineed waxa u xilsaaran saraada ay hoostagaan tusaale ahaan, wasaarada gaashaandhiga waxay kormeer fulineed ku leedahay talisyada ciidamada xooga dalkay ku leedahay, wasaaradda amniga qaranka waxay korjoogtayn fulineed ku leedahay nabad sugida iyo booliskay ku leedahay, garsoorkana sidaas oo kale, markaa meeshaasi iyada ah waxaa weeyi in sidaas loo cadeeyo.

Qodobka kale ee ah 176 aad sugi amniga jamhuuriyada federaalka soomaaliya, ciidamada faderaalka soomaaliya waxay damaanad qaadayaan nabada gobanida iyo amaanka jamhuuriyada qaranka soomaaliya iyo badbaadinta shacabkeeda iyadoo la adeegsano ciidamada amniga oo ay ku jiraan ciidanka xooga dalka, nabad sugida, ciidanka booliska, ciidamada asluubta, markaa kuwaasi waa agab, agabkaasna waxan jeclaan laahaa in gebigoodba la raacsiiyo ciidanka, ciidanka nabad sugida, ciidanka booliska, ciidanka asluubta. Nabad sugida waxaad moodaysaa in iyada gaar loo faquuqay markaa ha lagu soo daro, ciidamada sirdoonka iyo nabad sugida qaranka ha lagu soo daro.

Qodobka kale ee xiga 178 hay'addaha amniga qaran waa kuwan soo socda ciidanka xooga dalka, booliska, asluubta iyo hay'adda nabad sugida iyo sirdoonka qaranka. hay'adda socdaalka iyo jinsiyada ayaa halkan iiga jirto. Hay'adda socdalka iyo jinsiyada sidaad la socotaan waxay ka mid ahaan jirtay laan kamida nabad sugida ayey ahaan jirtay waana muhiim waa in wax aka soo galaya iyo waxa ka baxa iyo baasaboorka iyo waxa yaabaha ugu wey oo "identity" taabanaaya qayb ka ah markaa anuu waxaan jeclaan lahaa hay'adda socdaalka iyo jinsiyadda in lagu soo daro hay'addaha amniga qaranka in lagu soo daro ayaan jeclaan lahaa.

Hay'adda amniga ayaa ahayd afar hay'adood, farqada 1 aad waxaa lagu dhisi karaa xeer uu soo saaro baarlamaanka federaalka soomaaliya, malaha waxaa laga yaabaa hay'addan immigration ka iyo kuwa kaloo la mida inaa dib u dhigato laakiin waxaa fiican waa wax aan kala harin oo isla shaqeeya markii laga hadlaayo amniga gudaha iyo dibadaba "immigration" ku kaalin way ayuu ku leeyahay waxaan rajaynayaa in halkaas lagu soo daro.

Qodobka 179 aad faqradiisii (f) ayaan arkay waxaad leedihiin fullinta "strategy"-ada iyo qorshooyinka difaaca iyo amniga qaranka ee u degsan dawlada waxaanad kaga hadlaysaan golaha amniga qaranka, gola ee amniga waa gaolaha ugu weyn ee amniga masuulka ka ah ee madaxweynuhu ku jiro ra'iisaruhu ku jiro, wasaaradda gaashaandhiga, wasaaradda amniga, wasaaradda arrimaha dibada iyo maaliyadu ay ku jira. Meeshaas iyada ah meel fulineed maaha "totally" meeshaas waxaa weeyaan meeshii caqliga meeshaas waa meeshii qaraarada, waa meeshii waxyaabaha kookooban laga soo saari lahaa meelaha lagu furfuri lahaa hawlahaasi, waa meelaha "technical" ka ah iyo meelaha dhexe ee "operational" oo mesal markii amniga qaranka qaranku soo saaro ra'iisal wasaaaraha iyo xukuumadiisuu u keenayaa.

Xukuumadii waa level dhexe wasaarad walba intay qaado ayaa waxay hoos gaynaysaa mesalan tusaale ahaan haddii wasiirka gaashaandhigu soo qaado oo isaga kamida golihii amniga qaranka oo ah kuwii qorshaynayey wuxuu u gudbinayaa fulinta, fulintu waa ayo waa taliska googa dalka ama waa taliska booliska soomaaliyeed ama waa taliska asluubta ama waa immigrationka ama

meeshay noqotaba. Markaa qaybtaa fulinta ah meesha halaga saaro waxa ma fulisee go'aanay soo saartaa.

Mida kale goalaha amiga qaranka wuxuu ka kooban yahay madaxweynaha jamhuuriyada federaalka soomaaliya, intaas waa isla aragnay laakiin meesha waxaa weeyaan arrimo gudaha oo ma soo gali karto arrimaha gudaha markii hore waxaa loo yiri ha soo gasho waagaas waxaa hoostagi jiray booliska, laakiin hadda ma jirto waxay meesha ku soogashay sidaa darteed maadaama amniga qaranku ku jiro totally ha laga saaro oo waasaaradda amniga qaranka ayaa booskii wasaaradda arrimaha gudaha galaysa.

Wasaaradda gaadiidka waxay kaalin muhiima ka tahay maamulka iyo maaraynta hawada jamhuuriyada soomaaliya min cidhif ilaa iyo cidhif, sidaa darteed wax badan iyo xog badan ayaa iyadana ku maqan waxba kama qabo aniga inay ku jirto. Wasaaradda amniga waxaa laga yaabaa dadka inay u qaataan wasaaradda gaashaandhiga marna lagama yaabo inay iska baxdo iyada go'aan soo gaarto hubka nooca la soo gadaayo cida laga soo gadaayo meel ay ka jirto malaha. "Because" waxyaabahaas waxay saamayn ku yeelanayaan  dawlado kale iyo heshiisyo kale anaga tusaale ahaan haddaan "alliance" ku jirno ama "collation" ku jirno "alliance" uusan noo ogalaanayn dawlad hebel inaan hub ka soo gadno haddii wasaaradda gaashaandhiga baxdo oo dawlad kale hub ka soo gado macnaha waxaa weeyaan xaalad dagaal iyo xaalad cadawtooyo ayey abuurtay.

Markaa wasaaradda arrimaha dibada halkan waxay u joogtaa inay wasaaradda gaashaandhiga u sheegto dawlad hebelna waxaan la leenahay xidhiidh noocaas ah iskaashi military ayaan la leenahay hub noocaas ah ayaan ka soo gaden karnaa, hub kama soo gadan karno, dawlad heblaayo ma booqan karno, dawlad  heblaayo waxba nagama dhexayn karo wasaaradda arrimaha dibada kaalin muhiimay ugu jirtaa waxa ka baxsan xuduuda gaar ahaan markay imaato la tacaamulka arrimaha amniga ama arrimaha istaxaalufaysiga. Markaa wasaarada arrimaha guddaha ama arrimaha dibadana qayb muhiima ayey halkaasi ka tahay.

Isla qodobkaasi faqradiisa 2 aad oo a,b,c ah badbaadinta iyo gurmadka xaaladaha musiibooyinka dabiiciga ah, ciidamada xooga dalkaa waxaa lagu soo daray halkan, ciidamadaa xooga ee lagu soo daray asalka shaqadoodu ma'aha iyagaa arrimaha dabeec inay ka shaqeeyeen abaaraha iyo fatahaadaha iyo koronaha iy cudura kale oo imaan kara iyo maaha arrimahooda asalka ah. Laakiin waxay u yihiin taageero ayey u yihiin markii ciidamada gurmadka iyo booliska leh ee gurmadka gaarka ah leh markay ka tiro badato ayey waxaa weeyaan ay soo galaan laakiin asalka maaha.

Dawlada federaalka ayaa awood u leh dhismaha ciidanka xooga dalka soomaaliyeed hogaminta iyo toobabarka iyo maamulkiisaba. Qaybtaa iyada ah waxa loola jeedaa ma fahmin asalan ciidan waxaa dhisilahaa waa dawlada wasaarad walbana ciidanka iyaga hoos yimaada ayaa dhisayso qaabkay dhisaysaba ha ku dhistaane because ciidanka asalkiisu waa asal samaysanka bulshada, bulshada soomaaliyeed waa bulsho qabali ah qaab qabiilbuuna ku samaysmaa ciidanka. Laakiin in xaydaabkaa la xiro oo qabyaalada inta laga saaro ee shuruuc loo keeno ee la yiraahdo muwaadin kasta shuruudahaas oo kaliya ayaa xanibi kara, tusaale ahaan inuu 18 jir ahaado inuusan 25 ahaanin. Tusaale ahaan inuusan xaas lahaani, inuusan balwad la haanin inuu caafimaadkiisu fiican yahay baadhis maraayo, inuu ordi karo 15 kilo meter markaasi si mujtamaca ugu si ay ugu qancaan qofkii ciidanka ka haray sababtuu uga haray inuu yahay

aniga joogaygaa gaaban, aniga waxaan uga haray caafiamaad kaygaa xun in uu u galo. Waxaa ka soo baxaaya ciidan oo “professional” ah oo waddani ah nidaam aan ilaalinaynin, madaxna aan ilaalinayn ee dastuurka ilaalinaaya sidaa darteed waxaa loo yiraahdaa ciidamada qalabka sida ma’ aha ilaaliyayaasha maamulka, ciidanka qaranku waa ilaaliyayaasha dastuurka iyo dawladnimada waaye ee isaga maareeyaha maaha.

Mararka qaar waxyaabaha loo diidaya inay afgambiyada dhacaan waxaa waaye waxay maamulaan dawladnimadii halkay ahayd inaysan maamulin ee ilaaliyaan haddii ay ku xadgudbaan, madaxweynaha haddii xadgudbo waa inuusan ciidankii raacin madaxweynaha oo uu yiraahdaa dastuurka madaxweyne ixtiraam, hadduu diidana inay madaxweynaha meesha ka saaraan oo dawlad rayid ah meesha la dhiso. laakiin sida hadda aan ku wadno oo ah nabadoonkaaga keen iyo ugaaskaaga keen, xildhibaankaaga keen waa tii 60 kii aan ku soo bilownay 90 kiina aan aragnay taliye kastaba inuu aaday dadkiisii waa siday ku samaynayd markaa siday ku samaysento ayey ku dhamaataa.

Markaa dastuurkan wuxuu fursad inoo siinayaa ciidan soomaaliya oo dhan ay u midaysantahay oo muxtarim ah oo “professional” ah inaan dhisno sidaa darteed markaa qodobkan waa fahmi waayey. Ciidanka dawlada aay dhisaysa cid aan dawlad ahayn oo dhisi karta ciidan sharci ah maba jirtaba, wixii ka baxsan wax dawlad ah waxay noqonayaan wax sharci daro ah.

Qodobka kale booliska federaalka soomaaliya oo hoos imaanaya wasaaradda ay khusayso, ay khusayso maahee wasaaradda aminga toos haloo dhaho, mise waxaa noo ogtihiin in wasaaradda magaca laga beddeli rabo oo wasaaarad magac kale loo samayn rabo mise waxaa noo ogtihiin in booliskii la baabiin rabo, mise waxaa noo ogtihii booliskii wasaaradda amniga meesha laga baabiin rabo oo wasaaradda arrimo gudaha lagu soo koobi rabo. Midka khusayso halaga dhigo wasaaradda hadda taagan dastuurkana sidiisaba waxaa loo sameeyaa maanta kaliya maahan barri haddii ay wax yimaadaan waa la kordhinayaa shalayba ma lahay wasaaradda bii’ada xafiis waxay ka mid ahayd oo ra’iisal wasaaraha agaasim ka miduu ahaa. Barritona haddii hay’addaha qaarkood ay u soo dalacaan oo wasaaradda qaarkood hoos u baxaan waxa weeyaan markaas waa laga maarmi karaa oo dastuurka qodobkaa beddeli doon laakiin sida hadda ku qoran oo aad ku sheegteen golaha amaniga qaranka samaysankiisa wasaaradda amniga aad ku sheegteen maadaama aad ku sheegteen khusayso ha dhihine waxaa tiraahda wasaaradda amniga halkaas ku qora.

Qodobka kale xukuumadda federaalka ayaa dejianysa siyaasadda guud halbeegyada qaabdhismeedyada qorista, xilalka dalacsiinta, dhismaha garaadada, hawl-gabnimada habraacyadda kale oo dhamaan booliska heer federaal waxaana lagu soo saarayaa xeer uu ansixiyo baarlamaanka federaalka soomaaliyeed. “That is very nice” isla qodobkaas waxaan aaminsanahay halagu dhaqo dhamaan, taliyahaygaa fadhiya taliye Bashiir marxalda waxaa la gaadhay xildhibaan kasta inuu iska yimaado madaxweynihiina “pressure” ay ku noqoto oday kasta uu iska yimaado la yiraahdo ii dalacsiiya qof oobjac waligiis aan oran ama salaam ebedkiisa qaadin ama anshaxa iyo dhishibiliinka aan qaadan caqiidada dagaalka uu ku dhisan yahay aan waxba ka ogayn ayaa waxaa la siiyey jagooyin aanay ku musaasab ahayn aqoonteediina lehayn.

Taasi markaa waxay keentay markaa in fegaaraha calamka lagu ceeboobo sidaa darteed in badan ayaan ragaynayaa nidaamka dalacsiinta iyo qorista in aad iyo aad loo adkeeyo, si aanu

ulaaho khatarteeda waayo waa wajahnay "because" waxaan ku qornay anagoo xildhibaano ah hebel baan xidhibaan u nahay aan damiinano kuwii aan damiinaney inay dad dileen ayaan aragnay. Qaar ay nabadoona damiinteen kuwii ay damiinteen ay dad dileen ayaan aragnay, sidaa darteed dawladnimadu kama soo harto sharciyada kama soo harto qofka muwaadinka ah waa inuusan aniga isoo raadinin waa inuusan nabadoon raadinin waa inuusan wasiir iyo xildhibaan raadinin "totally"qof xasaanad leh waa inuusan raadinin waa inuu si toosa xarunta isaga u tagi karin hay'addaha u xilsaaran kala saarista, xulista iyo qaadashada ciidanka iyo albaabka laga soo galyo waa qof iyaga ay iska hubiyaan ay noqdaan iyagoo adeegsanaya aqoontooda waayo aragnimadooda iyo farsamadooda ay u qabaan ciidanka waa inay samaysataan.

Horta waa in meesha laga saaraa nidaamka dalacsiintaan waa inuusan noqonin waxyaabaha hadda dhacaaya oo kale xagan ka soo gudbay, intan ka soo gubay sidaa u dalacsii waa ianysan noqone, nidaam la yaqaano oo ummadda soomaaliyeed oo dhan aay isku mid ay u yihiin. Xukuumadda federaalka soomaaliya ayaa jeedinaysa xeer siyaasada guud, halbeegyada qaabdhismeedka, qorista xilalka, dalacsiinta dhigista garaadada, hawlgabnimada iyo habraacyada kale ee dhamaan hay'addaha asluubta heer federaal iyo heer dawlad goboleed. Taas waa isla qodobkii.

Qodobka 183 aad hay'adda sirdoonka iyo nabad sugida qaranka, sax waaye. Sirdoon markii la yiraahdo iyo nabad sugid waa kala labo, nabadsugid waxaa waaye garabka falgalka waaye ama hawl-galka ee awoodda leh ee qoriga wata ee fulinta leh. Sirdoonka isaga waxaa waaye fulintiisu isaga waa xog ururin "analyse" garayn iyo soo koobid taas oo madaxda qaranka u sahlaysa in khatari ay jirto go'aanadana inay "recommendation iyo option"-da ay leeyihiin madaxweyne "option"-kan kaasaa ka dhalanaay "option" sidaasaa ka dhalanaaya "recommendation" keenana waxaa soo jeedinaynaa in qodobkaas la qaato. Markaa iyaga waxay leeyihiin oo kaliya ururin iyo "analyse" gareyn kaliya maahee waliba waxay leeyihiin inay madaxweynaha ka talo galiyaan ama ay siiyaan tallo ah go'aankii uu qaadan lahaa kan ugu wanaagsan.

Qodobka 184 aad, inta halkaa inoo gu qoran daahfurnaanta iyo ogolaanshaha la xisaabtanka hay'addaha rayidka dhexdheaadnimo iyo iyaga oo aan ku milmaynin arrimaha siyaasada una hogaasamaya dastuurka iyo xeerka, waa qodobkaan sheegay ciidamada xooga dalkaa inta badan la yiraahdaa kacdoonada iyadaa xidhiidh la leh. Ciidanka xooga dalka markaan siyaasiyan u hadlayno sharciga sida noo qoran waa sax waa inaysan madaxweyne iyo ra'iisal wasaare, hay'ad baarlamaan iyo hay'ad dastuur iyo cidna aanay u eexanin ee sida uu dastuurka qabo inay iyaga raacaan.

Laakiin ogaada ciidanka laba shayba saamayn ayey ku yeelanayaan midna ciidanka waa maslaxad oo maslaxadiisa maanta wixii isaga maslaxadiisa ilaalinaaya ayuu u qaataa oo "empower" garaynaaya sida ka dhacday Tuunis Siyna Caabidiin markii la riday ciidankii militeriga ahaa shacabkuu la saftay ulama safanin jacayl shacab ee wuxuu ula saftay saynal caabidiin ayaa wuxuu kaalin mugleh oo libaax leh oo qalabayn leh oo casriyeyn oo dhaqaala leh awood xad dhaafa siiyey nabad sugida iyo booliska oo shacabka ku tagri falaayey si sidaas darteed iyagoo kuwaas la dagaalsan ayey maca isagii isla bixiyeen oo shacabkii la safteen.

Anaga sidoo kale soomaaliya taasmid ka duwan ayaa ka dhacday NS tii waa sax madaxweynihii iyo wixii ayey la safteen laakiin waxa saameeyey qaabsamaysankii bulshadeena oo ah inaan

qabaa'ilo u samaysmeen taliyihii yimaada haddii Cabdilaahi yuusuf tahay haddii Caydiid yahay hadduu Cabdiraxmaan Tuur yahay hadduu cidkale yahay nin waliba daraad meeshuu ka yimid asalkeeda ayuu ku laabtay wuuna ku dhamaaday, caydiid wuxuu ku dhaamday koonfur Cabdilaahi yuusuf wuxuu ku dhamaaday reerkiisuu ku dhamaaday. Markaa sidaa darteed ciinka waxa ilaalinkaro waa dastuurka weeyaan. Tawra haddii ay dhacdo ama kacdoon hadduu dhaco ama falaago hadduu dhaco waa inuu madaxweyne ama ra'iisal wasaare cidna ka amar qaadanoo uu fiiriyo xaalada si loo helo jawi yar oo marxalad kala guur ah oo lagu heli karo dawlad markaas beddesha dawladaas ama rayida ah doorasho uga qayb qaata.

Qodobka ugu danbeeya ayaan kusoo gabogabaynayaa, qodobka xaaladaha degdega ah normally xaaladaha degdega ahi  waxay u dhici karaan qaab siyaasadeed ayey u dhici karaan anaga waxaan rabnaa dal "post conflict countries" oo dagaal hadda ka soo baxay ayaan nahay tajribooyin farabadan oo anaga bes aan nagu koobnayn oo dawlado afrikaanan isla nahay sida ruwaanda, Burundi iyo Liberia, siiraliyoon. Dawladahaas oo kale waxay ka soo baxeen xaalado dagaal ayey ka soo baxeen, qaarna way ku fashilmeen sida ciraaq iyo Yemen iyo liibiya way ku fashilmeen qaarna way ku guulaysteen inaan fiirino kuwa ku guulaystay maxay ugu guulaysteen, kuwa aan ku guulaysana maxay ugu guulaysan waayeen, faa'iidada aan ka qaadano iyadoo waliba la fiirinaayo kala duwanaanshaha bulshada, kala duwanaansha nidaamka xukunka, kala duwanaanshaha nidaamka dhaqaalaha, kala duwanaanshaha nidaamyada baarlamaaniga iyo kuwa aan baarlaamniga ahayn.

Iyagoo la fiirnaayo haddan waxa anaga nagu munaasabka ah inaan ku fiirino xaalada degdega ah, mid waxay noqon kartaa mid gacan ku samaysay noqon kartaa oo siyaasad u adeegaysa, laakiin haddii xaalad logic ah ay tahay waxaan aamnisanahay madaxweynaha ama xukuumada inay soojeedin karaan laakiin the last okey inay lahaadaan hay'addaha sharciga ayaan aaminsanahay. waa mahadsantihiin, salaamu calaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu.

**Diyaariyey:**
(1) Abdirahman Ali Afrah
(2) Abdirisak Mohamed Adan
(3) Abdullahi Abubakar Yacqub
(4) Adan Abdullahi Omar
(5) Ali Mohamed Rooble
(6) Khalid Mohamed Deheye
(7) Mahad Abdikarim Jimale
(8) Mustafe Mohamed Abdi

**Tifaftiray:**
(1) Abdimajid Abdisalan Mohamud
Agaasimaha Xoghaynta iyo Xusuus-dhowrka

(2) Avv. Yusuf Abdullahi Hassan
Agaasimaha Dastuurka iyo Shuruucda

(3) Mohamed Deheye Ismail
Lataliyaha Guddiga ee Arrimaha Dastuurka

(4) Dayax Axmed-iley
Tifaftiraha Guddiga

**Hubiyey:**
(1) Sen. Said Abdi Hussein
Xoghayaha Guddiga Lasocodka Dastuurka

(2) Abdulkadir Mohamed Hassan
Xoghayaha Guud ee GMDHD

**Oggolaaday:**
(1) Avv. Burhan Aadan Cumar
Guddoomiyaha GMDHD.

(2) Xil. Hussein Qasim Yusuf Idow
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka Dastuurka

GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA

اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور

Independent Constitutional Review
and Implementation Commission